Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

OFFICIAL BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 5aad **FAAFIN SANADLE** **Muqdisho** **2017**

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2017

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADKA

2017

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA RASMIGA AH
الرسمية الجريدة
OFFICIAL BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 5aad Muqdisho, Lr. **5**

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN SANADLE

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADKA

2017

SHARCI Lr. 01 Taariikh: 15/03/2017
OGGOLAANSHAHA BAARLAMAANKA EE MAGACAABIDDA RA'ISUL –WASAARAHA MUDANE XASAN CALI KHEYRE Bog 1
Lifaaq: Oggolaanshaha Baarlamaanka ee Magacaabidda Ra'isul wasaaraha Mudane Xasan Cali Kheyre

XEER MADAXWEYNE Lr. 002 Taariikh: 21/03/2017
MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA Bog 3

SHARCI Lr. 003 Taariikh: 08/04/2017
OGGOLAANSHAHA BAARLAMAANKA EE GURMAD DEG DEG AH EE ABAARAHA Bog 4
Lifaaq: Oggolaanshaha Ansixinta Baarlamaanka ee Gurmad Degdega ee Abaaraha

XEER MADAXWEYNE Lr. 3b Taariikh: 17/04/2017
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 14

XEER MADAXWEYNE Lr. 4b Taariikh: 17/04/2017
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 15

XEER MADAXWEYNE Lr. 005 Taariikh: 23/02/2017
MAGACAABIS RA'ISUL WASAARAHA XFS Bog 17

XEER MADAXWEYNE Lr. 5b Taariikh: 17/04/2017
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 18

XEER MADAXWEYNE Lr. 6b Taariikh: 13/05/2017
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 19

XEER MADAXWEYNE Lr. 7b Taariikh: 13/05/2017
OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO Bog 20

XEER MADAXWEYNE Lr. 008 Taariikh: 15/03/2017
MAGACAABIS AGAASIMAHA HAB-MAAMUUSKA MADAXTOOYADA JFS Bog 21

XEER MADAXWEYNE Lr. 010 Taariikh: 21/03/2017
MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA SIYAASADDA IYO ISTIRAATIIJIYADDA Bog 22

XEER MADAXWEYNE Lr. 011 Taariikh: 06/04/2017
MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA DHAQAALAHA IYO MAAMULKA Bog 23

XEER MADAXWEYNE Lr. 012 Taariikh: 06/04/2017
MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA XIRIIRKA BAARLAMAANKA **Bog 24**

XEER MADAXWEYNE Lr. 013 Taariikh: 06/04/2017
MAGACAABIS GUDDOMIYAHA GOBOLKA BENAADIR AHNA DUQA MAGAALADDA MUQDISHO **Bog 25**

XEER MADAXWEYNE Lr. 014 Taariikh: 22/04/2017
MAGACAABIS KU XIGEENNADA GUDDOMIYAHA GOBOLKA BENAADIR KU XIGEENNADIISA IYO XOG-HAYAHA GUUD **Bog 26**

XEER MADAXWEYNE Lr. 015 Taariikh: 24/04/2017
DIB U QAABEYNTA GOLAHA AMNIGA QARANKA (GAQ) **Bog 28**

XEER MADAXWEYNE Lr. 017 Taariikh: 24/04/2017
MAGACAABIS KU XIGEENAKA AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA **Bog 32**

XEER MADAXWEYNE Lr. 019 Taariikh: 29/04/2017
MAGACAABIS LA TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA SIYAASADDA DIBADDA **Bog 33**

XEER MADAXWEYNE Lr. 020 Taariikh: 04/05/2017
XIL KA QAADIS HANTI DHOWRKA GUUD EE QARANKA **Bog 34**

XEER RA'ISUL WASAARE Lr. 001 Taariikh: 11/05/2017
ANSIXINTA QORSHAHA SUGIDDA AMNIGA IYO XASILINTA MAGAALADA MADAXDA SOOMAALIYA EE MUQDISHO **Bog 35**

XEER WASIIR Lr. 004 Taariikh: 12/07/2017
HAWL-GALIN WAKAALADDA MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA ISKAASHATOOYINKA – (UDHIS) **Bog 39**

XEER RA'ISUL WASAARE Lr. 001 Taariikh: 11/05/2017
ANSIXINTA RUGTA GANACSIGA IYO WARSHADAHA **Bog 60**

SHARCI Lr. 006 Taariikh: 08/08/2017
OGGOLAANSHAHA ANSIXINTA DIB U EEGISTA MIISAANIYADDA 2017
Lifaaq: Ansixinta Dib U Eegista Miisaaniyadda **Bog 61**

SHARCI Lr. 04 Taariikh: 27/08/2017
ANSIXINTA DIB U EEGISTA MIISAANIYADDA 2017 **Bog 62**

SHARCI Lr. 005 Taariikh: 02/10/2017
OGGOLAANSHAHA ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA ISGAARSIINTA QARANKA
Bog 170
Lifaaq: Sharciga Isgaarsiinta Qaranka

SHARCI Lr. 06 Taariikh: 27/11/2017
ANSIXINTA XISAAB-XIRKA MIISAANIYADDA 2015 **Bog 112**

SHARCI Lr. 07 Taariikh: 27/11/2017
ANSIXINTA XISAAB-XIRKA MIISAANIYADDA 2016 **Bog 123**

SHARCI Lr. 08 Taariikh: 27/11/2017
ANSIXINTA HESHIISKA ISUCALINTA MAXAABISTA XUKUMAN EE SOOMAALIYA IYO INDIYA **Bog 134**

XEER MADAXWEYNE Lr. 003 Taariikh: 16/02/2017
MAGACAABIS KU XIGEENAKA AGAASIMAHA GUUD(KMG) EE MADAXTOOYADA
Bog 159

XEER MADAXWEYNE Lr. 007 Taariikh: 26/02/2017
MAGACAABIS LA TALIYAHA MADAXWEYNAHA DHINACA ARRIMAHA DIINTA
Bog 160

XEER MADAXWEYNE Lr. 018 Taariikh: 25/04/2017
MAGACAABISTA MAAREEYAHA GUUD EE HAY'ADDA DUULISTA & SAADAASHA HAWADA
Bog 161

XEER MADAXWEYNE Lr. 022 Taariikh: 28/05/2017
MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA **Bog 162**

XEER MADAXWEYNE Lr. 023 Taariikh: 11/06/2017
MAGACAABIS ABAANDUULAHA X.D.S EE ARRIMAHA TAAKULEYNTA **Bog 163**

XEER MADAXWEYNE Lr. 024 Taariikh: 11/06/2017
DALLACSIIN MUDNAAN GAAR AH (ABAAL MARIN)
Bog 164

XEER MADAXWEYNE Lr. 026 Taariikh: 14/06/2017
MAGACAABIS KU XIGEENKA AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA
Bog 165

XEER MADAXWEYNE Lr. 030 Taariikh: 22/07/2017
MAGACAABISTA LA TALIYE SARE EE MADAXWEYNE DHINACA SIYAASADDA
Bog 166

XEER MADAXWEYNE Lr. 032 Taariikh: 31/07/2017
MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE MADAXWEYNE **Bog 167**
ARRIMAHA XOOGGA DALKA

XEER MADAXWEYNE Lr. 35 Taariikh: 11/09/2017
DALLACSIIN SARAAKIIL
Bog 168

XEER MADAXWEYNE Lr. 37 Taariikh: 08/08/2017
ANSIXINTA MAGACAABISTA HANTI-DHOWRAHA GUUD EE DOWLADDA
Bog 169

XEER MADAXWEYNE Lr. 049 Taariikh: 13/10/2017
MAGACAABISTA TALIYAHA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED
Bog 209

XEER MADAXWEYNE Lr. 050 Taariikh: 18/10/2017
DALLACSIIN SARKAAL
Bog 210

XEER MADAXWEYNE Lr. 52 Taariikh: 31/10/2017
AQBALID GO'AANKA GOLAHA WASIIRRADA EE XIL-KA QAADISTA
TALIYAHA CIIDANKA BOOLISKA **Bog 211**

XEER MADAXWEYNE Lr. 53 Taariikh: 31/10/2017
AQBALID GO'AANKA GOLAHA WASIIRRADA EE XIL-KA QAADISTA
AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA NABAD-SUGIDDA & SIRDONKA QARANKA
Bog 212

XEER MADAXWEYNE Lr. 54 Taariikh: 11/11/2017
DALLACSIIN SARKAAL
Bog 213

XEER MADAXWEYNE Lr. 055 Taariikh: 11/11/2017
DALLACSIIN SARKAAL XIGEEN
Bog 214

XEER MADAXWEYNE Lr. 056 Taariikh: 11/11/2017
DALLACSIIN SARKAAL XIGEEN
Bog 215

XEER RA'ISUL WASAARE Lr. 044 Taariikh: 18/11/2017
MAGACAABIDDA WASIIRKA GAASHAANDHIGGA
Bog 216

XEER RA'ISUL WASAARE Lr. 025 Taariikh: 03/08/2017
GO'AAN GOLE "ANSIXINTA QAAB- SIYAASADEEDKA MANHAJKA WAXBARASHADDA DALKA" **Bog 217**

XEER RA'ISUL WASAARE Lr. 025 Taariikh: 09/11/2017
GO'AAN GOLE "ANSIXINTA SIYAASADDA QARANKA EE DHALINYARADA **Bog 254**

XEER RA'ISUL WASAARE Lr. 026 Taariikh: 09/11/2017
GO'AAN GOLE "ANSIXINTA SIYAASADDA QARANKA EE MUSIIBOOYINKA **Bog 313**

XEER RA'ISUL WASAARE Lr. 027 Taariikh: 07/12/2017
GO'AAN GOLE "ANSIXINTA QAAB- SIYAASADEEDKA QORSHAHA ISTIRAATIIJIYADDA AMNIGA GUDAHA EE 2017 -2022" **Bog 47**

SHARCI Lr. 09 Taariikh: 30/12/2017
ANSIXINTA MEEL MARINTA QOONDAHA MIISAANIYADDA DOWLADDA 2018 **Bog 463**

Lifaaq: Ansixinta Meel Marinta Qoondaha Miisaaniyadda Dowladda 2018

XEER MADAXWEYNE Lr. 25 Taariikh: 13/06/2017
SOO WAREEJIN SARKAAL **Bog 510**

XEER MADAXWEYNE Lr. 58 Taariikh: 22/11/2017
DALLACSIIN SARAAKIIL & L/SARAAKIIL **Bog 511**

XEER MADAXWEYNE Lr. 59 Taariikh: 25/11/2017
DALLACSIIN SARKAAL **Bog 513**

XEER MADAXWEYNE Lr. 61 Taariikh: 09/12/2017
MAGACAABIS XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA **Bog 514**

XEER MADAXWEYNE Lr. 62 Taariikh: 18/12/2017
MAGACAABIS LA TALIYAHA AMNIGA QARANKA **Bog 515**

XEER MADAXWEYNE Lr. 66 Taariikh: 31/12/2017
DALLACSIIN L/SARAAKIIL **Bog 516**

XEER MADAXWEYNE Lr. 67 Taariikh: 31/12/2017
DALLACSIIN L/SARAAKIIL **Bog 518**

SHARCI Lr. 001 Taariikh: 15/03/2017

OGGOLAANSHAHA BAARLAMAANKA EE MAGACAABIDDA RA'ISUL-WASAARAHA MUDANE XASAN CALI KHAYRE

MADAXWAYNAHA J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad Xarfaha "A", "B" iyo "C" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "D" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Xeer Madaxweyne Lr. 005 ee 23/02/2017 kuna saabsan Magacaabista Ra'isul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S.

MARKUU ARKAY: Warqadda Lr. GSH/B-10/005/17 ee 01/03/2017 kuna saabsan Ansaxinta Magacaabista Ra'iisul Wasaaraha XJFS sida uu qabo Qodobka 69aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo isbeddel wax ku ool ah sidaas darteedna waa muhiim in si degdeg ah loo ansixiyo Magacaabista Ra'iisul Wasaaraha XJFS si uu u soo magacaabo Golaha Wasiirada .

Wuxuu soo saaray Sharcigaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo Maalinta uu Madaxweynaha saxiixo wuxuu si rasmi ah Madaxweynaha JFS u oggolaaday ansaxinta Baarlamaanka ee Magacaabista Ra'iisul Wasaare Mudane Xasan Cali Khayre.

Qodobka 2aad

Waa inuu Ra'iisul Wasaaraha ku soo magacaabaa Golaha Wasiirrada isla markaasna si degdeg ah u horgeeyaa Baarlamaanka sida uu qabo Qodobka 160aadd, Xarafka "D".

Qodobka 3aad

Wuxuu Xeerkaan dhaqangelayaa maalinta uu Madaxweynaha saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 15/03/2017

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HA/100/17
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

XEER MADAXWEYNE Lr. 002 Taariikh: 21/03/2017

MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA

MADAXWAYNAHA J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG ee Dalka Faqradda 1aad Xarafkiisa"C"

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, ee Dastuurka KMG

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo Magacaabista Agaasime Guud ee ay yeelato Madaxtooyada JFS .

Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabista

Qodobka 1aad

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 21-ka Maarso 2017, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay Danjire **Abuukar Daahir Cusmaan** in uu noqdo Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada JFS.

Qodobka 2aad

Xeerkaan waxa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 21/03/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/0031/001
TAARIIKH 20/3/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

SHARCI Lr. 003 Taariikh: 08/04/2017

OGGOLAANSHAHA ANSIXINTA BAARLAMAANKA GURMADKA DEGDEGGA AH EE ABAARAHA

MADAXWAYNAHA J.F.S.

Markuu Arkay:	Qodobka 87aad, Faqradda 1aad Xarfaha "A", "B" iyo "C" ee Dastuurka KMG
Markuu Arkay:	Qaraarka ku saabsan ansaxinta Gurmadka Degdegga ah ee Abaaraha Tix. GSH/B-10/010/17 ee 18/03/2017
Markuu Arkay:	Qodobka 10aad, Faqradda 1aad ee Dastuurka KMG
Markuu Arkay:	Qodobka 13aad, iyo 15aad ee Dastuurka KMG
Markuu Arkay:	Qodobka 1aad, iyo 3aad ee Axdiga Xuquuqda Aadanaha ee Qaramada Midoobay
Markuu Tixgeliyay:	Baahida loo qabo in Ummadda Soomaaliyeed meel kasto ay joogaan in laga badbaadiyo aafooyinka abaaraha, si loo helo shacab caafimaad qaba lagana badbaadiyo aafooyin sababa gaajo iyo rafaad baahsan
Isaga oo ogsoon:	Xaqa ay Ummadda ku leedahay Dowladdooda ee u taagan badbaadada Dhammaan Ummadda iyo Dalka Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan

Wuxuu Xeeriyay Sharcigan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo wuxuu si rasmi ah u oggolaaday ansaxinta Qaraarka Baarlamaanka ee ku saabsan Gurmadka Degdegga ah ee Abaaraha ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Waxaa lagula dardaarmayaa Xukuumadda Federaalka inay dardargeliso ayna sii xoojiso hawlaha wax looga qabanaayo Aafooyinka Abaaraha.

Qodobka 3aad

Waxaa sidaasi oo kale la farayaa Hay'adaha kale ee Dowladda iyo Ganacsatada Soomaaliyeed meel kasto ay joogaan inay ka qaataan qayb wax ku ool leh si looga samatabixiyo Ummadda Soomaaliyeed aafooyinka abaaraha, waxaa sidaasi oo kale laga codsanayaa Soomaalida dibadaha ku nool inay u soo gurmadaan Walaalahooda dhibaataysan oo ay aafeeyeen abaaraha ka jiro Dalka.

Qodobka 4aad

Waxa uu dhaqangelayaa Sharcigan maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.

Ra'isul Wasaaraha Xukuumadda J.F.S
Xasan Cali Khayre

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/1001/2017
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

GOLAHA SHACABKA

QARAAR KU SAABSAN

GURMADKA DEGDEG AH EE ABAARAHA

Tix: GSH/B-10/007/17

Kalfadhiga: 1-aad Taariikh: 18ka Maarso 2017

Kulankiisa 3-aad

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

Markuu fiiro gaar ah u yeeshay: in Qur'aanka Kariimka iyo Sunnada Rasuuulkeena Suuban (CSWS) iyo ilaalinta maqaasiidda Sare Shareecadda iyo cadaaladda bulshada u yihiin Mabda'a aasaasiga u ah Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka si waafaqsan Qodobkiisa 3-aad

Markuu Arkay: Qodobka 10-aad faqradda (1) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya oo qirayo in karaamada aadanuhu tahay deeq allahu swt ku manaystay qof kasta oo bani'aadan ah, xaquuqda aadanahahuna ay deeqdaas kazoo dhalatay.

Asaga oo xog ogaal u ah: In Qodobada 13-aad iyo 15-aad ee Dastuurkeena uu qof kasta siinayo xaqa nolosha xoriyadda shaqsiyadded iyo nabadgaleda qofnimadiisa. Sidoo kale ugu xog ogaalsan in cahdiga Qaruumaha Midoobay ee xaquuqda Aadanahu uu qofkasta oo banii-aadam ah siinayo isla xuquuqdan kor ku xusan ee dastuurkeena saa daraadeedna xuquudaas yihiin xuquuq alla-ku-siyeen ah oo banii aadamka addunka isku dhaqan-garto iskuna tixgeliyo;

Fiiro u yeeshay: In nabad la'aan iyo amni la'aan aanay suurtagal ahayn in la gaaro hormar dhaqaale io horumarinta iyo taakulaynta arrimaha bulshada toona;

Asaga oo ka welwelsan: Xaaladaha ka dhashay jiilaalkan dheeraaday oo durba sababay dhimasho dad iyo duunyoba leh, kana murugeysan xalada sii xumaanyasa ee abaarta ku sii fidaysa dalka taas oo iyadana dhalisay barkacayaal boqolaal ku qof abaarikeenti ah oo u baahan in si deg deg ah loola gurmado kaalmo bani'aadnimo heer qaran iyo heer caalami ahba leh lala gaaro dadka abaaratu tabaaleysay si halista naftoooda iyo noloshooda ku sugan thaay looga badbaadsho.

Fiiro gaar ah u yeeshay: Abaabulka iyo jihaynta ay muujisay Dawladda Federaalka ayadoo kaashanayso Dawlado-Goboleedyada federaalka io qaylodhaaminta ay u dirtay shacbiga Soomaaliyeed iyo beesha caalamka ugana baaqday in wadajir loogu gurmado ka hortagga aafooyinka abaarta dalka ka jirta;

Hadaba Golaha Shacabka Soomaaliya, Asaga oo Qoddareyey: Baaqii saamaynta abaarata dalka haysa, oo ku jiray Hadaljeedinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Hadaljeedintii Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka ka jeediyeen Golaha Shacabka Hortiisa maalintii arbacada 1-da **Maarso 2017:**

WUXUU GO'AAMIYEY QODOBBADA SOO SOCDA

Qodobka 1-aad:

Goluhu wuxuu u baaqaya dhamaana Hay'addaha Dowladda Federaalka iyo Hay'addaha Dawlado- Goboleedyada xubno ka ah federaalka shacbiga Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan ogaalleyda Diinta muwaadaniinta gacanasatada iyo Ururradda bulshadda in ay si wadajira ah ugu guntaddaan isuna abaabulaan sidii ay gacan uga geysan lahaayeen una kaalmeyn lahaayeen walaalahooda jiilaalka oo dheeraaday aafeeyey iyo abaartan sii baaheysana kusii habsanayso.

Qodobka 2-aad:

Wuxuu dhamaan wasaaradaha iyo hayaddaha Dawladda fadaraalka iyo dhamaan maamullada dawlado – Goboladeedyada Dalka ku dhiirrigelinaya in ay abuuraan jawi fududeeya gaarsiinta alaabada kaalmo aadaneedka ah ee loo wado taakkuleynta dadka u baahan iyo in ay la yeeshaan wada shaqeyn dhow hay'adaha sida kaalmo-aadamiyeedka kuna korjoogteeyaan in xilgudashadooodu u fuliynayaan si waafaqsan shuruucda dalka io mabaadii'dda cahdiyada caalimiga ah ee dadweynaha aduunka wada aqoonsan yahay.

Qodobka 3-aad

1. waxaa dawlada iyo dhamaan hay'adda dowladda federalka iyo dhamaan hay'adaha dawlado-goboleedyada dalka la farayaa in ay

canshuur dhaaf u sameeyaan alaabada loo keeno gargaarka taakulieynta aadanaha iyo ka hortagga aafooyinka abaarta.

2. Waxaa kaloo hey'adda kor ku xusan la farayaa in sharuucda xeer-nidaamyada iyo habraacyada kale ee jira la laalo hadii ay wax u dhimayaan habsami u socodka howlaha gaarsiinta taakuleynta ama shaqada haya'adda gargaarka ku howlan ama isu socodka dadka ama gaarsiinta alaabta gargaarka lagana ilaaliyo wixii arqalado ama daahid keeni karta ilaa iyo intii abaartan laga baxaayo.

Qodobka 4-aad

In xukuumaddu Golaha shacabka soomaaliya u soo diyaarsio nidaam-siyaasadeed (policy) leh istaraatiijyad qarameed looga hor tagayo abaaraha iyo aafooyinka dabiiciga ah.

Qodobka 5-aad

In la dhiso Guddi goloha shacabka soomaaliya oo korjoogteeya gurmadka gargaarka abaaraha iyo xukuumadda iyo guddiga Gurmadka abaaraha ay fulinayaan.

Qodobka 6-aad

In ciidamadda Qalabka sida ee soomaaliyeed io Ciidamadda AMISOM ay si buuxda ugu qeybgalaan Gurmadka Abaaraha iyo fududeynta gaarsiinta deeqaha gurmadka ah ee loo sido shacbiga tabaaleysan.

Qodobka 7-aad

Si loo sugo daahfurnaanta maamulka gurmadka abaaraha gudiga abaaruhu waa in uu shabakadda "website" ku soo bandhigaan dhamaan dhaqaalaha iyo agabka soo gaaray sida ku deeqday iyo halka ay ku bixiyeen si bulshda soomaaliyeed iyo deeqbixiyayaasha gudaha iyo dibededdaba loogu hubaalceliyo in deeuhu gaareen dadka loogu talagalay.

Qodobka 8-aad

In guddiga qaranka ee gurmadka abaaraha uu ugu yaraan bishiiba hal mar warbixin ku saabsan howlaha gudiga hadba halka ay marayaan u horkeeno golaha shacabka soomaaliyeed

Qodobka 9-aad

Dhamaan hay'adaha Qaranka heer federal iyo heer Dawlado goboleedyo waxaa la faraya in ay u hogaansamaan qaraarkan, hirgelintiisuna hubiyaan.

Qodobka 10-aad

Qaraarkani wuxuu hirgelayaa markuu madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo oo ku meelmariyo Xeer Madaxweyne lagna sooo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

QARAAR KU SAABSAN

DHISIDDA GUDDIGA KORJOOOGTAYNTA

GURMADKA ABAARAHA

Tix: GSH/B-10/008/17 Taariikh: 18ka Maarso 2017

Kalfadhiga: 1-aad Kulankiisa 3-aad

GUDOOMIYAHA GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

Markuu Arkay: Qaraarka GSH/B-10/007/17 ee 18ka Maarso 2017 oo ku Saabsan Gurmadka Degedegga ah ee abaaraha;

Markuu dhegeystay: Talada xildhibaanada Golaha Shacabka Soomaaliya;

Markuu Tashaday: Goddoomiyaha ku-xigeennada Golaha Shacabka

WUXUU GUDDOOMIYEY QODOBBADA SOO SOCDA

Laga bilaabo 18ka maarso 2017 waxaa la magacaabay Guddiga Korjoogtaynta Gurmadka Abaaraha oo ka kooban xildhibaaanada Golaha Shacabka magacyadooda halkan hoose ku xusan:

1. Xil. Amina Xassan Cali
2. Xil. Axmed Maxamed Jaamac "Ciro"
3. Xil. Axmed Xaaji Maxamed "taaw"
4. Xil. Cabdi Cali Xassan
5. Xil. Dahabo Suuban Maxamed
6. Xil. Duniyo Maxamed Cali
7. Xil. Khalid Macow Cabduqaadir
8. Xil. Maxamuud Cabdiraxmaan Beenebeene
9. Xil. Ubax Tahliil Warsame
10. Xil. Xaawa Yuusuf Axmed

Qodobka 2-aad

Guddiga xilkiisu waa korjoogtaynta iyo kormeeridda howlaha gurmadka io gargaarka ay fulinayaa xukuumadda federaalka Guddiga Gurmadka Abaaraha iyo Hay'adaha samafalka heer Qaran iyo kuwa caalamiga ka howlgala dalka.

Qodobka 3-aad

Si waafaqsan qodobka 65-ad faqradda 5-aad ee xeer hoosaaka Golaha shacabka xilhaynta gudigan wuxuu ku eg yahay marka howlaha gurmadku dhamaadaan xilalkiisuna lagu wareejiyo guddi ka mid ah guddiyadda joogtada ee Golaha Shacabka.

Qodobka 4-aad

Qaraarkan wuxuu hirgalaya markii uu saxiixo Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 3b Taariikh: 17/04/2017

OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay:	Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A' , 'B' iyo 'C' ee Dastuurka KMG
Markuu Arkay:	Qodobk 10aad, ee Dastuurka KMG
Markuu Arkay:	Qodobada kala ah 434aad iyo 440aad, Faqradda 2aad ee XCS
Markuu Arkay:	Qodobada kala ah 19aad iyo 195aad XCCQS
Markuu Arkay:	Warqadda Lr. XG/MCQS/130/2017 ee 15/04/2017 codsiga Xeer ilaalinta Guud ee Ciidamada Qalabka ee ku saabsan ogolaansho Xukun Dil Toogasho
Markuu Tixgeliyay:	In ay Waajib tahay Badbaadinta Nafta Muwaadiniinta Soomaaliyeed

Wuxuu Xeeriyay

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo wuxuu si rasmi ah u oggolaaday in lagu fuliyo xukunka dil toogasho gacan ku dhiigle Ex/D/le X. Dar Cali Buurow Maxamed, ina Xaawo Cali Maxamed, 24 jir ah kuna dhashay Buur hakaba, kana tirsanaa Ciidanka Daraawiishta ee Koonfur Galbeed Soomaaliya, isaga oo si bareer u dilay Marxuum Qaasim Cabdiyow Xaaji Keerow markeey taariikhdu ahayd 10/10/2016.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka sida la farayaa inay si degdeg ah u fuliso dilka toogasho oo ah qisaastii Marxuum Qaasim Cabdiyow Xaaji Keerow.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqangelayaa Sharcigan maalinta uu Madaxwaynaha JFS saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.

MUQDISHO 17/04/2016

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: Han/005/2017
TAARIIKH 30/5/2017
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 4b Taariikh: 17/04/2017

OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A' , 'B' iyo 'C' ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobk 10aad, ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobada kala ah 221aad, 222aad iyo 434/71 XCS,

Markuu Arkay: Qodobka 1aad XCCQS

Markuu Arkay: Warqadda Lr. XG/MCQS/223/2016 ee 05/05/2016 codsiga Xeer ilaalinta Guud ee Ciidamada Qalabka sida ee ku saabsan ogolaansho Xukun Dil Toogasho

Markuu Tixgeliyay: In ay Waajib tahay Badbaadinta Nafta Muwaadiniinta Soomaaliyeed

Wuxuu Xeeriyay

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo wuxuu si rasmi ah u oggolaaday in lagu fuliyo xukunka dil toogasho gacan ku dhiiglayaasha kala ah:

1. Xasan Aadan Mursal (Xasan Yare), 22 jir ah, ina Cibaado Mursal, kuna dhashay Bakool.

2. Cabdiladif Macallin Aadan Macallin Cabdiraxmaan, 30 jir, ina Dowlaay Aadan Yare, kuna dhashay Baydhabo

3. Siyaad Xasan Faarax, 30 jir ah, ina Mako Haye Shiil, kuna dhashay Gobolka Jubbada Hoose

4. Sharmad Aawow Maxamed, 40 jir ah, ina Maano Shariif Abuukar, ku dhashay Baydhabo

5. Cabdirashiid Ibraahim Xasan, 38 jir, ina Aamino Sheikh Cabdi (Maqane), waxayna gacan ku dhiiglayaashaan kawada tirsanaaneeyn Ururka Nabad diidka Al-shabaab. Waxay isla markaasi ka dambeeyeen abaabulkii iyo qaraxyadii mataanaha ahaa ee lala beegsaday maqaayadda Beder ee Baydhabo iyo meel suuq ah ee ku dhow Shirkadda Dahabshiil ee Baydhabo waxaana ku naf waayay 8 ruux, waxaana ku dhaawacmay 45 ruux markii ay taariikhdu ahayd 28/02/2016.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud ee Ciidamada Qalabka sida la farayaa inay si degdeg ah u fuliso dilka toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqangelayaa Sharcigan maalinta uu Madaxwaynaha JFS saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.

MUQDISHO 17/04/2016

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: Hanlaad/201
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 005 Taariikh: 23/02/2017

MAGACAABIS RA'IISUL WASAARAHA XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYEED

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradda 4aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Markuu Garwaaqsaday: Baahida loo qabo dhismaha Hey'adaha Dowladda gaar ahaan buuxinta Jagada Ra'iisul-Wasaaraha ka dib doorashooyinkii ka dhacay Dalka Soomaaliya

Markuu Tixgeliyay: Waayo-aragnimada iyo Aqoonta uu leeyahay Mudanaha loo magacaabayo Xilkan.

Wuxuu Xeeriyay

Qodobka 1aad

Waxaa **Xasan Cali Kheyre** loo magacaabay in uu noqdo Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliyeed

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqangelayaa Marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

MUQDISHO 23/02/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/607/2017
TAARIIKH 30/5/2017
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 5b Taariikh: 17/04/2017

OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A' , 'B' iyo 'C' ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobk 10aad, ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobada kala ah 434aad iyo 440aad, Faqradda 2aad ee XCS iyo 19aad XCCQS

Markuu Arkay: Warqadda Lr. XG/MCQS/115/2017 ee 06/04/2017 codsiga Xeer ilaalinta Guud ee Ciidamada Qalabka sida ee ku saabsan ogolaansho Xukun Dil Toogasho

Markuu Tixgeliyay: In ay Waajib tahay Badbaadinta Nafta Muwaadiniinta Soomaaliyeed

Wuxuu Xeeriyay

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo wuxuu si rasmi ah u oggolaaday in lagu fuliyo xukunka dil toogasho gacan ku dhiigle A/le Bol. Axmed Cabdi Maadeey, 27 jir ah, ina Khadiijo Kuusow, kuna dhashay Buaale, Wuxuu Gacan ku dhiigluhu si bareer ah ugu dilay Marxuum Maxamed Cali Cabdalla markey taariikhdu aheyd 05/01/2016 Degmada Afgooye ee Gob olka Shabeelaha Hoose.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka sida la farayaa inay si degdeg ah u fuliso dilka toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqangelayaa Sharcigan maalinta uu Madaxwaynaha JFS saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.

MUQDISHO 17/04/2016

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/0008/2017
TAARIIKH: 3/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 6b Taariikh: 13/05/2017

OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A' , 'B' iyo 'C' ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobk 10aad, ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobada kala ah 434aad, XCS iyo 19aad XCCQS

Markuu Arkay: Warqadda Lr. XG/MCQS/423-2/2017 codsiga Xeer ilaalinta Guud ee Ciidamada Qalabka sida ee soo baxday 22/04/2017

Markuu Tixgeliyay: In ay Waajib tahay Badbaadinta Nafta Muwaadiniinta Soomaaliyeed

Wuxuu Xeeriyay

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo wuxuu si rasmi ah u oggolaaday in lagu fuliyo xukunka dil toogasho gacan ku dhiigle Ex. D/le NISA **Yuusuf Xuseen Maxamuud**, 23 jir ah, ina Bintow Xaamuud, kuna dhashay Cadale, Gobolka Shabeelada Dhexe. Waxa uu Gacan ku dhiigluhu si bareer ah ugu dilay Taliyihii Nabadsugidda Gobolka Shabeelada Dhexe Marxuum **Cabdiweli Ibraahim Maxamed** markey taariikhdu aheyd 21/06/2016.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka sida la farayaa inay si degdeg ah u fuliso dilka toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqangelayaa Sharcigan maalinta uu Madaxwaynaha JFS saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.

MUQDISHO 13/05/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HANI009[illegible]
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 7b Taariikh: 13/05/2017

OGGOLAANSHO XUKUN DIL TOOGASHO

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay:	Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'A', 'B' iyo 'C' ee Dastuurka KMG
Markuu Arkay:	Qodobk 10aad, ee Dastuurka KMG
Markuu Arkay:	Qodobada kala ah 434aad XCS iyo 19aad XCCQS
Markuu Arkay:	Warqadda Lr. XG/MCQS/034-2/2017 ee 06/04/2017 codsiga Xeer ilaalinta Guud ee Ciidamada Qalabka sida ee soo baxay 01/05/2017
Markuu Tixgeliyay:	In ay Waajib tahay Badbaadinta Nafta Muwaadiniinta Soomaaliyeed

Wuxuu Xeeriyay

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta uu Madaxweynaha saxiixo wuxuu si rasmi ah u oggolaaday in lagu fuliyo xukunka dil toogasho gacan ku dhiigle A/le **Cabdulqaadir Cabdi Xasan**, 40 jir ah, ina **Xaliimo Cali Yarow**, kuna dhashay Gobolka Shabeelada Hoose.

Waxa uu Gacan ku dhiigluhu si bareer ah gaari qarax la beegsaday Suuqa Beerta ee Degmada Waaberi, waxaana ku geeriyooday 30 ruux oo isugu jira Rag iyo Dumar, waxaana isla markaasina ku dhaawacmay 43 qof markay taariikhdu ahayd 26/11/2016.

Qodobka 2aad

Waxaa Xeer ilaalinta Guud Ciidamada Qalabka sida la farayaa inay si degdeg ah u fuliso dilka toogasho.

Qodobka 3aad

Waxa uu dhaqangelayaa Sharcigan maalinta uu Madaxwaynaha JFS saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.

MUQDISHO 13/05/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: 4AN/010/2017
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 008 Taariikh: 15/03/2017

MAGACAABIS AGAASIMAHA HAB-MAAMUUSKA MADAXTOOYADA JFS

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG ee Dalka Faqradda 1aad, Xarafkiisa C

Markuu Arkay: Qodobk 90aad, ee Dastuurka KMG ah, Xarafkiisa L

Markuu Tixgeliyay: Baahida loo qabo magacaabista Agaasimaha Hab-maamuuska Madaxtooyada MJF

Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga billaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 15ka Maarso 2017, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay **Cabdullaahi Yuusuf Maxamed** in uu noqdo Agaasimaha Hab-maamuuska Madaxtooyada MJF.

Qodobka 2aad

Xeerkan Waxa uu dhaqangelayaa markuu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO 15/03/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/0111/2017
TAARIIKH 31/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 010 Taariikh: 21/03/2017

MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA DHINACA SIYAASADDA & ISTARAATIIJIYADA

MADAXWAYNAHA J.F.S

Marka uu Arkay: Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG ee Dalka Faqradda 1aad, Xarafkiisa C

Marka uu Arkay: Qodobk 90aad, ee Dastuurka KMG ah, Xarafkiisa L

Marka uu Arkay: Aqoonta iyo Waayo-Aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan

Markuu Tixgeliyay: Baahida loo qabo magacaabista Khabiir la-taliya Madaxweynaha oo aqoon fiican u leh dhinaca Siyaasadda & Istaraatiijiyadda.

Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga billaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 19ka Febraayo 2017, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay Prof. **Nur Dirie Hersi (Fursade)** in uu noqdo La-Taliyaha Madaxweynaha JFS ee dhinaca Siyaasadda & Istiraatiijiyadda.

Qodobka 2aad

Xeerkan Waxa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/012/2017
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

MUQDISHO 21/03/2017

[illegible]axweynaha J.F.S
[illegible]aahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 011 Taariikh: 06/04/2017

MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA DHAQAALAHA IYO MAAMULKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

Marka uu Arkay: Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG ee Dalka Faqradda 1aad, Xarafkiisa C

Marka uu Arkay: Qodobk 90aad, ee Dastuurka KMG ah

Marka uu Arkay: Aqoonta iyo Waayo-Aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan

Marka uu Tixgeliyay: Baahida loo qabo magacaabista Khabiir la-taliya Madaxweynaha oo aqoon fiican u leh dhinaca Dhaqaalaha iyo Maamulka.

Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga billaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 6da Abriil 2017, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay **Amiin Axmed Sheekh** in uu noqdo La-Taliyaha Madaxweynaha JFS ee dhinaca Dhaqaalaha iyo Maamulka.

Qodobka 2aad

Xeerkan Waxa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO 06/04/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HanD/013/2017
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 012 Taariikh: 06/04/2017

MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA XIRIIRKA BAARLAMAANKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

Marka uu Arkay: Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG ee Dalka Faqradda 1aad, Xarafkiisa C

Marka uu Arkay: Qodobk 90aad, ee Dastuurka KMG ah

Marka uu Arkay: Aqoonta iyo Waayo-Aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan

Marka uu Tixgeliyay: Baahida loo qabo magacaabista Khabiir la-taliya Madaxweynaha oo aqoon fiican u leh dhinaca Xiriirka Baarlamaanka.

Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga billaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 6da Abriil 2017, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay **Aamina Siciid Cali** in ay noqoto La-Taliyaha Madaxweynaha JFS ee dhinaca Xiriirka Baarlamaanka.

Qodobka 2aad

Xeerkan Waxa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO 06/04/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/0144/2017
TAARIIKH 30/5/2017

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 013 Taariikh: 06/04/2017

Magacaabis Guddoomiyaha Gobolka Benaadir Ahna Duqa Magaalada Muqdisho

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 8 7aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka

MARKUU ARKAY: Qodobk 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 8aad, Faqradda 4aad ee Xeer Lr. 6 ee soo baxay 12/02/1980, kuna saabsan in G/Banadir iyo Dowlada Hoose ay hoos yimaadaan Madaxtooyada J.F.S

MARKUU ARKAY: Soo Jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalka ee Magacaabista Guddoomiyaha Gobalka Benaadir ahna Duqa Magaalada Tirxraac: WAG&F/04/2017, taariikh: 06/04/2017

MARKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee ku saabsan Magacaabista Guddoomiyaha Gobalka Benaadir ahna Duqa Magaalada.

MARKUU GARWAAQSADAY: in ay jirto baahi loo qabo in loo magacaabo G/Benaadir Guddoomiye Cusub.

MARKUU TIXGELIYAY: Waayo-Aragnimada uu mudanuhu u leeyahay howlaha loo magacaabayo

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

1. Waxaa Mudane Thaabit Cabdi Maxamed loo magacaabay in uu noqdo Guddoomiyaha Gobalka Benaadir isla markaana ah Duqa Magaalada Muqdisho

Qodobka 2aad

Xeerkan Waxa uu burinayaa dhammaan wixii xeer ah ee aan waafaqsaneyn

Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan Madaxweyne dhaqangelayaa isla Maalinta uu Madaxwaynaha JFS Saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO 06/04/2017

JAMHIK. RIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/015/2017
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 014 Taariikh: 22/04/2017

MAGACAABIS KU-XIGEENNADA GUDDOOMIYAHA GOBOLKA BENAADIR KU XIGEENNADIISA IYO XOGHAYAHA GUUD

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka

MARKUU ARKAY: Qodobk 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 8aad, Faqradda 4aad ee Xeer Lr. 6 ee soo baxay 12/02/1980, kuna saabsan in G/Banadir iyo Dowlada Hoose ay hoos yimaadaan Madaxtooyada J.F.S

MARKUU GARWAAQSADAY: in ay jirto baahi loo qabo in loo magacaabo G/Benaadir Ku-Xigeenno iyo Xoghaye Guud.

MARKUU TIXGELIYAY: Waayo-Aragnimada ay mudanayaashu u leeyihiin howlaha loo magacaabayo

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

1. Waxaa Mudane **Saalax Sheekh Maxamuud Sh. Maxamed** loo magacaabay in uu noqdo **Guddoomiye Ku-Xigeenka 1aad ee Arrimaha Amniga & Siyaasadda** ee Gobalka Benaadir
2. Waxaa **Marwo Maluuka Dheere Cabdulqaadir** loo magacaabay in ay noqoto **Guddoomiye Ku-Xigeenka 2aad ee Arrimaha Maamulka & Maaliyadda** ee Gobolka Benaadir.
3. Waxaa Mudane **Cabdullaahi Cilmi Ereg** loo magacaabay in uu noqdo **Guddoomiye Ku-Xigeenka 3aad ee Arrimaha Bulshada & Wacyigelinta** ee Gobolka Benaadir.
4. Waxaa Mudane **Aadan Sheekh Cali Fiidow** loo magacaabay inuu noqdo **Guddoomiye Ku-Xigeenka 4aad** ee **Howlaha Guud** ee Gobolka Benaadir
5. Waxaa Marwo **Subeyda Maxamed Mukhtaar** loo magacaabay in ay noqoto **Xoghayaha Guud** ee Gobolka Benaadir

Qodobka 2aad

Xeerkan Waxa uu burinayaa dhammaan wixii xeer ah ee aan waafaqsaneyn

Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan Madaxweyne dhaqangelayaa isla Maalinta uu Madaxwaynaha JFS Saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO 22/04/2017

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)



XEER MADAXWAYNAHA Lr. 015 Taariikh: 24/04/2017

DIB-U-QAABEYNTA GOLAHA AMNIGA QARANKA (GAQ)

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobbada 90aad, 87aad, Xarafka 'C' 126aad ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Go'aanka siyaasadeed ee amni wadar-ogolka ah ee ay gaareen Madaxda Qaran iyo kuwa Maamul-Goboleed 16ka bisha Abriil 2017

Markuu Tixgeliyay: in Golaha Amniga Qaranku uu xaqiijinayo adkeynta istiraatiijiyad amni iyo difaac qaran oo dhammeystiran isla markaana uu mideynayao siyaasaadka amniga qaranka iyo howlaha ka dhaxeeyo Hey'adaha amniga. Sidoo kale uu Goluhu horumarinaayo aragtida ka tarjumeysa nabadgelyada iyo amniga Soomaaliya iyo ka Shisheeyeba.

Markuu Garwaaqsaday: Aragtida fog ee Golaha ee ah in uu hiigsanayo ku saleynta go'aan qaadashada difaaca iyo Amniga Qaranka, ilaalinta iyo Xaqiijinta danaha muhiimka ah ee Shacabka iyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed

Markuu ku Qancay: Baahida loo qabo dib-u-qaabeynta Golaha Amniga Qaranka oo noqonaya Awoodda ugu sarreysa ee Go'aan Qaadashada Amniga iyo Difaaca Qaranka si loo xaqiijiyo sarreynta Sharciga iyo Xoojinta Xasiloonida.

Waxa uu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo dikreetadan, waxaa dib loo qaabeeyey Golaha Amniga Qaranka.

Qodobka 2aad

Golaha amniga Qaranka waxa uu ka kooban yahay:

1. Xubhana Heer Qaran
2. Xubnaha Heer Gobol
3. Xubnaha Farsamo

Qodobka 3aad

Xubnaha Heer Qaran ee Golaha Amniga Qaranka waxa uu ka kooban yahay:

1. Madaxweynaha JFD — Guddoomiye
2. Ra'iisul Wasaaraha XFS — Guddoomiye-Ku-Xigeen
3. Wasiirka Cadaaladda — Xubin
4. Wasiirka Arrimaha Gudaha — Xubin
5. Wasiirka Amniga Gudaha — Xubin
6. Wasiirka Difaaca — Xubin
7. Wasiirka Arrimaha Dibadda — Xubin
8. Wasiirka Maaliyadda — Xubin

Xubnaha Heer Gobo lee Golaha Amniga Qaranka waxa uu ka kooban yahay:

1. Madaxweynayaasha Maamul-goboleedyada Dalka — Xubin
2. Guddoomiyaha Gobolka Benaadir ahna Duqa Magaalada — Xubin

Xubnaha Farsamo ee Golaha Amniga Qaranka waxa uu ka kooban yahay:

1. Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka — Xubin
2. Taliyaha Ciidanka Booliska — Xubin
3. Taliyaha/Agaasimaha Guud ee Hey'adda Nabad-Sugidda — Xubin
4. Taliyaha Ciidanka Asluubta — Xubin
5. La-Taliyaha Amniga Qaranka — Xubin

Qodobka 4aad

Xog-haynta Golaha Amniga Qarankad

Xafiiska Amniga Qaranka (XAQ) ayaa ah Xog-haynta Golaha Amniga Qaranka

Qodobka 5aad
Ujeedooyinka Golaha Amniga Qaranka

Ujeedooyinka Golaha Amniga Qaranka waxaa ka mid ah:-

1. Go'aan ka-qaadashada khatar kasta oo xasiloonida waddanka iyo nabadgalyada dadka ku imaan karta, ha ahaato weerar abaabulan ama mid dabiici ah
2. Hubinta iyo Tayeynta Hey'adaha Amniga Qaranka si ay si hufan u fushan karaan difaaca Dalka iyo Dadka
3. Dhisidda iyo Diyaarinta nidaam adkeysi iyo kabasho degdeg ah

Qodobka 6aad
Shaqada & Awoodda Golaha Amniga Qaranka

1. Horumarinta Siyaasaadka iyo istaraatiijiyadda Amniga Qaranka
2. Hubinta Heerka diyaar-garow iyo hufnaanta hay'adaha Amniga Qaranka.
3. La socodka iyo isku jaangoynta dhaqaalaha loogu talogalay kobcinta Hay'daha Amniga Qaranka.
4. La socodka iyo Qiimeynta Heerka khataraha Dalka iyo go'aaminta tillaabooyinkii laga qaadan lahaa sugista Amniga Gudaha iyo Dibaddaba ee JFS.

Qodobka 7aad
Masuuliyiinta Xubnaha Farsamo ee Golaha

Masuuliyadaha Xubnaha Farsamo ee Golaha waxaa ka mid ah:

1. Ka warbixinta Xaaladaha amniga, baahida iyo caqabadaha ciidamada Amniga
2. Talo Soo jeedin horumarinta Amniga
3. Ku soo warcelinta wixii ka qabsoomay go'aanadii Goluhu hore u gaaray

Qodobka 8aad

Masuuliyadaha Xog-haynta waxaa ka mid ah:

1. Ka-talosiinta Golaha heerka khataraha dalka
2. La socoshada iyo Qiimeynta heerka diyaar-garow ee Qaran
3. Dabagalka iyo aruurinta dhacdooyinka amniga iyo khataraha dalka
4. Soo diyaarinta iyo qeybinta tilmaamaha iyo warbixinnada Golaha ku socda hey'adaha ay khuseyso

5. Soo diyaarinta Warbixinnada sanadlaha ah ee istaraatiijiyada iyo Amniga Qaranka
6. Xiriirinta Hey'adaha iyo Wadamada naga kaalmeeya howlaha amniga
7. Isku-duwidda iyo ka qeyb-qaadashada qoondeynta kaalmada loogu tala-galay howlaha amniga
8. Diyaarinta ajendaha kulamada iyo jadwallada la-tashi Madaxweyne ka dib
9. Dabagalka qabsoomidda wixii ka hirgalay shirarkii ka horreeyay si uu warbixin uga keeno arrinkaas

Qodobka 9aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa Maalinta uu Madaxwaynuhu Saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO 24/04/2017

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HHA/012/2017
TAARIIKH 30/5/2017
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 017 Taariikh: 24/04/2017

MAGACAABIS KU-XIGEENKA AGAASIMAHA GUUD EE MADAXTOOYADA

MADAXWAYNAHA J.F.S

Marka uu Arkay: Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG ee Dalka Faqradda 1aad, Xarafkiisa C

Marka uu Arkay: Qodobk 90aad, ee Dastuurka KMG ah xarafkiisa L

Marka uu Tixgeliyay: Baahida loo qabo magacaabista Ku-Xigeen Agaasime Guud oo ay yeelato Madaxtooyada JFS

Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga billaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 24-ka Abriil 2017, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay **Cabdullaahi Aadan Kullane** in uu noqdo Ku-Xigeenka Agaasimaha Guud ee Madaxtooyada JFS.

Qodobka 2aad

Xeerkan Waxa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO 24/04/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/018/2017
TAARIIKH 31/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 019 Taariikh: 29/04/2017

MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA ARRIMAHA SIYAASADDA DIBADDA

MADAXWAYNAHA J.F.S

Marka uu Arkay: Qodobka 87aad, ee Dastuurka KMG ee Dalka Faqradda 1aad, Xarafkiisa C

Marka uu Arkay: Qodobk 90aad, ee Dastuurka KMG ah

Marka uu Arkay: Aqoonta iyo Waayo-Aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan

Marka uu Tixgeliyay: Baahida loo qabo magacaabista Khabiir la-taliya Madaxweynaha oo aqoon fiican u leh dhinaca Siyaasadda Dibadda.

Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkaan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga billaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 29ka Abriil 2017, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay Mudane **Balal Maxamed Cusmaan** in uu noqdo La-Taliyaha Madaxweynaha JFS ee dhinaca Siyaasadda Dibadda.

Qodobka 2aad

Xeerkan Waxa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO 29/04/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HA/1019/2017
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWAYNAHA Lr. 20 Taariikh: 04/05/2017

XIL KA QAADIS HANTI-DHOWRK GUUD EE QARANKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

Marka uu Arkay: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' Dastuurka JFS

Marka uu Arkay: Qodobk 118aad, Faqradda 4aad ee Dastuurka JFS

Marka uu Arkay: Qodobka 2aad, Xeerka Lr. 34 ee 14/04/1972 kuna saabsan Sharciga Hantidhowrka Guud ee Qaran

Marka uu Arkay: Qodobk 16aad, Faqradda 1aad ee Xeerka Lr. 11 ee 05/12/2005 kuna saabsan Shaqaalaha Rayidka ee Dowladdda JFS ee tilmaamayo inuu Madaxweynaha ku soo saaro Xeer Madaxweyne Shaqaalaha ay darajadooda tahay 'A'

Marka uu Tixgeliyay: Soo jeedinta iyo Go'aanka Golaha Tixraac: XRW/0400/05/2017 ee 04/05/2017.

Wuxuu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed saxiixo Xeerkaan, waxaa Xilkii Hanti-dhowrka Guud laga qaaday **Nuur Faarax Jimcaale.**

Qodobka 2aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa maalintii uu Madaxwaynaha Saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO 04/05/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY.
DIIWAAN NO: HHG/0400/2017
TAARIIKH 30/5/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed C/laahi Maxamed (Farmaajo)

Taariikh: 11/05/2017

Xeer Ra'isul Wasaare Lr.001

Ujeedo:- Go'aan Gole " Ansixinta Qorshaha Sugidda Amniga iyo Xasilinta Magaala Madaxda Soomaaliya ee Muqdishu"

Ra'isul Wasaaraha Xukuumadda JFS:

Markuu arkay: Qodobka 99aad (A), (B) & (F) ee Dastuurka Federaalka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG

Markuu arkay: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Qalabka Sida ee qorshaha Sugida amniga iyo xasilinta magaala madaxda soomaaliya Ee Muqdisho.

Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirada ee Summaddiisu tahay SHGW.00.06.05.17 ee 11/05/2017, kuna Saabsan ansixinta "Qorshaha Sugidda Amniga iyo Xasilinta Magaala Madaxda Soomaaliya ee Muqdishu", oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Markuu tixgaliyey: Baahida loo qabo in la meel mariyo qorshaha Sugidda amniga iyo xasilinta magaala madaxda Soomaaliya ee muqdishu.

Waxuu Xeeriyey

Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha wasiirada ee summadeedu tahay SHGW.00.06.05.17 ee 11/05/2017 Kuna saabsanaa ansixinta **"Qorshaha Sugida Amniga iyo Xasilinta Magaala Madaxda Soomaaliya ee Muqdishu"**, oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2aad

1. In Ciidamada Xooga Dalka, Boliiska iyo Nabad Sugida iyagoo Mideysan lehna hal hogaan in ay ka howlgalaan sugida amniga iyo xasilinta caasimadda soomaaliya.

2. Waxaa laga mamnuucay Caasimadda Muqdishu Ciidan hubeysan iyo gaadiidka dagaalka ee aan ku sugnayn Xaaladahan.
   a- Hawl gallada lagu xasilinayo caasimadda.
   b- Haysta warqadda oggolaanshaha dhaqdhaqaaqa.
3. Ciidamada Xooga Dalka Soomaaliya ee ka qeybgalaya qorshaha Sugida amniga iyo xasilinta Caasimadda, waa in ay ka mid ahaadaan horin ka tirsan Booliska Dableeyd (Military Police)
4. Waxaa Caasimadda dalka laga mamnuucay sida shada dhar ciidanka Xooga Dalka haddii aan loo heysan sharciyad, Lambar iyo aqoonsi buuxa oo uu bixiyey Taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed
5. Laga bilaabo 11/05/2017, waxaa mas'uuliyiinta Dowladda ee erga ahaan u haysta hubka, gaadiidka iyo xubnaha XDS lagana doonayo in ay ku celiyaan Taliska Ciidanka XDS muddo toban (10) casho gudahood ah.
6. Waxaa laga mamnuucay qof kasta iyo mas'uuliyiinta Dowladdaba in magaalada Muqdisho ay ku dhex wataan ilaalo ka badan afar askari mana la qaadan karo qori ka weyn AK 47.
7. Waxaa taliska ciidanka Boliiska laga doonayaa in muddo lixdan casho ku eg kusoo dhisaan ciidamo gaar ah oo ilaaliya madaxda qaranka iyo goobaha muhiimka ah ee dowladda.
8. Shirkadaha amniga ee gaarka loo leeyahay waxaa la farayaa in xarunta howlgalada wadajirka ah ay si joogta ah u ogeysiiyaan dhaqdhaqaaqa ciidanka iyo hubka ay maamulaan.
9. Ilaalada goobaha ganacsiga sida Hotelada, Carwooyinka, Isbitaalada, Jaamacadaha iyo WM waxay mas'uul ka ahaan doonaan amni darada ka dhaca goobaha ay ilaaliyaan iyo

agagaarkeeda, oo ayagoo wax ka qaban kara, ka baaqsada in ay ka hortagaan ama usoo gudbin waayaan ciidamada amniga.

10. Wasaaradaha Amniga, Gaashaandhigga iyo Taliyaasha ciidamada waa in ay sida ugu dhaqsiyaha u dhaqan geliyaan Xarunta Hoggaaminta Hawlgalka Xasilinta caasimadda oo loo gartay JOCC, taasoo noqonaysaa Taliska Hawlgalka.
11. Hawlgalka Xasilinta Caasimadda wuxuu u bilaaban doonaa si deg deg ah, inta ka horeysana ciidan waliba kaalinta hawlgalka kaga soo aada ciidan iyo qalab waa in uu ku wareejiyaa taliyaha Hawlgalka.
12. Maamulka Gobolka Banaadir ayaa ka hawlgalaya abaabulka iyo baraarujinta dadweynaha iyagoo kaashanaya Wasaaradda Warfaafinta, Bulshada qaybaheeda kala duwan iyo hay'adaha amniga.
13. Wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha Diinta iyo Wasaaradda Warfaafinta dowladda Federaalka waxa ay masuul ka ahaan doonaan:-
    a) Doorka culimada iyo warbaahinta ee la xiriira hawlgalka Xasilinta Caasimada iyo sidii saxaafadda loola wadaagi lahaa macluumaadka hawlgalada amniga lagu sugayo.
    b) Doorka wacyigelinta bulshada oo ka baxaya warbaahinta dowladda iyo kuwa madaxa banana.

Qodobka 3aad

Iyadoo la fulinayo jihaynta iyo tilmaamaha madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya waxay degmada Afgooye kamid noqonaysaa hawlgalka Xasilinta Caasimada.

Qodobka 4aad

1. Maamulka Gobolka Benaadir ayaa door hormuud ah ka qaadanaya isku dabaridka ciidanka hawlgalka caasimada.
2. Goluhu waxa uu soo dhaweeyay go'aanka Gobolka Benaadir ee lagu mamnuucay in gawaarida ladhigto wadada Maka Al-mukarama, waxaana lagu baaqayaa gaadiidlayda in ay gacan ka gaystaan sugida amniga.

3. Goluhu waxa uu soo dhaweeyay, kuna amaanay maamulka Gobolka Benaadir dhisida golaha amaanka ee Gobolka Benaadir, waxaa la farayaa hay'adaha amniga in ay si dhow ula shaqeeyaan si wax weyn looga qabto amaanka Gobolka Benaadir.

Qodobka Saad

Qorshaha sugidda amniga iyo xasilinta magaalada Madaxda Soomaaliya ee Muqdisho, waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Raisul wasaaraha xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Xasan Cali Kheyre
Raisul wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Xukuumadda Federaalka
WasaaraddaGanacsiga & Warshadaha
Xafliska Wasiirka

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
وزارة التجارة والصناعة
مكتب الوزير

Federal Government of the Somali Republic
Ministry of Commerce & Industry
Office of the Minister

SUMMAD/00899/WGW/16 Date: 12/07/2016

XEER WASIIR Lr. 004

Ujeeddo: Hawlgalin Wakaaladda Maalgashiga iyo Horumarinta Iskaashatooyinka - UDHIS

Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha

Markuu arkay: Qodobka 99aad, (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG
Markuu arkay: Qodobka 102aad, (1) ee Dastuurka KMG
Markuu arkay: Warqada summadeedu tahay: **00644/WGW/16** ee 23/01/2016, kuna saabsan Dib-u-hawl galinta Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed (UDHIS)
Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirada ee summadeedu tahay: **SHGW.00.057.02.16** ee 18/02/2016, kuna saabsanaa ansaxinta Qaab-siyaasadeedka Sharci ee lagu hawl galinaayo Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed (UDHIS) oo uu Golahu cod buuxa ku ansaxiyey.
Markuu arkay: Xeer-hoosaadka Wakaaladda Maalgashiga iyo Horumarinta Iskaashatooyinka - UDHIS ee summadiisu tahay: **1t/UDHIS-Wakaalad/02/2016** ee 26/02/2016, kuna saabsan hawl galinta Wakaaladda ee u adeegta Iskaashatooyinka dalka dhanka horumarinta wax-soosaarkooda iyo maareeynta hawlahooda ganacsi iyo maalgashiga hantidooda guurtada iyo ma-guurtada.
Markuu arkay: Warqada Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed (UDHIS) ee summadeedu tahay: **UDHIS-Wakaalad/1d/03/2016** ee 06/03/2016, kuna saabsan u magacaabista xilka Maareeyaha Wakaaladda Dr. Yahie Yusuf Haji-Ali.
Markuu tixgaliyey: Codsiga Ururka UDHIS iyo baahida ay u qabto Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha iyo Wasaaraddaha kale ee wada-shaqeeyn joogta ah la leh Iskaashatooyinka dalka, in si dagdag ah loo hawl galiyo Wakaalada Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka – UDHIS

Waxuu xeeriyey:

Qodobka 1aad: Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, oo ay Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha uga masuulka tahay dhanka Iskaashatooyinka Ururka UDHIS, waxay aqoonsatay Xeer-hoosaadkii Ururka ee lagu hawl galiyey Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Ishaashatooyinka – UDHIS ee dhaqan-galay maalintii 26/02/2016 iyo Warqada magacaabista Maareeyaha Wakaaladda oo ay u doorteen Dr. Yahie Yusuf Haji-Ali

Qodobka 2aad: Xeerkan waxuu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha Xukuumadda JFS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Eng. Qabdirashiid Maxamed Axmed
Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha

E-mail: moci@moci.gov.so/ motinsom@gmail.com Contact phones: +252-619521111/ +252699960547

Ururka Dhaq-dhaqaaqa
Iskaashatoovinka Soomaaliveed -

Muqdisho: 26/02/2016

XEER-HOOSAAD (Sharci Gaar ah)
Lr: 1T/UDHIS-Wakaalad/02/2016

XEER-HOOSAADKAN WAXAA DIB LOOGU HAWL-GALIYAY WAKAALADAHII URURKA UDHIS, SIDA: WAKAALADDIISOO-BIXINTA, DHOOFINTA & TIRADA ALAABTA IYO SAHAYDA MARAAKIIBTA OO MAANTA AY TAARIIKHDU 26/02/2016 SI BUUXDA LA HOOS-GEEYEY, LANA AASAASAY:

WAKAALADDA MAALGASHIGA & HORUMARINTA ISKAASHATOOYINKA – UDHIS,

OO NOQONEYSA DALLADA WAKAALADDAHA EE MIDEEYNEYSA: 1) WAKAALADDA SOO-BIXINTA ..., 2) WAKAALADDA DAN'WADAAGTA, 3) WAKAALADDA SHIDAALKA ISKAASHATOOTINKA, ... IWM

XEER-HOOSAADKAN AYAA LAGU SALEEYEY SHARCIGA CUSUB IYO KUWII HORE EE KALA AH:

(SHARCI Lr.40, 04/10/1973) EE LAGU DHISAY (ISKAASHATOOYINKA SOOMAALIYEED)

&

(SHARCI Lr.41, 8/10/1979) EE LAGU MIDEEYEY ISKAASHATOOYINKA "URURKA UDHIS", (URURKA DHAQDHAQAAQAISKAASHATOOYINKA SOOMAALIYEED")

&

(SHARCI Lr.9,18/03/1980) EE LAGU HORMARIYEY
ISKAASHATOOYINKA "URURKA UDHIS"
KUNA SOO BAXAY DIKREETO MADAXWEYNE Lr.2R3, MUQDISHO:
29 MAARSO 1980
&
(DIKREETADA SUMM: SHGW.00.57.02.16 OO AY GOLAHA
WASIIRADA, MAALINTII 18/02/2016 KU ANSIXIYEEN QAAB-
SIYAASADEEDKA SHARCIGA CUSUB EE URURKA
ISKAASHATOOYINKA UDHIS.
&
... AYAA MAANTA URURKA DHAQ-DHAQAAQA
ISKAASHATOOYINKA SOOMAALIYEED IYO WASAARADDA
GANASIGA & WARSHADAHA WAXAY ISKU RAACEEN XEER-
HOOSAADKAN IN:
DIB LOOGU HAWL-GALIYO, KADIBNA LA HOOS-GEEYO
WAKAALADAHII URURKA UDHIS
U ADEEGI JIRAY, AYADOO LA AASAASAYO WAKAALADDA GUUD
OO AH:

WAKAALADDA MAALGASHIGA & HORUMARINTA ISKAASHATOOYINKA – UDHIS

(COOPERATIVES INVESTMENT & DEVELOPMENT AGENCY – COOP Agency)

Xeer-hoosaadka waxuu siinaya Wakaalada Guud (Sharci gaar ah), waxaana lagu xoojinayaa Dikreeto Wasiir, kadibna Dikreetada Madaxweynaha JFS. Wakaaladda ayaa si madax banaan heshiis kula gali karto Shirkadaha dalka & kuwa Shisheeye ee maalgashanaya tacabka wax-soosaarka Ishaashatooyinka dalka, iyo sidoo kale Wakaaladda in ay maareeyso mashaariicda horumarineed oo ay Dawlada Soomaaliya ama Dalalka iyo Hayadaha Caalamka ugu deeqaan Iskaashatooyinka, si ayagana u gaarsiiyaan Xubnahooda iyo dalkaba 'isku-filnaansho cunto"

XEER-HOOSAAD (Sharci Gaar ah)
Lr: 1T/UDHIS-Wakaalad/02/2016

Maanta oo ay taariikhdu tahay 26/02/2016, Gudoomiyaha Ururka Dhaq-dhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed – UDHIS, asagoo la tashanaya Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha, oo ah Wasaaradda kor-joogteeynta ku leh hawlaha Iskaashatooyinka dalka, asagoo isla markaana eegaya Qodobka 14-aad, Farqadiisa 8-aad ee Dastuurka, Qaab-siyaasadeedka –Sharci ee Ururka UDHIS – ayaa waxuu iskugu yeeray Guddiga Abaabulka Dag-ddaga ee Ururka UDHIS oo kadibna shiriyey Madax-Guddiyeedyada iyo Xubnaha Iskaashatooyinka ee heer Tuulo, Degmo iyo Gobol, ayagoo si wadajir ah u go'aamiyey in meelmariyo Xeer-hoosaadkan oo Qobadiisa halkan ku faafaahsan yihiin.

Qeybta 1aad: Magaca iyo Astaanta Wakaaladda

Qodobka 1aad

Magaca Wakaaladda waa: "Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka –UDHIS (Cooperatives' Investment & Development Agency, or **COOP Agency**). Wakaaladda waa Qeyb kamid ah Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed, oo leh Sharciyad u gaar ah oo ay si madax-baanan u gudan karto waajibaadkeeda shaqo ee ku xusan Xeer-hoosaadkan.Wakaaladda waxaa lagu diwaan-galinaa DikreetadaWasiirkaWasaaradda

Ganasiga & Warshadaha, oo ah Wasaaradda koorjeegteynta iyo masuulka uga ah Golaha Wasiirada arrimaha Iskaashatooyinka ee ku saabsan Horumarinta ganacsigooda gudaha, iib-geeyntooda dibada iwm, ayadoo Wasaaradda arrimahaasi u wakiilaneyso Wakaaladdan.

Qodobka 2aad

Astaanta Wakaaladda waa: sidatan

Qeybta 2aad: MideeyntaWakaaladdahii hore

Qodobka 3aad

Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka UDHIS "Cooperatives' Investment & Development Agency" ayaa noqoneysa Dallada Guud eedhamaan Wakaaladaha u adeega Ururka Dhaq-dhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed – UDHIS.Wakaaladahaa ayaa Xubno ka noqonaya, ama hoos Imaanaya Wakaaladda Guud. Wakaaladahaas waxay kala yihiin: a) Wakaalada Soo-bixinta, Dhoofinta & Tirada Alaabta iyo Sahayda Maraakiibta, b) Wakaalada Danwadaagta, c) Wakaalada Shidaalka Iskaashatooyinka, iyo kuwa kale oo dib loo dhisayo.Wakaalada Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka ayaamideeyneysa dhamaan Wakaaladahaas kor ku xusan,hadda waxii ka dambeeya loogu yeerayaa 'Wakaalado-Hoosaadyo".

Qodobka 4aad

Wakaalad-Hoosaadyada sida:"Wakaaladda Soo-bixinta, Dhoofinta & Tirada Alaabta iyo Sahayda Maraakiibta", ayaa noqonayailaha iyo laf-dhabarta dhaqaale ee Wakaaladda Maalgashiga &Horumarinta Iskaashatooyinka. Wakaaladda Soo-bixinta, Dhoofinta & Tirada Alaabta iyo Sahayda Maraakiibta ayaa qabata adeegyo kala duwan, waxayna Dhismo Xarun dhexe ay ku leedahay agagaarka Dakada

Muqdisho, ayadoo horey usii wadaneysaa hawlaheeda adeeg-bixin oo ay ka qabato Dakada Muqdisho, guud ahaana dakadaha dalka iyo qaybooyinkooda kala duwan.

Qeybta 3aad: Ujeedooyinka iyo Hiigsiga Wakaaladda

Qodobka 5aad

Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Isaashatooyinka UDHIS waxay ujeedooyinkeedu yihiin:

1) Tayeeynta Xubnaha Iskaashatooyinka dalka dhanka ka-ganacsiga waxsoosaarkooda iyo maalgalintooda iyo suuq-geeyntooda gudaha & iib-geeynta dibada iyo kor u'qaadista aqoonta Xubnaha Iskaashatooyinka beeraleeyda, kaluumaysatada, xoolo-dhaqatada, farshaxanka & warshadaha, gaadiidleyda, kuwa dhismaha, kuwa quudka iyo adeega, ...iwm.
2) In ay maareeyso, abaabusho ayna xeer-nidaamiso Shirkadaha dalka iyo dibada ee doonaya inay hantidooda iyo qibradooda ku maalgashtaan Iskaashatootinka dalka.
3) In ay diyaariso codsiyada, baahiyada iyo mashaariicda horumarineed oo ay Iskaashatooyinkeena ka codsanayaan Dalalka iyo Ururada Caalamiga.
4) In ay gacan ka siiso Shirkadaha maalgashanaya Iskaashatooyinka dalka adeegyada: Latalinta Sharciga, qaadashata Shatiyada, qorista Heshiiyada & Nadaamka Qandaraas-qaadashada.
5) In ay Xubnaha Iskaashatooyinka ay u iftiimiso xuquuqdooda iyo danahooda masaalixeed ee ugu jirta Heshiis kasta ee maalgashi, ayadoo Wakaaladda ugu adeegaysa dhan walba, xaga Sharciga, xiriirka Wasaaradaha, Maxkamadaha, Notaayayaasha, iwm.
6) Wakaalada Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatootinka UDHIS ayaa tayeeyso Iskaashato kasta sida kuwa Beeraleeyda, ayadoo

kala kaashaneysa Wasaaradda Beeraha waxay maareyneysaa mashaariicda kor loogu qaadayo xirfadooda nidaaminta & dhul-diyaarinta (geedqaadista) casriga ah iyo nafaqeyntiisa, ayadoo ay Wakaalada ka shaqeeynayso sidii dib loogu dayac-tiri lahaa kanaaladii waraabinta beeraha ee ka duugmay, xoogana saaraysa sidii loo qodi lahaa kuwo cusub, isla markaana loogu sameyn lahaa biyo-xireeno si beeraleyda looga badbaadiyo fatahaadaha webiyada iyo daadadka biyo-roobaadka ee buux-dhaafiya webiyada, misena ay Wakaalada u raadiso Iskaashatooyinka beeraleyda abuur daaweysan iyo qalabyo casri ah ee dhanka dhul-diyaarinta, geed-qaadka, gooynta iyo finjilkaba, si markaa looga hortago cunto-lumista iyo dib-u-dhaca soo wajihi kara wax-soosaarka dhinaca tabcashada beeraha.

7) Wakaalada waxaa ujeedooyinkeeda ka mid in ay wada-shaqeeyn dhow la yeelato Wasaaradda Kaluumeysiga si ay u hormariso Iskaashatooyinka Kaluumaysatada. Inkastoo ay baaba'een qalabyadii bariga oo ay Iskaashatooyinka Kaluunka uga shaqeynayeen kaluunka sida keydintiisa kala duwan, ayaa Wakaalada waxay ka shaqeynayaa sidii Iskaashatooyinka kaluumeysiga u heli lahaayeen qaboojiyayaal, doomo, qalab kaluumeysi oo casri ah iyo qaababka kale.
8) Wakaalada waxay gacan ka siinaysaa Iskaashatooyinka Xoolaha, Dhirta & Keymaha kahortagista xaalufinta degaanka iyo nabaad-guurintiisa, misena ka taxadareeysa qorshooyinka oo ay Iskaashatooyinka Dhuxusha u jaan-gooyaan siyaasadooda ugu aadan Shidida Dhuxusha iyo ka-ganacisigeeda. Wakaalada waxay keeneysaa hanaan cusub ee dhir iyo coows beeris ah, looguna tala galay xoolaha, ayagoo kala kaashanaya Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa. Wakaalada waxay isla markaana u diyarinaysaa Iskaashatooyinka Xool-dhaqatada tababaro lagu kobcinayo aqoontoodooda dhanka xanaanaynta iyo naaxinta xoolaha iyo xirfadaha kale sida caanahooda looga

faaiideysto, oo looga dhigi karo farmaajada, buurada, jumnada iwm.

9) Wakaalada waxay xooga saaraysaa Iskaashatooyinka Adeega ee muruq-maalka sidii shaqoabuur loogu sameeyn lahaa Dekadaha dalka iyo qaybaha ay dhismooyinka dalka ay ka socdaan, ayadoo isku abaabuleysa Iskaashatooyinka Dhismaha, wada-shaqeeyn dhow la yeelaneysa Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Dib-udhiska. Wakaaladda waxay Wasaaradda kala shaqeeyneysaa sidii loo ilaalin lahaa xuquuqda Iskaashatooyinka Dhismaha ee ka shaqeeysta Kaawooyinka dalka iyo dhulalka laga soo saaro dhagaxa, jaayga, gibsiga, ciida, shamiindada iwm, ayadoo ayaga siineysa ahmiyada koowaad, kana difaaceysa Shirkada Shisheeye iyo ay Wada-jirka (Joint-venture'ka) ula leeyihiin Soomaalida ee ka boobaya shaqooyinkooda. Wakaalada waxay Iskaashatooyinkaa u raadineysaa qalabyada forootiyinka casriga ee dhagaxa.

10) Wakaaladda waxay dib u'habeeyn ku sameeneysaa Iskaashatooyinka Gaadiidleyda (Basaska yaryar, kuwa waaweeyn, tagaasyada, Bajaajka, Gawaarida xamuulka ee Dakadaha, kuwa dhagaxa dhismaha, kuwa Beeraha Cagafyada kala duwan...iwm. Waxay dib usoo celin doontaa Hoosooyinka iyo Garaashayada lagu cilad-bixiyo Gaadiidka Iskaashatooyinka, ayadoo u tababarayso Iskaashato makaaniik ee heegan u ah hawlaha dayac-tirida.

11) Wakaalada waxay isku abaauleysaa Iskaashatooyinka Shidaalka, ayadoo dib-udayactireysa Kaalimahii Shidaalka ee oo ay ka'shilaal qaadanayeen Iskaashatooyinka Gaadiidka ee ku xusan.

12) Sidoo kale waxay tayeeyneysaa Iskaashatooyinka farsamo--gacneedka ee Farshaxanka kuwa sameeya dharka aliindiga, iyo kuwa soo saara farshaxanada kala duwan ee dhaqankeena.

13) Dhanka Quudka iyo Adeega, Wakaalada waxay xooga saaraysaa Faya-dhowrka Kawaanada iyo Suuqyada Hilibka, Kaluunka iyo Qudaarta, iyo nadaamka xirxirista (packaging) ee suuq-geeynta.
14) Waxay ka taakuleeyneysaa Iskaashatooyinka Xoolo-dhaqatada iyo Beeraleyda dhanka qodista ceelal oo ay biyaha ka waraabiyaan xoolahooda, qoysaskooda iyo beerahooda.
15) Wakaalada la imaaneysaa istaraatejiyad lagu ceyminayo Xubnaha Iskaashatooyinka kuwa Muruq-maalka, kuwa beeraleeyda, xoolodhaqatada, kaluumaysatada, kuwa dhismaha kaawooyinka ayadoo u dhiseeysa Caymis Iskaashato oo casri ah.
16) Wakaalada waxay la dhiseeysaa Ururka UDHIS Nadaam Bangi "Cooperative Bank" oo loogu talagalay Dhigaalka, Khidmadaha Soo-gelista iyo Lacagaha Deymaha ee lagu hormariyo Iskaashatooyinka dalka.

Qodobka 6aad

Hiigsiga guud ee Wakaaladda waa kor u-qaadista dhaqaalaha, dhiira-galinta maalgashiga, tayeeynta, kobcinta waxsoosaarka Iskaashatooyinka Soomaalyieed.Wakaalada Hadafyadeeda waa:1) Wakaalada Maalgaashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka waxuu hadafkeedu yahay in ay kusoo xiriiriso IskaashatooyinkaShirkadaha Maalgashanaya beerahooda, kalumaysiga, xoolaha dhismaha gaadiidka, warshadaha & farshaxanka, quudka iyo adeega 2) Hiigsiga Wakaaladda waxaa udub dhexaad u ah sidii ay Iskaashatooyinka ku gaari lahaayeen horumar iyo isku-filnaansho dhaqaale iyo maalgashi faaiido keenaya. 3) Sidii ay Xubnaha Iskaashatooyinka kor ugu qaadi laheeyd aqoontooda xirfadeed, tacabkooda iyo tayadooda waxsoosaar, isla markaana badeecadoodaloogu heli lahaa suuq-geeyn gudaha iyo dibadaba, sidii loo buraarujin lahaa waa inay helaan 4) In ay dhisto Telefishan

u qaas ah Iskaashatooyinka Waxsoosaarkooda, loona dhisi lahaa Kooxo Isbootiga iyo Fanka u matala Iskaashatooyinka, 4) Sidii Wasaaradaha iyo Jaamacadaha dalka ay ugu abaabuli laheeyd shirar aqoonis-waydaarsi ee ku saabsan siyaasadaha iyo istraatejiyadaha caalamka ee lagu hormariyo beeraha, kaluumaysiga, xoolaha, iwm

Qeybta 4aad: Xarunta dhexe ee Wakaaladda

Qodobka 7aad

Xarunta Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka – UDHIS ayaa waxay noqoneysaa Magaalada Muqdisho, Dhismaha-Xaruntadhexe ee Wakaaladda Soo-bixinta, Dhoofinta & Tirada Alaabta iyo Sahayda Maraakiibta, oo ay ku leedahay agagaarka Albaabka dhanka bari ee Dakada Muqdisho.Wakaalado-hoosaadyada kale ee hoos yimaada Wakaaladda waxay Xafiis ku meelgaarka ah ku yeelan karaan Xarunta dhexe ee Wakaaladda ama meelo kale.

Wakaaladda waxay xafiisyo ku yeelan kartaa dhamaan magaalooyinka Xarunta u ah Dawlad-Goboleedyada dalka ka jira, ayadoo u dirsaneeysa U'Qeybsane.Waxayna sidoo kale Xasiisyo ku yeelan kartaa dalka dibadiisa, qaasatan Xafiisyada U'Qaabilsanayaasha Ganansiga ee dibada.

Qeybta 5aad: XubnahaWakaaladda

Qodobka 8aad

Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka waxaa Xubno ka ah Wakaalado-hoosaadyada kala ah: a) Wakaalada Soo-bixinta, Dhoofinta & Tirada Alaabta iyo Sahayda Maraakiibta, b) Wakaalada Danwadaagta, c) Wakaalada Shidaalka ee

Iskaashatooyinka, iyo kuwa kale oo dib loo dhisayo, oo ka mid ah Wakaaladahii hoos imaan jiray Ururka Iskaashatooyinka.

Waxaa kaloo xubno ka ah Wakaalado-hoosaadyada u adeegaya lixda Ururo Iskaashatooyin ee heer Maamul-Goboleed iyo Gobolka Benaadir. Wakaalado-hoosaadyadaa ayaa loogu yeerayaa: 1) Wakaaladda Iskaashatooyinka Beeraha, 2) Wakaaladda Iskaashatooyinka Kalluunka, 3) Wakaaladda Iskaashatooyinka Xoolaha, Keymaha iyo Xijiga,4) Wakaaladda Iskaashatooyinka Gaadiidka iyo Dhismaha, 5) Wakaalada Iskaashatooyinka Warshadaha iyo Farshaxanka, 6) Wakaaladda Iskaashatooyinka Quudka iyo Adeegga,... iyo Wakaaladdaha kale ee iska soo diwaan-galinaya, sida Wakaaladda Iskaashatooyinka Biyaha & Tamarta, Wakaaladda Iskaashatooyinka Xanaanada Digaaga, iyo kuwa la mid ah.

Wakaaladda waxay u dirsan kartaa Maamul-Goboleed kasta "U'Qeybsane" u adeegaya lixdaUruro Iskaashatooyin ee heer Maamul-Goboleed (+ Gobolka Banadir)

U'Qeybsaha Wakaaladda waxuu Xafiis ka furanayaa Xarunta Maamul-Gobolka uu ka hawlgalayo, asagoo ku shaqeeynaya awaamiirta Maareeyaha Guud ee Wakaaladda.

Qeybta 6aad: Sharciyada Wakaaladda

Qodobka 9aad

Xeer-hoosaadkan ayaa waxaa lagu dhisay "Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka – UDHIS'ayadoo lagu hoos-keenayo dhanaan Wakaaladahii horey ugu adeegi jiray Ishaashatooyinka dalka.Xeer-hoosaadkan ayaa waxuu Wakaaladdu lagu siinayaa Sharciyad gaar u ah, waxuuna dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Gudoomiyaha Ururka UDHIS, asagoo kadibna magacaabaya Maareeyaha Wakaaladda Maalgashiga &

Horumarinta Iskaashatooyinka.Xeer-Hoosaadkan ayaa laga diwaangaliyaa, laguna soo saarayaa Dikreetada Wasiirka Wasaaradda Ganasiga & Warshadaha, oo ah Hay'ada korjeegteeynta iyo masuulka ka ah Iskaashatooyinka dhanka Golaha Wasiirada iyo Hayadaha kale ee dalka.

Xeer-hoosaadkan ayaa sidoo kale lagu xoojinayaa Dikreetada Madaxweynaha, sidii horeybaay loogu soo saaray Wakaaladdii hore ee la hoos keenay Wakaaladdan.

Wakaaladdahii hore ee la hoos keenay Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka – UDHIS, ayaa horey u sii wadanaya adeegyadii ay u haayeen Iskaashatooyinka iyo dalkaba.

Qodobka 10aad

Xeer-hoosaadkan ayaa maadaama loogu tala galay inuu mideeyo Wakaaladdii hore una sameeyo Dallad Guud, ayaa hababa Wakaaladahii horewaxii hada laga bilaaboloogu yeerayaa Wakaaladdo-hoosaadyo, ayadoo mid kasta ay leedahay sharci lagu dhisay, laakiin kaliya lagunaxoojinayo Xeer-hoosaadkan.Tusaale ahaan sida: Wakaaladda Soo-bixinta, Dhoofinta & Triada Alaabta iyo Sahayda Maraakiibta ayaa markii hore lagu dhisay Xeer (**Sharci L.17**)ee soo baxay 16 Maarso 1978 **Tixraaca ujeedo ee sharcigaas:**"ayadoo la tixgalinayo baahida dhaqaale ee heysata Ururka Dhaq-dhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed, oo ah Urur dhawaan la aasaasay, loona baahday in loo abuuro illo dhaqaale, ayaa waxaa la gudoondsaday in la dhiso 'Wakaalad cusub' oo hawsheedu tahay Soo-bixinta, Dhoofinta & Triada Alaabta iyo Sahayda Maraakiibta". **(Tixraaca qobobo ee sharcigaasoo qoraya:**"Qododka 1aad: Dhismaha Wakaaladda, Qodobka 2aad: Xarumta & Laamaha Wakaaladda, Qodobka 3aad: Ujeedooyinka Wakaaladda,Qodobka 4aad: Hawlaha Wakaaladda,

Qodobka 5aad:Awooda Wakaaladda, Qodobka 6aad:Kormeerka; Qodobka 7aad: Maareeyaha Guud, Qodobka 8aad: Hawlaha Maareeyaha Guud (eeg ilaa Qodobka 18aad)

Qodobka 11aad

Hadaba, **Qodobka 25aad iyo 26aad**ee Xeerka Ururka ee ka hadlayey Wakaaladaha Ururka ayaa lagu badalay Qodoba Xeer-hoosaadkan ayadoo kaliya Wakaaladahaa la mideeyey, lana hoos keenay Wakaaladd Guud ee noqoneysa:**Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka – UDHIS**. Wakaaladda ayaa qabaneysa hawlaha Iskaashatooyinka arrimaha:**maareeynta, Horumarinta wax-soosaarka Iskaashatooyinka, dajintasiyaasada lagu maalgashanayo tacabkooda wax-soosaar, istraatejiyada suuq-geenta wax-soosaarkooda gudaha & dibada, diyaarinta mashaariicda horumarineed ee lagu tayeeynayo Iskaashatooyinka dalka.**

Qeybta 7aad: HantidaWakaaladda

Qodobka 12aad

Hantida Wakaaladda Malgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka waxay ka kooban tahay, oo ay ka imaanaysaa ilaha hoos ku xusan, oo kala ah:

1) Hantidii Guurtada & Ma'guurtada Wakaaladda (oo inta badan ka maqan gacanteeda)
2) Khidmooyinka ay bixiyaanXubnaha ka tirsan Wakaaladda.
3) Khidma-qaadista iyo soo-galintaanka guud ee kale, kuwaasoo ay soo xareeyaan Wakaalado-hoosaadyada ka farcama Wakaaladda (sida "Wakaaladda Soo-bixinta, Dhoofinta & Tirada Alaabta iyo Sahayda Maraakiibta, oo dakhli balaaran u xareeyn jirtay Wakaaladda iyo Ururuka Ururka Iskaashatooyinka UDHIS, ayadoo kaligeeda ku filneeyd

taakuleeynta Iskaashatooyinka beeraleyda, kaluumeysatada, xoolaleyda... marka ay aafooyinka dabiiciga ah ay soo food-saaraan. Waxaa kaloo ay dakhli fiican ka heli jirtay Wakaaladda Shidaalka Iskaashatooyinka oo sidoo kale laheeyd Xarumo Kaalimo Shidaal ah, ayadoo si joogto ah usiin jirtay shidaalka Gawaarida Iskaashatooyinka dalka oo idil.

4) Iyo Kaalmada ay Dawlada iyo Ururada Caalamiga u fidiyaan Wakaaladda.

Xeer-nadaamiye gaar ah ayaa lagu soo saarayaa Hantida Ururka Guurtada iyo Ma'guurtada, iyo sidoo kale Khidmooyinka (tariifooyinka) ay Wakaaladdaha "Wakaaladda Soo-bixinta, Dhoofinta & Tirada Alaabta iyo Sahayda Maraakiibta" iyo Wakaaladda Shidaalka Iskaashatooyinka ay dakhli ahaan ka helaan adeeg-bixintooda baaxada weynaa.

Qeybta 8aad: Maareeynta Hantida Iskaashatooyinka UDHIS

Qodobka 13aad

Wakaaladda ayaa ka masuul ah Maareeynta Hantida Guurtada & Ma'guurtada ee Ururka UDHIS

1) In Wakaaladda ay diyaariso, maareeyso, ayna qaado masuuliyada heshiisyada wadahal oo ay Iskaashatooyinka la galayaan Shirkadaha Maalgashi. Hantida Iskaashatooyinka oo ka kooban:

A. Hantidii joogtada ee Iskaashatooyinka 'dhulal, beero, warshado, qalabyo, kaalimo, hoosooyin;

B. Dhigaalka, Deymaha iyo Deeqaha kala duwan ee lagu hormariyo Iskaashatooyinka;

C. Khidmooyinkaiyo Faa'iidada ay ka hesho ganacsiga iyo iib-geeynta waxsoosaarkooda dibada;

D. Miisaaniyada horumarineed oo ay ka heshoDawlada ama Ururada& Wadamada Caalamka.

Qodobka 14aad

Ayadaa ka musuul ah Diyaarinta Heshiisyada Maalgashi ay "Shirkadaha Dalka"la galayaan UDHIS

1) In Wakaaladda ay maareeyso, maamusho, diyaarisana heshiisyada Maalgalinta Wadajirka ah oo ay Shirkadaha dalka la galayaan Iskaashatooyinka UDHIS, kuwaasoo noqonaya:

A. inShirkadaha dalka ay Hantidooda kula maalgashanaya Iskaashatooyinka; ama

B. in Shirkadaha dalka ay Qalabkooda-adeeg kula maalgashanaya Iskaashatooyinka, ama

C. inShirkadaha dalka oo Qibradooda-adeeg-bixin kula maalgashanaya Iskaashatooyinka.

Qodobka 15aad

Iyo Diyaarinta Heshiisyada Maalgashi oo ay "Shirkadaha Shisheeye" la galayaan Iskaashatooyinka

1) In Wakaaladda maareeyso, diyaarisana wadahadalada &heshiisyda Maalgashiga Wadajirka ah oo ay Shirkadaha Shisheeye la galayaan Iskaashatooyinka UDHIS: ("waxaa lagu dhaqayaa SHARCIGA MAALGASHIGA SHISHEEYEE ee uu ansaxiyey Golaha Shacabka 23/11/2016")

A. Shiradaha Shisheeye ee dibada u iib-geeynaya wax-soosaarka Iskaashatooyinka,

B. Kuwa maalgashanaya beeraha, kaluumaysiga, warshadaha iyo xoolaha Iskaashatooyinka, ama

C. Sirkadaha Shisheeye ee kula maalgashanaya Qibradooda & Qalabkooda Adeeg-bixin

Qeybta 9aad: Doorka Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha JFS

Qodobka 16aad

Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeeed - UDHIS ayaa asagoo eegaya **Qodobka 2aad, Farqadiisa 3aad:** ee Qaab-siyaasadeedka Sharciga cusub ee Ururka, misena ka ambaqaadayo Sharciyadii hore ee Sharci Lr.9/1980 ee lagu hormariyey Sharcigii Lr. 41/1979 ee qoraya in "Ururka Iskaashatooyinka UDHIS uu yahay Urur wax-soosaar, wuxuu awood u leeyahay inuu si toos ah uu u dhoofiyo xoolaha iyo badeecadda ay soo saaraan Iskaashatooyinka isagoo la kaashanaya Hay'adaha Dawladda ee ku shaqada leh Ganasiga iyo Dhoofinta badeecada", ayaa sidaa awgeed Ururka wuxuu garwaaqsaday in ay Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha noqoto Hayada korjoogteeynta ku leh ganacsiga, Maalgashiga iyo suuq-geynta waxsoosaarka Iskaashatooyinka dalka.

Farqadaas 3aad, xarfahiisa:b) In ay Wasaaraddu kor-joogteyn ku yeelato Ururka, isla markaana ay gacan ka siiso Ururka UDHIS sidii Qaab-siyaasadeedkan (iyo xeer-hoosaadyadiisa dambe) ay Golaha Wasiirradu ku meel-marin lahaayeen, iyo in Wasaaradu si joogto ah u difaacdo Ururka UDHIS su'aalaha iyo weydiimaha kaga iman kara Golayaasha Dawladda; iyo

Farqada 3aad xarafkiisa:t) In Wasaaraddu ka taageeerto Ururka UDHIS xaaladaha degdega ah ee Ururkakasoo wajihi kara dhinacyada: **(i)**Is-maandhaafka iyo su'aalaha ay soo weydiin karaan Wasaaraddaha kale ee Xukuumadda ee uu Ururku la-wadaago Istraatijiyad iyo Hadaf shaqo; iyo **ii)**Arrimaha ganacsiga dibadda, sidii ay markasta "U-qeybsanayaasha Ganacsiga" (Commercial Attachees) ee Wasaaradda, ay gacan buuxda uga siin lahaayeen Ururka hadafkooda ganacsi ee dibadda, iyo xaalad kasta ee ganacsiga dibadda khuseysa haddii ay lasoo gudboonaato Ururka.

Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha waxay u wakiilan kartaa hawlaheeda korjoogteeynta Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka, oo sidoo kale dhanka Ururka UDHIS ka heysato 'Sharciyad Gaar' oo sheegayo Xeer-hoosaadkan, ayadoo si madax-banaan u gudan karta hawlaha kobcinta ganacsiga, maalgashga iyo suuq-geynta waxsoosaarka Iskaashatooyinka UDHIS.

Qeybta 10aad: Shirarka Wakaaladda

Qodobka 17aad

Shirarka Wakaaladda ayaa waxay Wakaaladda kusoo saari doontaa Xeer-nidaamiye, kadib marka soo dhisato Qaab-dhismeedka ay isku maamuli doonto

Qeybta 11aad: Maareeynta Wakaaladda

Qodobka 18aad

1) Maareeyaha Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka UDHIS waa masuulka ugu sarreeya Wakaaladda ee hogaaminaya hanaanka ay ku shaqeeyso Wakaaladda, waxuu magacaabi karaa dhamaan xubnaha ka shaqeeya Wakaalaha Maamulayaasha Qayaha, Laamaha iyo Wakaalo-Hoosaadyada maamula Wakaaladaha ka hoos farcama Wakaalada Maalgashiga iyo Horumarinta UDHIS iyo kuwa Maamul-Goboleedyada intaba.
2) Maareeyaha Wakaaladda waxaa magacaasitiisa soo jeedinaya Guddiga Abaabulka Dagdaga ee Ururka UDHIS, waxaa xilka ka qaadaya ama u kordhinaya Shirweyaha Guud ee Ururka UDHIS ee dhaca 5tii shantii sano mar. Waxaa lagu soo saarayaa Xeer-hoosaad, oo kadib markuu saxiixo Gudoomiyaha Ururka UDHIS noqonayo mid dhaqan-gal ah.

3) Maareeyaha waxuu dajiyaa siyaasadda, istarateejiyada, mashruuc & dhaqaale abuurka, mushaharaadka, maareeynta isku daba-ridka shirkada dalka iyo kuwa shisheeye ee maalgashanaya Iskaashatooyinka dalka.
4) Maareeyaha waxuu u wakiilan karaa hawshiisa inta uu ka maqan yahay xafiiskiisa mid ka mid Maamulayaasha Qaybaha hoos yimaada Wakaaladda.
5) Maareeyaha wuxuu shir-gudoomiyaa, uuna soo jeediyaa waqtiyada Kulanada (shirarka) ay yeelanayaan Madaxda Wakaaladda.
6) Ugu dambeeyn, haddii Xubin kamid ah Maamulayaasha Qaybaha ama Madax-qeebeedyada ka hooseeyo iyo Shaqaaalaha kale ee Wakaaladaba uu mid kamid ah banneeyo jagadiisa si kastaba ha ku dhacdee Xubintaas bedelkeeda waxaa soo magacaabaya Maareeyaha Wakaaladda.

Maareeyaha Wakaaladda Maalgashiga & Horumarinta Iskaashatooyinka waxuu Xubin ka noqonayaa Guddiga Abaabulka Dagdaga.Guddiga ayaa ayadoo la tixraacayo Dastuurka **Qodobka 14aad, Farqadiisa 8aad:** waxuu si cad u qeexaya Guddiga iska leh Go'aan-Gaarista Dagdaga.Guddiga inta laga gaarayo Shirweynaha Guud ee Ururka. Guddiga waxuu ka jawaabi karaa, diyaarin karaa, ku dari karaa, isla markaana hor'geeyn karaa waxii sharci, xeer-hoosaad ee Ururka UDHIS, ama hindiso & xeer-sharciyeed, qaab-siyaasadeed, heshiis ama xeer-nidaamiye kasta oo ay soo waydiiyaan Golaha Wasiirada, Golaha Shacabka, Madaxtooyada, Xafiiska Raiisul Wasaaraha, Maxkamada Sare iyo kuwa Gobolada, Notaayayaasha, Wasaaradda Ganacsiga & Warsahadaha iyo Wasaaraddaha ama Hay'adaha kala duwan ee dalka, wada-shaqeeynta la yeelan kara Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed – UDHIS.

Xeer-nidaamiye gaar ah ayuu Maareeyaha Wakaaladda kusoo saarayaa hanaanka anshax-marinta iyo kala dambeeynta-maamul ay kala leeyihiin Masuuliyiinta ka hooseeysa Maareeyaha Wakaaladda.

Qeybta 12aad: Qaab-dhismeedka Wakaaladda

Qodobka 19aad

Qaab-dhismeedka Wakaaladda ee kumeel-gaarka ah waxuu noqonayaa sidatan:

Maareeyaha Guud ee Wkaaladda

Xogheynta Maareeyaha Wakaaladda

Maamulaha Wakaaladaha hoos yimaada Wakaalada

Maamulaha Arrimaha Maalgashiga

Maamulaha Arrimaha Horumarinta

1) Wakaaladda Soo-bixinta, Dhoofinta & Tirada Alaabta iyo Maraakiibta
2) Wakaaladda Shidaalka Iskaashatooyinka UDHIS
3) Wakaaladda Danwadaagta (ee mashaariicda beeraha, kaluunka, xoolaha...
4) Iyo Wakaaladda horumarinta iyo wadar-maalgashi la sameeysa Shirkadaha, ee isticmaasha Sanduuqa Maalgalinta 40% ee Ururka UDHIS.

Qeybta 11aad: Faiidada Wakaaladda

Qodobka 20aad

Marka laga bixiyo kharashaadka wixii saafi ah ee ka soo hara dakhliga Wakaaladda waxaa lagu soo saarayaa Xeer-nidaamiye gaar ah nadaamka loogu qeybinayo Sanduuqyada Wakaaladda.

Qeybta 12aad: Dhaqan-gal

Qodobka 20aad

Xeer-hoosaadkan wuxuu dhaqan-gal noqonayaa marka uu saxiixo Gudoomiyaha Ururka Dhaq-dhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed – UDHIS.

Madane Cali Cabdulle Guure

Godoomiyaha Ururka Dhaq-dhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed – UDHIS

XEER RAISUL-WASAARE Lr. 424/05/2017 Taariikh: 06/05/2017

ANSIXINTA RUGTA GANACSIGA IYO WARSHADAHA

RA'IISUL WASAARAHA XUKUUMADDA JFS

MARKUU ARKAY: Dastuurka Dalka ee 1960-kii

MARKUU ARKAY: Baahida Ganacsatada Soomaaliyeed ay u qabaan maamul mideeya iyo baahida Dalka uu u qabo Dhismaha Rugta Ganacsiga

MARKUU TIX-GELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha, kuna aadan ansixinta Dhismaha Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, wuxuu soo saarayaa Dekreeto ku aadan ansixinta Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed

Qodobka 1aad

Aqoonsi Madaxda Rugta

Wuxuu Ra'iisul Wasaaruhu ku oggolaaday kuna ansixinayaa dekreetadan doorashada Madaxda Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed, ee ka dhacay Muqdisho taariikhdu markay aheyd 09/03/2017

Qodobka 2aad

Dhaqan-gal

Dekreetadan waxay dhaqangelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

MUQDISHO 06/05/2017

Federal Government of the Somali Republic
Ministry of Commerce & Industry
Office of the Minister

Ku: Ra'iisul-Wasaaraha XFS
Og: Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliya
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

UJEEDO: Aqoonsiga Doorashada Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha

Mudane Ra'iisul wasaare,
Iyadoo ay Xukuumadda Federaalka ee Soomaaliya ay u taagan tahay horumarinta ganacsiga iyo ganacsatada soomaaliyeed , ayaa Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha XFS, abaabushay doorashada Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed oo ku dhacday Muqdisho taariikhdu markay ahayd **09/03/2017**.
Doorashada waxaa kasoo qeyb galay wufuud ka kala socotay rugaha ganacsiga iyo warshadaha Maamul Goboleedyada dalka ka jira oo dhan iyo goobjoogayaal ka kala socday qeybaha kala duwan ee bulshada rayidka iyo warbaahinta dalka ka jirta.
Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha XFS wuxuu doorkedu ahaa soo diyaarinta xeerka ay ku dhisan tahay Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha heer federaal, isugu yeeridda ergooyinka ka qeyb galay doorashada iyo ansixinta natiijada ka soo baxday kulan weynahaas.
Haddaba, waxay Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha XFS, si buuxda u aqoonsatay natiijadii doorashada iyo Gudoomkii la doortay, waxayna ballan qaadeysaa inay si toos ah ula shaqeynayso guddoonka cusub ee Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha, muddada **shanta (5) sano** ee ay xilka rugta haynayaan .
Ugu dambeyntii, waxaan si xushmad leh kaaga codsanaynaa in aad adigana ku darto taageeradaada ku saabsan natiijada doorashadaas.

Wada shaqeyn wacan.

Mudane xildh. Cabdirashiid Maxamed Axmed
Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha

SHARCI LR. 006/17 Taariikh: 08/08/2017

OGGOLAANSHAHA ANSIXINTA DIB U EEGISTA MIISAANIYADDA 2017

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobbada 4aad, 85aad iyo 87aad ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 63aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarafka 'F' ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Warqadda Lr. 0243/3/1/B-10/17 ee 08/08/17 kuna saabsan Ansixinta dib u eegista Miisaaniyadda 2017 ee Golaha Shacabka ee 06/08/2017

Markuu Arkay: Xeer Madaxweyne Lr. 004 ee 13/04/2017 kuna saabsan Oggolaanshaha Ansixinta Xeerka Qoondaha Miisaaniyadda 2017.

Markuu Tixgeliyay: Inuu Golaha Shacabka ansixiyay Dib u eegista Miisaaniyadda 2017 waqtigii habbonayd iyo si dardar loogu geliyo mushaharooyinka Ciidanka Qalabka sida iyo Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda.

WUXUU XEERIYAY

Qodobka 1aad

Laga bilaabo Maalinta uu Madaxweynaha saxiixo Sharcigaan, waxa la oggolaaday meel marinta Dib u eegista Miisaaniyadda 2017 soona ansixiyay Golaha Shacabka fadhigiisa 2aad, fadhigiisa 9aad ee 06/08/2017.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqangelayaa isla markuu Madaxweynuhu saxiixo, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS.

MUQDISHO: 06/08/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/032/2017
TAARIIKH 20/11/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

SHARCI LR. 04 Taariikh: 27/08/2017

ANSIXINTA DIB U EEGISTA MIISAANIYADDA 2017

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Faqaradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarafka 'F' ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Ref: 0243/3/1/B-10/17, Taariikh: 8/08/2017 kuna saabsan Ansixinta Dib-u- eegista Miisaaniyadda 2017 uuna u soo gudbiyay Madaxweynaha JFS si uu ugu rogo Sharci.

Markuu Tixgeliyay: Baahida loo qabo in dib-u-eegis lagu sameeyo Miisaaniyadda 2017

WUXUU SOO SAARAY XEERKAAN:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa la ansixiyay Dib-u-eegista Miisaaniyadda 2017 ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigaan dhaqan gelayaa isla markuu Madaxweynuhu saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 27/08/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO:
TAARIIKH
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XEERKA QOONDAHA KU NOQOSHADA MIISAANIYADDA 2017-KA

TIRSI 0015

HALKU-DHIGGA SANNADKAN 2017-KA

"KU TIIRSANAANTA DHAQAALAHEENA"

BAYAAN TIRSI 00011/2017
XEERKA DHAQANGELINTA KU NOQOSHADA MIISAANIYADDA SANADKA 2017 EE JAMHUURIYADDA FEDARAALKA SOOMALIYA.

Maadaama, uu qeexayo Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya in uu Golaha sharci dajintu ansixiyo, dhaqan galiyana miisaaniyadda Sanadlaha ah.

Maadaama, ay tahay lagama maarmaan in la ansixiyo, lana qaybiyo Miisaaniyadda Dowladda Federaalka ee Soomaaliya si ay ugu fuliso hawlaheeda sanad xisaabeedka 2017.

Haddaba, iyadoo laga duulayo qodobka 124rd xarafkiisa (a) ee Dastuurka KMG ah Dowladda Federalka Soomaliya, ayaa Golaha Shacabku ansixyey Miisaaniyadda 2017-ka ee faahfaahinteedu ku lifaaqan tahay halkan iyo xeerka dhaqangelinta Miisaaniyadda ee qodobadiisu hoos ku taxan yihiin: -

1. Qaybta Koowaad
Guud Ahaan

Cinwaan Gaaban

Xeerkan oo ka kooban bayaanno qodobeysan, faahfaahinta Miisaaniyada ayaa waxaa lagu magacaabay "Xeerka Dhaqangelinta Ku Noqoshada Miisaaniyadda Sanadka 2017-ka ee tirsi 00011/2017"

1.1 Qeexiid

Haddii aan si kale loogu fasirin xeerkan dhexdiisa, ereyada soo socda waxay yeelanayaa macnaha mid walba ku hor qeexan: -

1. "Qoondayn" waxaa loo la jeedaa amar kasta oo uu Golaha sharci dajintu ku amrayo in lacag laga bixiyo Miisaniyadda duduubka ah.
2. "Ansixin" waxaa loo la jeedaa ayidaadda uu ayido wasiirku, Miisaaniyadda ku diyaarsan walax kharasheedka qaab wafaqsan qoondo Miisaaniyadeedka uu Golaha sharci dajintu sameeyey.
3. "Kharashka Mashaaricda" waxaa loo laa jeedaa kharashka lagu bixiyo iibka iyo dayactirka hantida joogtada ah, oo ay ku jiraan kharashyada ay ka mid yihin kuwa tababarada iyo adeegyada latalinta.
4. "Gedab "waxaa loo la jeedaa waajibaadka noqonaya qaan hadiiba ama marka shuruudaha heshiis jiray ama sharci la fuliyo.

5. "Wasiir ama wasaarad" waxaa loo laa jeedda wasiirka maaliyadda ama wasaaradda maaliyadda hadba sida ay tahay.

6. "Xafiis dawladeed" waxaa loo la jeedaa xafiis kasta oo ka mid ah Dowladda Federalka Soomaaliya oo guud ahaan ama qayb-ahaan looga qoondeeyo miisaniyadda Dowladda ee bayaankan lagu xeeriyay.

7. "Kala wareejin" waxaa loola jeedaa ogolaanshaha kala warejinta Miisaaniyadda la qoondeeyey, lagana wareejiyo cinwaan, farac cinwaan mashruuc ama walax kharasheed laguna wareejiyo mid kale.

8. "Qaansheegatada" waxaa loola jeedaa shirkadaha ama shaqsiyaadka hay'adaha dowladda siiya adeeg ama agab.

1.2 Wadarta Miisaaniyadda La Qoondeeyey

Miisaaniyadda Dowladda Fedaraalka Soomaaliya ayaa si ay u meel-mariso hawlaha u qorshaysan Sanad misaaniyadeedka ka billaabma 1-da Janaayo 2017-ka kuna dhamaada 31, December 2017-ka, ayaa sida hoos ku xusan looga qoondeeyay dakhliga khasnadda iyo lacagaha kale ee Dowladda, sida lagu qeexay jadwalkan. Wadarta Miisaaniyadda ee loo qoondeeyey Miisaaniyadda Joogtada iyo tan Raasumaalka ah ayaa ah sidan hoos ku xusan:-

B) Kharashka Joogtada ah	US$ 247,875,350
T) Kharashka Raasumaalka ah	US$ 12,123,986
Wadarta Guud Ee Miisaaniyadda	US$ 260,129,324

2 Qaybta Labaad

Maamulka Miisaaniyadda

2.1 Awoodaha Xafiisyada Dowladda Federaalka Soomaaliya

1. Wasiirka maaliyadda waxaa loo Awood siiyay in uu fasaxo una qaybiyo dakhliga Dowladda Soomaaliya iyo lacagaha kaleba, cadadka halkan loogu qoondeeyay xafiisyadooda marka ay soo codsadaan mas'uuliyiinta xafiisyada Dowladda Federalka Soomaaliya ee ay khusayso, si ay hawlahooda ugu fushadaan.

2. Xafiisyada Dowladda waxaa loo awood siiyay in ay diwaan-galiyaan ciwaanka Miisaaniyadda la qoondeeyey, farac ciwaanka, mashruuca ama barnaamijyada xafiisyada, kolba kuu yahay. Waana inuu talaabada lagama-maarmaanka ah ka qaataa istic-maalka deynta ama deeq kasta oo dheerada, haday tahay mood ama lacag oo laga helo illaha gudaha ama dibadda looguna talogalay fulinta miisaaniyadda mashariicda ama miisaaniyadda joogtada ah. Sidoo kale, waxa lagama maarmaan ah in bil ka hor dhammaadka sannad miisaaniyadeedka loo gudbiyo warbixin Wasaaradda.

2.2 Miisaaniyad Wareejiin

1. Miisaaniyadda Joogtada ah waxaa loo wareejin karaa Misaaniyadda Mashaariiicda.

2. Miisaaniyadda Mashaariicada looma wareejin karo Miisaaniyadda Joogtada ah.

2.3 Miisaaniyad Wareejinta Xafiiska Dhexdiisa

1. Wasiirku wuxuu xafiis dhexdiis: -

B. Kala wareejin karaa kharashka Miisaaniyadda joogtada ah walax walax haddii ay isku madax yihiin

T. Ka wareejin karaa Miisaaniyadda mashruuc kuna wareejin karaa mashruuc kale, ka dib marka hay'adda Mashruucaasi hore ugu qoondeysnaa ogolaato Ra'iisul Wasaarahana Saxiixo.

2. Wasiirku wuxuu u xilsaari karaa mas'uulka xafiiska Dowladda ee ku habboon oo ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda in uu meel-mariyo ama fuliyo xilka iyo Awoodda lagu siiyay qodob-hoosaadka 1aad ee kor ku xusan.

2.4 Miisaaniyad Wareejinta Xafiisyada Dhexdooda

1. Wasiirku wuxuu wareejin karaa Miisaaniyadda joogtada ah ee loo qoondeeyay xafiis dawladeed in loo wareejiyo xafiis kale, kadib marka la xaqijiyo in xafiiska loo qoondeeyay Miisaaniyadda aanu wada istic-maali karaynin Miisaaniyadaas, hay'adda loo qoondeeyeyna ogolaato Ra'iisul Wasaaruhuna Saxiixo.

2. Wasiirku wuxuu amri karaa in Miisaaniyadda Mashaariicda ee loo qoondeeyay xafiis loo wareejiyo mashruuc xafiis kale. Kadib marka la xaqiijiyo in Miisaaniyad yaraanta xafiiska laga dabooli karo miisaaniyad mashaariic oo loo ansixiyey sanadkaas xafiis kale oo dowladeed.

3. Wasiirku waa inuu kusoo wargaliyaa Guddiga Maaliyadda ee Golaha Shacabka kala wareejinta ku xusan qodobada 2.3, Faqradiisa (B iyo T) iyo qodobka 2.4 faqradiisa (1 iyo 2) ee qodobada miisaaniyadda si uu u hubiyo sharci ahaan in ay waafaqsan tahay xeerka iyo habraaca miisaaniyadda ee sannad miisaaniyadeedka 2017-ka.

2.5 Wareejinta Miisaaniyadda kaydka (Lama Filaanka)

1. Wasiirku wuxuu ka dib ogolaashaha Golaha Wasiirada amri karaa in Miisaaniyadda kaydka loo wareejiyo loona istic-maalo kharash deg-dega ah kadib marka ay dhacaan hawlo gurmad deg-deg ah, oo uu baahan kharash deg-deg ah, oo aan baahidoodu horay u muuqanin wakhtiga la diyaarinayay Miisaaniyadda sanadka. Ansixinta Golaha Wasiirada ka dib wasiirka waxa uu la wadaagayaa Guddiga Maaliyadda Golaha Shacabka ogolaanshaha Golaha Wasiirada ee wareejinta keydka lama filaanka ah oo sababeysan. Kolka uu Wasiirka ansixiyo soo wareejinta kharashka keydka kabidda waxaa lagu wareejinayaa hay'adda ka mas'uulka ah.

2. Kharashka kaydka lama filaanka waxaa keliya oo loo isticmaali karaa xaalad degdeg ah sida fatahaado, abaaro, cuduro dilaacay ama kharashaad muhiimad Qaran oo lama huraan ah leh oo aan muuqanin markii la diyaarinayey qoondada miisaaniyadda, looma isticmaali karo baahida kharashka caadiga ah ee xafiisyada Dowladda.

2.6 Miisaaniyadda Kabista

Golaha sharci dajintu isagoo ka duulaya tala bixinta golaha fulinta ayuu meel mariyaa Miisaaniyadda kabista ah.

2.7 Deymaha/Amaahda

Deymaha iyo Amaada sharciyeysan ee laga dhaxlay Miisaaniyaddii 2015-2016-ka ayaa noqonaysa deyn usoo gudbeysa sanadka 2017-ka, waxayna noqoneysaa qeyb ka mid ah mudnaanta kharashka, waana in Wasaaradda maaliyadda in ay soo cadeyso deymaha laga dhaxlay miisaaniyadda sanadyadii 2015 iyo 2016 oo tifatiran iyada oo laga bixinayo Meesha ay uga jirto mudnaanta qarash bixinta.

2.8 Qaamaha

Dowladda Federaalka Soomaaliya ma gali karto wax deyn ah gudaha ama dibadda, marka laga reebo lacago horumaris yar yar ah ayna tahay in lagu bixiyo isla sanad Miisaaniyadeedka gudihiisa iyo dayn istraatiijig ah oo door weyn ka gali karta kobcinta dhaqaalaha.

3 Qaybta Sedexaad

Kharash Bixin

3.1 Mudnaanta Kharash Bixinta

Haddii ay timaado hoos u dhac dhanka dakhliga ama deeqaha wasaaraduna fulin weyso dhamaan kharashaadkii loogu talagalay Miisaaniyadda 2017-ka, waxaa mudnaanta bixinta kharashka loo raacayaa sida ay u kala horreyaan ee hoos taxan.

1. Raashinka iyo Gunnooyinka Ciidamada qalabka sida
2. Mushaarooyinka/gunnooyinka Shaqaalaha Rayidka ah
3. Gunnada Xildhibaanada iyo G/Wasiirada iyo agabka iyo adeegga Baarlamaanka
4. Khidmadaha Maaliyaddu ku shaqeyso (Finance Costs)
5. Mushaharka iyo gunooyinka deynta ah ee kasoo waregay miisaniyada sanadkii hore
6. Adeegga iyo Agabka Xafiisyada Dowladda
7. Deynta iyo Qaamaha la hormarsaday

3.2 Dhito

1. Dhakhliga Dowladda Federalka Soomaaliya waa in la dhigaa Khasnadda Dhexe ee Dowladda Soomaaliya 24 saacadood gudahooda oo ka bilaabanaysa marka la qabtay, haddii aysan ku soo aadin maalin aan la shaqaynaynin oo leh tixgelinteeda waqti.

2. Bangiga dhexe waa in uu aqbalaa qabashada dakhliga dawladda, islamarkaana uu meel-mariyo kharash bixinta isagoo isticmaalaya xisaabta Dowladda Federalka ah ee bankiga ka furan.

3.3 Lacagta Laga Bixiyo Miisaaniyadda Duuduubka

1. Iyada oo aanu golaha sharci dajintu ogolaan, wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda duuduubka ah.

2. Lagama gali karo kharash ama gedab Miisaaniyadda la ansixiyey, ka hor inta aanu ansixin ama qoondayn wasiirku.

3. Dhamaan bixinta qorsheysan waa in ay si toos ah oga baxdaa khasnadda dhexe una aadaa qaansheegatada ayadoo mareyn hay'adaha adeegga ama agabka la siiyey.

4. Dhamaan qabashada iyo bixinta lacageed ee miisaaniyadda waa in ay martaa hab-xisaabeedka dowladda (SFMIS) si elektroonik ah, ka dibna la waafajiyaa warbixin xisaabeedka Bangiga Dhexe.

5. Dhamaan bixinta qaansheegatada iyo qandarasleyaasha waa in ay martaa barnaamij xisaabeedka dowladda (SFMIS), lagana bixiyaa madax iyo madax-xigeenada ku haboon ee khasnadda dhexe ee dawladda si toos ah uu qaato qofka iyo shirka qaansheegtada ah.

3.4 Xaddiga kharash Bixinta

1. Waxaan ka ahayn, arrimaha lagu xeeriyay qodobada 4 ilaa 8 ee Xeerkan lama oggola in la siiyo xafiis dowlad sanad miisaaniyadeed gudihiis kharash bixin ka badabn cadadka miisaaiyadeed ee loogu qoondeeyay bayaankan Miisaaniyadda 2017.

2. Waxaa awood kooban loo siiyey hayadaha dawladda ee qoondaha miisaaniaydda ku jira inay gacanta ku hayn karaan kharash kooban oo loogu talo-galay hawlaha degdegga ah (petty cash for emergencies) taasoo Wasiirku wareegto ka soo saari doono ku saabsan cadadka iyo waxyaabaha loo isticmaali karo.

3.5 Gedab

1. Wax gedab ah lagama gali karo qoondaha, kaliya inuu soo codsado Mas'uulka xafiiska Dowladda ama cid uu qoraal ku wakiishay mooyee.

2. Madax kasta oo xafiis dawladeed magali karo heeshiis ama nidaam kale oo uu baahan kharash, kaliya marka ay jirto hadhaa aan qaan ahayn oo ku filan in ay daboosho deynta lagali doono sanad miisaaniyadeedka 2017.
3. Wasaaraddu waxay aasaasi doontaa habraaca la raaco iyo hab diwaaneed qoraya dabagalka gedebka maaliyadeed ee walax miisaaniyadeed kasta.
4. Madaxa xafiiska dawladdu wuxuu yeellan doonaa diiwaanno lagu hubiyo gedabyada maaliyadeed ee walax kharasheed kasta habka uu u xeeriyey wasiirku.

3.6 Lacag Bixinta Agabka iyo Adeegga

1. Ka sokow foojarada kale ama cadaymaha loo bahan yahay, Xafiis kasta oo dawladeed ma bixin karo lacag illaa uu xaqijiyo ama hubiyo madaxa xafiisku ama cidda kale ee uu madaxa xafiisku u xil saaray.

B. Marka lacag bixintu tahay mid la xidhiidha hawl u baahan in la qabto, Allaab keenid ama addeeg.

I. Waa in ay tahay shaqada laqabtay, allaabta la keenay ama adeegga la bixiyay & qiimaha la saaray mid waafaqsan heeshiiska ama haddii ayna heshiiska ku caddayn noqdaa mid macquul ah.

II. Waa in ay noqoto mid-waafaqsan shuruudaha heeshiiska kharash bixintu, ka hor inta aan la dhammaystirin shaqada, aan la soo xarayn allaabta ama la helin adeegga

III. Waa in ay ahaato kharash bixinta mashaariicdu mid waafaqsan nidaamka iyo awaamiirta u deggan Wasaaradda, islamarkaana mac-quul ah oo sugan: Ama

T. Lacagta kharash kasta oo kale waa in ay ahaato mid uu lacag-qaatuhu xaq u-leeyahay, qaadashada lacagta uu qaatay.

2. Wasaaraddu waxay soo saari kartaa nidaam lagu xaqiijinayo ama hubbinayo xaqiiqda cadaymaha uu u baahan yahay qodobkani.
3. Xafiisyada Dawladdu waxay yeelan doonaan sanduuq ay ku kayd sadaan lacagta hawl fulinta cadadka yar, cadadka lacageed ee loo istic-maali doono hawl-fulin waxaa go'aamin doona wasiirka.

3.7 Lacagta aan la Istic-maalin

1. Iyadoo lagu xeerin doono wareegtooyin ay wasaaraddu soo saarto ayaa waxaa lagu celin khasnada dhexe hadhaaga Miisaaniyadda la qoondeeyey ee sanad Miisaaniyadeedku ka dhacay, aan la istic-maalina. Waxaana lagu kordhinayaa sanduuqa qasnada dhexe ee wasaaradda.

Xisaabiyaha Guud. Waxaa awood loo siiyey Wasaaradda inay hakiso bixinta qoondaha ee miisaaniyadda ee hayadaha keeni waaya xisaab-xirka billaha ah.

2. Warbixinta Miisaaniyadda ayaa si bille iyo rubac sanadle ah lagu daabici doonaa website-ka Wasaaradda, xilliga kama danbeysta ah ee bilkasta lagu daabacayo warbixinta, wasiirka ayaa ku soo saari doona wareegto.

4 Qayabta Afraad

Qoondaynta Miisaaniyadda

4.1 Qoondaynta Miisaaniyadda Xafiisyada Dowladda

1. Miisaaniyadda hoos ku xusan waxaa loo qoondeeyay xafiisyada Dowladda sanad Miisaaniyadeedka 2017-ka, waana sida hoos ku xusan.

a) **Miisaaniyadda Joogtada ah**	**US$ 247,875,350**
b) **Miisaaniyadda Raasumaalka**	**US$ 12,123, 986**
Wadarta Guud	**US$ 260,129,324**

2. Faah-faahinta qoondaha Miisaaniyadda waxay ku caddahay oo ay ku fah-faahsantahay xagga hoose ee bayaankan

4.2 Muddada Dhaqan-galka

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa maalinta Madaxweynaha Saxiixo ee sanadka, 2017

Laga soo saaray Muqdhisho_____ malinta _____2017

Madaxwaynaha
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaali

5 Lifaaqyada Miisaaniyadda 2017-ka

5.1 Soo Koobidda Dakhliga iyo Kharashka Miisaaniyadda Sanadka 2017

(million US$)	2015 Dhabta	2016 Dhabta	MIISANIYADDA 2017	KU-NOQOSHADDA 2017	Isbadalka	% Isbadalka
1. REVENUE	141.2	168.0	267.6	260.1	-7.4	-2.8%
(A) DOMESTIC REVENUE	114.3	112.7	164.7	137.6	(27.1)	-16.5%
Tax Revenue	82.4	88.6	132.9	113.6	(19.4)	-14.6%
Tax on Income, Profit and Capital Gains	1.9	2.4	6.6	4.0	(2.6)	-39.5%
Taxes on goods and services	9.3	9.9	39.5	14.6	(25.0)	-63.2%
Taxes on international trade	71.1	76.3	86.8	95.0	8.2	9.4%
Non-Tax Revenue	31.9	24.1	31.8	24.0	(7.8)	-24.5%
(B) DONOR FUNDED	26.9	55.3	102.9	122.6	19.7	19.1%
Bilateral Assistance	2.8	31.3	18.5	38.1	19.6	106.0%
Multilateral	24.1	24.0	84.4	84.5	0.1	0.1%
2. EXPENDITURE	135.5	171.1	267.5	260.1	(7.4)	-2.8%
(C) RECURRENT EXPENDITURE	133.2	165.1	255.8	247.9	(8.0)	-3.1%
Compensation of employees	52.9	55.1	136.4	130.3	(6.0)	-4.4%
Use of goods and services	53.1	64.4	87.6	97.6	10.1	11.5%
Interest and other charges	-	-	0.0	0.1	0.1	246.7%
Grants	13.8	9.4	20.6	16.3	(4.3)	-20.8%
Contingency	2.6	2.1	2.1	3.6	1.5	70.8%
Repayment of arrears and advances	10.8	34.1	9.2		(9.2)	-100.0%
(D) CAPITAL EXPENDITURE	2.3	5.9	11.7	12.1	0.4	3.5%
Capital	2.3	5.9	11.7	12.1	0.4	3.5%
3. BALANCE	5.8	-3.1	0.0	0.0	0.0	-20.0%

5.2 Faah-faahinta Dakhliga Guud Dowladda Ee Miisaaniyadda 2017-ka

Madax Xigaha	FAAH-FAAHIN	2015 Dhabta	2016 Dhabta	MIISANIYADDA 2017	KU-NOQOSHADDA 2017
	WADARTA GUUD EE DAKHLIGA	141,196,856	171,066,744	267,577,964	260,129,323
	Wadarta Dakhliga Gudaha	114,280,009	117,674,720	164,705,501	137,560,000
	Dakhliga Canshuurta	82,375,416	88,569,153	132,922,043	113,560,000
111	Canshuurta Faa'idu Faa'idada	1,893,203	2,366,602	6,606,664	4,000,000
111101	Caanshuurta Mushaharka (Shaqaalaha Dowladda)	707,501	1,335,439	3,710,859	2,900,000
111102	Canshuurta Mushaharka (Shaqaalaha Gaarka ah)	414,796	545,817	2,478,306	800,000
111201	Canshuurta Faaidoyinka Ganacsiha	770,906	340,056	200,000	100,000
111204	Canshuurta Daaraha	-	145,290	217,500	200,000
114	Canshuurta Adeega & Alaabta	4,799,955	2,880,000	29,679,629	8,060,000
1141	Canshuurta Dheeraadka ah	4,799,955	2,880,000	29,679,629	8,060,000
114101	Biyaha Sifeysan	-		120,000	
114102	Qaansheegadka Hoteeladda			1,605,625	800,000
114103	Isgaarsiinta			24,500,000	5,660,000
114104	Warshadaha Krontadda dhaliya			1,300,000	
114105	Shirkadaha Biyaha			320,235	
114106	Iibka Badeecadaha Dekadda ka soo dega				
114107	Macaashka isgaadhsiinta	4,799,955	2,800,000	1,450,000	1,600,000
114108	Macaashka Xawaaladaha		80,000	100,000	
114109				259,769	
114110				24,000	
1142	Canshuurta Dheeraadka ah	-	-	-	-
114201					
4. In marka kala wareejin lagu sameeynayo madaxa lamafilaanka(Contingency) lagu soo wargeliyo Guddiga Maaliyadda ee Baarlamaanka ka hor inta aan la sameynin kala wareejinta si uu ula socdo sharci ahaanteeda.
5. In lagu saleeyo miisaaniyadda deeqaha laba dhinac ah (bilateral) ama dhinacyada badan leh (multi lateral) kuwa laga heysto ballanqaad rasmi ah oo keliya isla markaana loo hayo heshiiyo qoraal leh.
6. Iyadoo wax laga baranayo sannadihii la soo dhaafey, in marka la dejinayo Miisaaniyadda dawladda aad looga baaraan dego oo lagu saleeyo awoodda dakhliga la heli karo oo keliya oo aanan lagu soo darin isdhin iyo kharash aan la qiyaasi karin halka uu ka imanayo
7. Qandaraasyada iyo heshiisyada maal gashi ee la galayo in loo sameeyo xeer nidaamiye xaddidaya awoodaha kharash gelidda, qiimo go'anna loo sameeyo, kadib marka la dhammeystiro habka qandaraas bixinta, lagana diiwaan geliyo xafiiska Hanti dhowrka guud ee Qaranka.
8. In si dhammaytiran loo joojiyo kharashka laga galayo dakhliga ka hor inta aan lagu xerayn Khasnadda dhexe ee Dowladda (TreasuryAccount) isla markaana waxaa xaaraan ah in la bixiyo kharash aan loo marin habraaca iyo nidaamka sharciga maaliyadu xeerinayo.
9. In la xoojiyo awoodda xirfadeed maamul ee waaxda Miisaaniyadda Dawladda ee Wasaaradda Maaliyadda lana gaarsiiyo heer ay ku gudan karto waajibaadkeeda shaqo, iyadoo loo baahanyahay in la xoojiyo habraaca dejinta qoondada, maareynta dhaqdhaqaaqa kharash bixinta iyo maamulka Miisaaniyadda. Taasi oo looga baahanyahay Wasaaradda inay kusoo diyaariso miisaaniyad ka turjumeysa waaqica dhaqaale iyo awoodda dakhli ee dalka iyadoo la dhowrayo shintiriska diyaarinta miisaaniyadda ,iyo muddooyinka laga maarmaanka ah ee sharciga maaliyaddu xaddidayo..
10. Guddigu wuxuu soo jeedinayaa in la fuliyo arrimaha uu baarlmaanku go'aannada ka soo saarey ee ku lifaaqnaa ansixinta Misaaniyadda. gaar ahaan qaraaraadka ku saabsan nidaamka Miisaaniyadda iyo bixinta xuquuqda shaqaalaha iyo qaansheegatooyinka baaqiga ku ah Xukuumadda iyadoo loo samaynayo qorshe cad oo waqtiyeysan meel marin tooda.

==========DHAMMAAD==========

Federal Government of Somalia

Expenditures Report as of December, 2015

	Description	Budget / Estimate	YTD Actuals	Variance
1	**Hay'adaha Maamulka iyo adeegga Guud**	114,326,405.00	75,595,239.98	66%
10101	Xafiiska Madaxtooyada	4,370,876	3,413,650	78%
10201	Xafiiska Baarlamaanka	3,305,107	2,598,042	79%
10202	Xubnaha Baarlamaanka	11,673,712	10,700,400	92%
10301	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha	4,357,600	3,424,394	79%
10302	Agaasinka Biinda iyo Duur joogta	393,984	85,014	22%
10303	Mashruuca CIP	3,139,441	108,116	3%
10401	Wasaaradda Arrimaha Dibedda	2,694,855	1,600,216	59%
10402	Safaaradaha	5,233,600	3,312,258	63%
10501	Wasaaradda Maaliyadda	5,945,792	4,383,683	74%
10502	Xisaabiyaha Guud	761,064	545,531	72%
10503	Adeega Guud ew Duwladda	30,917,010	29,520,376	95%
10504	Mashruuca SFF	9,876,715	1,972,684	20%
10505	Mashruuca PFM	7,359,000	2,368,770	32%
10506	Mashruuca EFG	2,676,048	295,373	11%
10507	Mashruuca RCRF	3,620,142	1,308,128	36%
10601	Wasaaradda Qorsheynta iyo Isk. Caalamiga	984,256	701,173	71%
10701	Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Fadaraalka	3,519,724	1,141,160	32%
10702	Guddiga Qaxootiga Qaranka iyo Bamkacayasha	472,800	192,735	41%
10703	Hay'adda Maareynta Musiibooyinka	252,000	119,825	48%
10801	Wasaaradda Arrimaha Dilnta iyo Awqaafta	579,060	410,670	71%
10901	Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka	550,188	402,314	73%
10902	Ciidanka Ashuubta	4,332,000	2,914,344	67%
10903	Maxkamadda Gobolka Banaadir	1,155,612	729,253	63%
10904	Maxkamadda Racfaanka	204,144	116,496	57%
10905	Guddiga Adeegga Garsoorka	164,052	127,123	77%
10906	Maxkamadda Dastuuriga ah	222,000	0	0%
11001	Maxkamadda Sare	419,004	324,736	77%
11101	Xeer-ilaaliyaha Guud	1,038,648	632,517	61%
11201	Garyaqaanka Guud	401,364	283,006	71%
11301	Hanti-dhowrka Guud	900,240	695,081	77%
11501	Wasaaradda Dashiurka	326,812	134,619	41%
11601	Guddiga M. Banaan Ee Xududaha & Federalka	252,000	60,000	24%
11602	Guddiga M. Banaan Ee Dibu Heshiistinta Q.	426,708	254,922	60%
11603	Guddiga Madaxa Banaan ee Doroshoyinka Q.	401,050	143,400	36%
11604	Guddiga M. Banaan Ee Xuquuqul Adanaha	241,200	0	0%
11605	Guddiga M. Banan Ee Dibu Eegista iyo Hir. Dasturka	737,632	298,563	41%

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 125/B
TR: 13/11/2017
SAXIIX:

11606	Guddiga Madaxa Banaan Ee Shaqalaha Rayidka	430,356	276,669	64%
2	Security Services	58,111,956.00	45,162,280.98	78%
20101	Wasaaradda Gaashaandhiga	1,051,100	667,863	64%
20102	Taliska Ciidanka Xooga Dalka	34,525,680	25,335,570	73%
20103	Maxkamadda Ciidemadda	996,000	996,000	100%
20201	Wasaaradda Amniga Qaranka	2,399,096	1,886,783	79%
20202	Taliska Ciidanka Booliska	7,362,000	6,357,500	86%
20203	Hay'adda Nabadsugidda Qaranka	10,056,080	8,341,065	83%
20204	Hay'adda Soodhalka & Jinsiyadaha	1,722,000	1,577,500	92%
3	Hay'adaha Adeegga Dhaqalaha	20,582,324.00	10,929,395.73	0.53
30101	Wasaaradda Tamarta & Biyaha	639,544	448,149	70%
30201	Wasaaradda Maxdanta	1,080,380	872,074	81%
30301	Wasaaradda Beeraha	749,860	482,505	64%
30401	Wasaaradda Xanaanadda Xoolaha, Dhirta & Daaqa	684,360	428,057	63%
30402	Agaasimka Bii'ada iyo Duur joogta	0	156,402	
30501	Wasaaradda Kalluumaysiga & Khey. Badda	789,860	515,770	65%
30502	Hay'adda Cilmi Baadhista Badaha Soomaaliyeed	350,148	209,981	60%
30601	Wasaaradda Warfaafinta	3,360,008	2,439,903	73%
30701	Wasaaradda Boostada & Isgaadhsiinta	1,185,128	794,817	67%
30702	Mashruuca ICT	5,900,000	856,849	15%
30803	Wasaaradda Howlaha Guud iyo Dib-u-dhiska	660,100	432,847	66%
30901	Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawadda	942,176	623,468	66%
30902	Hay'adda Saadaasha iyo Duulista Hawadda	781,296	416,294	53%
31001	Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda	1,047,204	696,106	66%
31002	Dekadda Xamar	1,009,320	914,330	91%
31101	Wasaaradda Gamaesiga iyo Warshadaha	1,402,940	641,842	46%
4	Hay'adaha Adeegga Bulshada	6,013,153.00	3,765,989.10	63%
40101	Wasaaradda Caafimaadka	781,932	457,808	59%
40201	Wasaaradda Waxbarashadda & Tacliinta Sare	1,335,008	849,716	64%
40202	Jaamacadda Umadda	1,058,913	803,452	76%
40203	Hay'adda Cilmi, Fanka iyo Sugaanta	240,612	126,658	53%
40204	Akadeemiya Goboleedka Afka Soomaaliga	194,000	123,900	64%
40301	Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada	1,098,464	555,357	51%
40401	Wasaaradda Isboonaga & Dhaliyaradda	571,200	376,357	66%
40501	Wasaaradda Hawlaha & Hor. Xuq. Adanaha	733,024	472,741	64%
	Grand Total	199,033,838.00	135,452,903.79	68%

SHARCI LR. 07 Taariikh: 27/11/2017

ANSIXINTA XISAAB XIRKA MIISAANIYADDA 2016

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Faqaradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarafka 'F' ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Ref: 0351/1/B-/10/17, Taariikh: 18/11/2017 kuna saabsan Ansixinta Xisaab-xirka Miisaaniyadda 2016 uuna u soo gudbiyay Madaxweynaha JFS si uu ugu rogo Sharci.

Markuu Tixgeliyay: Baahida loo qabo in Xisaab-xir lagu sameeyo Miisaaniyaddii 2016

WUXUU SOO SAARAY XEERKAAN:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa la ansixiyay Xisaab-xirka Miisaaniyaddii 2016 ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigaan dhaqan gelayaa isla markii uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 27/11/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO:
TAARIIKH
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Guddiga Milsaaniyadda, Maaliyadda, Qorshaynta iyo La-Xisaabtanka Haay'adaha Dowladda

جمهورية الصومالي الفدرالية
مجلس الشعب
لجنة الشئون الميزانية، المالية، التخطيط، ومحاسبة هيئات الدولة

The Federal Republic of Somalia
House of the People
The Committee of Budget, Finance, Planning, International cooperation and Financial Oversight of Public Institutions

WARBIXINTA GUDDIGA MAALIYADDA EE XISAAB XIRKA MIISAANIYAD SANNADEEDKA 2016

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 121
TR: 11-11-2017
SAXIIX:

01th November 2017

WARBIXINTA GUDDIGA

A. HORDHAC

Guddiga Maaliyadda iyo Qorsheyntu isagoo tixraacaayo qodobada 2aad , 68aad iyo 70aad ee xeerhoodka BFS iyo Sharciga Maamulka Maaliyadda Qaranka Lm 2, ee 1961.

Guddigu isagoo gudanaya waajibaadkiisa dastuuriga ah eeku aaddan hawlaha maaliyadda dalka iyo xisaabaadka dawladda, wuxuu hawshiisa la xiriirta xisaab xirka 2016 ka guda galay markii loo soo gudbiyey 15/07/2017inkastoo ay ahayd in la sooo gubdibyo waqti hore balse ma dhicin madaama uu dalku ku jiray xili doorasho iyo kala guur, sidaa awgeed ayey warbixintani dib ugu dhacday in Baaralamaanka loo soo gudbiyo si uu waajibkiisa Dastuurigaah uga guto.

Guddigu isagoo tixraacaya wareegtada Ra'iisal wasaaraha ee sumaddeedu tahay XRW/0.609/6/2017 ku aaddan ansixinta Xisaab xirka 2016 ee Golaha wasiirrada ku astaysan SHGW00.09.06.2017 ee 08/06/2017 wuxuu guda galay falanqaynta iyo u kuur galidda xasaabxirka dawladda ee 2016. Wuxuu si qoto dheer uga baaraan degey warbixinnada loo soo gudbiyey oo ka kooban:

(a) Warbixinta Xisaabiayaha Guud.
(b) Xaqiijinta la socota ee Hantidhowrka Guud.

Guddigu isagoo tixraacaya warbixinta Hanti dhawraha Guud ee Qaranka ee ku lifaaqanXisaab Xirka kuna cadahay warbixinta hanti dhowrka in uu ku waafaqsanyahay isticmaalka miisaaniyada 2016 ee xisaab xirka dakhliga & kharashka xafiiska xisaabiyaha guud kana baxay bankiga dhexe ee dowlada ka dibna Guddiga wuxuu si qoto dheer uga baaran degay, is barbar dhigna ku sameeyey ku talagalkii Miisaaniyadda iyo Xisaab xirka dhabta ah ee sanadka 2016ka.

Guddigu isaga oo maanka ku haya arrimahan iyo masuuliyadda Dastuuriga ah ee Baarlamaanka ka saaran hubinta xaqiiqda iyo ku dhaqanka sharciga iyo nidaamka Miisaaniyadda dalka. Guddigu si uu u xaqiijiyo muhimmadda loo igmadey wuxuu kulamo la yeeshay warbixinna ka dhagaystay hay'adaha hoos ku qoran:

a) Wasaaradda Maaliyadda
b) Xisaabiyaha Guud ee Dowladda
c) Hanti dhowrka Guud ee Qaranka

Guddigu markii uu dib u eegis iyo baaritaano uu ku sameeyey xisaab xirka Miisaaniyad sannaddeedka 2016ka, waxaa soo if baxay arrimaha soo socda:

1. Guud ahaan qaabka diyaarinta Warbixinta Xisaabxirka waxaa ka muuqata in aysan jirin faahfaahin xisaabeed oo sahlaya dhaqso u fahamka Xisaab xirka Miisaaniyadda.

2. Muuqaalka guud ee warbixinta Xisaabxirka waxaa kamuuqdo khaladaad la sixi karay waqtigeeda. Sida kala wareejinta, isticmaalka madax xigaha lama filaanka ah

B. ISBARBARDHIG GUUD MIISAANIYADDA IYO XISAAB XIRKA 2016

Guud ahaan Miisaaniyaddii 2016 la qoondeeyay waxay ahayd$ 248, 327, 903.00 waxaana soo xarooday $171,066,721.00isla markaana waxaan soo xaroon lacagdhan $77,262,182.00taasi oo u dhiganta 31% kutalagaika miisaaniyada guud ee dalka.

Guud ahaan 31% ayaa la gaarin miisaaniyaddii la qoondayay dhamaan qeybaha duwan sida adeega guud ,dhaqaalaha, Amniga, maamulka iyo arimaha bulshada , muujinaysana in aan la gaarin qorshahii lagu talo galay sanadka 2016k hoos u dhaca dakhliga darteed taasi oo ay ugu muuqatay gudiga in aan sidii loo baahnaa aan loo aruurin dakhliga dowlada.

C. DAKHLIGA MIISAANIYADDA 2016KA

Warbixinta dakhliga ee Misaaniyadda 2016kii waxay Noqotay sida jaantuska hoose ku xusan:

Ku talo galkii Dakhliga Cashuuraha iyo Dakhliga dhab ahaan soo soo xeroodey 2016

Faahfaahin	A. Dakhliga Ku talogalka	B. Dakhliga Dhabta ah	Farqiga labada (B-A)	Percentage Change%
Dakhliga Cashuuraha	$ 101,428,196	$ 88,569,151	$ (12,859,045)	(13%)
Dakhliga Cashuuraha ka baxsan	$ 38,533,830	$ 24,105,567	$ (14,428,263)	(37%)
Deeqaha labada dhinac	$ 34,000,000	$ 31,260,098	$(2,739,902)	(8%)
Deeqaha dhinacyadada badan leh	$ 74,365,875	$ 24,041,451	$(50,324,424)	(68%)
Wadarta Guud ee Dakhliga Dawladda	$248,327,901	$ 167,976,267	$(80,351,634)	(32%)

Jaantuska kore waxaa ka muuqanaya qodobadaan soo socda:

1. Dakhliga Canshuurta waxaa la filaayey inay ka soo xarooto lacag dhan $101,428,196.00. Balse lacagta dhabta ee soo xarootay waxay noqatay $88,569,151.00.Farqiguna uu noqday 12,859,045.00 kaas oo noqonaayo Boqoley ahaan 12.68%.
2. Qiyaasta dakhliga aan canshurta ahayn waxa uu ahaa $38,533,83.00 inkastoo lacagta dhabta ah ee kasoo xarootay ay tahay $24,105,567.00 Faqriguna waa $14,428,263.00 oo ah boqolkiiba 37%.

3. Deeqaha dibadda ee laba dhinac ayaa waxaa la filaayey inay noqoto $34,000,000US$, lacagta dhabta ah ee soo xarootay waxay noqotay $31,260,098 Farqiga u dhaxeeya wuxuu noqday $2,739,902 oo ah boqolkiiba 8% inta aan la helin.
4. Markii la eego Deeqaha sadex Geesoodka ayaa waxaa la filaayay in aay ka soo xarootay lacag dhan $74,365,875 Lacagta Dhabta ah ee kasoo xarootay waa $24,041,451.Farqi uu dhanyahay $50,324,424 kaas oo noqonaya Boqolay ahaan 68% una muuqata in ay la lagu dhisin balanqaad sax ah.

Hadaba jaantuskan kore wuxuu noo muujinayaa in aan lagu salaynin xog sax ah iyo balanqaad qoraal ah kutalagalka miisaaniyada sanadka 2016k taas oo sahlikartay in markii horaba la dajiyo miisaaniyad sax oo la gaarikaro.

D. KHARASHAADKA MIISAANIYADA 2016KA:

Koobidda Kharashka qoodeysan iyo Midka dhab ahaan loo Isticmaaley 2016

Faahfaahin	A.-Kharash ka Qoondada	B.-Kharshka Dhabta ah	Farqiga (A-B)	Nisbada boqolkiiba
A) Kharashka Joogtada ah	$233,018,210	$ 165,127,681	$ 67,890,529	29%
Mushaaraadka /Gunnooyinka	$ 113,067,344	$ 79,314,010	$ 33,735,334	30%
Iibka iyo Adeegga Dawladda	$ 96,434,512	$ 70,246,999	$ 26,187,513	27%
Deeqaha	$17,229,550	$9,416,649	$ 7,812,901	45%
Lama filaanka	$ 2,116,804	$ 2,059,409	$ 57,395	3%
Daymaha iyo Curaarta	$ 4,100,000	$ 4,090,614	$9,386	0%
B) Raasamaalka	$ 15,309,692	$ 5,939,039	$9,370,653	61%
Isticmaalka Raasulmaalka	$ 15,309,692	$ 5,939,039	$9,370,653	61%
Wadarta Kharashka	$248,327,902	$ 171,066,720	$ 77,261,182	31%

Sida ku cad jaantuska kore kaas oo muujinaya habka uu ahaa kutalagalkii kharashka iyo kharashka dabta ah ee baxay miisaaniyadeedka 2016ka , kaas oo ah sida:

1. Adeegga Shaqaalaha (Mushaarka):

Mushaarka shaqaalaha ku baxay sanad Miisaaniyadeedka 2016 waxaa lagu talagalay kharash dhan $113,067,344, halka Miisaaniyadda Dhabta ah ee la baxshay ay noqotay

$79,314,010, farqiga uu ahaa $33,753,334, una dhiganta30%. Taasi oo keentay in la gaariwaayo dhakligii ku tala galka miisaaniyad 2016k, keenikartana dayac dhinaca shaqada ama wax soo saarka shaqada madaama uusan haynin qofka niyad uu ku shaqeeyo.

2. Agabka iyo Adeega:

Miisaaniyadda Sannadeedka agabka iyo adeega ku baxa waxaa lagu talagalay in ay noqoto $96,434,512.00, waxa ay noqotay kharashka dhabta ah ee la isticmaaley $70,246,999.00 ,waxaana timid kala duwanaansho qoondada iyo kharashaadka la isticmaaley oo dhan $26,187,513.00 noqonaysane 27%. Keentayna in ay curyaamaan howlihii dowlada lagu dardargalin lahaa maadaama uu ahaa halbowle.

3. Deeqaha/Mashaariicda (Grants)

Deeqaha laga helo Deeqbixiyaasha oo loogu talagalay mashaariicda waxa ay ahayd ku talagalka $17,229,550.00,waxaa la isticmaaley kharash dhan $9,416,649.00 ,waxaa timid kala duwanaashaha kutalagalka iyo kharashka farqi dhan $7,812,901, kaas oo noqonayo45%. Una muuqato in laga faaideysan waayay si kastoo ay ahaataba.

4. Keydka Kabidda(Contingency)

Lacagta Keydka Kabidda Miisaaniyadda oo loogu talagalay ka hortaga Masiibooyinka ,sida Abaaraha ,Daadadka ,Fatahaadaha iyo iwm. Waxaa loo qoondeeyey lacag dhan $2,116,804 , waxaa la isticmaaley $ 2,059,409 ,farqiga u dhaxeeyo lacagtii loo qoondeeyey iyo midda la isticmaalay waa $57,395 , markii boqoley loo bedelo waxay noqonaysaa 3%.Taasi uu u muuqata in lacagtii loogu tala galay 97% la isticmaalay halka madaxyada kale aan la isticmaalin badankood in ka badan 30%, sidoo kale madaxaan inta badan waxaa loo isticmaalay wax ka baxsan wixii loogu talagalay



5. Curaar iyo Deymo

Kharash bixinta Deymaha la galay sannadkii 2015ka laguna soo wareejiyey miisaaniyada 2016ka kaliya lacag dhan $4,100,000. waxaa la baxshay kharash dhan $4,090,614. farqiga u dhaxeeya wuxuu noqdey $9,386. Taasi uu muujinaysa in la iska xilsaaray bixinta kharashkaas inkastoo aysan ku cadeen warbixinta xisaabiyaha sida iskaleh deemaha iyo sida loo baxshay kaliya un ay tahay warbixin kooban taasi oo aan aad u sahlaynin ogaasho qota dheer ee dhinaca daymahaan.

6. Isticmaalka Ra'sulmaalka (Capital Expenditure)

Ra'sulmaalka waxaa loo qoondeeyey lacag dhan $15,309,692,waxaa la isticmaaley kharash dhan$5,939,039 , kala duwanaanshaha wuxuu noqdey $ 9,370,653 ,boqoley ahaana waxay noqotey 61%. Laba meelood meel ahaan waa ka badantahay inta soo hartey taasi uu muujinaysa in aan loo isticmaalin sidii kutalagalka ahaa qondada miisaaniyada 2016 laguna sababeeyay buuxin la'aan shuruudahii ku xirnaa helidooda.



E. TALO SOO JEEDIN

Waxaa haboon in markii miisaaniyad sannadeed la sameynaayo in Miisaaniyadda lagu saleeyo dakhliga dhabta ah iyo odoros ka turjumaya xaqiiqada dhaqaalaha dalka. waayo haddii lagu saleeyo Miisaaniyadda saadaal mala awaal ah waxaa soo noqnoqotay in la gaari waayo ,sida dhacday 2016 kii waxaa la qoondeeyey **$248,327,902** halka dhab ahaan la bixiyey **$171,066,720**. Taasi oo sababtay in xuquuq badan ku lunto amma ku habasaanto. Haddaba guddiga maaliyada waxa uu soo jeedinayaa talooyinka soo socda:

1. Iyada oo dalku ku jiro marxalad dib u soo kabasho dhaqaale, (recovery stage) oo laga filan karo in dakhliga miisaaniayadda dalku kororto haddana waxaa muuqata in uu jiro isdhin miisaaniyadeed oo xoog leh sidaa darteed guddigu wuxuu ku talinayaa in Wasaaraddu la timaaddo hawlgal iyo dadaal wax ku ool ah oo qorshayaal cadcad leh sidii dakhliga gaar ahaan cashuuraha loo soo ururin lahaa iyadoo loo marayo hannaan sharci oo qeexan iyo wacyi gelin joogta ah.
2. Miisaaniyadda dawladdu iyadoo guud ahaan aad u kooban oo aan la wada gaadhi karin qoondada ku talo galka ah ayaa haddana waxaa soo noqnoqotay sida warbixinta sare ku cad in dakhli qorsheysan amma deeq la heli karo ay hayaddii loo qoondeeyey isticmaali waydo sidaana waqtigu kaga dhaco oo ay ka baaqato ama lala noqdo. Haddaba guddigu wuxuu soo jeedinayaa in xil gaar ah la iska saaro sidii dhammaan miisaaniyadda qorsheysan loogu isticmaali lahaa meelihii loo asteeyey si looga baaqsado in miisaaniyada qorsheysan la isticmaali waayo ama adeeggii loogu talo galay la fulin waayo.
3. Guddigu wuxuu ku talinayaa in marka uu yimaado koror ammaba is dhin miisaaniyadeed in la sameeyo Miisaaniyad ku celin (supplementary budget) xilli munaasib ah sida uu qabo Sharcigu.
4. In marka kala wareejin lagu sameeynayo madaxa lamafilaanka(Contingency) lagu soo wargeliyo Guddiga Maaliyadda ee Baarlamaanka ka hor inta aan la sameynin kala wareejinta si uu ula socdo sharci ahaanteeda.
5. In lagu saleeyo miisaaniyadda deeqaha laba dhinac ah (bilateral) ama dhinacyada badan leh (multi lateral) kuwa laga heysto ballanqaad rasmi ah oo keliya isla markaana loo hayo heshiiyo qoraal leh.
6. Iyadoo wax laga baranayo sannadihii la soo dhaafey, in marka la dejinayo Miisaaniyadda dawladda aad looga baaraan dego oo lagu saleeyo awoodda dakhliga la heli karo oo keliya oo aanan lagu soo darin isdhin iyo kharash aan la qiyaasi karin halka uu ka imanayo
7. Gudigu wuxuu ku talilahaa in wazaarada maaliyada qabsato shaqadeeda dakhli aruurin oo aysan cid kale u xilsaarani taasi oo sababtay hoos dhac weyn dhinaca dakhliga.
8. Qandaraasyada iyo heshiisyada maal gashi ee la galayo in loo sameeyo xeer nidaamiye xaddidaya awoodaha kharash gelidda, qiimo go'anna loo sameeyo, kadib marka la dhammeystiro habka qandaraas bixinta, lagana diiwaan geliyo xafiiska Hanti dhowrka guud ee Qaranka.
9. In si dhammaytiran loo joojiyo kharashka laga galayo dakhliga ka hor inta aan lagu xerayn Khasnadda dhexe ee Dowladda (TreasuryAccount) Isla markaana waxaa xaaraan ah in la bixiyo kharash aan loo marin habraaca iyo nidaamka sharciga maaliyadu xeerinayo.

10. In la xoojiyo awoodda xirfadeed maamul ee waaxda Miisaaniyadda Dawladda ee Wasaaradda Maaliyadda lana gaarsiiyo heer ay ku gudan karto waajibaadkeeda shaqo, iyadoo loo baahanyahay in la xoojiyo habraaca dejinta qoondada, maareynta dhaqdhaqaaqa kharash bixinta iyo maamulka Miisaaniyadda. Taasi oo looga baahanyahay Wasaaradda inay kusoo diyaariso miisaaniyad ka turjumeysa waaqica dhaqaale iyo awoodda dakhli ee dalka iyadoo la dhowrayo shintiriska diyaarinta miisaaniyadda ,iyo muddooyinka laga maarmaanka ah ee sharciga maaliyaddu xaddidayo..
11. Guddigu wuxuu soo jeedinayaa in la fuliyo arrimaha uu baarimaanku go'aannada ka soo saarey ee ku lifaaqnaa ansixinta Misaaniyadda. gaar ahaan qaraaraadka ku saabsan nidaamka Miisaaniyadda iyo bixinta xuquuqda shaqaalaha iyo qaansheegatooyinka baaqiga ku ah Xukuumadda iyadoo loo samaynayo qorshe cad oo waqtiyeysan meel marin tooda.

DHAMMAAD

Federal Government of Somalia

Expenditures Report as of December, 2016

	Description	Budget / Estimate	YTD Actuals	Variance
1	Hay'adaha Maamulka iyo adeegga Guud	152578114.6	106456890.7	70%
10101	Xafiiska Madaxtooyada	4,204,727	3,145,505	75%
10201	Xafiiska Baarlamaanka	3,872,370	2,911,858	75%
10202	Xubnaha Baarlamaanka	10,012,512	5,015,000	50%
10301	Xafiiska Ra'iisul Wasaraha	5,103,703	3,879,400	76%
10302	Agaasimka Biiada iyo Duur joogta	393,000	250,811	64%
10303	Mashruuca CIP	4,386,430	1,145,267	26%
10401	Wasaaradda Arrimaha Dibedda	1,778,142	1,219,808	69%
10402	Safaaradaha	4,335,600	3,796,418	88%
10501	Wasaaradda Maaliyadda	7,475,433	6,402,993	86%
10502	Xisaabiyaha Guud	961,200	836,781	87%
10503	Adeega Guud ee Dowladda	57,131,996	49,258,930	86%
10504	Mashruuca SFF	6,558,750	643,891	10%
10505	Mashruuca PFM	10,030,000	4,351,858	43%
10506	Mashruuca EFG	2,977,062	1,767,531	59%
10507	Mashruuca RCRF	2,503,737	1,399,466	56%
10508	Somali Core Economic Institutions and Opp. Prg (SCORE)	3,297,110	266,339	8%
10601	Wasaaradda Qorshaynta Iyo Isk. Caalamiga	1,059,358	838,426	79%
10701	Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka	9,822,200	8,559,095	87%
10702	Guddiga Qaxootiga Qeranka iyo Barakacayasha	406,000	262,268	65%
10703	Hay'adda Maareynta Musiibooyinka	222,000	149,338	67%
10704	Mashruuca Tangeerada Xasilinta	1,320,269	222,271	17%
10705	Mashruuca SUIPP	800,000	0	0%
10801	Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awqaafta	602,429	480,890	80%
10901	Wasaaradda Cudaalaadda iyo Arrimaha Dastuurka	490,110	326,492	67%
10902	Ciidanka Ashnubta	4,511,000	3,512,173	78%
10903	Maxkamadda Gobolka Banaadir	1,060,798	847,983	80%
10904	Maxkamadda Racfaanka	181,783	156,511	86%
10905	Guddiga Adeegga Garsoorka	216,160	172,113	80%
10906	Maxkamadda Dastuuriga ah	33,000	0	0%
11001	Maxkamadda Sare	620,200	509,986	82%
11101	Xeer-ilaaliyaha Guud	910,950	710,873	78%
11201	Garyaqaanka Guud	442,820	388,031	88%
11301	Hanti-dhowrka Guud	1,230,138	1,118,382	91%
11501	Wasaaradda Dastuurka	425,360	203,046	48%
11601	Guddiga M. Banaan Ee Xudduudaha & Federaalka	562,000	226,000	40%
11602	Guddiga M. Banaan Ee Dibu Heshiisiinta Q.	444,655	264,848	60%
11603	Guddiga Madaxa Banaan ee Doorashooyinka Q.	646,471	425,595	66%
11604	Guddiga M. Banaan Ee Xuquuqul Adanaha	342,000	0	0%
11605	Guddiga M. Banaan Ee Dibu Eegista iyo Hir.	503,059	317,093	62%

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 126
TR: 13/11/2017
SAXIIX:

	Dastarka			
11606	Guddiga Madaxa Bansan Ee Shaqalaha Rayidka	693,580	533,619	77%
2	Security Services	67,833,489.17	47,846,242.64	71%
20101	Wasaaradda Gaashaandhiga	990,750	737,343	74%
20102	Taliska Ciidanka Xooga Dalka	35,834,740	23,566,745	66%
20103	Maxkamadda Ciidamadda	1,476,000	1,476,000	100%
20104	Hay'adda Naafada iyo Agoonta C. Qalabka Sida	110,000	30,000	27%
20201	Wasaaradda Amniga Qaranka	2,420,426	2,000,325	83%
20202	Taliska Ciidanka Booliska	16,335,160	10,689,510	65%
20203	Hay'adda Nabadsugidda Qaranka	9,126,413	7,922,320	87%
20204	Hay'adda Socdaalka & Jinsiyadaha	1,540,000	1,431,000	93%
3	Hay'adaha Adeegga Dhaqaalaha	19619401.67	12643311.83	0.644429022
30101	Wasaaradda Tamarta & Biyaha	635,280	487,889	77%
30201	Wasaaradda Maaliyadda	1,408,690	1,252,805	89%
30301	Wasaaradda Beeraha	704,010	562,114	80%
30401	Wasaaradda Xanaanadda Xoolaha, Dhirta & Daaqa	640,530	479,268	75%
30501	Wasaaradda Kalluumaysiga & Khey. Badda	771,650	570,875	74%
30502	Hay'adda Cilmi Baadhista Badaha Soomaaliyeed	356,390	271,958	76%
30503	Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumeysiga	96,950	96,910	100%
30601	Wasaaradda Warfaafinta	3,166,110	2,509,883	79%
30701	Wasaaradda Boostada & Isgaadhsiinta	1,013,830	797,387	79%
30702	Mashruuca ICT	5,733,333	1,635,864	29%
30801	Wasaaradda Howlaha Guud iyo Dib-u-dhiska	720,390	563,210	78%
30901	Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawadda	790,830	627,514	79%
30902	Hay'adda Saadaasha iyo Duulista Howadda	575,130	393,974	69%
31001	Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda	891,670	712,886	80%
31002	Dekadda Xamar	860,100	860,100	100%
31101	Wasaaradda Gaadiidka iyo Warshadaha	1,245,508	820,675	66%
4	Hay'adaha Adeegga Bulshada	8,296,896.67	4,120,275.19	50%
40101	Wasaaradda Caafimaadka	1,503,498	601,898	40%
40201	Wasaaradda Waxbarashadda & Tacliinta Sare	3,075,235	707,982	23%
40202	Jaamacadda Umadda	1,206,105	903,174	75%
40203	Hay'adda Cilmi. Farsha iyo Sugaanta	225,010	122,353	54%
40204	Akademiya Goboleedka Afka Soomaaliga	172,000	86,000	50%
40301	Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada	995,267	814,194	82%
40401	Wasaaradda Isboortiga & Dhalinyarada	488,263	387,892	79%
40501	Wasaaradda Hawenka & Hor. Xuq. Adanaha	631,520	496,782	79%
	Grand Total	248,327,902.11	171,066,720.34	69%

SHARCI LR. 08 Taariikh: 27/11/2017

ANSIXINTA HESHIISKA ISU CELINTA MAXAABIISTA XUKUMAN EE SOOMAALIYA IYO INDIYA

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Faqaradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarafka 'q' ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Ref: 0363/1/B-10/17, Taariikh: 14/10/2017 kuna saabsan Ansixinta Heshiiska Isucelinta Maxaabiista Xukuman ee Soomaaliya iyo Indiya uuna u soo gudbiyay Madaxweynaha JFS si uu ugu rogo Sharci.

Markuu Tixgeliyay: Baahida loo qabo in la ansixiyo Heshiiskaas

WUXUU SOO SAARAY XEERKAAN:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa la ansixiyay Heshiiska isucelinta Maxaabiista Xukuman ee Soomaaliya iyo Indiya.

Qodobka 2aad

Waxa uu sharcigaan dhaqan gelayaa isla markii uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 27/11/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: [illegible]
TAARIIKH: 29/11/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)



Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

HESHIIS DHEXMARAY XUKUUMADDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA IYO XUKUUMADDA HINDIYA OO KU SAABSAN ISU-GUDBINTA MAXAABIISTA XUKUMAN

Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Xukuumadda Jamhuuriyadda Hindiya, oo hadda kadib loogu yeerayo Qaramada heshiiska galay; Iyagoo daneynaya in ay fududeeyaan in dadka xukumani dhaqan-celinta bulsho ku qaataan dalalka ay u dhasheen;
Iyagoo tixgelinaya in himiladaas la hirgeliyo si loo siiyo muwaadiniinta shisheeye, kuwaas oo lagu helay laguna xukumay sabab la xiriirta gelitaankooda fal-dembiyeed, fursada in ay muddada xabsiyadooda ku dhex qaataan bulshadooda; Waxay ku heshiiyeen sida soo socota:

Qodobka 1-aad:
Qeexitaano

Si waafaqsan ujeeddooyinka Heshiiskan:

a) "**xukun**" waxaa loola jeedaa go'aan ama amar maxkamad meel-marsiisa xukumid;

b) "**Qaranka qaabilaya**" waxaa loola jeedaa Qaranka qofka xukuman loo gudbinayo ama loo gudbiyey si uu muddada xukunkiisa ama muddada u harsan uu ugu qaato halkaas;

c) "**xukumid**" waxaa loola jeedaa ciqaab kasta ama muddo xoriyad-ka-qaadid oo ay amartay maxkamada oo ah muddo go'an ama xabsi daa'im si waafaqsan xadka awoodeeda ku aadan fal-dembiyeedka;

d) "**qof xukuman**" waxaa loola jeedaa qof ku jira xukunaansho xabsi si waafaqsan go'aan ay gaartay maxkamad fal-dembiyeed oo ay ku jiraan maxkamadaha lagu abuuray sida sharciga ah ee markaas dhaqan-galka ka ah Qaramada heshiiska galay;

e) "**Qaranka gudbinaya**" waxaa loola jeedaa Qaranka xukunku uga dhacay qofka la gudbinayo ama la gudbiyey;

Qodobka 2-aad:
Mabaadi'da Guud

1. Qof lagu xukumay xuduudda mid kamid ah Qaramada Heshiiska galay waxaa loo gudbin karaa xuduudda kale ee Qaranka Heshiiska galay si waafaqsan qodobada Heshiiskan si uu ugu qaato xukunka lagu riday isaga. Isla halkaas, wuxuu u sheegan karaa Qaranka wax gudbinaya ama Qaranka wax qaabilaya rabitaankiisa ku aaddan in la gudbiyo si waafaqsan Heshiiskan.

2. Gudbinta waxaa codsan kara qof kasta oo xukuman oo ah muwaadin u dhashay mid kamid ah Qaramada Heshiiska galay ama qof kasta oo mudan in uu wakiil ka noqdo si waafaqsan sharciga Qaranka Heshiiska galay isagoo u gudbisanaya codsi Qaranka Heshiiska galay iyadoo la raacayo qaabka u degsan Xukuumadda Qarankaas Heshiiska galay.

Qodobka 3-aad:
Hay'adaha Dhexe

1. Hay'adaha u xilsaaran hirgelinta Heshiiskan ee ay wada galeen Qaramada Heshiiska waxay yihiin:

- Dhinaca Jamhuuriyadda Hindiya: Wasiirka Arrimaha Gudaha,
- Dhinaca Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya: Wasiirka Cadaaladda.

2. Haddii ay dhacdo in Qaramada Heshiiska midkood bedelo hay'adihiisa awoodeed, wuxuu ku wargelinayaa Qaranka kale sidaas iyadoo loo marayo maadooyinka diblomaasiyadeed

Qodobka 4-aad:
Shuruudaha Gudbinta

1. Qofka xukuman ee lagu gudbinayo si waafaqsan Heshiiskan waxaa laga rabaa shuruudaha soo socda:

a. in qofku ahaado muwaadin u dhashay Qaranka qaabilaya;
b. in aan ciqaab dil ah lagu ridin qofka xukuman;
c. in xukunku yahay kama-dambays;
d. in aysan jirin dacwado fal-dambiyeed oo u yaal qofka xukuman Qaranka gudbinaya taas oo joogitaankiisa loo baahan yahay;
e. in aan qofka xukuman lagu helin fal-dembiyeed la xiriira sharciga ciidamada;
f. waqtiga helitaanka codsiga gudbinta, qofka xukuman waa in xarigiisa ay ka harsan tahay ugu yaraan lix bilood ama uu xukunkiisu yahay xabsi daa'im;
g. in falalka ama ka-baaqsiyada ee qofkaas looga xukumay Qaranka gudbinaya ay yihiin kuwa ciqaab lagu mutaysanayo fal-dembi ahaan Qaranka qaabilaya, ama noqonaya fal-dembiyeed haddii lagu galo xuduudiisa;
h. gudbinta gacan-ku-haynta qofka xukuman ee Qaranka qaabilaya waa in aysan noqon mid dhaawacaysa madax-bannaanida, amniga ama dan kasta oo kale oo muhiim u ah Qaranka gudbinaya;
i. oggolaanshaha gudbinta waxaa bixinaya qofka xukuman ama, haddii marka la eego da'diisa, xaaladiisa jireed ama maskaxeed uu Qaramada Heshiiska midkood u tixgeliyo

lama-huraan, in qof kasta oo kale mudan yahay in uu u dhaqmo wakiilkiisa si waafaqsan sharciga Qaranka Heshiiska galay; iyo

j. in Qaranka gudbinaya iyo kan qaabilaya ay isla oggol yihiin gudbinta.

2. Haddii ay jiraan arrimo gaar ahaaneed, Qaranka gudbinaya iyo kan qaabilaya waxay oggolaan karaan gudbin xitaa haddii muddada xukunka ee u harsan qofka xukuman ay ka yar tahay lix bilood.

Qodobka 5-aad:
Waajibka isu-gudbinta macluumaadka

1. Haddii qofka xukuman uu u muujiyey daneyn Qaranka gudbinaya in lagu gudbiyo sida uu qabo Heshiiskani, Qaranka gudbinaya wuxuu u dirayaa macluumaadka iyo dokumentiyada soo socda Qaranka qaabilaya haddii aysan Qaranka qaabilaya iyo kan gudbinaya hore go'aan uga gaarin in aysan oggolayn gudbinta:

a. magaca iyo jinsiyadda, taariikhda iyo goobta dhalashada ee qofka xukuman iyo cinwaankiisa, haddii ay jiraan, Qaranka qaabilaya oo uu wehliyo nuqul baasaboorkiisa ah ama wax kastoo kale oo ah dokumentiyo aqoonsi ee shakhsiyeed, iyo muunado-fareed qofka xukuman, intii suurta-gal ah;

b. hadal-qoraal ku aaddan xaqiiqooyinka uu xukunku ku saleysnaa;

c. dabeecada, waqtiga iyo taariikhda bilowga xukunka;

d. nuqul tasdiiqsan ee xukunka iyo nuqul ku saabsan qodobada sharciga ee xukunka looga gaaray qofka xukuman;
e. warbixinada caafimaad, bulsho iyo wixii kale la xiriira tixraaca iyo dabeecada qofka xukuman, haddii ay la xiriirto natiijada codsigiisa ama go'aarninta xaalada xanibaadiisa;
f. wixii kale oo macluumaad ah ee Qaranka qaabilaya uu caddeeyo in loo baahan yahay, si uu awood ugu helo in uu tixgeliyo suurta-galnimada gudbinta iyo in uu awood u helo in uu ku wargeliyo qofka xukuman raadreebyada dhammeystiran ee gudbintiisa sida uu qabo sharcigiisu;
g. codsiga qofka xukuman in la gudbiyo ama qof mudan in uu isaga wakiil ka noqdo si waafaqsan sharciga Qaranka gudbinaya;
h. hadal-qoraal muujinaya muddada xukunka ee uu hore u dhammeystay, oo ay wehliyaan macluumaadka dhegaysiga dacwadiisa ka hor xariga, muddo dhimid, ama saameyn kasta oo la xiriirta meel-marsiinta xukunka; iyo
i. hadal-qoraal ka socda Qaranka gudbinaya oo oggolaanaya gudbinta qofka xukuman;

2. Si waafaqsan ujeeddooyinka awoodidda go'aan in la sameeyo codsi ku aaddan Heshiiskan, Qaranka qaabilaya wuxuu u dirayaa macluumaadka iyo dokumentiyada soo socda Qaranka gudbinaya haddii aysan Qaranka qaabilaya ama kan gudbinaya hore u go'aansan in aysan oggolaan doonin gudbinta:

a. Hadal-qoraal ama dokumenti muujinaya in qofka xukuman uu yahay muwaadin u dhashay Qaranka qaabilaya;

b. nuqul la xiriira sharciga Qaranka qaabilaya oo tilmaamaya in falalka ama kabaaqsiyaha ee ku aaddan xukunka lagu riday Qaranka gudbinaya uu yahay mid looga aqoonsan yahay fal-dembiyeed sida uu qabo sharciga Qaranka qaabilaya, ama uu noqonayo fal-dembiyeed haddii lagu galo xuduudiisa;

c. hadal-qoraal saameynta sharci ama xeer-nidaamiye kasta oo la xiriira waqtiga iyo meel-marinta xukunta ee Qaranka qaabilaya kadib gudbinta qofka xukuman oo ay ku jiraan, haddii ay haboon tahay, hadal-qoraal ku aaddan waxyeelada faqradda 2aad ee Qodobka 9aad ee Heshiiskan gudbintiisa;

d. rabitaanka Qaranka wax qaabilaya in uu oggolaado gudbinta qofka xukuman iyo qabashada in uu maamulo qeybta harsan ee xukunka ee qofka xukuman; iyo

e. wixii kale oo macluumaad ah ama dokumenti ee Qaranka wax gudbinaya uu u arko lama-huraan.

Qodobka 6-aad:
Codsiyo iyo jawaab-celino

1. Codsiyada gudbinta waxaa lagu sameynayaa qoraal dokumenti qeexan, haddii uu jiro, iyadoo lagu hagaajinayo Hay'adda Dhexe ee Qaranka wax gudbinaya oo la sii marsiinayo marinada diblomaasiyadeed Hay'adda Dhexe ee Qaranka qaabilaya. Jawaab-celinada waxaa lagula xiriirayaa marino sidaas oo kale ah.

2. Qaranka qaabilaya wuxuu si dhaqso ah ugu wargelinayaa Qaranka gudbinaya go'aankiisa ku aaddan in uu oggol yahay ama uusan oggolayn gudbinta laga codsaday.

Qodobka 7-aad:
Oggolaanshaha iyo xaqiijintiisa

1. Qaranka gudbinaya wuxuu xaqiijinayaa in qofka looga baahanyahay in uu bixiyo oggolaansho gudbinta si waafaqsan faqradda 1(i) ee Qodobka 4aad ee Heshiiskan, uu ku sameeyey si iskiis ah iyo aqoon buuxda oo ku aaddan raad-reebyada qaanuun ee ka dhalan kara halkaas. Habraaca bixinta oggolaanshahaas waxaa lagu dhaqayaa sharciga Qaranka gudbinaya.
2. Qaranka gudbinaya wuxuu siin karaa fursad Qaranka qaabilaya in uu xaqiijiyo in oggolaanshaha lagu bixiyey si waafaqsan shuruudaha ku xusan faqradda 1aad ee isla Qodobkan.

Qodobka 8-aad:
Saameynta gudbinta ee Qaranka qaabilaya

1. Hay'adaha awoodda leh ee Qaranka qaabilaya waxay sii wadayaan meel-marsiinta xukunka iyadoo la marayo maxkamad ama amar-maamuleed, sida loogu baahan karo ee sharcigiisa dalka, si waafaqsan shuruudaha ku xusan Qodobka 9aad ee Heshiiskan.
2. Si waafaqsan xeerarka Qodobka 11aad ee Heshiiskan, meel-marsiinta xukunka waxaa lagu dhaqayaa

sharciga Qaranka qaabilaya iyo in Qarankaas oo keliya uu awoodi karo in uu qaado dhammaan go'aanada ku haboon.

Qodobka 9-aad:
Sii-wadid meel-marsiin xukun

1. Qaranka qaabilaya waxaa ku waajib ah dabeecada qaanuun iyo muddada xukunka sida uu go'aamiyey Qaranka gudbinaya.

2. Haddii xukunku yahay mid dabeecadiisa ama muddadiisa, ama labadaba, aan la saan-qaadi karin sharciga Qaranka qaabilaya, in Qaranka uu, si wehlisa oggolaanshihii hore ee Qaranka gudbinaya, oo ku saleysan maxkamad ama amar maamuleed, u bedelo xukunka xukun ku tilmaaman isaga sharcigiisa ee faldembiyeed la mid ah. Si ku aaddan dabeecadiisa iyo muddada, xukunka la qabatimay waxay, intii suurta-gal ah, waafaqayaa kan lagula riday xukunka Qaranka gudbinaya. Wuxuu, si kastaba, uusan uga darayn, ha ahaato dabeecadiisa ama muddada, xukunka uu ku riday Qaranka gudbinaya.

Qodobka 10-aad:
Saameynta dhammeystirka xukun ee Qaranka gudbinaya

Marka Qaranka qaabilaya uu wargelinayo Qaranka gudbinaya sida ku xusan faqradda 1(a) ee Qodobka 13aad ee Heshiiskan in xukunka la dhammeystiray, wargelintaas waxay ku yeelanaysaa saameyn gudashada xukunka ee Qaranka gudbinaya.

Qodobka 11-aad:
Dib-u-eegista Xukunka iyo cafis, dembi-dhaaf iyo xisaabin

1. Qaranka gudbinaya kĕligiis ayaa go'aaminaya codsi kasta oo la xiriira dib-u-eegista xukunka.

2. Mid kasta oo kamid ah Qaramada heshiiska galay ayaa bixin kara cafis, dembidhaaf ama xisaabin xukunka si waafaqsan dastuurkiisa ama shuruucdiisa kale.

Qodobka 12-aad:
Dhammaadka meel-marsiinta xukunka

1. Qaranka gudbinaya wuxuu dhaqso u wargelinayaa Qaranka qaabilaya wax kasta oo go'aano ah oo lagu gaaray xuduudiisa ee la xiriirta dhammeynta meel-marinta xukunka ama qeyb kamid ah.

2. Qaranka qaabilaya wuxuu dhammeynayaa meel-marinta xukunka ama qeyb kamid ah sida ugu dhaqsaha badan ee uu ku wargeliyey Qaranka gudbinaya ee wax kasta oo go'aan ama tallaabo ah oo laga dhaxlay xukunka ay joogsatay meel-marsiintiisu.

Qodobka 13-aad:
Macluumaadka meel-marinta xukunka

1. Qaranka qaabilaya wuxuu ku wargelinayaa Qaranka gudbinaya:

a. goorta meel-marinta xukunka la dhammeystiray; ama
b. haddii qofka la xukumay uu ka baxsaday xabsiga ka hor inta meel-marinta xukunka aan la dhammeystirin. Arrimahaas oo kale Qaranka qaabilaya wuxuu qaadayaa tallaabooyin uu ku xaqiijinayo xarigiisa si ku aaddan ujeeddooyinka gudashada muddada uga harsan xukunkiisa iyo in la yareeyo in lagu helo gelidda fal-dembiyeed sharci la xiriira ee Qarana qaabilaya.

2. Qaranka qaabilaya wuxuu u gudbinayaa warbixin gaar ahaaneed oo khuseysa meelmarinta xukunka, haddii uu sidaas weydiisto Qaranka gudbinaya.

Qodobka 14-aad:
Hakasho

1. Haddii Qaramada Heshiiska midkood la galo qorsheyaal ku aaddan gudbinta dadka xukuman Qaran kasta oo saddexaad, Qaranka kale ee Heshiiska wuxuu sameynayaa iskaashi in uu fududeeyo hakashada ay ku dhexmarayaan xuduudiisa dadka xukuman oo lagu gudbinayo si waafaqsan qorsheyaashaas, marka laga reebo in uu diido in uu bixiyo hakashada:

a. haddii qofka xukuman uu yahay ruux kamid muwaadiniintiisa; iyo
b. haddii codsigu waxyeelaynayo madax-bannaanidda, nabadgelyada, deganaanshaha dadweynaha ama dan kale oo muhiim u ah Qaranka Heshiiska ku jira.

2. Qaranka Heshiiska ku jira ee ku-talo-jira in uu fuliyo gudbinta waa in uu hore ugu wargeliyaa Qaranka kale ee Heshiiska gudbintaas.

Qodobka 15-aad:
Kharashyo

Kharashyo kasta oo lagu galay hirgelinta Heshiiskan waxay saraan tahay Qaranka qaabilaya, marka laga reebo dhammaan kharashyada lagu galay xuduuda Qaranka gudbinaya. Qaranka qaabilaya wuxuu, si kastaba, weydiisan karaa ama raadsan karaa in uu dib uga helo kharashyada gudbinta qofka xukuman ama ilo kale.

Qodobka 16-aad:
Afka

Codsiyada iyo dokumentiyada waxtarka leh waxay ku qornaanayaan Ingiriis ama waxaa ku xirnaanaya turjumaad Ingiriis ah.

Qodobka 17-aad:
Baaxadda Hirgelinta

Heshiiskani wuxuu ku dabaqmayaa meel-marinta xukunada ku dhacay ka hor ama kadib markuu dhaqan-galo Heshiiskani.

Qodobka 18-aad:
Hadal-qoraalka Khilaafaadka

1. Hay'adaha Dhexe waxay ku dadaalayaan in ay si wadajir ah u xalliyaan khilaaf kasta oo ka dhasha ~~fasiraadda, dabaqaada ama hirgelinta Heshiiskan~~.

2. Haddii Hay'adaha Dhexe ay ku guul-darraystaan in ay xalliyaan khilaafka si wadajir ah, waxaa lagu xallinayaa marinada diblomaasiyadeed.

Qodobka 19-aad:
Wareejinta Dadka Xukuman

Wareejinta qofka la gudbinayo ee Qaranka gudbinayaa u gudbinayo Qaranka qaabilaya waxay ka dhacaysaa goob ay isla oggolaadeen Qaranka gudbinaya iyo Qaranka qaabilaya.

Qaranka qaabilaya ayaa xil ka saaran yahay safarka maxbuuska looga qaadayo Qaranka gudbinaya isagoo sidoo kale mas'uul ka ah gacan-ku-haynta qofka xukuman markuu ka baxo xudduuda Qaranka gudbinaya.

Qodobka 20-aad:
Wax-ka-bedelo

Wax-ka-bedel kasta ama dib-u-habayn kasta oo lagu sameeyo Heshiiskan ay ku heshiiyeen Qaramada Heshiiska wuxuu u dhaqan-galayaa si la mid ah sida Heshiiska oo kale.

Qodobka 21-aad:
Qodobo Gebegabo ah

1. Heshiiskani wuxuu u baahan yahay ansixin. Dhinac kasta oo ah Qaranka Heshiiska galay wuxuu dhanka kale ku wargelinayaa sida ugu dhaqsaha badan, si qoraal ahaan, iyadoo la marsiinayo marinada diblomaasiyadeed, arrinta ku aaddan dhammeystirka habraacyadiisa qaanuun ee loo baahan yahay si loo dhaqan-geliyo Heshiiskan. Heshiiskani wuxuu dhaqan-gelayaa maalinta kowaad ee bisha labaad ee taariikhda u dambeysa ee wargelinta.

2. Heshiisku wuxuu meelmar ahaanayaa mudo aan cayinayn. Waxaa, si kastaba, dhammeyn kara mid kamid ah Qaramada Heshiiska galay isagoo bixinaya wargelin qoraal ka joojinaya ciddii la gashay heshiiskaas. Joojintu waxay hirgelaysaa lix bilood kadib taariikhda wargelintaas.

3. Ka sokow dhammaad kasta, Heshiiskani wuu soconayaa in uu ku dabaqmo meelmarinta xukunada maxaabiista ee lagu wareejiyey sida uu qabo Heshiiskani ka hor taáriikhda uu dhammaadkaasi saameynta yeesho.

Markhaati hortiis, saxiixayaasha hoose, iyagoo ka wakiil ah Xukuumadahooda ay khuseyso, waxaa saxiixeen Heshiiskan.

Waxaa lagu fuliyey ..... taariikh .....

laba nuqul oo isku mid ah oo mid walba ku qoran yahay afafka Hindiga iyo Ingiriiska, dhammaan qoraalado waa isla mid. Haddii ay dhacdo in laysku khilaafo fasiraadda nuqulka af Ingiriiska ayaa jiraaya.

Dhanka Xukuumadda	*Dhanka Xukuumadda*
Jamhuuriyada Federaalka	*Jamhuuriyadda Hindiya*
Soomaaliya	
Magac:	*Magaca:*
Mansab:	*Mansab:*

AGREEMENT BETWEEN THE GOVERNMENT OF THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA AND GOVERNMENT OF INDIA THE ON THE TRANSFER OF SENTENCED PERSONS

The Government of the Federal Republic of Somalia and the Government of the Republic of India, hereinafter referred to as the Contracting States;

Desiring to facilitate the social rehabilitation of sentenced persons into their own countries; and

Considering that this objective should be fulfilled by giving foreign nationals, who have been convicted and sentenced as a result of their commission of a criminal offence, the opportunity to serve their sentences in their own society;

Have agreed as follows:

ARTICLE 1

Definitions

For the purpose of this Agreement:

(a) "judgment" means a decision or order of a court or tribunal imposing a sentence;

(b) "receiving State" means a State to which the sentenced person may be, or has been, transferred in order to serve his sentence or remainder thereof;

(c) "sentence" means any punishment or measure involving deprivation of liberty ordered by a court or tribunal for a determinate period of time or for life imprisonment in the exercise of its criminal jurisdiction;

(d) "sentenced person" means a person undergoing a sentence of imprisonment under a judgment passed by a criminal court including the courts established under the law for the time being in force in the Contracting States;

(e) "transferring State" means the State in which the sentence was imposed on the person who may be, or has been transferred.

ARTICLE 2

General Principles

1. A person sentenced in the territory of one Contracting State may be transferred to the territory of the other Contracting State in accordance with the provisions of this Agreement in order to serve the sentence imposed on him. To that end, he may express to the transferring State or the receiving State his willingness to be transferred under this Agreement.

2. Transfer may be requested by any sentenced person who is a national of a Contracting State or by any other person who is entitled to act on his behalf in accordance with the law of the Contracting State by making an application to the Contracting State and in the manner prescribed by the Government of that Contracting State.

ARTICLE 3

Central Authorities

1. Authorities in charge of the implementation of this Agreement for the Contracting States are:
- For the Republic of India: Ministry of Home Affairs.
- For the Federal Republic of Somalia: Ministry of Justice

2. In case either Contracting State changes its competent authorities, it shall notify the other State of the same through diplomatic channels.

ARTICLE 4

Conditions for transfer

1. A sentenced person may be transferred under this Agreement on the following conditions:

(a) the person is a national of the receiving State;

(b) the death penalty has not been imposed on the sentenced person;

(c) the judgment is final;

(d) no criminal proceedings are pending against the sentenced person in the transferring State in which his presence is required;

(e) the sentenced person has not been convicted for an offence under the military law;

(f) at the time of receipt of the request for transfer, the sentenced person still has at least six months of the sentence to serve or is undergoing a sentence of life imprisonment;

(g) that the acts or omissions for which that person was sentenced in the transferring State are those which are punishable as a crime in the receiving State, or would constitute a criminal offence if committed on its territory;

(h) transfer of custody of the sentenced person to the receiving State shall not be prejudicial to the sovereignty, security or any other essential interest of the transferring State;

(i) consent to the transfer is given by the sentenced person or, where in view of his age or physical or mental condition either Contracting State considers it necessary, by any other person entitled to act on his behalf in accordance with the law of the Contracting State; and

(j) the transferring and receiving States agree to the transfer.

2. In exceptional cases, the transferring and receiving States may agree to a transfer even if the remaining period to be served by the sentenced person is less than six months.

ARTICLE 5

Obligation to furnish Information

1. If the sentenced person has expressed an interest to the transferring State in being transferred under this Agreement, the transferring State shall send the following information and documents to the receiving State unless either the receiving or the transferring State has already decided that it will not agree to the transfer:

(a) the name and nationality, date and place of birth of the sentenced person and his address, if any, in the receiving State along with a copy of his passport or any other personal identification documents, and Fingerprints of the Sentenced Person, as possible;

(b) a statement of the facts upon which the sentence was based;

(c) the nature, duration and date of commencement of the sentence;

(d) a certified copy of the judgment and a copy of the relevant provisions of the law under which the sentence has been passed against the sentenced person;

(e) a medical, social or any other report regarding the antecedents and character of the sentenced person, where it is relevant for the disposal of his application or for deciding the nature of his confinement;

(f) any other information which the receiving State may specify as required, to enable it to consider the possibility of transfer and to enable it to inform the sentenced person of the full consequences of transfer for him under its law;

(g) the request of the sentenced person to be transferred or of a person entitled to act on his behalf in accordance with the law of the transferring State;

(h) a statement indicating how much of the sentence has already been served, including information on any pre-trial detention, remission, or any other factor relevant to the enforcement of the sentence; and

(i) A statement from the Transferring State agreeing to the transfer of the Sentenced Person.

2. For the purposes of enabling a decision to be made on a request under this Agreement, the receiving State shall send the following information and documents to the transferring State unless either the receiving or the transferring State has already decided that it will not agree to the transfer:

(a) a statement or document indicating that the sentenced person is a national of the receiving State;

(b) a copy of the relevant law of the receiving State which provides that the acts or omissions on account of which the sentence has been imposed in the transferring State constitute a criminal offence according to the law of the receiving State, or would constitute a criminal offence if committed on its territory;

(c) a statement of the effect of any law or regulation relating to the duration and enforcement of the sentence in the receiving State after the sentenced person's transfer including, if applicable, a statement of the effect of paragraph 2 of Article 9 of this Agreement on his transfer;

(d) the willingness of the receiving State to accept the transfer of the sentenced person and an undertaking to administer the remaining part of the sentence of the sentenced person; and

(e) any other information or document which the transferring State may consider necessary.

ARTICLE 6

Requests and replies

1. Requests for transfer shall be made in writing in the prescribed proforma, if any, and addressed by the Central authority of the transferring State through diplomatic channels to the Central Authority of the receiving State. Replies shall be communicated through the same channels.

2. The receiving State shall promptly inform the transferring State of its decision whether or not to agree to the requested transfer.

ARTICLE 7

Consent and its verification

1. The transferring State shall ensure that the person required to give consent to the transfer in accordance with paragraph 1(i) of Article 4 of this Agreement, does so voluntarily and with full knowledge of the legal consequences thereof. The procedure for giving such consent shall be governed by the law of the transferring State.

2. The transferring State shall afford an opportunity to the receiving State to verify that the consent is given in accordance with the conditions set out in paragraph 1 of this Article.

ARTICLE 8

Effect of transfer for the receiving State

1. Cid kasta oo doonaysa inay isticmaasho Hir raadiyo, TV, Isgaarsiin iyo wixii la mid ah oo u baahan in loo isticmaalo hir mucayan ah, waxay qaadanaysaa Rukhsadda istcmaalka Hirarka. Ciddii hore u isticmaali jirtayna waa inay waafajisaa adeeggeeda Sharcigan.
2. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa xaddidaysa khidmadda laga qaadayo cidda qaadanaysa Rukhsadda, ayadoo kala tashanaysa Wasaaradda Boòstada, Isgaarsiinta iyo Tiknoloojiyada, iyo Wasaaradda maaliyadda; waxaana tixgelin la siinayaa xaaladda adeeg-bixiyaha.

3. Khidmadda Hay'addu qaadayso sida ku cad Sharcigan waxay xaqiijinaysaa:

a. Inay ka qeyb-qaataan adeeg-bixiyeyaasha ka ganacsada isgaarsiinta, kobcinta dhaqaalaha dalka iyo horumarinta Isgaarsiinta, laguna xaqiijinayo inay bulshadu ka faa'iidaysato dhaqaalaha ka soo baxa; iyo
b. Khidmadda laga qaado adeeg-bixiyeyaasha waxaa lagu shubayaa khasnadda guud ee Dawladda si waafaqsan sharciga maamulka miisaaniyadda dalka.

Qeybta 7-aad:
Rukhsadaha
Qodobka 41-aad:
Rukhsadaha

1. Qofna kuma shaqeysan karo shabakad isgaarsiineed, isagoo isticmaalaya Hirarka Raadiyaha ee Isgaarsiinta, saldhig warbaahin ama bixin adeeg isgaarsiineed ee Soomaaliya

gudaheeda, asagoo aan u haysan rukhsad adeegga isgaarsiinta ee uu bixinayo.

2. Hay'addu waxay bixin kartaa rukhsad isgaarsiineed oo oggolaanaysa bixinta adeegyo isgaarsiineed, qaab ku saleysan rukhsado gaar ah iyo rukhsado guud si waafaqsan shuruudaha rukhsad-bixinta iyo nidaamka Hay'adda u degsan.
3. Hay'addu waxay boggeeda internet-ka ku daabacaysaa adeeg-bixiyeyaasha isgaarsiineed ee u qalma rukhsadaha guud iyo kuwa gaarka ah.
4. Hay'addu marka ay go'aaminayso cidda u qalanta Rukhsadaha guud, ama kuwa gaarka ah, waxay hubinaysaa in ciddii hore u haysatay rukhsadda bixinta adeeggaas oo kale, waqtiga go'aanka la gaarayo, in aysan wax dhibaato ahi ka soo gaarin go'aankaas.
5. Rukhsadlaha aan isticmaalin rukhsadda uu qaatay oo aan bixin adeeggii uu u qaatay muddo lix bilood ah, way ka dhacaysaa rukhsaddu magdhaw la'aan.

Qodobka 42-aad:
Habka Rukhsad-bixinta

1. Hay'addu waxay bixin kartaa Rukhsad guud ee adeeg isgaarsiineed iyadoo ku bixineyso muddo cayiman sida uu qabo Sharcigan.
2. Habka Codsiga rukhsadaha isgaarsiinta wuxuu noqonayaa mid qoraal ah, laguna soo hagaajinayo Hay'adda, iyadoo la raacayo qaabka ay Hay'addu u diyaarisay rukhsad bixinta, laguna soo lifaaqayo macluumaadka loo baahan yahay iyo caddeyn muujinaysa in la bixiyey khidmaddii codsiga, sida waafaqsan Sharcigan
3. Hay'addu waxay siinaysaa codsadaha jawaab qoraal ah go'aankii ay ka gaartey codsiga muddo 30 maalmood gudahood oo maalmo shaqo ah, kana bilaabata markii laga guddoomey codsiga.

4. Hay'addu hadday go'aansato inaysan siin codsadahaas Rukhsadda, waxay muddo 14 maalmood gudaheeda ah si qoraal ah ugu wargelinaysaa codsadaha, loona sharaxayaa sababaha go'aankeeda si faah-faahsan islamarkaasna waafaqsan Sharcigan iyo shuruucda kale ee Dalka.
5. Rukhsadda guud ee lagu bixiyey si sharcigan waafaqsan, haddii aan looga joojin Rukhsadlaha si qoraal ah, wuxuu ku jirayaa kuna shaqeeynayaa si sharci ah oo awoodeysan ilaa laga gaarayo waqtiga dhamaanshaha rukhsadda.
6. Rukhsadda ay bixisey Hay'addu si waafaqsan sharcigan, laguma wareejinkoro, lagamana iibin karo qeyb ama dhammaan shakhsi ama shirkad kale iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga helin hay'adda.

Qodobka 43-aad:
Bixinta Rukhsad Guud

1. Rukhsadda adeegga isgaarsiinta guud waxa loo bixinayaa habka rukhsad qaadashada guud.
2. Hirarka iyo lambarrada isgaarsinta.
3. Rukhsadda guud waxa la siinayaa codsadaha marka uu buuxiyo shuruudaha loo dejiyey bixinta rukhsadda guud, iyada oo hay'adda isgaarsiinta ka dalban karto xog dheeraad ah.
4. Codsadaha wuxuu buuxinayaa form-ka rukhsadda guud ee hay'addu diyaarisey

Qodobka 44-aad:
Muddada Rukhsadda Guud

Muddada rukhsada guud ee adeeg bixiye isgaarsiineed waxaa lagu nidaaminayaa Xeerhoosaadka Hay'adda ayadoo lagala tashanayo Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, isla markaana la tixgelinayo baaxadda adeeg bixiyayaasha.

Qodobka 45-aad:
Qiimaha Rukhsadda Guud

Qiimaha rukhsadda guud iyo wixii la xiriira sida lambarrada waxaa xadidayo Hay'adda kaddib marka ay kala tashato Wasaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknooloojiyada, ayadoo la tixgelinayo qaabka caalamka looga dhaqmo iyo duruufaha u gaarka ah dalka, waxaana la raacayaa nidaam maaliyadeedka dalka, haddii loo baahdo waxaa warbixin dheeraad ah laga waydiin karaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

Qodobka 46-aad:
Cusboonaysiinta Rukhsadda

1. Hay'addu waxay cusbooneysiineysaa Rukhsad marka uu Rukhsadlaha soo codsado, una hoggaansamay dhammaan shuruudihii hore ee lagu siiyey rukhsadda sida ku cad sharcigan iyo hab-nidaaminta Hay'adda.
2. Rukhsadluhu waa inuu soo codsadaa cusbooneysiinta inta aysan ka dhicin rukhsaddii hore.
3. Haddii rukhsadda ay ka dib dhacdo waqtigii loogu talagalay in lagu cusbooneysiiyo, rukhsadlaha waxaa loo tixgelinayaa duruufaha keeni kara dib u dhac sababeysan oo maangal ah, haddii la waayo duruuf cad oo sababeysan waxuu mudan doonaa ganaax sida ku cad xeer-hoosaadka hay'adda ee habraaca ganaaxa.
4. Haddii ay dhacdo in Hay'addu cusbooneysiin weydo codsiga, Rukhsadlaha wuxuu wadan karaa hawlahiisa shaqo si waafqsan shuruudihii horay loogu siiyey ilaa inta Hay'addu ka gaarayso go'aanka cusbooneysiinta
5. Markasta oo ay Hay'addu qaadanayso go'aan diidmo cusbooneysiin, ama ay saarayso ganaax rukhsadlaha jebiyey shuruudihii lagu siiyey rukhsadda si waafaqsan sharcigan, Hay'addu waxay ka gaaraysaa go'aan iyadoo ku soo gudbinaysa hab qoraal ah.
6. Cusboonaysiinta rukhsadda guud waxa loo marayaa habraaca rukhsadaha si waafaqsan sharciga.

7. Shirkadaha isgaarsiinta wadaniga ah ee ka shaqeynayey dalka ka hor inta aan la ansixin Sharcigan isgaarsiinta, hay'addu waxay u tixgelineysaa jiritaanka sharciyadooda, inta laga waafajinayo sharcigan.

Qodobka 47aad:
Ka-tanaasulidda ama Dib-u-soo-celinta Rukhsadda

Rukhsadlahu wuxuu u soo celin karaa Hay'adda rukhsaddiisa asagoo soo raacinaya qoraal ogeysiin waqti walba, si waafaqsan Sharcigan, waxayna soo-celinta rukhsaddu hirgelaysaa marka hay'addu hesho qoraalka rasmiga ah ee rukhsadlaha.

Qodobka 48-aad:
Kala-noqoshada Rukhsadda

Hay'addu waxay amar qoraal ah ku hakin kartaa ama ku soo ceshan kartaa rukhsaddii ay bixisay marka ay dhacaan xaaladahan soo socda:

1. Haddii Rukhsadluhu bixin waayo ganaax lagu saaray ku xad-gudubka sharciga isgaarsiinta ee lagu siiyey Rukhsadda, waxaana lagala noqon karaa rukhsadda;
2. Marka uu fulin waayo ama u hogaansami waayo xeer-nidaaminta ay soo rogtay Hay'adda si waafaqsan sharcigan waxaa hay'addu kala noqon kartaa rukhsadda;
3. Haddii uu ku qanci waayo rukhsadluhu go'aanka hay'adda ee kala noqoshada rukhsadda waxaa uu u dacwoon karaa maxkamadda awoodda u leh si waafaqan xeerka nidaamka garsoorka soomaaliyeed; iyo
4. Waxaa kale oo lagala noqon karaa rukhsadlaha haddii uu rukhsadluhu bixin waayo khidmadda ku waajibtay.

Qeybta 8-aad:
Isku-xirka Shabakadaha Adeegga Isgaarsiinta

Qodobka 49-aad:
Codsiga Isku-xirka

1. Isku-xirka adeegga Isgaarsiinta telefoonnada, waa dan guud, waxaana lagama maarmaan ah in la isu furo khadadka shirkadaha kala duwan ee ka ganacsada adeegga telefoonnada, si loogu sahlo bulshada in ay isticmaalaan hal laf (SIM Card), oo ay kula xiriiri karaan dhammaan shirkadaha kale ee ka hawl-gala dalka.
2. Haddii adeeg-bixiye isgaarsiineed oo leh rukhsad adeeg uu ka codsado isku-xir shirkad kale oo adeeg isgaarsiineed bixisa, waxaa la waafajinayaa sharcigan isgaarsiinta iyo heshiiska u dhexeya labada shirkadood.

Qodobka 50-aad:
Shuruudaha Isku-xirka

1. Dhammaan isku-xirka shirkadaha waa inay noqdaan mid qoraal ah una hoggaansanaadaan qodobbada Sharcigan iyo xeer-nidaaminta hay'adda.
2. Shuruudaha isku-xirka shirkadaha isgaarsiintu waa inay marka hore ku heshiiyaan shirkadaha isku-xirmaya, hase yeeshee hay'addu way soo faragelin kartaa ayadoo kaashanaysa wasaaradda, waxaana la waafajinayaa sharcigan.
3. Haddii ay hay'addu aragto in heshiiska oo dhan ama qeyb kamid ah aysan waafaqsaneyn qodobbada sharciga ama hab-nidaaminta Hay'adda, waxay go'aamin kartaa inay shirkaduhu soo waafajiyaan heshiiskooda Sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka.
4. Haddii ay dhinacyadu gaari waayaan go'aan laysku raacsan yahay ama ku yimaado dib u dhac heshiiskooda, Hay'addu waxay soo faragelin kartaa, go'aanna ka gaari kartaa arrinta la isku hayo ayadoo loo marayo si waafaqsan Sharcigan.

5. Haddii go'aanka hay'adda dhinacyada dhinac kamid ah ku qanci waayo, Wuxuu uga dacwoon karaa maxkamadda awoodda u leh.
6. Haddii shirkadi bixin waydo lacagta lagu yeeshay ee ka dhalatay iskuxirka shirkadaha, waxaa lagu dhaqayaa sharcigan, xeer-nidaaminta hay'adda iyo xeerka madaniga Soomaaliyeed.

Qodobka 51-aad:
Diiwaan-gelinta Heshiisyada Isku-xirka

1. Dhammaan shirkadaha adeegga bixiya waxay ka diiwaan-gelinayaan Hay'adda Isgaarsiinta heshiis walba oo isku-xiraya shabakadaha mudo 30 maalmood gudohood laga bilaabo maalinta la kala saxiixdo heshiiska.
2. Dhinacyada heshiiska waa inay u soo gudbiyaan Hay'adda heshiiska isku-xirka oo ay galeen Shirkadaha adeegga bixiya.
3. Kaddib marka Hay'addu qiimeeyso shuruudaha heshiiska isku-xirka iyo kharashka isku-xirka lagu heshiiyey in uusan waafaqsanayn Sharcigan ama habnidaaminta Hay'adda, waxay ka codsan kartaa dhinacyadda in dib loogu noqdo heshiiska, lana soo waafajiyo.

Qodobka 52-aad:
Xeer-nidaaminta Isku-xirka

1. Hay'addu waxay sameyn kartaa xeer-nidaamin la xiriirta isku-xirka shirkadaha.
2. Xeer-nidaaminta isku-xirka hay'adda waxay qeexeysaa arrimaha soo socda:

a Waqtiga iyo wada-xaajoodka gunnaanadka heshiiska isku-xirka.
b Tayada iyo heerka adeegga;
c Habraaca loo qaadaayo tariifada;
d Xafididda lahaanshaha gaarka ah;
e Xafididda xogaha ganacsiga;
f Fududeynta isku-xirka dhinacyada; iyo
g Xaddididda tariifada isku-xirka marka ay dhinacyadu ku heshiin waayaan.

Qodobka 53-aad:
Shuruudaha Jaridda Isku-xirka

1. Dhinacyada galay heshiiska isku-xirka maka bixi karaan heshiiskooda ayagoon ka haysan ogolaansho qoraal ah Hay'adda.
2. Hay'addu waxay dhiirigalineysaa iskaashiga bixiyayaasha adeegga isgaarsiinta.
3. Haddii dhinacyadu ay ku heshiin waayaan arrimaha kor ku xusan Hay'adda Isgaarsiintu waxay ku sameyn kartaa fara galin lagu xalinayo arintaas iyadoo mudnaanta koowaad la siinayo danta guud.

Qeybta 9-aad:
Qorshaha Lambar-bixinta Qaranka
Qodobka 54-aad:
Qoondaynta iyo Bixinta Lambarrada

1. Waxa reeban in la isticmaalo lambarrada qaranka, iyadoo aan loo haysan rukhsad ay bixiysay Hay'adda Isgaarsiinta qaranka si waafaqsan Sharcigan
2. Furaha qaranka 252, lambarada taleefanada iyo Sumadda qaranka dot So (domain) waa hanti Dawladdu leedahay, waxaana u xilsaaran Hay'adda Isgaarsiinta qaranka, waxaana loo maamulayaa si waafaqsan Sharcigan, iyadoo la dhawrayo xeerarka caalamiga ah iyo kuwa gobolka.
3. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay qoondeyneysaa qaabka loo isticmaalayo lambarrada dalka, sidaa darted shirkad kasta oo isgaarsiineed waxay soo codsanaysaa in la'eg ama u dhiganta baahideeda.
4. Hay'addu waxay leedahay awood ay ku ilaaliso, kuna sameeyso xeernidaamiye habka loo isticmaalayo qorshaha qoondeynta iyo bixinta lambarrada Qaranka iyo shabakadda internet-ka, taasoo lagu isticmaalayo in lagu bixiyo adeegyo Isgaarsiineed.

5. Dhammaan adeeg bixiyayaasha leh rukhsad isgaarsiineed, waxay xaq u leeyihiin inay helaan lambarro baahidooda ku filan si ay u bixiyaan adeegyada isgaarsiinta, kaddib mark ay soo buuxiyaan shuruudaha, soona qortaan codsigiisa, sida ku cad sharcigan.
6. Sharcigani waxa uu qeexayaa habka diidmada qeyb ama dhammaan codsi la xiriira isticmaalka lambarrada iyo diiwaangalinta magaca shabakadaha bixiya adeegga internet-ka haddii ay dhacaan arrimaha soo socda:

a. Haddii codsaduhu aanu haysan rukhsad uu ku bixin karo adeegga isgaarsiinta iyo internet-ka;
b. Haddii codsigiisu aanu waafaqsanayn qorshaha lamabarradda ee heer qaran;
c. Haddii ay muuqato in codsiga rukhsadluhu uusan waafaqsaneyn sharcigan iyo shuruudaha qoondeynta ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka;
d. Haddii ujeeddada isticmaalka lambarrada la soo codsaday ay halis ku yihiin jiritaanka shirkadaha isgaarsiinta iyo amniga qaranka sida khiyaano (fraud); iyo
e. Haddii ujeeddada loo soo codsaday lambarrada aysan ku caddeyn codsiga hay'adda loo soo gudbiyey.

Qodobka 55-aad:
Diidmada Codsiga

1. Haddii ay Hay'addu diiddo codsiga bixinta lambarrada ama diiwan-gelinta shabakadda adeegga Internet-ka sida waafaqsan Sharciga hay'adda, waxaa ay ku soo saaraysaa go'aan qoraal ah, iyadoo ku caddeynayaa sababta keentay diidmada codsiga.
2. Codsaduhu wuxuu ka codsan karaa Hay'adda inay dib-u-eegis ku sameyso go'aanka codsigiisa lagu diiday.
3. Codsaduhu dib ayuu u soo codsan karaa lambarrada ama diiwaan-gelinta shabakadda Internet-ka uu dalbanayo, isagoo dib-u-habeyn ku soo sameynaya qodabbadii iyo

sababihii loogu diiday soona waafajinaya habraacyada Hay'adda.

4. Haddii ay Hay'addu markale diiddo codsiga, wuxuu codsaduhu u gudbin karaa dacwad maxkamadda awoodda u leh.
5. Waxaa reeban ogolaansho rukhsad la xiriirta lambarrada iyo diiwaan-gelinta shabakadaha internet-ka ee ku dhisan khiyaano (fraud).
6. Hay'addu waxay awood u leedahay in ay joojiso isticmaalka lambarrada iyo diiwaan-gelinta shabakadaha Internet-ka ee ku dhisan khiyaano (fraud).
7. Cid kasta oo isticmaasha lambarrada shabakadaha internet-ka ee ku dhisan khiyaano (fraud) waxaa loo cuskan karaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

Qodobka 56-aad:
Xeer- nidaaminta Lambarrada

Hay'addu waxay soo saari kartaa xeer-nidaamin lagu horumarinayo ujeeddooyinka Sharcigan, nidaaminta lambarrada iyo shabakadaha internet-ka, ayadoo la kaashanaysa Wasaaradda, isla markaana tixgelin la siinayo Siyaasadda Isgaarsiinta Qaranka.

Qodobka 57-aad:
Liiska Lambarrada Adeegyada gaarka ah

1. Hay'addu waxay awood u leedahay inay soo saarto xeer-nidaamin lagu dhaqayo lambarro adeegyo khaas ah oo ay adeeg-bixiyeyaasha laga doonayo in ay hirgeliyaan iyadoo la dhawrayo maslaxada guud iyo midda gaarka ah, sida lambarrada adeegga degdegga ah iyo kuwii kale ee loo arko in ay yihiin dan guud.
2. Haddii Hay'addu soo saarto go'aan ah in adeeg bixiyeyaashu ay siiyaan macaamiishooda adeeg lambar guud xaaladaha degdegga ah ee dhammaan Soomaaliya laga isticmaali karo si loo dhiirri-geliyo nabadgelyada guud,

waxay adeeg-bixiyeyaashu bixinayaan lambarro degdeg ah oo khaas ah, kuwaas oo ka shaqeyn kara dalka oo dhan.

3. Hay'addu sidoo kale waxay qaadaysaa tallaabooyin lagu dhiirri-gelinayo in si degdeg ah loo hirgeliyo dhismaha kaabeyaasha qorshaha lambarrada degdegga ah, kuwaasoo u sahlaya dadweynaha in lagu isticmaali karo meel kasta oo gudaha Soomaaliya ka tirsan.

Qeybta 10-aad:
Xuquuqda Shirkadaha Isgaarsiinta iyo Macaamiisha

Qodobka 58-aad:
Ilaalinta Xuquuqda Shirkadaha Isgaarsiinta Wadaniga ah iyo maalgashadayaasha

1. Si waafaqsan shuruucda maalgashiga dalka Waxaa la dhiirri-gelinayaa, lana dhawrayaa xuquuqda shirkadaha isgaarsiinta waddaniga ah iyo guud ahaan maal-gashadayaasha isla markaana waxaa la ilaalinayaa xuquuqdooda iyo jiritaankooda.
2. Hay'adda waxay ka ilaalineysaa shirkadaha isgaarsiinta wadaniga ah in uu ku yimaado burbur sababtiisu tahay tartan sharci dara ah.

Qodobka 59-aad:
Oggolaanshaha Hirarka iyo Qalabka Isgaarsiinta

1. Hay'addu waxay bixinaysaa rukhsadda isticmaalka hirarka mowjadaha.
2. Hay'addu waxay leedahay ka-talo-bixinta iyo fududeynta agabka isgaarsiinta ee waddanka la soo gelinayo, kaasoo ay keensanayaan shirkadaha bixiya adeegga isgaarsiinta.
3. Hay'addu iyadoo hirgelineysa hawshan waxay qabaneysaa wada-tashi guud oo ay la yeelaneyso shirkadaha isgaarsiinta si ay iskula meel-dhigaan hay'adda loo aqoonsanayo hal-beegga sheybaarka qalabka isgaarsiinta; hay'adahaas oggolaanshaha ay bixiso oo laga aqoonsan yahay Soomaaliya.

4. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay diiwaan-gelineysaa, hay'adda loo aggolaaday in la siiyo rukhsadda hal-beegga sheybaarka qalabka isgaarsiinta; Shirkadaha isgaarsiinta dalka way soo-jeedin karaan in wax laga beddelo ama lagu daro hay'adda qalabka baarta.
5. Cid kasta oo wadani ah waa keeni kartaa qalabka isgaarsiinta, hase yeeshee waxaa uu dalbanayaa rukhsad uu ku keeno qalabka isgaarsiinta, wuxuuna raacayaa shuruudaha loo dejiyey, isla markaana wuxuu bixinayaa khidmadda loo qoondeeyey adeegga, waxaana xaddidaya Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

Qodobka 60-aad:
Xaqa Marinka Adeeg-bixiyaha

1. Rukhsadlaha bixiya adeegyada Isgaarsiinta wuxuu xaq u leeyahay in si waafaqsan sharciga loogu oggolaado dhex-maris uu dhex-marsado dhulka guud qalabkiisa, meel walba oo waddanka ka mid ah, marka uu dhisayo, dayactirayo ama ka shaqeynayo xarumaha looga baahan yahay gudashada waajibaadka rukhsadda loo siiyey si uu u bixiyo adeeg isgaarsiineed.
2. Rukhsadlaha bixiya adeegyada isgaarsiinta wuxuu xaq u leeyahay in si sharciga waafaqsan loogu oggolaado, una helo dhex-mariska uu marsado qalabkiisa dhulalka sida khaaska loo leeyahay, iyadoo oggolaansho iyo heshiis la weydiisanayo milkilaha isla markaana ay waajib ku tahay in uu aqbalo codsigaas, sida uu qabo sharciga isgaarsiinta qaranka.
3. Rukhsadlaha bixiya adeegyada isgaarsiinta waxa xaq loogu leeyahay in uu dayactiro dhibka uu u geystay hantida gaarka ah iyo tan guud
4. Hay'addu waa iney soo rogtaa xeer-nidaamin lagu bixinayo mag-dhaw lagu hagaajinayo dhibkii ay geysatay isticmaalidda xaqa loo siiyey dhexmarsashada qalabka iyo kii loogu geystay, dhulka/hawada guud ama kan gaarka ah

5. Hay'addu waa iney soo rogtaa xeer-nidaamin lagu bixinayo mag-dhaw lagu hagaajinayo dhibkii ay geysatay isticmaalidda xaqa loo siiyey dhexmarsashada qalabka iyo kii loogu geystay, dhulka/hawada guud ama kan gaarka ah.
6. Hay'addu waxay leedahay awood ay ku dhegeysato, go'aannana uga gaarto wixii is-afgaran-waa ah ee ka dhasha isticmaalka xaqa marinka ee Adeegbixiyuhu xaqa u leeyahay.

Qodobka 61-aad:
Helitaan Adeeg Isgaarsiineed oo Baahsan

1. Adeeg-bixiyeyaasha iyagoo kaashanaya Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay u hawl-gelayaan in dadweynaha ay gaarsiiyaan baahida ay u qabaan isgaarsiinta gaar ahaan maagaalooyinka, tuulooyinka, miyiga iyo meel walba oo ay baahi isgaarsiineed ka jirto.
2. Hay'adda isgaarsiinta qaranka waxay iska xilsaaraysaa fududeynta iyo baahinta isgaarsiinta ay baahida u qabaan dadweynaha in ay helaan adeeg isgaarsiineed oo baahsan.

Qodobka 62-aad:
Tartanka Suuqa Isgaarsiinta

1. Waxaa u furan adeeg-bixiyeyaasha Isgaarsiinta tartan ganacsi oo xor ah, iyadoo aan la jebinayn sharciga isgaarsiinta.
2. Hay'addu waxay kormeeraysaa, go'aanna ka gaareysaa, iyadoo hubinaysa in dhammaan adeeg-bixiyeyaashu u hoggaansameen shuruucda tartanka xorta ah iyo habka uu u nidaamiyey sharcigan iyo xeer-nidaaminta Hay'adda iyadoo marwalba la ilaalinayo hannaanka cadaaladda.
3. Hay'addu waxay xaqiijineysaa adeeg-bixiyeyaasha Isgaarsiintu inay dhawraan tartanka suuqa xorta ah, xaqa lahaanshaha iyo maamulidda saldhigyada isgaarsiinta.

Qodobka 63-aad:
Si-xun-u-isticmaalidda Awoodda Suuqa

1. Waxaa ka-reeban Rukhsadle kasta oo bixiya adeeg isgaarsiineed oo ay Hay'addu oggolaatay, inuu ku kaco fal ujeeddadiisu tahay in lagu waxyeelleeyo tartanka suuqa xorta ah ee isgaarsiinta dalka.
2. Waxaa ka-reeban in Rukhsadle bixiya adeeg isgaarsiineed uu galo heshiis ama ballan-qaadyo, taasoo ujeeddadoodu tahay in hoos loo dhigo tartanka suuqa Isgaarsiinta dalka.
3. Haddii ay Hay'addu u aragto, kaddib dhageysi iyo wada-tashi loo qabtay adeegbixiyeyaasha si waafaqsan sharcigan, in rukhsadle Isgaarsiineed uu ku kacay falal ujeeddadoodu tahay khasaarin hantiyeed oo suuqa ganacsiga Isgaarsiinta ku yimaada, Hay'addu waxay qaadeysaa talaabooyinka soo socdo:

b. Ku soo rogitaan ganaax lacageed oo ay Hay'addu xaddido iyadoo tixgelinaysa waxyeellada uu suuqa u geystay falkiisa sida ku cad Sharcigan; iyo

t. Haddii Hay'addu u aragto in waxyeellada uu geystay falkaas ka dhalan karta dhibaato loo gaystay cid kale, waxaa loo gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh si ay go'aan uga gaarto inta uu gaarsiisan yahay fal-dembiyeedkaas, ciqaabta ku habboon iyo in ay xaddido mag-dhawga ka dhalan kara khasaaraha uu geystay.

Qodobka 64-aad:
Faaf-reeb

Shirkaduhu waxay mas'uul ka yihiin anshaxa isticmaalka adeegga ay bixiyaan, waxayna faaf-reeb ku sameynayaan dadka u isticmaala waxyaabaha Diinta Islaamka iyo anshaxa suuban ka soo horjeeda, sida:

1. Waxaa anshaxa suuban cabbir u noqonaya dhaqanka suubban ee bulshada iyo mabaadi'da Shareecada Islaamka.
2. Wax kasta oo ka horimaanaya dhaqanka suubban ee bulshada iyo mabaadi'da shareecada Islaamka waa anshax-xumo, waxayna shirkaduhu ka qaadi karaan qofkii ku xad-gudba tallaabo anshax-marin ah oo gaari karta in laga xiro isticmaalka adeegga, haddii cidda ku xad-gudubtay joojin waydo isticmaalkaas ka soo horjeeda anshaxa suubban.

3. Shirkaduhu waxay si qoraal ah ku soo wargelinayaan Hay'adda go'aanka ama tallaabada ay ka qaadeen cidda geysatay xad-gudubka.

Qodobka 65-aad:
Amniga Qaranka

1. Waxaa waajib ku ah Rukhsadle kasta ilaalinta amniga qaranka, waana inuu fuliyaa codsiyada hay'adda iyadoo la raacayo shuruucda dalka.
2. Haddii ay jiraan baaris sababo la xiriira nabadgelyada qaranka, waxaa laga codsan karaa lambarka macmiilka, marka ay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ama hay'adaha Amnigu u soo dalbadaan si qoraal ah; haddii looga baahdo xog dheeraad ah, ayadoo loo marayo maxkamadda awoodda u leh; waxaana ku waajib ah rukhsadlaha in uu ilaaliyo sirta xogta laga dalbaday oo aysan gaarin cid kale.
3. Haddii loo baahdo baaris la xiriirta amniga qaranka waxaa la tixgelinayaaa duruufaha nabadgelyada dalka iyo ilaalinta xuquuqda gaarka ah ee muwaadinka.

Qodobka 66-aad:
Diiwaan-gelinta Lafta (SIM Card)

1. Shirkadaha Isgaarsiintu waxay diiwaan-gelinayaan dhammaan dadka iska leh Lafaha (SIM Cards) Telefoonka iyo kuwa la siinaayo Lafaha (SIM Cards) marka uu sharcigan dhaqan-galo, si loo sugo milkiyadda iyo xuquuqda gaarka ah ee macmiilka.
2. Si loo fuliyo tilmaanta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxaa lagamamaarmaan ah in uu haysto macaamilku wax sugi karo aqoonsiga shakhsi.

Qeybta 11-aad:
Qodobka 67-aad:
Hirgelinta Sharcigan

1. Hay'addu waxay leedahay awood ay ku hirgelinayso Sharcigan iyo xeernidaaminta hay'adda isgaarsiinta qaranka, hase yeeshee ayadoo la tixgelinayo duruufaha gaarka ah uu

Dalku ku sugan yahay Wasaaradda, Hay'adda iyo adeeg-bixiyayaashu waxay iska kaashanayaan sidii si buuxdo loogu hirgelin lahaa Sharcigan.

2. Hay'addu waxay leedahay awood ay ku kormeerto in loo hoggaansamay sharcigan iyo xeer-nidaaminta hay'adda ay soo saartay.
3. Hay'addu waxay raacaysaa qaab daah-furan, waafaqsanna sharciga isgaarsiinta qaranka.
4. Hay'addu waxay awood u leedahay in ay ganaax saarto ciddii jabiso sharcigan. Lana siiyo mag-dhaw cid walba oo ay dhibaato ka soo gaartay ku xad-gudubka sharcigan.
5. Hay'addu waxaa kale oo ay dhaqan-gelinaysaa heshiisyada caalamiga ah ama kuwa goboleed oo ay Soomaaliya qeyb ka tahay kuwaasoo la xariira arrimaha isgaarsiinta.

Qodobka 68-aad:
Xaaladahii Ka Horreeyey Sharcigan

Cidna laguma qaadi karo ganaax kasta oo ka dhashay falal ama talaabooyinka uu reebay saameyntooda Sharcigan falalkaasoo dhacay ka hor dhaqan-galkiisa, hase yeeshee waxaa la waafajinayaa sharcigan kaddib marka uu dhaqan-galo.

Qodobka 69-aad:
Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin Sharcigan.

Qodobka 70-aad:
Dhaqan-gal

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

XEER MADAXWEYNE LR. 49 Taariikh: 13/10/2017

MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED

MADAXWAYNAHA J.F.S

Marka uu Arkay: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfaha 'a', 'b' iyo 'c' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S

Marka uu Arkay: Qodobka 90aad, Xarfaha 'b' iyo 'c' ee Dastuurka J.F.S

Marka uu Arkay: Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed

Marka uu Arkay: Go'aanka Golaha Wasiirrada iyo soo jeedinta Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliyeed Ref: XRW/034 Taariikh 12/10/2017 kuna saabsan magacaabista iyo dallacsiinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed

Markuu Garwaaqsaday: In ay muhiim tahay in la magacaabo Taliye Cusub oo uu yeesho Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ka dib markii ay jagadaas bannaanatey

Waxa uu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Waxaa Xeerkaan loogu dallacsiiyey G/Sare **Cabdiweli Jaamac Xuseen Gorod** labo darajo oo uu u dallacay darajada **S/Gaas** waxaana loo magacaabay in uu noqdo **Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed**.

Qodobka 2aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqan gelayaa markii uu Madaxweynaha **Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta ee Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 13/10/2017



Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWEYNE LR. 50 Taariikh: 18/10/2017

DALLACSIIN SARKAAL

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed Lr: XTC/XDS/385/17 taariikh 16/10/2017 kuna saabsan Soo Jeedin Dallacsiin Sarkaal

MARKA UU GARWAAQSADAY: Mudnaanta uu mudan yahay in la dallacsiiyo Sarkaalka

Waxa uu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa Sarkaalka magaciisa hoos ku qoran yahay loo dallacsiiyey derajada ku hor qoran magaciisa:

No	Darajada	Magaca	Loo Dallacsiiyay
1.	G/Sare	**Maxamuud Maxamed Macallin " Koronto"**	S/Guuto

Qodobka 2aad

Mudanaha ku tilmaaman xeerkaan wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmaamayo

Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa markii uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta ee Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 18/10/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HANG045/2017
TAARIIKH 20/11/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWEYNE LR. 52 Taariikh: 31/10/2017

AQBALID GO'AANKA GOLAHA WASIIRRADA EE XIL-KA-QAADISTA TALIYAHA CIIDANKA BOOLISKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 97aad, Farqadda 1aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Farqadda 2aad, ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarfahiisa 'C' iyo 'K' ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Xeer Lr. 2 ee soo baxay 23/12/1972 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliska iyo Xeer Lr. 14 ee soo baxay 04/01/1973 kuna saabsan Nidaamka Ciidanka Booliska

Markuu Arkay: Soo Jeedinta Ra'iisul Wasaare ku xigeenka ee **Warqadda Lr. XRW/038/10/17** ee **29/10/2017,** kuna saabsan go'aanka Golaha Wasiirada ee Xil-ka-qaadis Taliyaha Ciidanka Booliska

Wuxuu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/10/2017 waxa uu Madaxweynaha JFS oggolaaday soo jeedinta Golaha Wasiirrada ee Xil-ka-qaadista Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed **S/Guuto Cabdixakiin Daahir Saciid.**

Qodobka 2aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa markii uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta ee Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

MUQDISHO: 31/10/2017

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HHN/0111/2017
TAARIIKH 31/11/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

XEER MADAXWEYNE LR. 53

Taariikh: 31/10/2017

AQBALID GO'AANKA GOLAHA WASIIRRADA EE XIL-KA-QAADIS AGAASIMAHA GUUD EE HEY'ADDA NABAD-SUGIDDA & SIRDOONKA QARANKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 97aad, Farqadda 1aad, Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Farqadda 2aad, ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarfahiisa 'C' iyo 'K' ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 117aad, ee Dastuurka J.F.S

Markuu Arkay: Xeer Lr. 14 ee soo baxay 15 Febraayo 1970, kuna saabsan Dhismaha Hay'adda Nabadsugidda Qaranka

Markuu Arkay: Soo Jeedinta Xafiiska Ra'iisul Wasaare ku xigeenka ee **Warqadda Lr. XRW/038/10/17 ee 29/10/2017,** kuna saabsan go'aanka Golaha Wasiirada ee Xil-ka-qaadista Agaasimaha Guud ee Hey'adda Nabad-Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka

Wuxuu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 31/10/2017 waxa uu Madaxweynaha JFS oggolaaday soo jeedinta Golaha Wasiirrada ee Xil-ka-qaadista Agaasimaha Guud ee Hey'adda Nabad-sugidda iyo Sirdoonka Qaranka Mudane **Cabdullaahi Maxamed Cali (San-balooIshe).**

Qodobka 2aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa markii uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta ee Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

MUQDISHO: 31/10/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: XRW/038/10/2017
TAARIIKH: 31/10/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWEYNE LR. 54 Taariikh: 11/11/2017

DALLACSIIN SARKAAL

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 2 ee 23/12/1973 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliiska Dalka Soomaaliyeed

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed Ref: XTC/3/24/1 Taariikh: 26/10/2017 kuna saabsan soo jeedin Dallacaad gaar ahaaneed

MARKA UU GARWAAQSADAY: Mudnaanta uu mudan yahay in la Dallacsiiyo Sarkaalka

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo markii uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa Sarkaalka magaciisa hoos ku qoran loo dallacsiiyey derajada ku hor qoran kana tirsan ciidanak Booliiska Soomaaliyeed

No	Darajada	Magaca	Loo Dallacsiiyay
1.	G/Dhexe	Xasan Cali Maxamuud	G/Sare

Qodobka 2aad

Sarkaalkaan ku tilmaaman xeerkaan wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmamaayo.

Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta ee Rasmiga ee J.F.S

MUQDISHO: 11/11/2017

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)



XEER MADAXWEYNE LR. 55 Taariikh: 11/11/2017

DALLACSIIN SARKAAL XIGEEN

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 2 ee 23/12/1973 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliiska Dalka Soomaaliyeed

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed Ref: XTC/2/5/17 Taariikh: 26/10/2017 kuna saabsan soo jeedin Dallacaad gaar ahaaneed

MARKA UU GARWAAQSADAY: Mudnaanta uu mudan yahay in la Dallacsiiyo Sarkaal xigeenkaan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo markii uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa Sarkaal xigeenkaan magaciisa hoos ku qoran loo dallacsiiyey derajada ku hor qoran kana tirsan ciidanak Booliiska Soomaaliyeed

No	Darajada	Magaca	Loo Dallacsiiyay
2.	K/s.21407	**Xaliimo Cali Cariif**	X/le

Qodobka 2aad

Sarkaal xigeenaan ku tilmaaman xeerkaan wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmamaayo.

Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta ee Rasmiga ee J.F.S

MUQDISHO: 11/11/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HHN/0018/2017
TAARIIKH 24/11/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWEYNE LR. 56 Taariikh: 11/11/2017

DALLACSIIN SARKAAL XIGEEN

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 2 ee 23/12/1973 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Booliiska Dalka Soomaaliyeed

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Booliiska Soomaaliyeed Ref: XTC/1/1-/17 Taariikh: 28/10/2017 kuna saabsan soo jeedin Dallacaad gaar ahaaneed

MARKA UU GARWAAQSADAY: Mudnaanta uu mudan yahay in la Dallacsiiyo Sarkaal xigeenkaan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan

Qodobka 1aad

Laga bilaabo markii uu Madaxweynaha saxiixo Xeerkaan, waxaa Sarkaal xigeenkaan magaciisa hoos ku qoran loo dallacsiiyey derajada ku hor qoran kana tirsan ciidanak Booliiska Soomaaliyeed

No	Darajada	Magaca	Loo Dallacsiiyay
3.	K/s.21093	Gacal Amiin Iiwaan	X/le

Qodobka 2aad

Sarkaal xigeenaan ku tilmaaman xeerkaan wuxuu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq oo ay kafaalo qaadayaan Shuruucda xagga sare ku xusan & wixii xuquuq oo xeerka ciidamadu tilmamaayo.

Qodobka 3aad

Waxa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta ee Rasmiga ee J.F.S

MUQDISHO: 11/11/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/0119/2017
TAARIIKH 20/11/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

XEER RA'IISUL-WASARE LR. 044 Taariikh: 18/11/2017

MAGACAABIDDA WASIIRKA GAASHAANDHIGGA

Ra'iisul-Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

MARKUU ARKAY: Qodobka 97aad, Faqradda 3aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 98aad, Faqraddiisa 2aad, Xarfaha A & B ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qod. 100aad Xarfaha A,B & C ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Hawlaha baaxadda leh ee horyaalla Xukuumadda JFS

MARKUU TIXGELIYAY: Talada Madaxweynaha JFS.

MARKUU GARWAAQSADAY: Baahida loo qabo magacaabidda Wasiirka Gaashaandhigga

Wuxuu magacaabay

Qodobka 1aad

1. Mudane **Maxamed Mursal Sheekh Cabdiraxmaan**, waxaa loo magacaabay xilka Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga ee Xukuumadda JFS, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu 22/10/2017

Qodobka 2aad

2. Wasiirka Cusub ee Wasaaradda Gaashaandhigga Xukuumadda JFS, waxa la farayaa in uu si degdeg ah ula wareego xilkiisa.

Qodobka 3aad

3. Magacaabiddani waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saaraya a Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 18/11/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: 44/2017
TAARIIKH 22/11/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

XEER RA'IISUL-WASAARE LR. 025 Taariikh: 03/08/2017

GO'AAN GOLE " ANSIXINTA QAAB-SIYAASADEEDKA MANHAJKA WAXBARASHADA"

Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda JFS

MARKUU ARKAY: Qodobka 99^aad^(a), (b) & (e) ee Dastuurka Federaalka KMG

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare.

MARKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.14.08.17** ee **03/08/2017**, kuna saabsan ansixinta **Qaab siyaasadeedka Manhajka Waxbarashada Dalka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo Qaab-siyaasadeedka Manhajka Waxbarashada Dalka.

Wuxuu Meel-mariyay:

Qodobka 1^aad^

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.14.08.17** ee **03/08/2017,** kuna saabsan ansixinta **Qaab-siyaasadeedka Manhajka Waxbarashada Dalka,** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay

Qodobka 2^aad^

Waxa Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Qaab-siyaasadeedka Manhajka Waxbarashada Dalka

Qodobka 3^aad^

Qaab-siyaasadeedka Manhajka Waxbarashada Dalka, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 03/08/2017



Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare

Qaabdhismeedka Manhajka Waxbarashada Qaranka Soomaaliyeed

Muqdisho - Soomaaliya, 2017



Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare

Qaabdhismeedka Manhajka Waxbarashada Qaranka Soomaaliyeed

Muqdisho - Soomaaliya, 2017

QAABDHISMEEDKA MANHAJKA QARANKA SOOMAALIYEED

1. Gogoldhig

Qaabdhismeedka Manhajka Qaranka Soomaaliyeed (QMQS), waa qoraal qeexaya sida ay u dhisan tahay waxbarashada (Manhajka) dalka iyo tiirarka waaweyn ee saldhigga u ah. Manhaj Soomaaliyeed oo shaqeynaya waxaa u dambeysay sannadkii 1991. Muddadaas oo inta badan dalku ku jiray degganaansho la'aan iyo dawlad la'aan. Waxaana wax lagu baranayey muqarraraad iyo buugaag kala gedisan oo laga kala keenay dalal kala duwan, oo ujeeddooyin kala duwan ka leh waxbarashada iyo mirodhalkeeda.

Dhanka kale, manhajkii ugu dambeeyay ee Soomaaliya waxaa la qoray 1984kii. In kastoo hay'adaha UNICEF iyo UNESCO iyaga oo la kaashanaya aqoonyahanno Soomaaliyeed ay isku dayeen in ay dib u habeyn ku sameeyaan muqararkii iyo buugaagtii heerarka aasaasiga ahaa ee manhajkii hore haddana wax dib u eegis ah laguma sameyn Manhajkii Qaranka Soomaaliyeed. Muddadaasi soddon sano ku dhowaadka ah waxa adduunka ka dhacay isbeddello fara badan oo saameynaya waxbarashada. Haddaba, waxaa cad in loo baahan yahay in la helo manhaj Soomaaliyeed oo la jaan qaadi kara isbeddelada ka socda dunida.

Waxaa kale oo xusid mudan in manhajkii hore ee Soomaaliya uu ahaa mid ku saleysan maaddo (content based), adduunyaduna waxa ay maanta u guuraysaa habab cusub, sida mid ku saleysan mirodhal (Outcome based) oo la rumeysan yahay in uu ka waxtar roon yahay kan ku salaysan maaddada marka laga eego xagga baridda iyo barashada. Taas ayaa haddaba waxa ay na tusinaysaa in baahi loo qabo in la diyaariyo manhaj ku saleysan qaab cusub.

Qaabdhismeedka manhajkan waxa uu qeexayaa muwaadiicda, xirfadaha iyo qiyamka ay tahay in lagu fududeeyo manhajka, iyada oo loo marayo qaybaha waxbarashada tooska ah iyo midda gaarka ah. Waxa uuna xaqiijinayaa himilooyinka qaran ee waxbrashada, kuwaas oo saameeynaya muwaadiicda ay tahay in lagu qaato qaybaha barashada ee kala duwan ee lagu xusay manhajka dugsiyada.

Ugu dambeyn waxa aan la wada soconaa in dalkeena ay ka dhaceen dagaallo sokeeye oo aad loogu hoobtay muddo dheerna socday. Waxaa xaqiiqo ah markaa in loo baahan yahay manhaj xallin kara dhibaatooyinkaas, soona saari kara ummad jecel nabadda iyo wadajirka.

Sidaas darteed, iyada oo la tixgelinayo arrimaha aan kor ku soo sheegnay, waxaa muhiim ah in la helo manhaj Soomaaliya leedahay. Haddaba, iyada oo ka shidaal qaadanaysa arrimaha kor ku xusan, waxa Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare ay garatay in la sameeyo manhajkan cusub oo la filaayo in dhibaatoyinka la soo xusay uu xallin karo.

2. Habka horumarinta iyo fulinta qaabdhismeedka Manhajka

Qaabdhismeedka manhajkan waxa uu sharax guud ka bixinayaa qaabdhismeedka manhajka dugsiyada dalka. Majaallada barashada iyo waxa laga filaayo guud ahaan waxaa saldhig u ah diyaarinta muqarrarada maaddo kasta oo ay la socdaan waxa sida gaarka ah looga filanaayo barashada maaddo kasta.

Qaabdhismeedkan waxa uuu ka dhashay wada tashiyo ballaaran oo lala sameeyey bulshada qaybaheeda kala duwan sida: aqoonyahannada, culumada, dhallinyarada, haweenka iyo mas'uuliyiinta dowladda.

Haddaba, habka wadatashiyada, diyaarinta iyo soo saarista nuqulkan wuxuu u dhacay:-

- Doodo iyo falanqayn ka dhex dhacday guddiga farsamada iyo shaqaalaha wasaaradda..
- Wada tashiyo ballaaran oo lala sameeyey qaybaha bulshada, ka dibna isbeddello lagu sameeyey nuqulkii hore si loo waafajiyo jawaabaha ka soo baxay wadatashiyada.
- Nuqulkan ugu dambeeya waxaa lagu ansixin doonaa shirweyne qaran.
- Waxaa la sameeynayaa guddiyada maaddooyinka oo soo diyaarinaya muqarrar ku saleysan qeybaha barashada iyo waxa guud ee laga filayo barashada, iyaga oo raacaya qaabdhismeedkan.
- Manhajka iyo muqarrarada cusub waxaa lagu hubinayaa lana barbardhigayaa agabka barashada ee la heli karo lana awoodi karo.
- Fulinta manhajka cusub waxaa la bilaabi doonaa sannad dugsiyeedka 2018/19.

3. Waxyaabaha aasaaska u ah Manhajka cusub

Waxbarashadu waa furaha horumarka. Haddaba, waa in ay ahaataa waxbarasho tayo leh oo keeni karta natiijo ku haboon waxbarashada iyo dhaqanka bulshada, waxaana aasaas u ah:

- In lagu caawiyo dalkeena iyo dadkeena in ay horumaraan.
- Inuu la socdo isbedellada joogtada ah ee tignoloojiyada, hababka baridda, barashada, iyo waxa la baranaayo kana tarjumo siyaasadda waddanka, diinta, dhaqanka bulshada iyo horumarka.
- Inuu soo saaro arday Soomaaliyeed oo ka dhisan aqoonta, xirfadaha, iyo itijaaha; diinta, dhaqanka, iyo waddaniyadda.
- Inuu ka qeyb-qaato koboca dhaqaalaha iyo horumarinta bulshada.
- Inuu xailiyo mushkiladaha dalka ka jiro, abuurana isku kalsooni Soomaalinimo.
- Inuu baro ardeyda xuquuqda ay waddanka ku leeyihiin iyo waajibaadka iyaga lagu leeyahay.
- Manhajka cusub ujeedkiisu waa in uu caawiyo dib u qaabaynta iyo casriyeynta nidaamka waxbarashada dalka, lana xaqiijiyo in ardeyda ka aflaxda ay la jaan qaadi karaan qarnigan 21aad.
- Inuu ku caawiyo kuna dhiirrigeliyo carruurta iyo dadka kale in ay ku noolaadaan nolol nabdoon, farxad iyo caafimaad leh, taas oo ku dhisan saldhig adag oo qiyamka Islaamka ah.
- Inuu ku caawiyo ardeyda kobcinta iyo gaaridda himiladooda.
- Inuu u diyaariyo ardeyda nolol shaqo hal abuureed oo miro dhal ah.
- Inuu u diyaariyo ardeyda in ay noqdaan muwaadiniin fir-fircoon ee la socda isbadallada dunida.

3.1. Maxaa la barayaa ardeyda?

- Waxa muhiim ah isku dheellitirka ka dhexeeya barashada qayb kasta oo aqooneed, itijaah iyo barashada xirfadaha.
- Waxa jiri doona waxyaabo lagama maarmaan u ah mustaqbalka, kuwaasi oo muhiim u ah qof kasta in uu barto sida akhriska, qoraalka iyo sida loola jaanqaado isbedallada ka dhasha tiknoloojiyada casriga ah.
- Waxa kale oo jiri kara majaallo gaar ah oo dad khaas ah ay daneeyaan, waafaqsanna diinta iyo sharciga dalka.
- Dad kala duwan ayaa daneeya oo ku fiican meelo kala duwan ha ahaadaan maaddooyinka caadiga ah, xirfadaha mihniga ah, ama waxyabaha kale ee qofku ku fiican yahay. Iyada oo taasi maskaxda lagu hayo, waxa muhiim ah in tixgelin la siiyo nooca aqoonta iyo xirfadaha ay da'yartu u baahan yihiin si ay u noqdaan dad waxtar leh.
- Isbeddellada ku dhacaya sida aan u nool nahay una shaqeyno, iyo xiriirka ka dhexeeya dadka iyo saameynta ay teknoloojiyada casriga ahi keentay, waxa ay saameynayaan waxa da'yartu ka doonayaan dugsiyada.

3.2. Sidee loo barayaa?

- Manhajku waxa uu ku saleysan yahay sida ay carruutu wax u bartaan.
- Sanadahan waxa jiray cilmi baaris badan oo lagu sameeyey sida ay u shaqayso maskaxda carruurta. Iyada oo arintaasi laga shidaal qaadanayo manhajkani waa inuu ku caawiyaa carruurta in ay noqdaan kuwo sameeya waxqabad ku saleysan hal abuur iyo cilmibaaris wax kasta oo ay samaynayaan.
- Farsamada casriga ah waxa ay ku socotaa xawaare aad u dheereeya, sidaasi darteed waa in looga faa'iideystaa waxbarashada.

3.3. Kuma la barayaa?

- Qof kasto oo Soomaali ah xaq buu u leeyahay inuu wax barto.
- Dhammaan ardeyda waxa ay xaq u leeyihin waxbarasho ku saleysan farsamada casriga. Waxa la doonayo in la wajaho waa in qof walba lagu caawiyo sidii uu u heli lahaa waxbarasho u horseedda nolosha ugu wanaagasan.

3.4. Yaa Baraya?

- Waxaa wax baraya bare leh aqoon iyo xirfad waxbarid, awoodna u leh in uu fuliyo manhajka waxbarasho ee loogu tala galay in lagu dhiso mustaqbalka ardeyda Soomaaliyeed.
- Bare taba-baran, haystana daryeel iyo nolol ku filan.
- Bare buuxiyey shuruudaha macallinimada ee ku xusan siyaasadda macallinnimada qaranka.

3.5 Xaggee lagu barayaa?

- Waxaa lagu barayaa goob ku habboon barista iyo barashada sida ku xusan siyaasadda qaranka ee goobaha waxbarashada.

- Goob waxbarasho oo leh agabkii waxbarashada oo ay ku jiraan sheybaaro, maktabad, garoomo ku habboon heerka ardeyda.

4. Qiyamka uu ku dhisan yahay manhajku

Qaab dhismeedka manhajkan waxa uu ku saleysan yahay kana turjumayaa qiyamka ay ku dhisan tahay bulshadeennu oo ay ka mid yihiin:

- Aqoonsiga, ku barbaaridda iyo ku dhaqanka qiyamka Islaamka.
- Horumarinta iyo jaceylka, dalka, dadka, hiddaha iyo dhaqanka.
- Horumarinta dhaqanka, nabadda, isdhexgalka, wada noolaanshaha iyo iskaashiga.
- Ixtiraamidda iyo qiimaynta xuquuqaha dadka oo dhan ayadoon loo eegeynin jinsi, karti iyo kaalin bulsho, ama degaan.
- Dhowrista iyo ilaalinta deegaanka, muuqaallada dabiiciga ah iyo kuwa taariikhiga ah.
- Horumarinta maskax furnaanta iyo xirfadaha xallinta mushkiladaha.
- Horumarinta dhaqanka ixtiraamidda xirfadda iyo xirfadlaha.
- Dhisidda bulsho xor ka ah qabyaaladda.

5. Argatida manhajka

Waxaa dhab ah in ummad kasta ay waxbarashadeedu ku saleyso waxa ay aaminsan tahay diin ahaan, ummad ahaan iyo aragtideeda ku aaddan adduunka, bani'aadamka iyo nolasha guud ahaanba.

Haddaba, maadaama ay Soomaaliya tahay waddan Muslim ah, waxa ay aragtida waxbarashadeedu ku dhisan tahay laba tiir oo kala ah:

A) Muslimnimo; oo ah caqiidada iyo aragtida Islaamku ka bixinaayo adduunka, bani'aadamka iyo nolasha guud ahaan.

B) Soomaalinnimo; oo ah baahideenna iyo jiritaankeenna dhanka qoowmiyadda iyo ummadnimada.

Sidaas darteed waxbarashadeennu waa in ay ahaato mid:

1) Dareensiineysa qofka kaalinta uu ku leeyahay uunka iyo xilka ilaahay saaray;
2) Ilaalineysa, kobcineysana qiyamka Islaamka iyo dhaqanka suubban ee ummadda Soomaaliyeed, iyada oo lala falgalayo lagana faa'iideysanayo ummadaha kale.
3) Isku xiran oo muujineysa isla jaanqaadka diinta iyo cilmiga; xisiga iyo sharciga; tijaabo cilmiyeedka iyo iimaanka; adduunka iyo aakhirada.

Qaabdhismeedka manhajkan cusub wuxuu ku dhisan yahay aragtida habka saddex jihoolaha dheellitiran (3 dimentional): marka uu heerku kordho waxaa sii kordhaya loollanka, baahsanaanta iyo xirfaddaha barashada sida ka muuqato jaantuska 1aad. Tani waxey ka duwan tahay manhajkii hore oo ku dhisnaa loollanka barashada iyo kororka heerka sida ka muuqato jaantuska 2aad.

Jaantuska 1aad: Qaabdhismeedka manhajka cusub



Jaantuska 2aad: Qaabdhismeedka manhajkii hore



6. Heerarka manhajka waxbarashada

b) Siyaasadda waxbarashada qaranka ayaa u xakameyneysa heerarka waxbarashada dugsiyada sida soo socoto:
- Dugsi quraanka iyo xannaanada - laba sano
- Dugsiga aasaasiga - siddeed sano (4 hoose iyo 4 dhexe)
- Dugsiga sare afar sano

t) Manhajka waxaa uu qaatey habkan, hase yeeshee iyada oo loo fiirinaayo xaqiijinta la socodka natiijooyinka barashada oo ballaaran awgeed waxbarashada aasaasiga waxa loo qaybiyey laba heer oo kala ah: dugsi hoose iyo dugsi dhexe oo min afar fasal ah, heer waliba waxa uu leeyahay mirodhal barasho ballaaran oo la doonayo in la gaaro.

j) Afarta heer waxbarasho ee ballaaran waxa si isle'eg loogu dabaqayaa waxbarashada tooska ah iyo waxbarashada baahida gaarka, in kasta oo tirada ardeyda, saacadaha, iyo habka hirgelinta ay ku kala duwanaan karaan marka loo eego baahiyaha iyo garaadka bartaha.

Tusaha 1aad: Heerarka manhajka

Waxbarashada tooska ah	Heerka manhajka	Heerka waxbarashada baahida gaarka
Jaamacad Kulliyad	Heerarka dugsiga ka dib	
12	Heer 4	
11		
10		
9		
8	Heer 3	
7		
6		
5		
4	Heer 2	
3		
2		
1		
Dusi Qur'aan ama xannaanada	Heer 1	

7. Mirodhalka guud ee heer kasta

7.1. Mirodhalka waxbarashada dugsiga ka hor

Waxyaabaha soo socda waa natiijooyinka laga filayo waxbarashada carruurnimada hore.

Carruurtu waa iney:

- Leeyihiin aqoonta aasaasiga ee Qur'aanka Kariimka iyo luqadda carabiga, leeyihiinna dareen jaceyl diinta Islaamka.
- Ka kobacsan yihiin dhanka asluubta iyo anshaxa wanaagsan
- Ku tababaran yihiin jaceylka waalidka, macallimiinta, dalka, deriska iyo dadka kaleba.
- Sare u qaadan tahay xiriirka ay la leeyihiin bulshada.
- Ka dhisan yihiin jir iyo maskax ahaanba.
- Leeyihiin dareen waddaniyad iyo dal-jaceyl.
- U diyaarsan yihiin bilaabidda waxbarashada dugsiga hoose.

7.2. Mirodhalka waxbarashada aasaasiga (Dugsiga hoose)

Waxbarashada aasaasiga waa aasaaska ka guul gaaridda waxbarashada carruurta Soomaliyeed. Dhammaadka waxbarashada dugsiga hoose ardeyda waxa laga filayaa in ay:

- Xambaarsan yihiin aqoonta diinta Islaamka aasaasiga ah, qiyamka wanaagsan iyo waddaniyadda.
- Ka dhisan yihiin xirfadaha jireed, maskaxeed iyo ruuxeed oo ay la socdaan aqoon iyo xirfado wax qabad ah.
- Kasbadeen aqoonta, aragtiyada, xirfadaha, kartida iyo qiyamka munaasibka ku ah heerkan, kuwaasi oo awood u siiya in ay ku xaqiijiyaan hammigooda, iyo in ay wax ku soo kordhiyaan bulshada.
- Ka horumarsan yihiin xirfadaha akhriska, qoraalka, dhageysiga iyo ku hadalka afafka Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiriiska ee ku habboon heerkan.
- Kasbadeen waxyaabaha aasaaska u ah tirooyinka, iyo in xisaabta u adeegsan karaan xallinta mas'alooyinka la xiriira noloshooda.
- Garowsan yihiin waxtarka qoyska, bulshada, horumarka dalka iyo isku tiirsanaanta qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaliyeeed.
- Kasbadeen waxyaabaha saldhigga u ah sayniska lehna dhaqan fekerrid iyo halabuur.
- Yaqaannaan waxyaabaha aasaaska u ah cilmiga bulshada.

7.3. Mirodhalka waxbarashada aasaasiga (Dugsiga dhexe)

Waxbarashada aasaasiga waa aasaaska ka guul gaaridda waxbarashada carruurta Soomaliyeed. Dhamaadka waxbarashada dugsiga dhexe ardayda waxa laga filayaa in ay:

- Xambaarsan yihiin aqoonta diinta islaamka aasaasiga ah, qiyamka wanaagsan iyo waddaniyadda.
- Ka dhisan yihiin xirfadaha jireed, maskaxeed iyo ruuxeed oo ay la socdaan aqoon iyo xirfado wax qabad ah.
- Kasbadeen aqoonta, aragtiyada, xirfadaha, kartida iyo qiyamka munaasibka ku ah heerkan, kuwaasi oo awood u siiya in ay ku xaqiijiyaan hammigooda iyo in ay wax ku soo kordhiyaan bulshada.
- ka horumarsan yihiin xirfadaha aqriska, qoraalka, dhageysiga iyo ku hadalka afafka Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiriiska ee ku habboon heerkan.
- Kasbadeen waxyaabaha aasaaska u ah tirooyinka iyo in xisaabta u adeegsan karaan xallinta mas'alooyinka la xiriira noloshooda.
- Garowsan yihiin waxtarka qoyska, bulshada, horumarka dalka iyo isku tiirsanaanta qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaliyeeed.
- Kasbadeen waxyaabaha saldhigga u ah sayniska, lehna dhaqan fekerrid iyo halabuur.
- Yaqaannaan waxyaabaha aasaaska u ah cilmiga bulshada, taariikhda iyo juquraafiga dalka.

7.4. Mirodhalka waxbarashada dugsiga sare

Waxbarashada dugsiga sare waa asaaska ka guul gaaridda waxbarashada ka dambeysa dugsiga sare iyo xaqiijinta nolol shaqo.Dhamaadka waxbarashada dugsiga sare ardeyda waxaa laga filayaa in ay:

- Kasbadeen qiyam anshax wanaagsan, wadaniyad iyo xirfado ku habboon heerkooda.
- Ka dhisan yihiin ruuxadda, maskaxda, akhlaaqda ku saleysan dhaqanka Islaamka, si ay wax ugu soo kordhiyaan horumarka bulshada.
- Ku qalabeysan yihiin aqoon, xirfado, fikrado iyo aragtiyo ku filan si ay awood ugu yeeshaan xaqiijinta hamigooda..
- Yihiin kuwo dheellitiran, leh aqoon iyo xirfad tusaalena u noqon kara bulshada.
- Kasbadaan aqoonta looga baahan yahay si ay ugu talaabsan karaan, sii wadashada waxbarashada sare gudaha iyo dibadda.
- Yihiin kuwo ku firfircoon howlaha ka baxsan manhajka, ee gudaha dugsiga iyo dibaddiisaba.
- Yihiin kuwo ku fiican aqoonta dalka, hogaaminta wanaagsan, fikir halabuur leh iyo xallinta khilaafaadka.

7.5. Waxbarashada baahida gaarka ah

Mirodhalka waxbarashada baahiyaha gaarka ah waxey la mid tahay kuwo hoose, dhexe, iyo sare. Haddaba si loo gaaro mirodhalkaas waxaa lagama maarmaan ah in ay Wasaaradda waxbarashadu:

- Siiso waxbarasho gaar ah dadka maskaxda ama jirka naafada ka ah, sida dadka aan wax maqli karin ama arki karin.
- Siiso carruurta naafada ah waxbrasho gaar ah, iyada oo loo eegayo baahidooda, laguna caawiyo sidii ay u gaari lahaayeen isku filaansho.
- Bixiso waxbarashada baahida gaarka ah ee dugsiyada la wada dhigto intii suuragal ah.
- Soo saarto sharciyo la xiriira:

    - Muddada waxbarasha aasaasiga iyo sare ee ku habboon baahiyaha ardeyda si ay u helaan waxbarashada gaarka ah.
    - Agabka la adeegsan doono marka loo eego waxbarashada gaarka ah.
    - Qaybaha carruurta u baahan waxbarashada gaarka ah iyo habka ku habboon waxbarashada carruurta ee qayb kasta oo ka mid ah dugsiyada gaarka ah.
    - Iyo wixii kale ee lagama maarmaanka u ah arrintan.

8. Aqoonta aasaasiga ah, fahamka iyo xirfadaha

8.1. Maaddooyinka aasaasiga ah iyo arrimaha xoogga la saarayo

Manhajkeennu waa in uu aad u xeeldheeraadaa, si uu u daboolo dhammaan qaybaha kala duwan ee aqoonta iyo xirfadaha aadanaha. Barista maaddooyinka manhajka ee soo socda iyo qodobka kale ee ku jiri kara maaddooyinka oo dhan waa in laga helaa heer kasta. Waxa la barayo ardeyga waxaa lagu aruurin karaa hal maado ama waxa loo qeybin karaa dhowr maado marka heerku adkaado ama

kordhaba, iyada oo loo eegayo baahida ardeyda. Tani waxa ay dhacaysaa marka muqarrarada loo dejinaayo qaabdhismeedkan.

Tusaha 2aad: Maaddooyinka aasaasiga ah iyo kuwa baahsan ee dugsiga hoose/dhexe

Maaddooyinka aasaasiga ah	Mowduucyadan waa in ay ku dhex jiraan maaddooyinka oo dhan
1. Tarbiyada Islaamka	1. Caafimaad, fayadhowr. 2. Waxbarashada nabadda 3. Waxbarashada deegaanka 4. Barashada waddaniyadda 5. Xuquuqda aadanaha, iyada oo loo eegayo Islaamka 6. Qataraha maandooriyayaasha iyo walxaha qarxa (miinada iyo wixii la mid ah) 7. Khayraadka dalka: kaluumaysiga, xoolaha, beeraha iyo macdanta. 8. Ganacsiga 9. Xallinta mushkiladaha.
2. Saynis	
3. Xisaab	
4. Afka Soomaaliga	
5. Afka Carabiga	
6. Afka Ingiriiska	
7. Cilmiga Bulshada	
8. Farshaxan	
9. Jir-dhiska	
10. Tiknoolojiyada	

Tusaha 3: Maaddooyinka aasaasiga ah iyo kuwa baahsan ee dugsiga sare

Maaddooyinka aasaasiga ah	Mowduucyadan waa in ay ku dhex jiraan maaddooyinka oo dhan
1. Tarbiya Islaam	Caafimaad, fayadhowr. Dhaqaalaha guriga, waxbarashada nabadda iyo xallinta khilaafaadka, waxbarashada deegaanka,
2. Baayoloji	
3. Kimistari	
4. Fiisigis	
5. Xisaab	

6. Af Soomaali	barashada wadaniyadda. Xuquuqda aadanaha iyada oo loo eegayo Islaamka. Qataraha maandooriyeyaasha iyo walxaha qarxa (miinada iyo wixii la mid ah). Khayraadka dalka: kaluumaysiga, xoolaha, beeraha, iyo macdanta. Ganacsiga.
7. Af Carabi	
8. Af Ingiriis	
9. Taariikh	
10. Juquraafi	
11. Tiknooloji	
12. Jir-dhis.	

8.2. Xirfadaha Muhiimka u ah manhajka

- Manhajkani waxa ku dhex jira xirmooyin xirfado ah, oo u suurageliya ardeyda in ay ku dabbaqaan aqoontooda iyo fahamkooda dunida casriga ah.
- Xirmooyinkan xirfadaha ah waa ay isku soo noq-noqdaan, waxa ayna ku dhex jiraan maaddooyinka la barto oo dhan.
- Waa xil ka saaran qorayaasha muqarrarka ee maaddo kasta, in ay ku daraan xirfadahan iyo mowduucyada kale ee muqarrarka maaddooyinka iyo waxqabadyada oo dhan.

Dugsiyada xirfadaha muhiimka ah ee loo baahan yahay in la abuuro.
Beeraha, xannaanada xoolaha, farsamada gacanta, isgaarsiinta, tiknoolojiyadda casriga, kaluumeysiga iyo caafimaadka.

Tusaha 3aad: Xirfadaha muhiimka u ah manhajka

Xirfadda	Tusaale
Xirfadaha nolosha.	Dabeecadaha qofka, dhisidda xiriirka qofka, wada noolaansho, dabacsanaan, laqabsi, go'aan qaadasho, xallinta mushkiladaha, xallinta khilaafaadka, xirfado ganacsi, is-qadarin.
Xirfadaha barashada.	Akhris –qoraal, tirinta, saafid, hal abuurid, baaris, qiimayn xeeldheer, su'aalo iyo jawaabo, xusuus iyo jawaab-celin.
Xirfadaha shaqo.	Nidaamsanaan, maareyn, hoggaamin, qorsheyn, koox u wada shaqayn, ganacsi, aftahan iyo codkar.

b) Xirfado - nololeed

Ardeydu waxa ay hadda ku dhex nool yihiin deegaan teknoloji iyo warbaahin xoog badan oo la helo xogo badan oo awood u siinaya qofka inuu sameeyo ka qayb qaadasho qofeed iyo mid wadaag ah. Si loo noqdo dad waxtar leh

waa in la awoodaa in la soo bandhigo silsilado xirfado shaqo, iyo fakir xeeldheer oo la xiriira cilaaqaadka, xogta, warbaahinta iyo teknoolojiyada.

Ardeydu waa in ay qaabeeyaan oo ay joogteeyaan shakhsiyad wanaagga, wada-xiriiridda, bulshannimada, soo bandhigaan isku kalsoonaan naftooda, xiisagelinta naftoodaa, muujiyaan adkeysi marka ay la kulmaan caqabado iyo dib u dhacyo, fahmi karaan dareenka dadka kale lana qeybsadaan shucuurtooda, tixgeliyaan fikirka qofka kale, aragti dheer leh, sameeyaan qorshaha noloshooda, shaqadooda iyo tan qoyskoodaba.

t) Xirfadaha barashada iyo fikiridda

Xirfadaha barashada iyo fikiridda ayaa loo aqoonsaday iney yihiin kuwo lagu kala saari karo dadka u diyaarsan nolosha adag iyo goobaha shaqo ee qarniga 21aad, iyo kuwa aan u diyaarsaneyn.
In diiradda la saaro hal-abuuridda, fikirid xeeldheer, wada xiriiridda iyo iskaashiga ayaa lagama maarmaan ah si ardeyda loogu diyaariyo mustqabalka.

j) Xirfadaha shaqo

Xilligan la joogo goobaha shaqo waxa ay u baahan yihiin wax ka badan xirfado fikireed iyo aqoon. Si loo helo awood looga gudbi karo howlaha adag ee shaqo ee ka dhex jira caalamkan ku tartamaya tiknoolojiyada casriga ah, waxaa loo bahan yahay dadku in ay ahaadaan kuwo dabacsan, lana qabsan kara isbeddalka xaaladaha, abuurran-karaanna shaqooyinkooda haddii fursadaha shaqo ay yaraadaan.

9. Qaybaha waxbarasho iyo mirodhalka barashada ee laga filayo heer kasta

Qaybtani waxa ay ina siineysaa qaybaha barashada iyo mirodhalka barashada laga filayo heer kasta ee waxbarashada tooska ah iyo tan baahida gaarka ah ee dugsiyada aasaasiga iyo sare. Mirodhalka barashada waxa ay noqonaysaa aasaaska lagu horumarinayo muqarrarka maaddo kasta ee dugsiyada aasaasiga ah. Manhaj qoreyaasha ayaa mirodhalka barashada u isticmaali doona bartilmaameed ahaan.
Muqarrarada ayaa sii qeybinaya mirodhalka barashada gaarka u ah sannad kasta, oo ay la socdaan waxqabadyada iyo mowduucyada.

9.1. Afafka

Waxbrashada Soomaaliya waa seddex luqadley, iyada oo afafka Soomaliga, Carabiga iyo Ingiriisiga ay yihiin kuwo muhiim u ah baridda iyo barashada. Carruurta Soomaaliyeed waxa ay u baahan yihiin in ay si fiican u bartaan saddexda luqadood, iney u adeegsan karaan ugu yaraan laba luqadood oo ka mid ah luqadahan waxbarashadooda, iyo iney ku kasbadaan aqoon.

Maadaama uu Af-soomaaligu yahay luqadda koowaad, akhris-qoraalkiisa waa aasaaski ay ku dhismi lahaayeen luqadaha kale, waana furaha maaddooyinka.

Af-Soomaaligu waxa uu soconayaa laga bilaabo xannaanada ilaa Fasalka 12aad ee dugsiga sare.

Luqaduhu waxa ay muhiim u yihiin waxbarashada iyo bulshada, haddaba, bilowga hore akhris-qoraalka iyo fikir dhisiddu waa in lagu kobciyaa af-somaaliga, ka dib loo gudbaa luqadaha Carabiga iyo Ingiriisiga inta uu bartuhu ku guda jiro dugsiga aasaasiga, si ay ugu suuragasho in uu wax ku barto dugsiga sare iyo jaamacadaha afka Carabiga ama Ingiriiska.

Tusaha 4aad: Mirodhalka Afafka

Afafka	Dugsi hoose Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro.	Dugsiga dhexe Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro.	Dugsiga sare Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro.
Af-soomaali	Ardeydu waxa ay: • yaqaanaan akhris – qoraalka aasaasiga ah ee af-soomaliga. • Yaqaanaan qorista, akhriska, maqalka iyo dhageysiga afka Soomaaliga, isla markaana si fiican u kala yaqaannaan shaqalladda, shibbanayaasha iyo xarfaha labanlaabma. • Awoodaan in ay si fiican u akhriyaan, qoraan, higgaadiyaan af- soomaaliga. • Akhriyaan sheekooyin, heeso howleed iyo gabayo fudud. • Fahamsan yihiin tilmaamaha ku saabsan ardeyda, qoyska, dugsiga, iyo deegaanka. • Ka kobocsan yihiin xirfadaha dhageysiga qoraalka, akhriska iyo ku hadalka. • Astaameeyaan waxa ay qoraan isla markaana si sax ah u	Ardeydu waxa ay: • Awoodaan in ay hadal iyo qoraal ku gudbiyaan aragtidooda, iyaga oo ku saleynaya sababo. • Fahmayaan, yaqaannaan qaybo ka mida ah gabayada, heesaha iyo suugaanta qaybaheeda kala duwan. • Ka dhisan yihiin dhammaan qaybaha afka Soomaaliga. • Sharxayaan kana hadlayaan waxa iyaga, bulshadooda, deegaankooda iyo dalkooda ku saabsan. • Curinayaan sheekooyin gaagaaban. • Fahamsan yihiin gabayo la xiriira suugaanta Soomaalida. • Akhrinayaan buugaagta, wararka iyo xog kasta oo ku qoran af-soomaaliga. • Awoodaan in qoraallo ku qoran af Soomaali si fiican u akhriyaan. • Awoodaan in ay fikirkooda ku qoraan afka Soomaaliga iyaga oo sababaynaya	Ardeydu waxa ay: • Awoodaan iney hantiyaan naxwaha, suugaanta, gudbinta aqoonta, curinta qoraallo iyo gabayo. • Dhaliilayaan oo qiimeynayaan qoraallo ay akhriyeen ama xog loo sheegay. • Yaqaanaan adeegsiga naxwaha iyo macnaha qaybaha suugaanta, oo ay kala saaraan waxa ay xambaarsan tahay. • Sheegayaan waxa ay sarbeebtu tahay. • leeyihiin awood ay kula soo baxaan murtida ay ku fadhido suugaanta. • Curinayaan qoraallo iyo sheekooyin. • Ka war celinayaan waxa ay soo akhriyeen.

	adeegsanayaan naxwaha af-soomaaliga. • Leeyihiin dhaqan wax akhris joogta ah. • Iney yaqaannaan sida loo isticmaalo qaamuuska.	islamarkaana dhawraya astaamaynta qoraalka. • Fahamsan yihiin, kalana soo baxayaan dulucda suugaanta iyo qoraallada. • Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah. • Awoodaan iney qaamuuska kala soo bixi karaan ereyada ay u baahan yihiin.	• Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah.
Afka-Ingiriisiga	Ardaydu waxa ay: • Fahmayaan kana jawaabayaan salaamaha, weedhaha gaagaaban ee ku saabsan iyaga, qoyska, dugsiga iyo deegaankooda. • Awoodaan iney akhriyaan kana fal celiyaan tilmaamaha iyo weydiimaha. • Isku aaddinayaan ereyo iyo weedho gaagaban ee la xiriira dhammaan inta sare lagu xusay. • Yaqaannaan ereyada looga baahan yahay deegaankooda. • Si sax ah ugu dhawaaqaan uguna hadlayaan ereyada afka Ingiriiska. • Dhisayaan weedho gaagaaban. • Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah.	Ardeydu waxa ay: • Awoodaan akhris – qoraalka aasaaska u ah afka Ingiriiska. • Awoodaan ku hadalka afka Ingiriiska • Adeegsanayaan oo ay fahmayaan tilmaamaha, sharraxaadaha, iyo sheekooyinka fudud ee ku qoran afka Ingiriisiga. • Awoodaan akhrinta qaybo (tuducyo) la xiriira qodobbo barasho kala duwan. • Adeegsanayaa af-sayniseed iyo xisaabeed fudud si ay ugu diyaar noqdaan in Ingiriiska uu u noqdo afka waxbarashada fasalka 1aad ee dusiga sare. • Awoodaan qoridda qaybo (tuducyo) gaagaaban oo iyaga iyo deegaankooda ka hadlaya oo leh higgaad, naxwe iyo erey bixin sax ah. • Kasbadeen oo ay leeyihiin xirfadaha qoraalka, akhriska, dhageysiga iyo ku hadalka afka Ingiriiska, iyaga oo adeegsanaya weedho iyo sheekooyin gaagaaban. • Si sax ah u adeegsanayaan astamaynta qoraalka iyo eray bixinta maaddooyinka. • Leeyihiin dhaqan wax	Ardeydu waa in ay: • Ku doodi karaan kuna gudbin karaan luuqadda Ingiriiska fikradaha ay doonayaan inay gudbiyaan. • Ka baxaan fasalka 12aad ee dugsiga sare iyaga oo si fiican ugu hadlaya afka Ingiriska. • Awoodaan la sheekeysiga qof luqadda Ingiriiska ay u tahay luqadda kowaad. • Fahmayaan wararka raadiyaha iyo hadal jeedinta ku baxa afka Ingiriiska. • Gaaraan heer ay luqaddan wax ku akhriyaan oo ay ku sameeyaan cilmi baaris iyaga oo tixraacaya buugaagta ama internetka. • Curiyaan qoraallo leh astaameyn iyo naxwe sax ah. • Awoodi karaan in ay ka faalloodaan qoraallo ay akhriyeen. • Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah.

		akhris oo joogta ah	
Afka-Carabiga	Ardeydu waxa ay: • Awoodaan iney fahmaan, qoraan si sax ahna ugu dhawaaqaan xuruufaha afka Carabiga. • Ku hadlaan kana jawaabaan salaamaha, weeraha gaagaaban ee ku saabsan iyaga, qoyska, dugsiga iyo deegaankooda. • Akhrinayaan kana fal celinayaan tilmaamaha iyo weydiimaha. • Isku aaddinayaan ereyo iyo weero gaagaaban ee la xiriira dhammaan inta aan kor ku soo sheegnay. • Si sax ah ugu dhawaaqayaan uguna hadlayaan ereyada afka Carabiga ee looga baahan yahay heerkan. • Dhisayaan weedho gaagaaban. • Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah. • Yaqaannaan hababka qoridda farta qurxan. • karaan akhrinta ereyada carab jalqiska, fahmayaanna halxiraalayaasha fudud ee ku saleysan dhaqanka.	Ardeydu waxa ay: • Barteen akhris – qoraalka aasaaska u ah luqadda carabiga. • Awoodaan ku hadalka, sheegidda iyo fahmidda tilmaamaha iyo weydiimaha, sharaxaada iyo sheekooyin fudud. • Akhrinayaan faqrooyin (Tuducyo) la xiriira qodobbo barasho kala duwan. • Adeegsanayaan luqad sayniseed iyo xisaabeed fudud, si ay ugu diyaar noqdaan in afka carabiga uu noqdo luqadda waxbarashada fasalka 1aad ee dugsiga sare. • Qorayaan tuducdyo gaagaaban oo iyaga iyo deegaankooda ka hadlaya oo leh hingaad, naxwe iyo erey bixin sax ah. • Kasbaday oo uu leeyahay xirfadaha dhegaysiga, akhriska, qoraalka iyo ku hadalka Afka Carabiga. • Akhrinayaan, qorayaanna weedho iyo sheekooyin gaagaaban. • Si sax ah u adegsanayaan astaamaynta qoraalka. • Adeegsanayaan eray bixinta maaddooyinka cilmiga. • Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah. • Yaqaannaan ereyada isku-dhiggidda kala dhihidda ah.	Ardeydu waxa ay: • Ka baxayaan fasalka 12aad ee dugsiga sare iyaga oo si fiican ugu hadlaya afka Carabiga oo la sheekeysan kara qof luqadda Carabiga ay u tahay luqadda koowaad. • Fahmayaan wararka raadiyaha iyo hadal- jeedinta ku baxa afka Carabiga. • Gaarayaan heer ay luqadda wax ku akhriyaan oo ay ku sameeyaan cilmi baaris, iyaga oo tixraacaya buugaagta ama internetka. • Curinayaan qoraallo sax ah naxwi ahaan. • Ka faaloonayaan qoraallo ay akhriyeen • Leeyihiin dhaqan wax akhris oo joogta ah.

9.2. Sayniska

Saynisku waa maaddo guud oo ay dadku ku baaraan maatarka noole iyo ma-noole, tamarta iyo isla falgalka ka dhaxeeya maatarka iyo tamarta. Waa aqoonta ku saabsan caalamka dabiiciga, ah ee caawiya in uu si macne leh wax ugu kordhiyo horumarka bulshada, deegaanka iyo tiknoolojiyadda.
Waxa uu nagu caawinayaa baarista ifafaalayaasha dabiiciga ah, si ay u caddaato mala'awaalo loona awoodo in la hubiyo sharraxaado, cabbirro, aragtiyo iyo tijaabooyin si loo gaaro go'aan sax ah oo lagu dhiso gebegebo dhab ah, oo ku saabsan degaankeenna iyo dunida naga baxsan.

Tusaha 5aad: Mirodhalka laga filanayo Sayniska

Dugsi hoose Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro	**Dugsi dhexe** Dhammaadka heerkani qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro
Ardeydu waxa ay: • Kasbadeen oo ay isticmaalaan dhaqanno caafimaad iyo in ay wax ka weydiiyaan naftooda iyo deegaankooda. • Fahamsan yihiin farqiga noole iyo ma-noole. • Isbarbar dhigayaan oo ay kala saarayaan xayawaannada iyo dhirta degaanka. • Saynis ahaan u fiiriya walxaha laga helo deegaannada agagaarka dugsiga iyo guryaha, garanayaana raadka ay ku leeyihiin noloshooda. • Saynis ahaan wax u cabbiraya si ay u sameeyaan saadaalin heerkooda ah. • Fahamsan yihiin micnaha iyo muhiimadda nadaafaddu u leedahay caafimadka. • Yaqaanaan tallaabooyinka badbaadinta iyo nadaafadda. • Sharxayaan sida loo yareeyo cudurrada la kala qaado, waxaa ayna aqoonsan yihiin fayadhowrka aasaasiga ah iyo horumarinta howlaha caafimaad ee guriga, dugsiga, bulshada sida gacmo dhaqashada xilliga loo baahan yahay,	Ardeydu waxa ay: • Ka dhisan yihiin aqoonta iyo fahamka fikradaha nolosha, culuumta dabiiciga ah, culuumta dhulka iyo hawada sare. Ku dabaqayaa fahamkani soo bandhigidda, isdhexgelinta iyo kordhinta aqoontiisa. • Sharaxayaa astaamaha muuqda ee: hawada, biyaha iyo carrada, kala saaraa sida ay isula falgalaan hawada, biyaha iyo carrada. • Sharaxayaan sababta hawada, biyaha iyo carrada ay muhiim ugu yihiin noolaha. • Awoodaan Cabiridda cimilo-gooreedka heerkul ahaan, dhedo ahaan, daruuraha, xawaaraha iyo jihada dabaysha. • Qiimeeyaan saameynta cimilo-gooreedku ku leeyahay noole iyo ma-noole. • Sharxayaan qaabdhismeedka iyo shaqooyinka aasaasiga ah ee habdhisyada neefsashada, dheefshiidka, dhiig-wareegga, qalfoofka, muruqyada, qashin-saarka, dareenka iyo taranka, iyo sida habdhisyada jirku ay isugu xiran yihiin. • Garanayaan qaybaha laga beddeli karo tijaabo. • Qiimeeyaan wax ku oolnimada tijaabooyinka, sharxaan

qashin qubidda, biyo nadiifinta, iwm. • Hormarinayaan isdhexgalka, xirfadaha wada shaqeynta iyo in ay fuliyaan u kuur gelidda iyo wax ka sheegidda deegaanka iyaga ku xeeran. • Iska ilaaliyaan waxyaabaha khatarta ah sida xayawaannada dadka cuna, kuwa qaniina, waxyaabaha lagu sumoobo, khatarta hubka noocyadiisa kala duwan sida miinooyinka, qoryaha, bistooladaha, mindiyaha iyo sida khatarta korontada la isaga ilaaliyo. • Is-barbardhigayaan xayawaannada duur joogta iyo daba joogta ah.	tallaabooyinka lagu dejiyo tijaabo, soo bandhigaan habsami u adeegsiga qalabka tijaabada si uu u baaro noolaha aan lagu arki karin isha caadiga ah oo keliya. • U adeegsadaan qalabka sida ugu habboon si aan naftooda iyo dadka kale khatar u gelin, fahamsan yihiin sida noolayaashu ay u qabatimeen deegaanadooda. • Saafid ku sameeyaan sida ay cunno ahaan, bulsho ahaan isugu xiran yihiin noolayaasha yar yar, dadka, bulshooyinka, iyo habdhiska degaanka. • Sharxayaan faa'iidada caafimaadka qofka, jirka, dareenka maskaxda u leeyihiin ka qayb qaadashada waxqabadka jirka. • Baaris ku sameeyaan xiriirka ka dhexeeya nafaqada iyo waxqabadka jirka. • Garanayaan ilaha ilayska iyo jabaqda; sharxaan astaamaha ilayska, jabaqda; fahmaanna sida xoogagga kala duwan ay u saamayn karaan dhaqdhaqaaq-yada walxaha. • Sheegaan waxtarka makaanikeed ee makiinadaha fudud, qiimeeyaan habab kala duwan oo lagu dhallin karo danabyo koronto oo sahlan, hubiyaanna meelaha ay korontadu marto iyaga oo isticmaalaya mareeg qulqul danab toosan, tusiyana in korontada loo beddeli karo ilays, kul, jabaq, dhaqaaq, iyo saamaynta birlabta. • Kala soocaan tamarta danabka ee la cusboonaysiin karo iyo kuwa aan la cusboonaysiin karin. • Sharxayaan astaamaha dhaqdhaqaayada walxaha ku dhex jira hab qorraxeedkeena. • Garanayaan abla-ablaynta dhirta iyo xayawaannada, habdhiska dhirta iyo shaqooyinka ay qabtaan. • Kala saaraan maatarka iyo wejiyadiisa. • Adeegsadaan tusaha kalgalka curiyeyaasha. • Sharxaan noocyada falgallada kiimikaad. • Sharxaan cudurrada faafa iyo ka hortagooda.

9.3. Xisaabta

- Xisaabtu waa sababeyn iyo waxqabad hal-abuureed oo ku shaqeeya malo'awaal iyo go'aan guud si loo aqoonsado, sharxo, loona dabbaqo qaabdhismeedyo iyo xiriiro.
- Xisaabta oo asalkeedu yahay summado waxa ay bixinaysaa hab isgaarsiin awood badan oo leh qeexid kooban oo go'an.
- Fikiradda xisaabta waxa ay isa soo dhalan rogaysey dhaqano kala duwan kumannaan sano, walina waxa ay ku jirtaa horumar joogta ah.
- Tiknoolojiyada tirooyinka ayaa fududeynaya fidista fikirridda, waxa ayna na siinayaan furaha albaabo loo maro sahanka xisaabta iyo casriyeynteeda.
- Xisaabtu waxa ay kaga lammaanan tahay maaddooyinka kale, horumarka tiknoolojiyada iyo sayniska meelo badan.
- Xisaabtu waa maaddo si dhab ah loo dabbaqayo barashadeeda, ka sokowna waa muhiim, waayo waxa ay ku siineysaa fursado horumar iyo xiiso gelin.

Tusaha 6aad: Mirodhalka laga filaayo xisaabta

Dugsi hoose Dhammaadka heerkan qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro.	**Dugsi dhexe** Dhammaadka heerkan qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro.	**Dugsi sare** Dhammaadka heerkan qodobbadan waaweyn ee soo socda ayaa la filayaa in la gaaro.
Ardeydu waxa ay: • Si kalsooni ku jirto u furfuraan mas'alooyin la xiriira tirooyinka idil. • Sameeyaan xisaabin sax ah iyaga oo adeegsanaya xisaab fallada isugeynta, kalagoynta, isku dhufashada iyo isu qaybinta. • Awoodaan in ay xalliyaan masalooyin kala duwan oo ay ka mid yihiin qiimerugeedka tiro idil, jajab fudud iyo jajab tobanle fudud. • Kala saarayaan qaababka iyo astaamahooda. • si sax ah wax u sawiraan iyaga oo adeegsanaya qalabka cabbiraadda.	Ardeydu waxa ay: • Ka kobacsan yihiin xirfadaha maskaxeed ee tirooyinka idil ilaa malaayiin, qiime rugeed, labajibaar iyo xidid labajibbaar, xidid saddex jibbaar, tirooyinka ilaa 3 god. • Sameeynayaan xisaabinta la xiriirta jibbaarrada iyo logaridim, ururada isutagga, ururada dhextaalka iyo hormo ururada. qaabdhismeedyada tirooyinka, raadinta bedka sallaxa, goobooyinka, afar-geesleyaasha, iyo qaabab iskudhafan; mas'alooyin la xiriira wareegga, bedka iyo halbeegyada.	Ardaydu waxa ay: • Hanteen furfurista tirooyinka, Aljabra, Joomateri, xisaab maaliyadeed ku baahsan xaaladaha dahsoon iyo kuwa dhabta ah ee nolasha. • Si kalsooni ku dheehan tahay u soo bandhigayaan cilmiga xisaabta ee lagu soo qaatay muqarrarka. • Leeyihiin xirfado camali ah oo la xiriira cabbiraadda, iyo furfurista mas'alooyin ku saabsan fansaarka, joomateriga iyo kaalkulaaska; iyo tiroooyinka kakan. • Leeyihiin xirfado baariseed oo ku saabsan xallinta mas'looyinka la xiriira

• Hormariyaan sababayn ku dhisan xisaabta. • Sameeyaan cabbiraadda waqtiga, lacagta, bedka, wareegga. • Aqoonsadaan astaamo joomateri oo fudud oo ay ku jiraan xariiqo barbarro ah, qotome, iyo xagal. • Sameeyaan tarjumidda tuseyaal iyo garaafyo.	• Adeegsadaan xeerarka bedka, mugga iyo qaadka adkeyaasha, • Furfurraan mas'alooyin ay ku jiraan lacagta, qiimaha, qiimo dhimis iyo qiimo dhimis boqoleey, biilasha, xawaare, fogaan, hawl, waqti, iyo celceliska xawaaraha. • Yaqaanaan xirfado la xiriira nolol maalmeedka oo ay ku jiraan jajabyo, tobanle, boqoley, kala hormarinta xisaabfailada, • Furfuraan mas'alooyin ay ku jiraan joomateri: saddex xagallo isu eg, isku sargo'an, dhisidda saddexagallada, ku dhisidda saddexagallo gudaha iyo dibadda goobo. • Adeegsadaan aragtida baaytogaraska. • Kala saaraan tuseyaal, iyo garaafyo. • Furfuraan mas'alooyin celcelis, badidhace, dhexfur, iyo xog la siiyey. • Sawiraan garaaf laydiyeed iyo mid goobo. • Furfuraan mas'alooyin itimaal oo aasaasi ah, algebra, is-le'egyo toosan iyo isle'egyo wada jira, iyo kuwo saabley ah. • Yaqaanaan xisaabta faa'iidada iyo qasaaraha, saami wadaagga iyo doorsoonka (transformation)	nolol maalmeedka, iyaga oo adeegsanaya habab badan oo ah xallinta mas'looyinka. • Leeyihiin awood cilmi baariseed, xirfado fikirid iyo in ay si sax ah wax u taxliiliyaan, kuwaasi oo la xiriira itimaalka iyo istaatistikiska. • Kasbadeen aragtiyo u saamaxaya in ay wax casriyeeyaan oo ay hal-abuuraan kaas oo waxtar u leh bulshada. • Ka helaan barashada xisaabta iyo in ay ku guda jiraan nolol waxbarasho oo joogta ah.

9.4. Cilmiga Bulshada

- Cilmiga bulshada waa duruus baahsan oo ka kooban maaddooyinka taariikhda, jugraafiga, wadaniyadda iyo xirfad-nololeed, taas oo ka kaalmeyneysa ardeydu in ay ku noolaadaan, bartaanna deegaan kala duwan kuwaasi oo ay ka mid yihiin qoyska, guriga, dugsiga iyo bulshada sida ay u dhan tahay.
- Cilmiga bulshada waxa uu si weyn uga kaalmeeyaa carruurta in ay fahmaan oo ay ogaadaan in ay ku tiirsan yihiin deegaankooda taas oo saameyn ku leh noolashooda.
- Waxa kale oo ay dhiirigelineysaa xog ogaalnimo bafaaran in ay dunida u lahaadaan, ku caawisaa kobcinta xirfaddooda, awooddooda iyo fikir toosan oo ay ku soo bandhigaan nolol maalmeedkooda oo ay lahaadaan hal abuur.

Tusaha 7: Mirodhalka maaddada cilmiga bulshada

Dugsiga hoose Dhammaadka heerkani ardeyda waxaa laga filayaa in ay gaaraan guulahan soo socda:	**Dugsiga dhexe** Dhammaadka heerkani ardeyda waxaa laga filayaa in ay gaaraan guulahan soo socda:
Ardaydu waxa ay: • Awoodaan horumarinta caadooyinka wanaagsan, la xiriirridda bulshada inteeda kale, tilmaan ka bixinta degaanka ku xeeran, jacaylka dhaqammada suubban iyo qiyamka ummaddu wada leedahay, taas oo u ah hanti ay ku xusuustaan waalidiintoodii hore. • Yaqaanaan taariikhdii Nebi Muxamed (CSW), • Tilmaamaan dawrka ay ku leeyihiin qoyskooda iyo deriskooda. • Fahamsan yihiin arrimaha qoyska dhexdiisa ah. • Fahamsan yihiin khilaafaadka iyo waxyaabaha keena. • Ka qeyb qaataan xallinta khilaafaadka ardeyda filkooda ah, iyo saaxiibbadooda kuna dhammeeyaan si nabad ah. • Awoodaan in ay si fudud u dhexgali karaan saaxibbadooda iyo bulshada inteeda kale. • Ixtiraamaan bulshada ay la nool yihiin gaar ahaan waalidiinta,	**Aradaydu waxa ay :** • Dhowraan nadaafaddooda qofeed iyo tan bulshada ay ku dhex nool yihiin. • Ku tababaran yihiin laylinta fayadhawrka bulshada, • Xiriir wadareed la sameyaan dadka kale ee ay la nool yihiin, taas oo lala xiriirinayo deegaankooda, lana barbar dhigayo deegaannada kale, sida degmooyinka iyo goballada kale. • Jecel yihiin qarannimada. • Leeyihiin xirfadaha xallinta khilaafaadka dhexmara kooxaha fac wadaaga ay yihiin, una dhexgelaan si wax ku ool ah saaxibbadooda, qoyska iyo bulshada inteeda kale. • Ixtiraamaan dadka ay la nool yihiin iyo bulshada inteeda kale, dhowraanna hantida dadweynaha iyo tan gaarka ah. • Yaqaanaan muhiimadda uu leeyahay qiyamka Islaamiga, dhaqanka suubban iyo taariikhda asxaabtii Nebi Muxamed (NNK). • Awoodaan in ay gartaan waxtarka ay leedahay isku baraarujinta wadaniyadda, iyo dawrka hoggaamineed ee hoggaamiyayaasha dalka ay leeyihiin,

macallimiinta, waayeelka, deriska iyo areyda ay wax la bartaan. • Ilaaliyaan hantida qoyska, dugsiga, iyo bulshada isla markaana ay dhawraan deegaankooda. • Tilmaamaan, sheegi karaanna dawrka ay leeyihiin hogaamiyaasha bulshada. • Sheegi karaan geesiyadii u soo halgamay Soomaaliya iyo guulihii ay soo hooyeen. • Tilmaan ka bixiyaan xudduudaha, dhulka, biyaha, iyo kheyraadka Eebbe ku maneystay dalkeenna. • Yaqaanaan akhrinta iyo tarjumidda khariidadaha aasaasiga ah. • Yaqaannaan waxtarka dhirta iyo hababka dhireynta.	iyo soo bandhigidda hoggaamiyeyaashii taariikhda ka sameeyay Islaamka, Afrika iyo guulihii ay soo hooyeen. • Tixgeliyaan qiimaha uu leeyahay deegaanka iyo khataraha ku soo fool leh. • Tilmaamaan xudduudaha, dhulka, biyaha, dhaqaalaha Eebbe ku maneystay dalkooda, wadamada Geeska Afrika, Bariga Afrika, dunida islaamka iyo caalamka kale. • Garanayaan cimilada deegaannada kala duwan iyo saameynta ay ku leedahay kala duwanaanshaha dhaqanka. • Yaqaanaan qaabdhismeedka dhulka sida buuraha, badaha iyo webiyada. • Yaqaanaan akhrinta iyo tarjumidda khariidadaha.

9.5. Barbaarinta Islaamiga (Tarbiyah Islamiyah)

- Ujeeddada ugu weyn ee ay xambaarsan tahay maaddadani, waa in ay sabab u noqoto dhisidda caqiido sax ah oo dhalineysa anshax suubban iyo in ay beerto qof huwan mabaadii'a aassaasi ah oo adag, muujiyana dulqaad iyo la dhaqanka wanaagsan ee bulshada kale. Maaddadan waa inay siisaa ardeyda, xaqiiq dhab ah iyo aqoon gaarsiinaysa barashada Allaah iyo cibaadadiisa, Nebiga (SCW) iyo ku dayashadiisa, sidaa oo kale aragtida Islaamka ee ku aaddan abuurista adduunkan aan ku noolnahay iyo xaqiiqada nolosha aadanaha iyo meesha uu ku danbaynayo.

- Maaddaddan waxa ay ardeydu si weyn uga kororsan doonaan, xumaanta qabyaaladda iyaga oo ka shidaal qaadanaya aafada ay ku reebtay ummaddeena.
- Daraasada Islaamku waa qeybta ugu muhiimsan manhajka dugsiyada, waxaana loo dejiyey in uu macallinka hago, iyo in uu ku caawiyo ardayda in ay ka kobcaan akhlaaq iyo ruuxi ahaanba, taas oo ka dhigeysa in uu u koro qof masuul dheellitiran oo bisil waxtar ku leh bulshada dhexdeeda.
- Waxa jira fursado badan oo daraasaadka Islaamiga ah loogu dhex dari karo maaddooyinka kale sida kobcinta anshaxa, akhlaaqda, ruuxa, oo si fiican loo dhexgelin karo dhisidda waxa la xiriira dareenka qofka, maskaxda iyo jirkaba.
- Inta aan kor ku soo sheegnay, barashada Islaamka marka loo eego manhajka dugsiga waa hiigsiga lagu horumarinaayo wacyigelinta nafta, oo ah wax gaar ah oo leh awood aqooneed, faham iyo ku dhaqan. Taariikhda aadamiga waxaa la garwaaqsaday in diinta aan looga maarmin nolasha, oo wax waliba oo la soo xiganaayana Aayad ama Xadiis lagu saleeyo. Soomaaliya Islaamku waa aasaaska dhaqan aqooneedka, dawr weynna ku leh muuqaalka qaranka Soomaaliyeed mustqbalka sida uu u ekaanayo.

- Maaddadan waa inay siiso ardeyda aragti sax ah oo adag, kuna aaddan mabaadi'da guud ee diinta Islaamka, sida tiirarka islaamka, tiirarka iimaanka iyo ixsaanka.
- Manhajka maaddadani waxaa laf dhabar (saldhig) u ah kitaabka Quraanka iyo Sunnada Nabi Muxamed (SCW).

Tusaha 8aad, waxa uu tusinayaa mirodhalka barashada ee laga filaayo heer kasta oo la soo xusay in lagu gaaro. Mirodhalka laga filayo waxbarashada waxa ay saldhig u noqoneysaa horumarinta maaddo kasta oo ka mid ah muqarrarka waxbarashada aasaasiga.

In labaro ardeydu waxa ka dhexeeyo isaga iyo waalidka:

Ardayga	Waalidka
Ixtiraam	Barbaarin wanaagsan
Qadarin	Naxariis
Ismaqal	Saaxiibtinimo
Ku dayasho wanaagsan	Tusaale wanaagsan

Tusaha 8aad: Mirodhalka laga filaayo barbaarinta Islaamiga

Dugsiga Hoose Dhammaadka heerkan waxaa la gaari doonaa waxqabad kan hoose.	**Dugsiga Dhexe** Dhammaadka heerkan waxaa la qaban doonaa waxyaabaha soo socda.	**Dugsiga Sare** Dhamaadka heerkani waxaa la ogaan doonaa in la garto waxqabadkan hoose.
Ardeydu waxa ay: • Yaqaanaan iskuna layliyaan qodabbada aasaasiga ee caqiidada Islaamka, aqoon badan u yeeshaan akhrinta iyo qorista Qur'aanka iyo barashada siirada Nabiga (SCW) oo kooban. • Yaqaannaan mabaadii'da guud ee Islaamka sida: tiirarka Islaamka iyo tiirarka iimaanka. • Yihiin dad jecel Allaah, Nabi Muxamed (SCW) iyo diinta Islaamka, kuna dhaqmo diinta Islaamka. • Ka horumarsan yihiin	Ardaydu waxa ay: • Aqoonsan yihiin cajaa'ibta abuurka Allaah u abuuray makhluuqaadkiisa. • Horumariyaan dareen masuuliyadi ku jirto ee maareynta deegaanka aynu ku nool nahay. • Yaqaannaan dhibaatada ay leedahay qabyaaladda, kana fogaadaan ku dhaqankeeda. • U gutaan shaqadooda si ikhlaas ah oo Allah ka cabsi ku jirto, baadigoobaanna xirfado habboon, oo ay kaga hortagayaan caqabadaha dalka iyo dunidan ay ku nool yihiin, taas oo ah in ay	Ardaydu waxa ay: • Awoodaan in ay si buuxda u aqoonsadaan cajaa'ibta abuurka Allaah u abuuray makhluuqiisa (uunkiisa). • Sheegaan qisooyinkii nabiyada, sida ay ugu soo arooreen Qur'aanka Kariimka ah. • Horumariyaan dareen masuuliyadi ku jirto ee maareynta deegaanka aynu ku noolnahay. • Aqoon weyn u leeyihiin dhibaatada ay leedahay qabyaaladdu, ka fogaadaan ku dhaqankeeda, kana wacyi geliyaan bulshada inteeda kale. • Aqoonsan yihiin in shaqada ay ka mid tahay

dhanka akhlaaqda Islaamka, qiyamka iyo qiimaha ruuxiga, aadaabta, ursursanaanta, dulqaadka, dabeecad wadaagga iyo ixtiraamka dadka ay la nool yihiin gaar ahaan dadka ka waaweyn. • Fahamsan yihiin muhiimadda ay leedahay nadaafadda, nabadda, u adeegidda bulshada, u gargaaridda dadka dhibaateysan iyo kuwa baahida gaarka ah qaba. • Yaqaannaan aasaasiyaadka diinta Islaamka sida salaadda.	dhisaan awoodooda shakhsiyeed. Waa in uu yaqaannaa, fahmana Allah in uu yahay kan looga dambeeyo koonkaan, laguna dhaqmo diintiisa. • Awoodaan in ay dib u fiiriyaan dhacdooyinkii taariikhda Islaamka iyo horumarkii uu soo maray, soona dhoweeyaan dawrka horumarineed, dhanka dhaqanka iyo xadaaradahii Islaamka soo maray oo ay ugu horreeyaan siirada Nabiga (SCW) iyo taariikhda afartii khaliif. • Awoodaan in ay fahmaan waxqabadkii iyo isbeddelkii ay keeneen aqoonyahankii Islaamka oo kooban. • Yaqaannaan caqiidada sunniga ah, iskana ilaalin karaan afkaaraha kale ee diimeed ee qaldan. • Yaqaannaan, gudanayaanna waajibaadka diinigi ah.	cibaadada si ikhlaas ahna u gutaan. • Yaqaannaan xirfad habboon oo ka hortagi karta caqabadaha dalka iyo dunida heysta maanta, taas oo lagu dadaalayo horumarinta shaqsi waxtarkiisu habboon yahay kana dhawrsoon caddaalad darada iyo qabyaaladda. • Fahamsan yihiin, awoodda ALLAH (SW). Awoodaan in ay dib u eegaan dhacdooyinka taariikheed ee Islaamka soo maray, iyo guulihii waaweynaa ee uu soo hooyey, sida ilbaxnimadii iyo dhaqamadii aqooneed ee u gaarka ahaa Islaamka, taas oo la rabo in la garto waxqabadkii aqoonyahankii Islaamka, siirada asxaabihii iyo hoggaamiyeyaasha Islaamka iyo isbedellada ay ku soo kordhiyeen dunida aan ku nool nahay.

9.6. Waxbarashada jirdhiska

- Waxbarashada jirdhiska waxa ay ka kooban tahay jirka, dareenka iyo aragtida bulshada ay ka qabto nolasha qofka. Ciyaaruhu waxa ay ka xoojiyaan ardeyda dhanka la xiriira fayoqabka, aqoonta, xirfadaha iyo baratanka, si loogu noolaado firfircooni iyo nashaad joogta ah oo ku dhisan caafimaad. Sidaa oo kale ardaydu waxa ay aqoonsan yihiin waxtarka ciyaaraha iyo goobaha kale ee jimicsi si ay kor ugu qaadaan caafimaadka qofka iyo bulshadaba. Heerka dugsiga hoose ardeydu waa in lagu horumariyaa arrimo aasaasi ah oo kor u qaadi kara firfircoonidooda, loo fidiyaa heerkani fursado uu kaga qeyb qaato hawlaha jirdhiska, is dhexgalka, la kordhiyaa dhaqdhaqaaqa jirkooda horumarinaya, iyaga oo adeegsanaya ciyaaraha gudaha, kuwa dibadda,layliyada, hawlaha la xiriira ciyaaraha kala duwan iwm.

- Barashada ciyaaraha jirka waxaa xoog lagu saaraa xiriirka adag ee ka dhaxeeya cilmi nafsiga, habdhiska jirka guud ahaan iyo xaaladaha la xiriira cilmiga bulshada.
- Barashada ciyaaraha, jirka waxa ay u yeelaan aasaas adag oo ardeydu rabto in ay sii wataan daraasad dheeri ah oo ku lug leh dhaqdhaqaaqa aadamiga, taas oo la xiriirta maareynta horumarinta ciyaaraha, siyaasadaha ciyaaraha iyo jirdhiska, warbaahinta ciyaaraha, oroddada kala duwan iyo sida loo maareeyo.
- Waxaa kale oo muhiim ah in ardeyda loo fidiyo tababaro shaqsiyeed iyo casharo siin ku aaddan saddexda heer: Hoose/dhexe/sare.
- Waxaa kale oo muhiim ah in ciyaaraha jirdhiska lagu daro kuwa ku saleysan dhaqanka Islaamiga iyo kan Soomaalida.

Tusaha 9aad: Mirodhalka laga filaayo waxbarashada / jirdhiska.

Dugsiga Hoose Dhammaadka heerkan waxaa la gaari doonaa waxqabadkan soo socda	**Dugsiga Dhexe** Dhammaadka heerkan waxaa la gaari doonaa wax qabadkan soo socda	**Dugsiga Sare** Dhammaadka heerkan waxaa la gaari doonaa waxqabadkan soo socda
Ardeydu waxa ay: • Awoodaan horumarinta guud ahaan jirkooda, isku dheelitirka, kor u qaadidda iyo isku duwida wada shaqaynta xubnaha jirka. • Yihiin kuwo fayow jirkana ka dhisan. • Garanayaan qiimaha iyo raaxada uu leeyahay sameynta layliga joogtada ah. • Caadeysteen jir dhiska qumman. • Ardeyda baahida gaarka ah leh waxa ay yaqaannaan layliyo xaddidan ee ku beeri kara kalsooni ay ku sii wataan hawlahooda ciyaareed.	Ardeydu waxa ay: • Qabatimeen sameynta, caadeysiga layliyo joogta ah oo ay ka qeyb qaataan iyo qabsoomida hawlo badan oo ku aadan jir dhiska. • Ogaadaan in horumarinta xirfadaha ciyaaraha ay la xiriirto tiro ciyaaro oo kala duwan. • Awoodaan in ay adeegsadaan shuruucda ciyaaraha. • Lahaadaan anshax wanaagsan oo gaarsiiya in ay qaban karaan ciyaar wanaagsan. • Muujiyaan wada shaqeyn kooxeed. • Ardeyda baahida gaarka ah leh waxa ay barteen sida ay ku heli lahaayeen faai'idada ugu wanaagsan ee xaddideysa hawlahooda ciyaareed.	Ardeydu waxa ay: • Sameeyaan laylin joogto ah oo xiisa badan, kana qeyb qaadanaya horumarinta dhismaha jirkooda. • Kororsadeen waayo aragnimo ku aaddan ciyaar gaar ah, waxa ayna horumariyaan xirfado badan oo ku habboon dhaqdhaqaaqa ciyaaraha ay sameeyaan. • Noqdeen dad ka qeyb qaata tartamada iyaga oo isku kalsoon, muujinaayana ciyaar wanaagsan iyo wada shaqeyn kooxeed.

9.7. Tiknooloji

- Maaddadaani waxa ay xoojineysaa ardeygu in uu isticmaalo tiknoolojiyadda, si uu u adeegsado erayo, sawiro iyo codadba.
- Waxa ay helayaan xirfado ku dhoweeya kala beddelashada macluumaadka kala duwan oo ay ku jirto adeegsiga e-mailada iyo aaladda internetka.
- Waxa kale oo awood u siineysaa tiknoolojiyadu in ay ku xakameeyaan dhacdooyinka iyo qalabkaba.
- Waxa kale oo ay baranayaan sida loo ururiyo xogta, loo istcmaalo, loo bandhigo, loola wadaago dadka kale.

Tusaha 10aad: Mirodhalka laga filayo maaddada Teknolojiyadda.

Dugsiga Dhexe Dhammaadka heerkan waxaa la filayaa ardeydu in ay soo hooyaan guulaha hoos ku xusan.	**Dugsiga Sare** Dhammaadka heerka waxbarshada dugsiga sare in ay ardeydu gaaraan guulaha hoos ku xusan
Ardeydu waxa ay: • Awoodaan in ay isticmaalaan qalabka computerka wax lagu geliyo waxna looga soo saarto (input/output devices), taas oo sahleysa in ay fahmaan isticmaalka qalabka tiknoolojiyada kala duwan, iyaga oo si madax bannaani ku jirto ugu isticmaalaya. • Si xeel dheer u adeegsadaan tiknoolojiyada iyo eray bixinadeeda. • Yaqaannaan isticmaalidda qalabka softweerka iyaga oo uga faa'ideysanaya dhanka waxbarashada iyo xaaladaha bulshada. Isticmaalidda tiknoolojiyada waxaa fududaanaya xiriirka isgaarsiinta in uu noqdo mid taabba gal ah.	Ardeydu waxa ay: • Awoodaan in ay si fiican oo wax ku ool ah u adeegsadaan qalabka lagu geliyo lagalana soo baxo xogta kumbiyuutarada. • Farsameeyaan qalabka kumbiyuuterka soona bandhigaan habsami u adeegsiga tiknolojiyada iyo xogta. • U isticmaalaan si masuuliyad ku jrto tiknoolojiyada iyo xogta, taas oo waxbarshadooda kor u qaadeysa. • Muujiyaan in ay ku beerto isdhexgal bulsho iyo dabeecad wanaag goorta ay isticmaalayaan tiknoolojiyada. • Awoodaan in tiknoolojiyada la heli karo ay u adeegsadaan xallinta mas'alooyinka, ku soo bandhigaan fikirkooda iyo sheekooyinkooda, u adeegsadaan tiknoolojiyada xallinta mushkiladaha, wax isbaridda qofka, balaarinta hawlahooda waxbarasho iyo wax soo saarka qofka. • Leeyihiin awood ay ku sameeyaan qiimeyn sax ah, munaasib ah, ku habboon, laguna qanci karo. • Fahmaan dhibaatooyinka ay bulshada u keeni karto teknoolojada haddii loo isticmaalo si qaldan.

Maaddooyinka u gaarka ah waxbarashada dugsiga sare

9.8. Taariikh

- Daraasadda maaddada taariikhda waxa ay ka caawineysaa ardeyda in ay helaan aqoon xiriirta, iyo in ay fahmaan taariikhdii hore ee Soomaliya soo martay iyo dhammaan adduunka, waxa ayna ku dhiiragalineysaa ardeyda in ay wax badan ka ogaadaan waxyaabihii hore.
- Baridda maaddada taariikhda waxa ay ka kaalmeyneysaa ardeyda, in ay kororsadaan aqoon ballaaran oo ku aadan taariikhdii hore ee Soomaaliya iyo kasbashada aqoon isku xiran ee dunida. Waxa ay gelineysaa ardeyda xiiso badan, si ay wax uga ogaadaan dhacdooyinkii hore.
- Baridda taariikhda waxa ay awood u siineysaa ardeydu in ay baaraan weydiimo ku aadan sidii ay u heli lahaayeen xog badan oo la isku haleyn karo, una fikiraan si waaqici ah, cadeymo la qaadan karo ku saleeyeen doodooda, ka fogaadaan muranka iyo wixii la halmaala, go'aanadoodana ay noqdaan kuwo si fiican ay uga baaraan degeen.
- Taariikhdu waxa ay ka caawisaa ardeyda in ay fahmaan isku-dhafnaanta nolasha aadamiga, geedi socodka isbedelka kolba dhacaayo, kala duwanaanshaha ummadaha iyo xiriirka ka dhexeeya ee isku keeni karo, iskaashiga iyo ka hortagidda caqabadaha wakhtiga.

Tusaha 11aad: Mirodhalka maaddada taariikhda

Dugsiga sare Dhammaadka heerkan mirodhalka ballaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaari doono
Ardeydu waxa ay: • Awoodaan in ay aqoonsadaan, xiiso gaar ahna siiyaan waxtarka barashada maaddada taariikhda ay u leedahay qaranka, si loo helo fikir waadix u ah ardayda , isku xirnaanta, taxanaha taariikhda laga soo bilaabo waagii hore ila maantadan aynu joogno, sida nolosha dadku ay u qaabayso dalkooda, iyo sida Soomaaliya saameynta ugu laheyd uguna yeelan doonto dunida inteeda kale. • Aqoon fiican u leeyihiin taariikhda Islaamka iyo tan Soomaaliya. • Gartaan waxtarka ay leedahay barashada taariikhda dunida, dabciga ilbaxnimadii hore ee dunida soo martay, fidistii iyo burburkii boqortooyooyinka, astaamihii iyo qaabkii ay lahaayeen bulshadii hore, guulihii iyo guuldarradii aadanaha soo maray. • Awoodaan in ay kasbadaan aqoon oo ay tusiyaan in ay ku faraxsan yihiin si fiicanna u kala dhig-dhigaan habka dhaqan dhaqaale iyo ururada siyaasadeed ee bulshooyinka adduunka. • Fahmayaan oo ay si xiiso ku jrto u eegayaan xuquuqda, sharafta iyo waajibaadka qofka iyo dadka kale si loo horumariyo bulsho ku dhisan caddaalad iyo nabadgelyo. • Fahmaan fikradaha taariikheed oo ay ka mid yihiin joogtayn iyo natiijada ka

dhalata, isu-ekaansho, kala duwanaansho iyo muhimad-siin, iyo in kuwani loo adeegsado isku xiriirid, isbarbardhigid, lagu kala dhigdhigo arrimo, laguna qaabeeyo weydiimo taariikheed oo dhab ah.

- Sameyn karaan cilmi baaris taariikheed.
- Fahmaan hababka loo baaro (raad goobo) taariikhdii hore oo ay ka mid tahay, in la adeegsado daliil si loo sheego taariikh jirtay waxa lagu saleeyay iyo sida loo soo bandhigay wixii la soo dhaafay.

9.9. Juqraafi.

Maaddo dabeecadeed iyo bulsho ahaan, cilmiga juqraafigu waa barashada oogada dhulka, iyo aadamiga siyaabaha uu ugu nool yahay, deegankiisa iyo sida uu u daryeelayo. Dadku waxa ay ka kaalmeyneysaa helitaan aqoon dhab ah, xirfado, fikir toosan iyo qiimo, si loo maareeyo gacan ku heynta kheyraadka dabiiciga ee buuxa dhulka aanu ku nool nahay.
Juqraafiga sidoo kale waxa uu siiyaa ardeyda fursado ay ku xiiseeyaan kuna fahmaan dunida aynu ku nool nahay; iyo xiriirka iyo isku xirnaanta ka dhexeysa bulshada kala duwan heer tuulo, degmo, gobol iyo caalamkaba.

Tusaha 12aad: Mirodhalka laga filaayo maaddada Juqraafiga

Dugsiga sare Dhamaadka heerkani mirodhalka balaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaari doono
Ardeydu waxa ay: • Awoodaan in ay soo bandhigaan xirfadaha kala duwan sida: Akhrinta, tarjumida iyo fasiraadda khariidadaha, iyo xog badan oo ku saabsan maadada juqraafiga iyo macluumaadka kale ee la xiriira. • Fahamsan yihiin qaabdhismeedka dhulka, biyaha iyo gibilka inaga sarreeya sida: Atamasfiir, bayasfiir, haydrosfiir iyo lidosfiir. • Xiiseeyaan muhiimadda uu deegaanku leeyahay, dhawristiisa iyo in ay ku tababartaan maareynta khayraadka dabiiciga oo joogta ah, si looga faa'ideysto kheyraadka iyo quruxda uu huwan yahay. • Soo bandhigi karaan faham la xiriira goobaha: degaaneed, goboleed, daleed, caalami, iyo dunida oo idil, marka loo eego dhaqaale qaybinta iyo waxqabadyada bulsheed, fahmaanna isku tiirsanaanta ka dhexeysa dalalka dhinaca arrimaha: deegaanka, dhaqaalaha, bulshada iyo tiknolojiyada si loo helo horumar taabba qaada oo joogta ah. • Aqoon u leeyihiin cimilooyinka kala duwan ee dunida iyo saamayntooda. • Aqoon fiican u leeyihiin juqraafiga Soomaaliya. • Sameyn karaan tijaabooyin la xiriira kala saaridda ciidda qeybaheeda iyo faa'iidada ay la gaar tahay.

9.10. Kimistari

Barashada maaddadan waxa ay ardeyda u suurto gelineysaa in ay dhisaan heemaal ay ku soo bandhigaan kuna saadaaliyaan fahamka astaamaha maatarka iyo dhammaan qaababkiisa kala duwan iyo isbedellada ku dhaca.

Tusaha 13aad: Mirodhalka laga filaayo maaddada Kimistariga.

Dugsiga sare

Dhammaadka heerkani mirodhalka ballaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaaro.

Ardeydu waxa ay:

- Yaqaannaan Halojiinis, Al-kaaliyada birta, biraha gudban, neefta wahsata, iyo curiyeyaasha kalaguurka, si ay u sharxaan qaabdhismeedka tusaha curiyeyaasha marka loo eego tirada atomka iyo astaamaha kiimikaad ee curiyeyaasha.
- Fahamsan yihiin qabdhismeedka atamka, iyo qaabka ay ku sameysmaan dabarrada kiimikaad, moolka, garaam-atamada, iyo graam-molakuyuulka.
- Sawiraan jaantuska xeyndaabka elektaroonada dibadda.
- Sharaxaan milanka iyo milmidda.
- Leeyihiin xirfadaha iyo farsamada agabka, tijaabooyinka, ururinta natiijoyin si cad loo fahmi karo.
- Awoodaan sameynta shaxda tijaaboyinka iyo milanka.
- Sharaxaan dhibaatooyinka dikhowga (wasaqeynta) deegaanka sida salfar dhayo-oksaydhka iyo kaarboon laba oksaydhka.
- Tusaale ka bixiyaan masiibooyinka.
- Fahmaan saameynta roobka aysidhka leh, oo sharraxaan in salfar laba oksaydhka hawada gasha ay la falgaleyso biyaha si ay u sameyso roob aysid ah, kana bixiyaan tusaalooyin raadadka waxyeellada ee uu roobka aysiidhku ku leeyahay dhismooyinka, carrada, dhirta iyo nolosha xayawaanka.
- Sharaxaan daxaleysiga, sababaha keena iyo ka hortaggeeda.
- Yaqaanaan kiimikada orgaanikada ah, xeerarka neefaha, danab soocidda, ogsidheyn iyo yareyn, falgallada (noocyada, dhaqsaha, iyo dheellitiranka).
- Kala gartaan ururka 5aad iyo ururka 6aad ee tusaha falgalka curriyeyaasha.
- Qeexaan oo kala saaraan aysidhada, bays-yada, iyo cusbooyinka.
- Horumariyaan fahamka isbedellada "enthalpy".
- Sawiraan jaantus ku tusinaya sida elektaroonnada ugu koreeya atamada u sameeyaan dabarro elektaroon wadaag ah.
- Sawiraan jaantus ku tusinayo qaababka ay laba curiye u sameeyaan molekiyuul.
- Sharaxaan iyada oo la fiirinayo milmidda iyo curiyeyaasha muhimka ah, sababta ay cusbooyinka ammooniyam iyo kaalsiyam naytaraytyada, fosfeydyada ay lagama maarmaanka ugu yihiin sameyta bacrimiye-yaasha.
- Muujiyaan farsamooyinka ku habboon ee badbaadada iyo adeegsiga saxda ah ee qalabka.
- Tusaan sida xogta loo qiyaaso, keydiyo, loona soo bandhigo.
- Muujiyaan awood ay ku dhisaan, soo bandhigaan, saafaanna tijaabada mitmiska [Titration] oo ay ku jiraan qaababka aasaasiga, milannada caadiga ah [standard solution], xariiqda mitmiska iyo tuseyaal ku habboon.
- Tusaallooyin ka bixiyaan dhibaatooyinka dikhowga saliidda iyo dhuxusha, sharraxaanna helitaankooda.
- Sheegaan waxa uu yahay monomer, polymer iyo ploymerimization.
- Fahmaan xeerarka neefaha oo ay dejiyeen Boyle, Charles, Dalton, Graham iyo in ay xaliyaan mas'alooyinka la xiriira xeerarkaas.
- Tusayaan nambarrada ogsidheynta ee curiyeyaasha ku jira iskudhisyada kala duwan iyo marka ay yihiin wajiga curiye-nimada.
- Sheegaan qaar ka mid ah astaamaha guud ee iskudhisyada orgaanikada ah,

magacaabidooda, qeexaanna qaar ka mid ah falgalladooda.

9.11. Bayoloji

- Barashada Bayolojiga ardeyda waxa ay ku xiraysaa dunida ay ku dhex nool yihiin, iyo in ay muujiso in ay ardeyda baranayaan isku xirnaanshaha dhammaan qaababka nololeed ee dunida.
- Waxa ay ka caawinaysaa in ay ardaydu horumariyaan ka warqabidda fauna iyo flora ekosistemiska u gaarka ah Soomaliya.
- Waxaa kale oo ardaydu wax badan ka ogaanayaan caaafimaadkooda iyo arrimaha barashada noolaha iyo waxa la xiriira.

Tusaha 14aad: Mirodhalka laga filaayo maaddada Bayolojiga

Dugsiga sare Dhamaadaka heerkani mirodhlka balaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaaro.
Ardeydu waxa ay: • Si kalsooni leh u baarayaan una sahminayaan ifafaalayaasha ku habboon nolosha, iyaga oo adeegsanaya xirfadaha: weydiinta iyo furfuridda mas'alooyinka. • Yeelanayaan aragti fog, xirfad dhalliilid toosineed iyo xirfado kale sida: loo garto, fahmo, dhiso, loona adeegsado cilmiga nolosha. • Isbarbardhigayaan, kala duwayaan, sameeynayaan go'aanno sax ah oo ku saabsan baaritaannada si loo garto micnaha cilmiyeed ee gunaanadka la gaaray. • Isbarbardhigayaan, kala duwayaan, kalana garanayaan kala dhimanaan-shaha xogta la helay. Sidoo kalena qiimeeynayaan hab tijaabeedka. • Aqoonsanayaan xogta iyo tijaabooyinka waxtarka leh, kor u qaadayaan fahamka walxaha nool iyo ma-noolaha, meertooyinka nafaqada iyo socodka tamarta ee deegaanka. • Sheegayaan kaarboohaydaraydka ay dhirtu ku sameystaan habka cunto sameynta (photosynthesis). • Sameeynayaan baaritaanka tijaabooyinka footosintesiska. • Soo gudbinayaan, sharraxayaan tijaabooyinka kale ee ku saabsan kelyaha, wadnaha iyo indhaha iyada oo la adeegsanayo jeebis. • Qaabeeynayaan habdhisyada aadanaha iyo dhirta. • Sharraxayaan habka qeybsanka unugga – koromo-soomyada, maayoosiska iyo taranka unugyada jinsiga. DNA, hiddo sidayaasha, dhaxalka, cudurrada la iska dhaxlo, cudurrada faafa iyo habdhiska difaaca jirka. • Sheegayaan habdhiska neefsashada in uu yahay habka uu nooluhu (Dhirta iyo xayawaanka) ka helo tamarta ay u baahan yihiin. • Garanayaan dabeecadda cilmiga sayniska iyo tiknoolojiyada iyo xiriirka ka dhexeeya sayniska iyo tiknoolojiyada. • Fahmayaan saameynta uu cilmiga sayniska iyo tiknoolojidu ku leeyihiin

bulshada iyo deegaanka.

- Kala saafayaan, qiimeeynayaan kana warbixinayaan aragtiyada kala duwan iyo saameynta hababka bayolojiga iyo tiknoolojiyaddu ku leeyihiin bulshooyinka deegaanka ku nool.
- Yeelanayaan xirfadda hal-abuuridda (fikiridda), dhalliilidda toosan si loo fahmo loona sharaxo dhismaha iyo faa'iidada nolosha.
- Sharaxayaan unugyada dhirta iyo xayawaanka iyo abla-ablaynta dhirta, xayawaanka iyo deegaanka.

9.12. Maaddada Fisigiska

Barashada maaddadan waxa ay ardeyda u suurto gelineysaa in ay dhisaan heemaal ay ku soo bandhigaan kuna saadaaliyaan fahamka xisaabinta, cabbiridda, dhisidda xiriirada ku saleysan tijaabooyinka; dabaqayaanna aqoonta iyo xirfadahooda sayniseed.

Tusaha 15aad: Mirodhalka maaddada Fisigiska

Dugsiga sare
Dhammaadka heerkani mirodhalka ballaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaaro.
Ardeydu waxa ay: • Soo bandhigayaan xirfado muhiim ah oo ku saabsan cabbiraadda, xisaabinta, iyo kala bedelidda halbeegyada sayniseed. • Sameeynayaan tijaabooyinka fisigiska. • Dhisayaan xiriirada iyo soo dheegidda gebegebooyin ku salaysan natiijooyinka ka soo baxa tijaabooyin. • Si sax ah ugu gudbinayaan ra'yigooda habab munaasib ku ah (qaab jaantusyo, tuseyaal, garaafyo, iyo shax) iyaga oo isticmaalaya xeerar sayniseed iyo xisaabeed. • Xakameeynayaan makiinadaha la xiriira nolosha, astaamaha maatarka, korontada, tamarta, kulka iyo heerkulka, hirarka iyo astaamaha ilayska, birlabta iyo gudbinta birlab-danabeedka iyo kaahfalka. • Cabbiri karaan culeyka, mugga, cufka iyo fogaanta. • Isku xirayaan, dabbaqayaanna aqoontooda iyo xirfadahooda sayniseed, si ay u korodho fahamkooda deegaanka iyo nolol maalmeedkooda. • Muujinayaan aqoon, xirfado, aragtiyo iyo dareen habboon oo xoojiya si ay u gaaraan hammigooda waxbarashada dugsiga sare ka dib, iyo in uu ku dabbaqo aqoontiisa fisigiska nolosha shaqada ee dhabta ah.

9.13. Maaddada Ganacsiga

Barashada maadadan waxa ay ardeyda u suurto gelineysaa, in ay dhisaan heemaal ay ku soo bandhigaan, kuna saadaaliyaan fahamka ganacsiyada kala duwan ee dunida ka jira, gaar ahaan kan Soomaaliya. Ganacsigu waa laf-dhabarka nolosha aadanaha waxa uuna noqday maanta mid si fudud loo gaarsiin karo dunida iyadoo aaney jirin caqabad xuduud iyo waqti.

Ardeydu waxa ay baranayaan waxyaabaha iyo waddooyinka casriga ah ee loo isticmaalo ganacsiga, iyagoo ku saleynaya shareecada islaamka iyo hal abuur ku dhisan baahiyaha bulshada iyo deegaanka.

Tusaha 16aad: Mirodhalka laga filaayo maaddada ganacsiga.

Dugsiga sare Dhamaadaka heerkani mirodhalka ballaaran ee soo socdo ayaa la filayaa in la gaari doono
Ardeydu waxa ay: • Taxliilinayaan waajibaadka bulsheed ee ganacsiga iyo waxbarashada, marka loo eego arimaha la xiriira deegaanka, anshaxa, caafimaadka, badbaadada, kala duwanaanta bulshada dhexdeeda iyo goobaha shaqada. • Awood u leeyihiin in ay kasbadaan aqoonta aasaasiga ah ee sharciyeed ee ku dhisan qiyamka Islaamka, suuqeed, dhaqaaleed, iyo teknoolojiyadeed ee la xiriirta ganacsiga si ay u noqdaan isticmaale, shaqaale iyo ganacsi abuure firfircoon. • Horumarinayaan xirfad waxbrasho joogta ah sida akhriska, xisaabinta, xiriirka, iyo go'aan qaadashada, kuwaasi oo horumarinaya wadiiqooyin shaqo furan iyo kalsooni ay ku qabi karaan goobaha shaqada, taasi oo u baahan dib isu qalabayn joogta ah. • Awood u yeelanayaan in ay bartaan oo ay ficil ahaan u sameeyaan xirfadaha is-dhexgalka iyo wada-shaqaynta, si loo xoojiyo waxqabadka qofka ee goobaha shaqada iyo bulshada dhexdeeda, iyo in la sameeyo in ay si guul leh ugu gudbaan goobaha shaqada ama sii wadashada waxbarashadooda dugsiga sare ka dib.

10. Siyaasadda afka lagu bixinaayo manhajka

- Dugsiyada aasaasiga iyo xannaanada, waxa ay wax ku baranayaan afka Soomaaliga.
- Afka Carabiga maadda ahaan waxaa lagu bilaabayaa fasalka koobaad ee dugsiga hoose.
- Afka Ingriisiga maadda ahaan waxaa lagu bilaabayaa fasalka sadexaad ee dugsiga hoose.
- Dugsiyada sare afka ay wax ku baranayaan waa: Soomaali, Carabi ama Ingiriisi.
- Tallaabooyinka aan laga maarmin in la qaado waa xoojinta afka wax lagu baranayo dhammaan heerarka kala duwan.
- Istaraatiijiyo/xaalad kala guur oo cad ayaa loo sameeynayaa ardeyda muqarrarka fasalka siddeedaad dhiganeysa iyo kuwa fasalka koobaad ee dugsiga sare, si loo xaqiijiyo dhibaato afeed in ardeydaasi aanay la kulmin.

11. Hababka baridda iyo barashada

Bixinta manhajka fasalka dhexdiisa macallimiintu waxa ay adeegsanayaan jidad kala duwan si loogu gudbiyo casharka dhammaan ardeyda. Iyadoo la eegayo arintaa macallimiintu waxa ay adeegsanayaan qaababka horumarin kara barashada sida:

1. **Barashada firfircoon-** Ardaydu waa inay si micne leh uga shaqeeyaan hawsha ku aadan mirodhalka waxbarashada.
2. **Barashada waayo-aragnimada -** Waa waxbarasho ka timid sahmin, helitaan, fal ama hawl gacmeed.
3. **Barashada horumarinta xirfadaha-** Waa mid ku saleysan helitaan xirfado baahsan, sida fakir hal-abuur iyo xallinta caqabadaha.

Manhaj qorayaashu waxa ay xaqiijinayaan in hababka barashadu ay ka muuqato tayada iyo mirodhalka waxbarasho, taas waxa ay ku xiran tahay xulashada, qorsheynta agabka waxbarasho ee loo adeegsado fulinta hababkani. Baruhu waa fududeeye, ee ma aha cilmi gudbiye sidaa darteed, waxaa ka badalaya habka uu macallinku yahay xuddunta baridda iyo barashada wuxuuna u badalayaa habka ay ardeydu ka firfircoon yihiin macallinka. Macallimiintu waa in ay u adeegsadaan gudbinta habab kala duwan si ay u gaarsiiyaan dhammaan ardeyda iyadoo aan loo eegin awood yaraan. Ardeyda baahida gaarka ah leh iyo kuwa dhugga fiican leh waa la caawinayaa si ay ula socdaan heerkooda iyada oo aan la xannibin (marka ay habboonaato waxa loo diraa hawl ku habboon oo xoogaa ka adag kuwa kale).

12. Hababka qiimeynta

Manhajka dugsiga waxaa uu u aqoonsan yahay in qiimeyntu ay ku lammaanan tahay hab socodka barista iyo barashada. Dowrka qiimeyntu waa in ay:

- Bixisaa talo soo jeedin iyo warbixin ku saabsan horumarka ay ardeyda sameeyeen ee ka muuqda mirodhalka waxbarasho si loogu adeegsado tilmaan marka la rabo in wax la saxo ama la caawiyo ardeyda.
- U suurtogelisaa ardeyda ogaanshaha maaddooyinka ay ku wanaagsan yihiin iyo kuwa ay ku liitaan, si kor loogu qaado waxbarashadooda.
- Wargelisaa macalimiinta, maamulka dugsiga iyo wasaaradda horumarka guud ee ardeyda ka sameeyaan mirodhalkii barasho ee laga filaayey.

Qiimeyntu waxa ay diiradda saareysaa hubinta horumarka dhammaan ardeyda, sida ay u gaareen mirodhalka ku qeexan muqararka la baraayo iyo qorshaha casharka. Gaar ahaan qiimeyntu waxa ay diiradda saareysaa qodobada soo socda:

1. Kasbashada ardayga ee aqoonta, xirfadaha iyo qiyamka.
2. Awoodda ay ardeydu u leeyihiin in ay xirfadihii iyo aqoontii ay ka kasbadeen fasalka ku dabaqaan nolol maalmeedkooda.
3. In si cad loo arki karo in ardeyda uu ku dhacay isbeddel aqooneed iyo habdhaqameed.

Baruhu waa inuu hubiyaa baahida khaaska u ah ardaydiisa, isaguna waa in la siiyaa agab iyo qiimeyn tayo leh ee uu ku ogaado heerka ardeyda. Manhajkii hore waxa uu ku saleysnaa habka uu macallinku yahay xuddunta qiimeynta, laakin manhajkan waxa

uu awood siinayaa in ardeydu ka qeybqaataan qiimeyntooda, sidaas darteed waxaa la qaatay hababka qiimeynta soo socota:

- Isqiimeynta shaqsiga: Ardeydu wey qiimeyn karaan heerka horumarka waxbarashadooda. Tani waa in si aad ah loogu dhiiragaliyaa ardeyda dugsiyada dhexe iyo sare.
- Qiimeynta kooxda isku heerka ah: Ardeyda waxaa awood loo siinayaa in ay faalo ama talo ka bixiyaan horumarka barasho uu qof kale samaynayo. Hawl qabadkooda waxaa qiimeynaya ardeyda kale.
- Qiimeynta baraha: Baruhu waxa uu fududeynayaa qiimeynta joogtada ah iyo tan wadareed si dheelitiran.

Manhaj qoreyaasha goorta ay horumarinayaan muqararada maaddooyinka, waa in ay hubiyaan qiimeynta bartilmaameedyada muhiimka ah iyo hababka ka turjumaya waxaa aan kor ku soo xusnay ee lagu qiimeynayo mirodhalka barashada iyo hanashooyinka. Qoreyaasha buugaagta maaddooyinka waxa laga filayaa in ay la yimaadaan siyaabo lagu samayn karo isqiimaynta, qiimaynta kooxda isku heerka ah iyo qiimaynta macallinka waxqabad barasho ahaan, taas oo ah shuruud ay wasaaradda waxbarashadu ku oggolaanayso in buugtooda lagu dhigo dugsiyada.
Xafiiska imtixaanaadka qaranka waxa ay lahaanayaan kaalinta ugu muhiimsan hawshaasi, waxa ayna qabanayaan hawlaha soo socda:

- Iney yihiin xarunta macluumaadka qiimeynta
- Qaadista imtaxaanaadka iyada oo ujeedku yahay shahaado siin dhammaadka marxaladda.
- In ay bixiyaan hubin dhab ah oo ku saabsan hawlqabad sanadeedka waxbarashada ardeyda ee heer qaran.

Tayodhowrka iyo xafiiska imtaxaanaadka qaranka, labadooda waxa ay isla sameynayaan kormeer sahan xilliyeysan si loo cabbiro (ogaado) guulaha ardeyda ee heerka la xushay, waxa ayna wada qiimeynayaan guulaha iyo nuxurka.

13. Kaalinta wasaaradda waxbarashada

Wasaaradda ayuu xil ka saaran yahay fulinta iyo dabagalka manhajka. Wasaaraddu waxa ay qaadaneysaa mas'uuliyadda hawlahan hoose:

- Horumarinta siyaasadda manhajka ayada oo loo marayo waaxda manaahiijta.
- Gudbinta/dhigidda manhajka iyo kormeerka tayada gudbintiisa/qeybintiisa iyadoo loo marayo waaxda tayo dhawrka.
- Xaqiijinta qiimeyn sax ah ee mirodhalka, iyada oo loo marayo nidaamka imtixaanka caadiga ah iyo habab qiimayn joogto ah.
- Xaqiijinta in nidaamka waxbarasho uu ilaaliyo heerarka loo cayimay mowduuc kasta oo waxbarasho ee heer walba ee ka dhex jira xarumaha waxbarashada oo dhan, waxaana kormeeraya xafiiska imtixaanaadka iyo waaxda tayo dhawrka.

14. Maal gelinta manhajka

Habsami u fulinta hadafka qaabdhismeedka manhajkan waxa ay ku xiran tahay in la helo taageero dhaqaale iyo mid farsamo oo joogto ah. Dawladda waxaa ka go'an xaqiijinta waxbarasho tayeysan oo ay helaan dhammaan ubadka Soomaaliyeed. Si taasi loo gaarana Wasaaradda Waxbarashada waxay::

1. Diyaarinaysaa, si simmanna u gaarsiineysaa dhammaan agabka loo baahan yahay ee ay ardaydu ku gaari karaan mirodhalka barashada.
2. Tababareysaa shaqaalaha si ay u kasbadaan aqoonta iyo xirfadaha munaasibka iyo lagama maarmaanka ah ee lagu caawini karo hirgelinta manhajkan.
3. Diyaarineysaa jawi u suuragelinaya daneeyayaasha waxbarashada (stakeholders) in ay buuxiyaan qeybaha kaga aaddan helitaanka waxbarasho tayeysan.
4. Ku garabsiineysaa hay'adaha aan dawliga aheyn ee xiiseeya in ay wax u qabtaan heerarka kala duwan ee waxbarashada.
5. Baadigoobeysaa taageero farsamo si loogu suurageliyo dhammaan ardeyda in ay helaan waxbarasho tayo leh oo loo siman yahay.

15. Xilli - dugsiyeedka iyo saacadaha ugu yar ee waxbarista

Xilliga sanad-dugsiyeedka waxbarashada tooska ah uu noqonayo sanad waliba, waxaa lagu saleynayaa saacadaha waxbarista ugu yar iyo toddobaadyada hoos ku xusan. Wakhtiyeyntu waa ay isbeddeli karaan marka laga eego cimilada iyo xilliyada, hase yeeshee saacadaha waxbaristu waa isku mid. Dugsiyada dalka xilliga ay ku shaqeynayaan waa midkan hoos ku xusan. Waxaa kale oo loo baahan yahay in la tixgeliyo ardeyda dhuga badan (gifted) ee waxbarshadoodu sarreyso ee qaadan kara saacado yar, iyo ardeyda liidata ama ka gaabiya waxbarashada, ama kuwa baahida gaarka ah qaba waxaa laga yaabaa in wakhtiga waxbarasho loo kordhiyo, saacado badanna ay helaan. Isbeddeledan waxa ay dhici karaan keliya marka heshiis gaar ah lala galo Wasaaradda waxbarashada.

Tusaha17aad: Xilli - dugsiyeedka dugsiga iyo saacadaha waxbarista.

	Tilmaan	Dhererka Wakhtiga
	Sanad Dugsiyeedka	Laba xilli (simistar)
	Xilli dugsiyeedka	Xilliga 1aad: Agoosto ilaa Disembar. Xilliga 2aad: Jannaayo ilaa Maajo
	Toddobaad waxbarasho	36 toddobaad sannadkiiba
	Maalmaha dugsiga	6 maalmood (Sabti ilaa Khamiis)
	Xisadaha toddobaadkii	42 xisadood
	Muddada xisadaha	Dugsiga Hoose iyo Dhexe 40 daqiiqadood Dugsiga Sare 45 daqiiqadood.
	Tirada saacadaha halkii sano dugsiyeed.	**Dugsiga Hoose/Dhexe 1008 saacadood.** **Dugsiga Sare 1134** saacadood sanadkiiba

Saacadaha waxbarashada aasaasiga ah

	Maado	Dugsiga Hoose				Dugsiga Dhexe			
		1	2	3	4	5	6	7	8
1	Tarbiyah	5	5	5	5	5	5	5	5
2	Saynis/Caafimaad	5	5	5	5	5	5	5	5
3	Xisaab	6	6	6	6	6	6	6	6
4	Soomaali	7	7	6	6	6	6	6	6
5	Carabi	6	7	6	6	6	6	6	6
6	English			5	5	5	5	5	5
7	Cilmiga Bulshada	5	5	4	4	4	4	4	4
8	Ciyaaraha	4	3	2	2	2	2	2	2
9	Farshaxan	3	3	2	2	2	2	2	2
10	Teknooloji	1	1	1	1	1	1	1	1
	Wadar	42	42	42	42	42	42	42	42
	28 saac usbuucii	**4.67 saac maalintii**				**1008 saac sannadkii**			

Saacadaha waxbarashada dugsiyada sare

	Maado	Xiso Usbuucii	Daqiiqo Xisaddii	Saacad Usbuucii	Saacad Sannadkii	%
1	Tarbiyah Islaamiyah	5	45	3.75	135	12%
2	Bayoloji	3	45	2.25	81	7%
3	Kimistari	3	45	2.25	81	7%
4	Fiisigis	3	45	2.25	81	7%
5	Soomaali	3	45	2.25	81	7%
6	Carabi	5	45	3.75	135	12%
7	English	5	45	3.75	135	12%
8	Taariikh	3	45	2.25	81	7%
9	Juqraafi	3	45	2.25	81	7%
10	Xisaab	5	45	3.75	135	12%
11	Jir-dhis	1	45	0.75	27	2%
12	Tiknooloji	2	45	1.5	54	5%
13	Ganacsi	1	45	0.75	27	2%
	Wadar	**42**		**31.5**	**1134**	**100%**
				5.25		

16. Eray-bixinnada erayada farsamo ee la adeegsaday

Waxaa jira baahsanaan ballaaran iyo jahwareer la xiriira eraybixinta ay adeegsadaan manhaj qorayaasha. Iyadoo sababtu ay tahay khubarada waddanno kala duwan ayaa u isticmaala erayo kala duwan waxyaabo isku mid ah sidaa darteed, waxaa hoos ku xusan eraybixin kooban ee ku saabsan ereyada lagu adeegsaday qoraalkan:

b) Qaab-dhismeedka manhajka

Waa qoraal ballaaran oo si cad loogu qeexay ujeeddooyinka, qiyamka isla markaana taxaya miradhalka ballaaran ee laga filayo waxbarashada. Waxa uuna ku shaqeeyaa aasaaska horumarinta muqarrarka maaddada, isaga oo ogolaanaya xulashada ballaaran marka la barbardhigayo manhaj dhaqameedkii hore. Kani ma aha inuu tilmaamayo baaxadda, iyo silsiladda hawsha, balse waxa uu muujinayaa mirodhalka waxbarasho ee laga filayo heer kasta. Waxa uu culeyska saarayaa heerka laga rabo marxalad kasta. Waa waddo waxtar u leh isla socodka ardeyda ku kala duwan garaadka iyo awoodda.

t) Qiyamka

Waxaan filaynaa in qiyamka si fiican loo fahmay, si aad u ballaaran ayaan uga soo hadalnay intii aan ku soo jirnay qaabdhismeedka manhajka, waxaa muhiim ah in uu ka muuqdo dareenka bulsha weynta Soomaaliyeed.

j) Yoolka

Yoolka waxaa loo qaadan karaa micne ballaaran sida himilooyinka iyo waxa la rabo in la gaaro. Guud ahaan waxaa la isku raacsan yahay in manhajku kaabayo bartilmaameedka laakin kama guul keeni karo keligii. Haddaba, bulsho caafimaad qabta, jir ahaan dhisan waxay noqon kartaa yool, ama deegaan horumarsan oo nabdoon. Hase ahaatee labada xaaladood, waxbarashada waa ay kaabeysaa gaarista bartilmaameedyadaasi. Waxaa xusid mudan in wasaaradaha caafimaadka iyo warshadaha ay kaalin mug leh ku leeyihiin.

x) Ujeeddooyinka guud iyo kuwa gaarka ah

Waa wax adiga aad ula jeeddo in manhajku uu gaaro, iyada oo aan loo baahan taageero kale.

kh) Mirodhalka waxbarashada

Mirodhalka waxbarasho waxa ay la mid yihiin ujeeddooyinka, waxayse ku kala duwan yihiin halka culeyska la saarayo. Mirodhalka waxbarashadu waxa ay culeyska saareysaa waxa aan ka fileyno natiija ahaan waxbarasho la fuliyay, waxa ay qeexeysaa guulaha waxbarasho ee laga filayo ardadu in ay gaarto dhammaadka heer gaar ah. Muqararrada kale sida USA iyo Scotishka waxa ay ku magacaabaan heer (standard). Hase yeeshee, waa la tilmaami karaa faraqa u dhexeeya manhaj ku salaysan mirodhal iyo midka ku salaysan ujeeddooyin.

Midka hore, waa manhaj ku saleysan mirodhalka la filayo dhammaadka heerka marka loo eego ardeyda iyo waxa ay barteen. Manhajka ku saleysan ujeedooyinka bartilmaameedka manhajku waa bilowga habka. Farqiga waxaa dhici karta inuu yar yahay ujeedooyin badan ayaa loo tibaaxaa mirodhal ahaan iyada oo keliya ay ku kala duwan yihiin sida loo sheegay.

Arintu si kasta ha ahaatee, caalamka ayaa u batay dhanka mirodhalka tobankii sano ee dambe, waxa ayna culeyska saareen ardeyda bedelkii macallinka. Qoraalkaani waxa aan ujeedooyinka u isticmaalaynaa in lagu qeexo waxa wasaaradda iyo dowladda ay rajeynayaan gaaristooda, dhanka kale natiijada waxbarashada waa xoogga dhaqaajiya horumarinta manhajka iyo u qeybintiisa taxanayaal ah muqarrarada maaddooyinka.

d) Hanashada

Hanashada dhab ahaan waa mirodhalka barashada oo loo kala qaybiyey qaybo yar yar. Qaybo u suurageliya in ardaydu ay ku hanan karaan mirodhalka. Halka marka uu dal isticmaalayo ereyga heer (standrad), waxa ay u adeegsadeen mirodhalka barashada in ay la micne tahay cutubyadan yar yar. Tusaale ahaan, haddii hiigsiga mirodhalku uu yahay in uu ardaygu awoodi karo in uu si fiican u akhrin karo faqro af-soomaali ah oo uu fahmi karo. Kartida lagu dhisayo tan waxa ka mid ah awoodi karo in uu aqoonsado dhawaaqyada xuruufaha.

- Ku dhawaaqi karo hal dhawaaqle.
- Aragti ku aqoonsan karo erayo.
- Samayn karo sumadaynta.

Natiijada ka dhalata middani waxa uu ardaygu markan si fiican u akhrin karaa faqro waana fahmi karaa, markaa mirodhalkii waa la gaaray. Haddii si ballaaran loo eego waxa loo arkaa in la gaarayo mirodhalka barashada. Marka dal kale u isticmaalo mirodhalka barasho heer ahaan waxa ay la micne tahay cuytubyo yar yar.

r) Heerarka

Waxa ay tilmaamayaan ka gudubka marxalad gaar ah, marka tiro cad oo waxa la filaayo in la gaaro loo qoro mirodhal barasho ahaan oo la barbardhigo tiro bartilmaameedyo la qiimayn karo. Dhererka marxaladdani oo kale sida qaalibka ah waa 3 ilaa 4 sano, lamana mid aha fasal sababta oo ah, arday kala duwan ayaa ku gaari doona mirodhalka loo baahan yahay heerar kala duwan. Hase ahaatee, afar sano ka dib waxaa dhici karta in la gaaro 70% mirodhalka laga doonayay heerka koobaad. Si kastaba ha ahaatee, 15% waxa dhici karta in hore loo gaaray iyo in lagu sii dhow yahay heerka labaad iyo in 15% kale ay u baahan tahay lix bilood kale ama ka badan ka hor inta aan la gaarin heerkii la filaayey.

s) Muqarrarka

Ereyga muqarrar waxa aan u isticmaalnaa inuu yahay tafaasiisha waxa lagu baranayo maaddo kasta. Muqarrarku waxaa uu ku saleysan yahay barasho mirodhal baaxad ballaaran leh, waxaana loo dejiyaa in lagu gaaro Ujeedooyin. Muqrararka waxaa la qoraa marka lagu heshiiyo mirodhalka ballaaran ee barashada iyo mowduucyada la baranayo. Muqarrar kasta ee maaddo waxa uu yeelanaya sababayntiisa iyo mirodhal barasho oo loo kala jejebiyey awoodo. Waxa dhici karta in mowduuc barasho oo gaar ah lagu siiyo tixgelin gaar ah hal muqarrar ama muqarrarro kala duwan taaasi waxa ay ku xiran tahay heerka iyo baahiyaha bartaha. .

XEER RA'IISUL-WASAARE LR. 025 Taariikh: 09/11/2017

GO'AAN GOLE " ANSIXINTA SIYAASADDA QARAN EE DHALINYARADA"

Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda JFS

MARKUU ARKAY: Qodobka 99^aad^(a), (b) & (e) ee Dastuurka Federaalka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 100^aad^ (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Dhalinyarada iyo Isboortiga

MARKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.27.11.17** ee **09/11/2017**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo Siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada

Wuxuu Meel-mariyay:

Qodobka 1^aad^

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.27.11.17** ee **09/11/2017**, kuna saabsan ansixinta "**Siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada**" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay

Qodobka 2^aad^

Waxa Wasaaradda Dhalinyarada iyo Isboortiga loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada.

Qodobka 3^aad^

Siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 09/11/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/025/Ba/17
TAARIIKH 13/11/2017
SAXIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

SIYAASADDA QARAN EE DHALINYARADA

WAXAA SOO DIYAARISAY

WASAARADDA DHALINYARADA IYO ISBOORTIGA
XUKUUMADDA JFS
2017

EREYGA WASIIRKA

1. GOGOL-DHIG

Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortigu

- Markay u kuurgashay dhibaatooyinka baahsan ee dhalinyarada haysta sida shaqo la'aanta, amni darrada, marin habaabinta iyo xagjirnimada, caddaalad darrada ay dhalintu ka cabanayso, waxbarasho la'aanta, gar-gaar la'aanta dhinaca caafimaadka ah, tahriibka, iyo tababar la'aanta xirfadeed;
- Markay garwaaqsatay inaanay dhalinyaradu helin adeegyadii aasaasiga ahaa ee ay u baahnaayeen;
- Markay aragtay inay lagama maarmaan tahay in xaaladda cakiran ee dhalinyarada wax laga qabto;
- Markay aragtay inaanay jirin siyaasad cad oo ka tarjumaysa baahiyaha dhalinyarada ayey garwaaqsatay inay muhiim tahay in la sameeyo siyaasaddii lagu hagi lahaa adeegyada dhalinyaradu u baahan yihiin;

Waxay Wasaaradda Dhalinyarada iyo Isboortigu go'aamisay:

- ✓ In la sameeyo siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada Soomaaliyeed

Haddaba, si loo dar-dargeliyo hawshaa lagama maarmaanka ah, waxay Wasaaradda Dhalinyarada iyo Isboortiga bilowday kulamo wadatashi iyo xog uruurin ah.

Ujeedooyinka Siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada

- In la sameeyo siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada oo la jaanqaadi karto siyaasadaha kale ee dalka.
- In la kobciyo aqoonta iyo garaadka dhalinyarada si ay suurtogal ugu noqoto inay dhalinyaradu helaan adeegyadii ay u baahnaayeen.
- In la kobciyo dareenka waddaninimo ee dhalinyarada si ay berri u noqdaan dad xilkas ah
- In la taageero dhalinyarada qaybahooda kala duwan si ay uga qayb-galaan dhammaan fursadaha waddanka lagu horumarinayo.
- In dhalinyarada loo abuuro fursado ay kaga wada xaajoodaan arrimaha dalka ka jira laguna abuuro shucuur waddaninimo.
- In lagu baraarujiyo dhalinyarada inay ka qayb-qaataan si fir-fircoonna uga muuqdaan mashaariicda iyo hawlaha kala duwan ee lagu kobcinayo dhalinyarada, waddankana lagu horumarinayo.

Haddaba kulamadii wadatashiga ahaa waxaa lala yeeshay:-

1. Ururada dhalinyarada kala duwan ee gobolka Banaadir
2. Ururada iyo dalladaha dhalinyarada madaxa bannaan ee soomaaliyeed.
3. Dhalinyarada baahiyaha gaarka ah qabo
4. Culumada soomaaliyeed
5. Ururada bulshada rayidka
6. Ururka haweenka soomaaliyeed
7. Ardayda Jaamacadaha dalka
8. Wasaaradaha Adeega Bulshada(Line Ministries)
9. Dawlad Goboleedyada(Wasaaradaha Dhalintayarada iyo Isboottiga)

1. 1.1. Hor-dhac

Halgankii ummadda Soomaaliya uu hogaanka u soo hayay xisibgii SYL iyo qaar ka mid ah halgamayaashii dalka u soo halgamay waxay aheyd talaabo ay qaadeen dhalinyaradu oo loo qaaday dhanka sidii la isaga qaadi lahaa heeryadii gumaysiga isla markaana ummada Soomaaliya loo gaarsiin lahaa xoriyad buuxda.

Waxaa sidoo kale si buuxda u soo baxdey inay jiraan dad badan oo aan fahamsaneyn qiimaha ay leedahay xorimada iyo dal waliba in uu yeesho calan iyo dawlad caalamka laga aqoonsan yahay. Xoriyadii ummada Soomaaliya ay hanatey sanadkii 1960-kii waxaa loo marey halgan aad u dheer oo dhiig badani ku qubtey, isla markaana halgamayaal fara badani ay maalkooda iyo naftooda u hureen, si ummada Soomaaliya ay u helaan xornimo, iyadoo xiligaasi ay aheyd xili ay qaaradan Afrika ay si weyn uga halgamaysay xoriyada iyo inay iska qaado heeryadii guumaysatayaashii reer Yurub.Xiligaasi waxaa qaarada Afrika ka shidnaa shulcad loogu magacdaray "Kacdoonkii Xoriyada ee Afrika" shulcadaasi guumaysi diidka ee ifaysay Soomaaliyana waxay qayb ka aheyd ummadihii kale ee Qaarada madow ee halganka ugu jirey hanashada xoriyada.

15-kii May 1943 waxaa u suurta gashey 13 dhalinyarada Soomaaliya ka mid ahaa inay dhibada u taagaan xisbigii la magac baxay SYC (Somali Youth Club) ama ururuka dhalinyarada Soomaaliya, kaasi 4 sanno ka dib u xuubsiibtey ururka dhalinyarada Soomaaliya ee SYL (Somali Youth League), sanadkii 1947-kii bishii May ayaa ururka SYL si rasmi ah magacaasi u qaatey 100%.

1da Luulyo 1960 ayay ahayd markii ay labadii Gobol (Waqooyi iyo Koofur) ee Soomaalida xornimada qaatay isku biireen isla markaana ay samaysantay Jamhuuriyada Soomaaliya. Inqilaab ay hogaaminayeen ciidamada qalabka sida ayaa ka dhacay dalka oo ay ku doorteen dawlad ciidan oo ay hogaamiyaan 25 xubnood oo golihii sare kacaanka ah.

1991dii burburkii dowladii dhexe ka dib dhalinyaradu waxay noqdeen kuwa dhibta qaybta ugu badan ka qaatay ee loo adeegsaday dagaaladii sokeeye iyada oo ilaa maanta ay yihiin kuwa loo adeegsado falalka argagixiso. Siyaasadan ayaa ah mid lagu daweynayo dhibaatooyinka dhalinyarada haysta si ay u noqdaan kuwo si buuxda uga qayb qaata horumarinta bulshadooda.

Sida ku cad xog-ururintii Tirada dadka ee Somalia, (Population Estimate Survey for Somalia – PESS) ee laga sameeyey dalka sanadkii 2014 kii ayaa lagu qiyaasay in 75% tirada guud ee dadka ay yihiin kuwo da'doodu ka yar tahay 30 sanno, tani waxa ay ina tusinaysaa in isbedel wanaagsan oo dalkan ka dhacaa uu ku xidhan yahay hadba sida dhalinyaradiisa loo bedelo loona jiheeyo.

Tirada badan ee dhalinyarada ayaa keenaysa in ay noqdaan kuwo dhibaatooyinka inta ugu badani ay iyaga ku habsato. Hadaan eegno xaalada amni daro iyo colaadaha muddada jiitamayay ayaa ahaa kuwo loo adeegsaday dhalinyarada, ururka argagixisada ah ee Al-Shabaab ayaa magaciisa marka loo turjo Afka Soomaaliga noqonaya "Dhalinyarada" taas oo ujeedada laga leeyahay tahay in ay helaan awoodaas u baahan in laga faa'iideysto. Waxay isticmaalaan dhalinyaro, waxay laayaan

dhalinyaro, waxay sitaan magaca dhalinyaro, sidaas darted dhibaatadaas waxaa lagaga bixi karaa dhalinyarada oo la jiheeyo lana daboolo baahiyaha keeni kara in si qaldan looga faa'iidaysto dhalinyarada.

Dhalinyarada ma aysan helin fursad buuxda oo ay kaga qayb galaan arrimaha kala duwan ee dalka ka socday si ay u noqdaan muwaadiniin wax-soo saarka qayb ka ah. Dhalinyaradu mudadii ay dagaaladu dalka ka socdeen ee dawlad la'aantu jirtay waxay waayeen fursado ay ku horumariyaan aqoontooda waxbarasho. Tani waxa ay sabab u noqotay in dhalinyaradu halis u noqdaan dhibaatooyinkii ku xeernaa deegaanadooda sida colaadaha, caafimaad daro, tahriib, argagixiso, jahli iyo in aan waxba laga waydiin habka maamulka iyo nabadeynta dalka.

Siyaasada qaran ee dhalinyarada waxay marqaati ka tahay sida ay dawlada federaalka Soomaaliya uga go'an tahay horumarinta, jiheynta iyo ka caawinta dhalinyarada in ay helaan baahiyahooda kala duwan. Siyaasada qaran ee dhalinyarada waxay qeexaysaa ujeedooyinka, xeeladaha la adeegsanayo, talaabooyinka wax ku oolka ah, cida bartilmaameedka u ah siyaasadan, iyo hay'adaha dawr muhiim ah ka ciyaari doona fulinta siyaasada. Waxay si cad u sharaxaysaa kaalinta dhalinyarada iyo masuuliyada ay ku leeyihiin bulshadeena dhexdeeda.

Siyaasada Qaran ee Dhalinyarada waxay qayb ka tahay dadaalada caalamiga ah ee sameynta siyaasado dhalinyaro oo ku aadan xaaladaha aadka isku bedelaya ee qarnigan 21$^{naad.}$ Iyada oo ay dalalka kala duwan ee caalamku ay ku hawlanaayeen mudooyinkii u dambeeyey sameynta iyo dib-u-

eegista siyaasadaha dhalinyarada si loo horumariyo dhalinyarada oo ah xooga dihin ee dal kastaa uu haysto ama uu leeyahay.

Siyaasadan Qaran ee Dhaliyarada waxay u taagan tahay baaqa iyo dadaalka ay dawlada Federaalka Soomaaliya ugu jirto qadarinta iyo taageerista horumarinta dhalinyarada muddada shanta sanno ee soo socota. Siyaasadan waxay qiraysaa in dhalinyarada Soomaliyeed ay haystaan caqabado baaxad leh oo ku aadan dhinacyada kala duwan ee nolosha sida in dhalinyarada aan si wanaagsan looga faa'iideysan awoodooda iyo in aaney kheyraadka dalka ka helin qaybtooda, isla markaana loo baahan yahay in laga shaqeeyo sidii looga faa'iideysan lahaa xooga dihan ee dhalinyarada si ay horumarka dalkooda uga qayb qaataan. Siyaasadani waxay salka u dhigi doontaa in dadaaladaas gaaristooda ay bar bilow ah u noqoto.

Diyaarinta Siyaasada Dhalinyarada Qaranka ee Soomaliya ma aha kaliya mid ay ku qirayso qiimaha iyo muhiimada bahweynta dhalinyarada laakiin waa mid ay ku dejinayso siyaasad balaaran oo ka turjumaysa baahiyaha muhiimka ah dhaliyarada iyo qaabdhismeed ay dhamaan daneeyayaasha da'yartu ay ku saleeyaan hawlahooda ku wajahan horumarinta dhalinyarada. Haddaba dhammaan fikradaha soo socda waa aaraahdii iyo fikradhihii laga soo ururiyay dadkii ka qayb-galay kulamadaa oo dhalinyaro u badnaa.

1.2. Muhiimada Siyaasada

Waxaa jira caqabado badan oo ku xeeran dhalinyarada soomaaliyed iyo arrimo badan oo saameyn ku leh dhalinyarada sida Shaqo la'aanta, colaadaha iyo amni darada, waxbarasho

tayadeedu hooseyso, musuqmaasuqa iyo cadaalad darrida. Waxaa jirta in tiro aad u badan oo dhalinyaro ah ay dalka uga qaxeen colaadihii muddada socday oo ay qaaradaha dunida qaxooti ku noqdeen. Tiro kale oo ahaa beeralay ama xoolo dhaqato ayaa nolosha oo adkaatay awgeed usoo wareegay magaalooyinka taas oo yaraysay waxsoosaarkii lagu tiirsanaa iyo heerkii nolosha ee dalka. Dhalinyarada ka soo wareegaya miyiga ayaa ah kuwo aan haysan aqoon ama xirfado ay ku helaan shaqooyin ay nolol maalmeedkooda ku maareeyaan.

Marka laga yimaado xaqiiqda ah in dhalinyaradu yihiin tirada ugu badan ee bulshadeena iyo in loo aqoonsan yahay xooga dihin ee dalka; ma ay jirin Siyaasad dhalinyaro ama qoraal guud oo ka hadlaya baahiyaha dhalinyarada si loo mideeyo adeegyada hay'adaha dawliga iyo kuwa aan dawliga ahayn oo waxqabadkoodu isku soo noqnoqdo isla markaana ay yar tahay iskaashigooda ku aadan horumarinta dhalinyarada.

Hadaba, baahida loo qabo in la sameeyo siyaasad qaran oo hagta horumarinta iyo tayeynta waxbarashada, shaqada iyo heerka nolosha dhalinyarada, ayaa noqotay lagama maarmaan waana sababta ay siyaasadan qaran ee dhalinyaradu ugu taagan tahay in ay hagto hiigsiga dawladda Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee ku aadan mustaqbalka bulshadeeda, gaar ahaan dhalinyarada.

Siyaasada Qaran ee Dhalinyarada waxaa looga gol-leeyahay buuxinta baahiyada jira, ka jawaabista iyo xal u helista caqabadaha iyo soo jeedinta barnamijyo lagu horumarinayo laguna dardargelinayo fulinta hawlaha lagu xaqiijinayo Hadafka siyaasadan si ay u helaan dhalinyarada xuquuqdooda

kuna noolaadaan Somaliya oo dib-u-dhisantay oo dimuquraadiyad ka hanoqaaday. Siyaasadan waxay muhiim u tahay maalgelinta mustaqbalka iyo badbaadinta dhalinyarada, la dagaalanka xagjirnimada, nabadeynta iyo xalinta khilaafaadka, dib-u-dhiska qaranka, horumarinta waxsoosaarka, tayaynta daryeelka caafiimaaka, diimuqraadiyada iyo doorashooyinka, dib-u-habaynta deegaanka, dhiirigalinta iyo ilaalinta dhaqanka, cadaalada bulshada iyo horumarka.

Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay qiraysaa muhiimada ay leedahay ka qayb galinta dhalinyarada ee horumarinta dalka, tilmaamaha shaqooyinka kala duwan ee hay'adaha dawladu qaban doonaan iyo kuwa taageera ee hay'adaha aan dawliga ahayn.
Siyaasadu waxay u taagan tahay tilmaame guud oo leh ujeedooyin laga mideysan yahay iyadoo hiigsigu yahay horumarinta dhalinyarada.

1.3. Dhinacyada Siyaasadda

Qodobada muhiimka ah ee Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada tilmaameyso waa sida hoos ku qoran:-

1. Xoojinta Waxbarashada iyo Tababarada Xirfadaha,
2. Shaqo Abuurista
3. Ka qaybgelinta dhaqaalaha iyo yareynta Saboolnimada
4. Nabadda iyo Xasilinta Amniga Dalka
5. Caafimaadka iyo Tayeynta Nolosha
6. Ka qayb qaadashada siyaasadda
7. Ilaalinta iyo Badbaadinta dhalinyarada
8. Garsoorka iyo caddaalada

Siyaasadda Horumarinta Dhallinyarada ee Soomaaliya ayaa sidoo kale muujineysa xuquuqda iyo waajibaadka dhallinyarada Soomaaliyeed.

Waxa ay Siyaasadda Dhallinyarada Qaranku saadaalineysaa in fikirka cusub iyo qaab-dhismeed sal-balaadhan loo baahan doonaa si loo hubiyo fulinta tabaha iyo waxqabadyada lagu taliyay mudadii wada tashiyada ay socdeen. Waxaanay soo jeedinaysaa dejinta qorshe hawleed qaran oo si faahfaahsan uga jawaabaya *'Maxaa la qabanayaa, Yaa qabanaya, Sidee loo qabanayaa, iyo goorma ayaa la qabanayaa'*.

1.4. Qeexida Dhalinyaro

Siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada waxaa ay diiradda saareysaa in da'da u dhexeyso 15 ilaa 40 sano jir loo aqoonsaday in ay yihiin dhalinyaro taas oo ka soo baxday talooyinkii iyo xog ururintii la sameeyey gaar ahaan culumada soomaaliyeed. Marxaladan waa marxalada dhalinyaradu ugu firfircoon yihiin, ugu xoog badan yihiin, mustaqbalkooduna dhismo. Marxaladan ayaa u baahan in la taageero si loo hubiyo in isbedeladaasi u dhacaan si wanaagsan oo lagu gaari karo in qof kasta uu ka faa'iidaysto awoodiisa si uu uga qaybqaato horumarka bulshada.

Dhalinyarada Soomaaliyeed waxa ay la kulmaan xaalado adag oo kala duwan iyo fursado ku xiran xaaladdahooda dhaqan-dhaqaale, kartidooda iyo deegaankooda. Iyadoo siyaasadani ay awooda saari doonto diyaarinta barnaamij hawleed iyo talaabooyin lama huraan ah in la qaado, si loo horumariyo dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 15 - 40 sano jirka:

1.5. Siyaasadda iyo Saameynta Shuruucda kale

Siyaasadan Qaran ee Dhalinyarada Soomaaliyeed waxa saameyn ku leh Shuruuco iyo qaraaro caalami ah iyo kuwo qaranka u gaar ah sida –

- **Dastuurka KMG ah ee Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** – dastuurka dalku waxa uu dhigayaa qaab dhismeedka siyaasadeed iyo kan maamul ee dawlada Fadaraalka Soomaaliya, sidoo kale waxa uu xusayaa xuquuqda, xoriyada iyo waajibaadka muwadiniinta (Si cad Xuquuqda Dhallinyarada uguma qeexna Cutubka labaad ee Dastuurka KMG).

- **Baaqa Caalamiga ee Xuquuqda Aadamaha** – waa baaq sheegaya xuquuqda aadamaha ee la isla qaatay, dhalinyaraduna waxay ka mid yihiin aadamahaa xuquuqdooda halkaa lagu sheegay.

- **Siyaasada Waxbarashada Qaranka Soomaaliya**
- **Sharciga Xuquuqda Caruurta –**
- **Siyaasada Qaran ee Gender-ka**

Marka labaad, Siyaasaddan Horumarinta Dhallinyarada Qaranka waxa ay ka tarjumaysaa taabagalinta baaqyada iyo heshiisyada caalamiga ah ee lagu dhiirigalinayo sameynta siyaasado dhalinyaro maadaama ay yihiin xooga dihin ee bulsho kasta.

Qoraalada ay xiganayso siyaasadan qaran ayaa waxaa ka mid ah: -

- **Qaraarkii Siyaasadaha iyo Barnaamijyada Dhalinyarada ee Lisbon** – waxa ay Wasiirada Wasaaradaha Dhalinyarada ee Dunida soo saareen qaraar shir uga qabsoomay magaalada Lisbon ee dalka Boortaqiiska kaas oo lagu go'aamiyay samaynta siyaasado Qaran oo dhalinyaro kuwaas oo ah kuwo balaaran oo dhinacyo badan taabanaya.

- **Heshiiska Afrika ee Dhalinyarada (2006)** - war qoraal ah oo kasoo baxay Midowga Afrika oo sheegayay baahida loo qabo in dal kasta oo Afrikaan ah uu yeesho Siyaasad Dhallinyaro si ay u horumariyaan Siyaasadaha Qaran ee Dhalinyarada iyo waxyaabaha lagama maarmaanka ah. Qoraalkani waxaa sidoo kale lagu muujiyey xaquuqaha iyo waajibaadka dadka dhallinyarada ah.

- **Heshiiska Xuquuqda Caruurta (HXC)** – heshiiskani waa mid galay taariikhda oo dunidu isla qaadatay. HXC waa heshiis caalami ah oo gorgortana aan la galin. Waxa uu heshiiskani tilmaamayaa xuquuqda caruurta ee aasaasiga ah – faquuq la'aan. Waxa ay diirada saaraysaa xuquuqda badbaadada caruurta; horumarintooda; ka ilaalinta wixii dhibaato ku ah, xad-gudubyada ka dhanka ah iyo ka faa'idaysigooda; iyo in ay si buuxda uga qayb galaan dhaqanka qoyska iyo nolosha bulshada.

- **Ujeedooyinka Horumar Waara "Sustainable Development Goals" (SDG's)** – 25kii September 2015, dawladaha caalamku waxay isla qaateen qodobo dhowr ah si loo ciribtiro saboolnimada, badbaadinta dhulka, loona hubiyo horumarinta dhamaan dhinacyada kala duwan ee nolosha 15ka sanno ee soo socda. Ujeedooyinkan waxa ay ku aadanyihiin arrimo muhiim ah oo ay Siyaasadani ka jawaabayso sida dhiirigalinta cadaalada, tayaynta iyo Dhiirigalinta waxbarasho joogta ah, daryeelka Caafimaadka, ciribtirka saboolnimada, badbaadada deegaanka bad, berri iyo Hawo.

2. HIGSIGA, MABAADII'DA & ISTARAATAJIYADAHA SIYAASADDA

2.1. Hiigsiga Siyaasadda

Qoraalka hoos ku qoran waa masxuulka la filayo in bulshada Soomaaliya iyo da'yarteedu gaaraan marka la fuliyo Siyaasada Dhalinyarada Qaranka:

> *"Gaadhista bulshada Soomaaliya oo dhammaan dhalinyarada rag iyo dumar ay ku jiraan dadka baahiyaha gaarka ah qaba laga haqabtiray baahidoodii aasaasiga ahaa isla markaana ah kuwo isku kalsoon una hogaansan nabadaynta iyo horumarka dalkooda, diintooda suuban, iyo dhaqankooda. Dhalinyarada oo xuquuqdooda la ilaaliyey loona diyaariyey fursado loo siman yahay si ay uga qaybgalaan geedi socodka dimuqraadiyada ugana faa'idaystaan adeegyada faraha badan ee ciyaaraha (Isboortiga), bulshada, waxbarashada iyo shaqooyin ay helaan".*

2.2. Mabaadii'da Hagidda Siyaasadda

Mabaadiida soo socota waxa ay muujinayaan qiyamka asaasiga ah ee ay ka duulayaan ujeedooyinka siyaasada dhalinyarada iyo talaabooyinka lama huranka ah. Waxaana waajib ah in lagu dhaqmo, la ilaaliyo oo loo hogaansanaado mabaa'didaasi si looga dhabeeyo higsiga Siyaasada Dhalinyarada Qaranka. Waxayna mabaadi'daasi yihiin:

- Iimaanka Islaamka (Caqiidada)
- Madaxbanaanida Soomaliya (dawladnimada)
- Ixtiraamka sharafta, hidaha iyo dhaqanka Soomaaliya
- Maamul wanaagga
- Ka qaybgalka dhalinyarada ee horumarinta dalka
- Dhiirigalinta iyo awoodeynta dhalinyarada soomaaliyeed
- Ilaanlinta deegaanka bad, berri iyo hawada.
- Iskaashi iyo ka qaybgal balaaran oo ku aadan horumarinta dhalinyarada

2.3. Bartilmaameedka Siyaasadda

Bartilmaameedka guud ee siyaasada dhalinyaradu waa in kor loo qaado awoodaha dhalinyarada iyada oo loo kuurglayo baahiyahooda, sida la isaga kaashanayo wax ka qabadkooda, iyo diyaarinta barnaamij balaadhan si loo mideeyo oo si wanaagsan loogu maamulo adeegyada, fursadaha, taageerada ay fidinayaan hay'adaha kala duwan ee ku hawlan horumarinta dhalinyarada si loo gaadho maxsuul wanaagsan oo taabanaya dhinacyada bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasada. Hadaba siyaasadani waxay leedahay todoba ujeedo oo gaar ah:

a) In la hubiyo iskudubaridka iyo isla jaanqaadka siyaasadaha kala duwan si ay ugu adeegaan dhalinyarada.
b) Xoojinta awooda hay'adaha horumarineed si loo hubiyo iskaashiga iyo wadashaqayntooda si maxsuul la taaban karo uga soo baxo adeegyada ay dhalinyarada u qabtaan;

c) Xoojinta iyo dhiirigalinta dhalinyarada si ay u noqdaan kuwo masuuliyad iska saara tayanta noloshooda si ay u gaadhaan horumar ay ku hantaan waajibaadkooda sida ugu haboon;
d) Adkaynta dareenka muwaadinimo ee dhalinyarada si ay u noqdaan mustaqbal waayeel masuuliyad iska saara qoysaskooda iyo dadka kaleba;
e) Taageerida kooxaha dhalinyarada ah ee fiiro gaar ah u baahan si loo hubiyo in ay heleen fursado u sahlaya ka qaybgalka horumarinta dalkooda;
f) U istaagida isku duubni qaran, iyada oo la tixgalinyo kala duwanaanshaha xaaladaha iyo baahiyaha loona diyaarinayo fursado ka jawaaba arrintan;
g) In la baro dhalinyarada wadaniyada iyada oo la dhiirigalinayo ka qaybgal muuqda oo firfircoon hawlaha iyo mashaariicda kala duwan ee dib-u-dhiska dalka.

3. MAWDUUCYADA MUDNAANTA LEH & ISTARAATAJIYADAHA WAXQABAD

Siyaasaddan Dhallinyarada Qaranka ee Soomaaliya waxa ay noqon doontaa mid hagta jihada iyo heykal waxqabadka dhammaan hay'adaha ay ka go'antahay horumarinta dhallinyarada. Dhalinyarada Soomaaliya ayaa la kulma caqabado aad u weyn, si loo helo xal meelaha ay siyaasada Dhalinyarada Qaranku ay bartilmaameed uga dhgayso waxqabadyada ayaa ah:

1. Xoojinta Waxbarashada iyo Tababarada Xirfadaha,
2. Shaqo Abuurista, Ka qaybgelinta dhaqaalaha iyo yareynta Saboolnimada
3. Nabadda iyo Nabadgelyada
4. Caafimaadka iyo Tayaynta Nolosha
5. Ilaalinta iyo Badbaadinta Dhalinyarada
6. Kor u qaadista Ka qaybgalinta dhalinyarada iyo Muwaadinimada
7. Garsoorka iyo Dhalinyarada sharciga khilaafta

Istaraajiyadaha dhamaan arrimahan mudnaanta leh ee kor ku xusan iyo talaabooyinka mahuraanka ah in la qaado ayaan ku xusi doonaa qormoorinka hoos ku qoran.

3.1. Kor U Qaadida Waxbarashada iyo Xirfadaha

3.1.1. Dulmar

Tan iyo kolkii burburku ka dhacay dalka 1991 waxaa hoos u dhac weyni ku yimi waxbarashadii dalka xag tiro iyo xag tayo maadaama gebi ahaanba ay meesha ka baxday dawladdii dhexe ee maamulka dalka hoggaaminaysay oo hormuudka u ahayd adeegyada bulshada.

Intii ka dambeesay burburkii dawladdi dhexe ee soomaaliya waxaa ku dhacay dhammaan dhallinyarada waddanka waxbarasho la'aan baahsan oo ay gayeysiiyeen dhibaatooyinkaas colaadeed oo ay kala siman yihiin guud ahaan bulshada soomaalida ah. Arrinta waxbarashadu waa laba arrimood oo is-huwan ah. Tan kowaad waa iyada oo carruur iyo dhalinyaro badan oo Soomaaliya ay waayeen waxbarasho maadaama colaado iyo qax dheceen qof walbana uu meel u cararay iyo tan labaad oo ah iyadoo hay'adihii waxbarashadu la dumeen dawladdii gacanta ku haysay ee dhacday 1991. Waa arrintan waxbarasho la'aanta ah tan saamaynta xoogga leh yeelatay maadaama malaayiin carruur ahi ay ku dhacday waxbarasho la'aan ayna sidaa ku weynaadeen iyagoo aan waxna qorin waxna akhriyin.

Dhibaatada ugu weyn ee waxbarasha la'aantu keentay waa ammaan-darro maadaama dhalinyarada badankeed eey noqdeen kuwo si sahlan loo duufsan karo, si guracana loo saameeyn karo hab fikirkooda.

Waxaa iyana jirta in nidaamkii tacliimeed ee dhallinyarada Soomaaliya ka baaba'ay nidaamki lagu beddeli lahaa aan la qorshayn si buuxdana loogu hawl-gelin taasoo ay sababeen xaaladaha dalka ka jira ee amaan-darradu kow ka tahay.

Arrimaha gun dhigga u ah arrintanna waxa ka mid ah:

- Tayada macalinka iyo mushaharka oo liita
- Tayada Manhajka waxbarasho oo liita iyo Manhaj mideysan oo jirin
- Fursadaha waxbarasho ee dhallinyarada reer miyiga ah oo yar

- Baahida cusboonaysiinta ama kor u qaadista Agabka waxbarasho
- Helitaanka waxbarashada ee dhalinyarada Baahiyaha Gaarka qaba
- Dugsiyada iyo macalimiinta farsamada gacanta oo yar
- Maalgashiga waxbarashada oo hooseeya.
- Heerka is qorida waxbarashada dadban oo aan jirin (Seeraale)
- Talo-bixinta waxbarashada iyo shaqooyinka oo aan jirin

3.1.2. Ujeeddada 1aad ee Istaraatajiga ah:

KOR U QAADISTA HELITAANKA WAXBARASHADA IYO KA QAYBGALINTA ARDAYDA HORUMARKA WAXBARASHADA IYADA OO LAGA DHIGAYO WAXBARASHADA MID TAYO LEH OO LA WADA HELI KARO.

Talaabooyinka lama huraanka ah ee la qaadayo:

1. In la mideeyo manhajka ay wax ku baraan dugsiyada gaarka loo leeyahay iyo kuwa dawladda ah lana tayeeyo;
2. In kor loo qaado lana kobciyo tayada aqooneed ee barayaasha dugsiyada iyo Jaamacadaha, tababarro macalinimo/barenimo loo fidiyo si loo helo aqoonyahan da'yar ah oo aad uga dhisan xagga tacliinta.
3. In la kordhiyo tiradda macalimiinta haysta shahaado macalinimo
4. In dib loo hagaajiyo dugsiyadii iyo kuliyadihii waxbarasho ee hore u jiray kuwo cusubna la dhiso.

5. Kor u qaadista waxbarashada iyada oo la kordhinayo miisaaniyada ay dawladu ku bixiso mushaharka macalimiinta.
6. In la hubiyo in dhamaan dhalinyarada nugul (Sabool, barakacayaal, dadka lagu liido farsamada gacanta iyo Agoonta) ay helaan waxbarashada ay u baahanyihiin
7. Kor u qaadista fursadaha aqoon kororsi ee macalimiinta
8. Dhiirigalinta waxbarashada ee dhalinyarada naafada ah iyo ka taageerida baahida u sahlaya ardaynimadooda.
9. Ilaalinta tayada waxbarashada dugsiyada gaarka loo leeyahay
10. Sameynta dugsiyo ardaydu u hooyato (Boarding) iyo kuwo guurguura si loo hubiyo in dhalinyarada reer guuraaga ahi ay helaan waxbarashada aasaasiga ah.
11. In la sameeyo dugsiyo u gaar ah caruurta baahida gaarka ah qaba sida caruurta aan xiskoodu dhamayn.
12. In la sameeyo barnaamijyo wacyigalineed si waalidku u ogaado muhiimada iyo faa'idooyinka waxbarashada.
13. In kab dhaqaale oo hor leh loo raadsho sidii tacliinta looga dhigi lahaa mid lacag la'aan ah oo dawladdu dammaanad qaaddo iyadoo la kaashanaysa bulshada caalamka sida Bangiga adduunka, kan Islaamka, Qaramada Midoobay, Jaamacadda Carabta iyo ururada kale ee caalamiga ah ee danaynaya in ay soomaaliya arrintan ka taageeraan.
14. In kor loo qaado barnaamijyo taageeraya in gabdhaha eey aadaan waxbarashada dugsiyada sare.
15. In la curiyo manhaj u gaar barashada muwaadinimada oo ku jaan go'an heerarka wax barasho qaran

1. **3.1.3 Ujeedada 2aad ee Istaraatajiga ah:**

DHIIRRIGELINTA WAXBARASHADA DADBAN EE DHALINYARADA IYO KU FIDINTA WAXBARASHADA DHAMAAN GOBOLADA SOOMAALIYA

Tallaabooyinka lama huraanka ah ee la qaadayo:

1. In la sameeyo manhaj tayo leh oo waxbarashada dadban (Seeraale)
2. Hirgalinta qaab-dhismeed waxbarashada dadban (Seeraale) ee heer qaran ah
3. Wacyigalin balaadhan oo ku aadan WBD (Seeraale)
4. Tayaynta tababarada macalimiinta iyo dugsiyada WBD (Seeraale)
5. Ku dhiirrigelinta bulshada miyiga in ay ka faa'idaystaan dugsiyada WBD (Seeraale)

3.1.4 Ujeedada 3aad ee Istaraatajiga ah:

BALAADHINTA FURSADAHA DUGSIYADA WAXBARASHADA IYO TABABARADA FARSAMADA GACANTA (WTFG).

Tallaabooyinka lama huraanka ah ee la qaadayo:

1. In la ballaadhiyo dugsiyada bixiya tababarada farsamada gacanta ee Soomaaliya
2. In la dejiyo qiyaasta sanadkiiba la rabo in la soo saaro xirfadleyaal dhalinyaro ah lagana taageero sidii loogu maalgelin lahaa fursado ganacsi oo la xariira farsamooyinka eey barteen
3. In ganacsatada lagu dhiirigaliyo sidii ay u sameysan lahaayeen dugsiyo WTFG.

4. In laga shaqeeyo sidii la iskugu xidhi lahaa dugsiyada WTFG iyo baahida shaqaale ee suuqa ka jirta.
5. In loo raadiyo taageero qalab iyo agabka muhiimka ah ee ay u baahan yihiin dugsiyada WTFG si ay usoo saari karaan farsamo yaqaano tayo leh
6. In la kordhiyo tirade iyo tayada xirfadaha ay bixiyaan dugsiyada WTFG.

3.2. Kor U Qaadida Shaqo Abuuridda, Dhaqaalaha iyo Yareynta Saboolnimada

3.2.1. Dulmar

Saboolnimada baahsan ee Soomaliya ka jirta waxaa sabab u ah shaqa la'aanta. Natiijooyinki ka soo baxay kulumo wada tashi waxaa ka mid ah in shaqa la'aantu tahay dhibaatada ugu weyn ee Somaliya. Wixi ka horeeyay 1991, dwolada ayaa ahayd shaqa bixiyaha ugu badan. Sidaas awgeed bur burki dawladii dhexe waxaa lala kowsaday shaqa la'aan baahsan taasoo marba marka ka sii danbeeya cirka isku sii shareeresay. Shaqo la'aanta baahsan ee gaartay ilaa 80% waxeey sababtay dhalinyarada in eey tahriibaan si eey u helaan fursado nololeed oo aanay ka heli Karin dalkooda. Baahinta fursadaha shaqo abuurista waa baahida ugu badan ee ka yimaada dhalinyarada waqti la waday la tashiga.

Arrimaha gun dhigga u ah arrintanna waxaa ka mid ah:

- Haykal cayiman oo shaqo abuur iyo shaqaaleyn oo aanay dawladu dejin
- Xeerarkii shaqada iyo shaqaalaha oo aan jirin
- Eexda iyo Musuqmaasuqa

- Goobo la-talinta dhalinyarada ee arrimaha shaqada oo aan jirin
- Fursado dhakhli abuur oo aan jirin
- Xirfadaha iyo fursadaha tababaradda oo xaddidan
- Heerka sicir bararka oo aad u sareeya
- Abaabulka iyo dhiirigalinta maalgashiga qurbe-joogta iyo ganacsatada oo liita

3.2.2. Ujeedadda 1aad ee Istaraatajiga ah:

DHIIRRIGELINTA DIYAARINTA XEERKII SHAQAALAHA.

Tallaaboovinka lama huraanka ah ee la qaadayo:

1. Diyaarinta iyo dhaqangelinta xeerka shaqaalaha
2. Ku dhiirrigelinta ganacsatada, in ay ka hawlgalaan shaqaaleynta Dhalinyarada
3. U ololeynta shaqaaleyn ka fayow eexasho iyo musuqmaasuq

3.2.3. Ujeedadda 2nd ee Istaraatajiga ah:

IN DAWLADU AY HOGAANKA U QABATO SHAQO ABUURKA DHALINYARADA.

Tallaaboovinka lama huraanka ah ee la qaadayo:

1. Dejinta qorshe shaqa abuur oo heer qaran ah oo sannadle ah
2. U sinnaanta fursadaha shaqada
3. Suuqa shaqa abuurka ee xorta ah waa in uu mudnaan siiya shaqo gelinta dhallinyarada.

4. Waa in dhalinyarada shaqooyin laga siiyaa dhammaan hay'adaha dawladda iyo ciidamada oo aad ugu baahan xoog xusub oo Nabada iyo Nabadgalyada dalka qayb ka qaata.
5. Waa in hay'adda shaqaalaha ravidka ah yeelato madax banaani iyo awood eey ku xaqiijiso dejinta habraaca shaqa abuur, tababarro xirfadeed, dallacaad iyo xaqsiin
6. Waa in dhalinyarada loo sameeyo dakhli abuur (income generation).
7. Waa in hay'adaha caalamiga ah iyo Qaramada Midoobayna ay door weyn ka qaataan shaqaaleynta dhalinyarada aqoonta leh isla markaana ay joojiyaan dadka ajnebiga ah ee ay shaqo walba dibedda uga keenayaan.
8. Waa in dhalinyarada loo oggolaadaa inay ka mid noqdaan wasiirada, xildhibaanada, agaasimayaasha, safiirada, iyo la taliyeyaasha madaxda dalka.

3.2.4. Ujeedadda 3aad ee Istaraatajiga ah:

DHIIRRIGELINTA IN DHALLINYARADU AY SAMEYSTAAN SHAQOOYIN IYAGU AY LEEYIHIIN.

Tallaabooyinka lama huraanka ah ee la qaadayo:

1. Horumarinta barnaamijyada wacyigalinta shaqada iyo shaqaaleynta,
2. Hirgalinta tababarro ku habboon suuqyada shaqada,
3. Kor-u qaadista dugsiyada farsamada gacanta iyo xirfadaha
4. Samaynta barnaamijyo maalgelin (Amaah ay ganacsiyo ku bilaabaan dhalinyaraddu);

3.2.5 Ujeedadda 4aad ee Istaraatajiga ah:

ISKU-XIDHKA SUUQYADDA SHAQADA IYO GOOBAHA WAXBARASHADA IYO TABABARRADA

Tallaabooyinka lama huraanka ah ee la qaadayo:

1. In la sameeyo waxbarasho ku salaysan baahida dalka kajira
2. Kala talinta dhalinyarada arrimaha shaqo
3. Isku xidhka loo shaqeeyayaasha iyo goobaha waxbarasho
4. In cilmi baadhisyo joogto ah lagu sameeyo shaqaalaha loo baahan doono si da'yartu u doortaan barashada aqoonta aadka loogu baahan yahay

3.3. Nabadda iyo Nabadgalyada

3.3.1 Dulmar

Dhallinyaradu waxay fahamsanyihiin baahida aasaasiga ah ee loo qabo in Soomaaliya nabad iyo nabadgalyo hesho, waxayna aad ugu hanqal taagayaan inay noqdaan dad si laxaad leh uga qayb qaata dadaalka nabadaynta.

Marka xagga nabadgalyada dhalinyarada laga hadlayo waxaan shaki ku jirin in qaar badan oo ka mid ah dhalinta maskaxda laga xaday loona adeegsado falal amni darro ah oo ay soo abaabulaan kooxo dhalinyarada baahideeda ka faa'idaysta.

Arrimaha gun dhigga u ah arrintanna waxa ka mid ah:

- Fursadaha shaqaalaynta oo kooban
- Duufsiga dhalinyarada

- Xag-jirnimada iyo argagixisonimada
- Sicir bararka aad u sareeya
- Isticmaalka daroogooyinka (Muqaadaraadka)
- Dhul isku qabsiga
- Dagaal beeleedka
- Daaqsin iyo biyo ku dirirka
- Awood ku loolanka siyaasiyiinta
- Hab dhaqanka bulshada iyo takoorka

3.3.2. Ujeedada 1 aad ee istaraatajiga ah

FURSAD ABUURIDDA DHALLINYARADA SI AY UGA QAYB QAATAAN NABADAYNTA IYO XASILINTA.

Tallaabooyinka ma huraanka ah ee la qaadayo:

1. Ka qayb galinta dhalinyarada hanaanka, jaangoynta iyo hirgalinta barnaamijyada nabad adkayta.
2. Dhaqan celinta dhallinyarada u banbaxa kuna dhiirada sharci diidnimada.
3. Ka qayb galinta dhalinyarada ololaha ka hortagga xag jirnimada iyo argagixisonimada
4. Sameynta manhaj dugsi oo dhigaya arimaha nabadda iyo nabadgalyada
5. in loo sameeyo muwaadiniinta kaarar aqoonsi si nabad galyada loo sugo
6. Ku dhiirinta dhalinyarada in ay si buuxda u ilaalyaan sharciga iyo kala dambaynta iyo inay gacan siyaan hey'adaha sharciga

7. Suurtagalinta in dhalinyaradu helaan tababarro la xidhiidha nabadda iyo nabad galyada iyo maaraynta khilaafaadka
8. Tixgelinta barakacayaasha gudaha dalka
9. Dhalinta oo laga qayb geliyo go'aan qaadashada
10. in la dardar galiyo diiwaan galinta hubka fudud
11. in la dhiiri galiyo ka qayb galka dhalinyarada ee nabad ilaalinta bulshada

3.4 Horumarinta iyo Baahinta Fursadaha Helitaanka Adeegyada Caafimaadka

3.4.1 Dulmar

In kasta oo horumarinta adeegga caafimaadka Soomaaliya ay tahay waajib qaran, haddana dhallinyaradu waa kuwa nacfiga uugu badan ka helaya. Sidaas awgeed waxaa dhallinyarada la gudboon in aaney horumarinta adeegga caafimaadka ka eegin oo keliya dhinaca faa'iidada ugu jirta ee ay noqdaan kuwa ku bararugsan in ay tahay kuwa oo isla markaas saaranyahay waajibka ugu badan. Siyaasadda caafimaad ee taabba galka noqon karta waa midda tix-gelisa baahida qaybaha dhallinyarada xaaladaha gaarka ah ku sugan.

Dhibaatooyinka caafimaad ee sida weyn u kala dhantaala awoodaha jireed iyo hal-abuurka ee dhallinyarada waa badanyihiin waxaase ugu waxyeello badan:

- Cudurrada faafa (Comunicable deseases);
- Cudurada Dilaaga ah (HIV/Aids)
- Dhimashada Dhallanka iyo Hooyada;

- Cudurrada ka Dhasha Biyaha aan Cabbidda ku Habboonayn iyo Nadaafad Xumada Magaalooyinka;
- Nafaqadarrada;
- Cudurrada Dhimirka;

Arrimaha gun dhigga u ah arrintanna waxa ka mid ah:

- Adeegga Caafimaadka magaalooyinka oo kooban iyo meelaha miyiga oo aanu ka jirin
- Heerka saboolnimada oo sarreeya iyo abaaraha soo noq-noqda
- Adeegyada u gaarka dadka ku dhasha xaalado gaar ah iyo kuwa ay loo soo gudboonaadaan oo aan jirin;
- Wacyigelinta joojinta Muqaadaraadka iyo dhammaan maandooriyayaasha oo hooseeya
- Adeegga asaasiga iyo wacyigelinta cafimaadka oo kooban tayadooduna ay hoosayso
- Xarumaha daaweynta iyo wacyigalinta cudurka HIV/AIDS oo yar iyo Takoorka lagu hayo dadka la nool xanuunka HIV/AIDS
- Qiyaasta nafaqa darrada oo sareysa qaas ahaan gabdhaha dhalinyarada ah ee uurka leh iyo kuwa nuujiya;
- Tacadiyada loo geysto gabdhaha sida kufsiga, jirdilka iyo gudniinka fircooniga ah
- Adeegyada caafimaad oo ku yar bulshooyinka reer guuraga ah iyo kuwa ku barakacay wadanka gudihiisa
- Dhalinyarada derbi jiifka ah oo batay
- Dadka bartay cilmiga caafimaadka oo yar tiro ahaan, gaar ahaan kuwa leh takhasusyo gaar ah.
- Nadaafada iyo Fayodhawrka oo aad u hooseeya

- Goobaha lagu jimicsado oo aad u yar
- Goobo la isku wargeliyo macluumaadka la xariira caafimaadka oo aan jirin
- Qoondada miisaaniyadda ee la xariira Kharashaadka iyo maalgelinta caafimaadka oo aad u yar.

3.4.2 Ujeedada 1aad ee Istaraatajihga ah

AWOODSIINTA DHALINYARADA SIDII AY ISKU WEYDAARSAN LAHAAYEEN XOGTA, TALOOYINKA LA XIDHIIDHA WAXBARASHADA IYO ADEEGYADA CAAFIMAAD EE DHALINYARTU U BAAHAN TAHAY.

Tallaabooyinka ma huraanka ah ee la gaadayo:

1. In loo abuuro dhalinyarada goobo ay ka heli karaan adeeg caafimaad oo ay xogta, waxbrashada iyo talooyinkaba ay isku dhaafsan karaan, sida in xog laga siiyo Xanuunada galmada lagu kala qaado iyo muqaadaraadka.
2. In Gabdhaha dhalinyarada ee uurka leh eey helaan wacyigelin caafimaad iyo goobo tayo leh eey ku dhalaan
3. In la hormariyo adeegyada caafimaad ee dhallinyarada baahiyada gaarka ah qabo
4. In la hormariyo adeegyada caafimaad ee dhallinyarada reer guuraga ah
5. In kor loo qaado wacyigelinta la xidhiidha sidii hoos loogu dhigi lahaa tacadiyada lagu la kaco haweenka iyo caruurta sida gudniinka fircooniga, jirdilka iyo guurka qasabka ah
6. In loo abuuro dhalinyarada iskuulada iyo kuwa kale ee bulshada ka mid ka ah goobo ay ku jimicsadaan

7. In lagu daro manhajka qaranka mawduucyo khuseeya qaababka caafimaad lagu ilaaliyo
8. In la hubiiyo shaqaalaynta hawl wadeenada ka shaqeeya goobaha caafimaamaadka iyo wasaarada caafimaadkaba.
9. Cisbitaalada iyo goobaha caafimaadka ee dawliga ah waa in muhiimad la siiyaa siiba wakhtiyada shaqada sida goobaha gaarka loo leeyahay oo kale.
10. Xeerka tayada iyo dabagalka dawooyinka waa in la aas aasaa.
11. In la kordhiyo wacyigelinta xanuunka HIV/AIDS sidii looga hortegi lahaa iyo sidii loo dawayn lahaaba

3.4.3 Ujeedada2aad ee Istaraatajiga ah

XAKAYMAYNTA IYO HOOS U DHIGIDDA XANUUNKA HIV/AIDS IYO SAAMANAYNTA UU DHALINYARADA KU LEEYAHAY.

Tallaabooyinka ma huraanka ah ee la qaadayo:

1. In si buuxda loo aqbalo lana taageero khubarada Hay'adda qaramada midoobay u qaabilsan xanuunka HIV/AIDSka (UNAIDS) iyo in la xoojiyo Hay'adaha xakamaynta HIV/AIDS ka ee Somalia.
2. Inay kulmaan markasta hay'adaha ay khusayso xakamaynta xanuunka HIV/AIDS si ay u wadaagan xogoha ku saabsan xanuunkaas.
3. In la bartilmaansado dadka Khatarta ugu jira xanuunka, lana xoojiyo ka hortaga iyo daawaynta xanuunka HIV/AIDS ka.
4. In xirfadaha hawlwadeennada adeegga caafimaadka kor loo qaad.

5. In olole laga sameeyo sidii loo yarayn lahaa takoorka haysta dadka qaba xanuunka HIV/AIDSka.
6. In dib u qaabayn lagu sameeyo lana xoojiyo xeerka ka hortaga takoorka
7. In la xoojiyo wacyigelinta HIV/AIDSka ee haayadaha maxalliga ah iyo kuwa caalamiga ahba ee ka shaqeeya HIV/AIDSka, dawlada hoose, siyaasiyiinta iyo culimada, sidii looga hortegi lahaa loona daweyn lahaa xanuunkaas.
8. In la sameeyo manhaj iskuulada ama goobaha xirfadaha lagu barto oo khuseeya HIV/AIDSka
9. In la xoojiyo sidii dhalinyarada aqoon ku filan looga siin lahaa xanuunka HIV/AIDSka iyo in loo dhiso shabakado isku xidha oo ay aqoontaa ku kala qaataan.
10. In la fududeeyo lana dhiirigeliyo guurka
11. In la baro dhalinyarada akhlaaqda fiican ee islaamka

3.4.4 Ujeedada 3aad ee Istaraatajiga ah

OLOLAYAAL LA DAGAALLANKA MAANDOORIYAASHA (MUQAADARAADKA).

Tallaabooyinka ma huraanka ah ee la qaadayo:

1. In la isticmaalo olole ay ka qayb qaataan hogaamiyayaasha diinta, dhaqanka iyo dhalinyarada sidii looga wacyigelin lahaa dhalinyarada khataraha balwadaha.
2. In loo hadlo ama loo ololeeyo in Baarlamaanku qaraarro ka soo saaro xakamaynta maandooriyeyaasha.
3. In goobaha ay ku kulanto bulshadu laga mamnuuco maandooriyeyaasha.
4. In la sameeyo goobo lagu dhaqan–celiyo dhallinyarada ay maandooriyuhu diloodeen.

3.5. Badbaadinta Dhallinyarada

3.5.1 Dulmar

Soomaaliya ayaa ah dal ay dhalinyaradiisu u bareereen inay haajiraan saboolnimo iyo shaqa la'aan baahsan oo dalka ka jirta awgood. Inta badan waxay naftooda ku biimeeyaan tahriib in badan oo ka mid ahina waxay ku naf waayaan ayaga oo aan gaarin hadafkii ay u tahriibeen. Inta aan loo gudbin wax ka qabashada tahriibta waxaa loo baahanyahay in la guudmaro taariikh ahaan isaga kala gooshidda Soomaaliya iyo adduunku. In kasta oo Soomaalidu leedahay taariikh dheer oo badmaaxnimo haddana inta badan Soomaliya ayey ahaan jirtey meesha dad dalal kale ka soo haajirey ay si rasmiya ugu negaadaaan muddo ka dibna ay Soomaaliyoobaan dhaqan ahaan, diin ahaan iyo macaamil ahaanba. Safarrada Soomaalidu ku aadaan dibadda inta badan waxay ahaan jireen kuwo looga gol leeeyahay aqoon raadsi iyo ganacsi marka ay aqoonta heer ka gaaraanna waa ay soo noqon jireen si ay dadkooda u tacliimiyaan. Tusaalooyinkii ugu dmbeeyey haddaan soo qaadanno socdaalladii Soomaalida ugu badanaa waxay ahaayeen kuwa shaqa raadis ah mana ahayn kuwa ka tallabsan dalalka khaliijka carabta oo u baahday shaqaale farabadan ka dib markii dhaqaalihii batroolka ay ku baraareen laga bilaabo lixdamaadkii qarnigii tegey. Dalal badan oo dunida ayaa dawladda Soomaaliya u fidiyey deeqo waxbarasho dhammaan ardadii fursadahaas helayna waxay ku soo noqdeen Soomaaliya markii mid waliba dhammaystay wax-barashadiisii si uu uga qayb-qaato dhismaha dalka mustaqbalkiisa iyo kan qoyskiisa uu meeleeyo. Tusaalayaasha kale ee aan soo xusi karno waxaa ka mid ah mid kasta oo ka mid ahaa badmaaxyadii Soomaaliyeed wuxuu ku soo noqday deegaankii uu ku dhashay si uu dalka gudihiisa uga

abaabusho qoys iyo dhaqaale asaga oo ka faa'iidaysanaya kaydkii lacag ee tabcay intii uu badmaaxa ahaa. Waxaa kaloo xusid mudan in dhallin fara badan oo Yaman wax ku bartay gaar ahaan Cadan ay soo aadeen Soomaaliya markii la hantay gobonimadii Qaran 1960kii ayna dib gadaal ugu noqon. Guud ahaan Soomaali qaxooti ku noqota dalal kale waa xaalad la kowsatay dhiciddii dawladdii qaran 1991kii waxaana qasbay badbaadadii nafta oo ciriiri gashay. Sidaas awgeed firxadkii ugu horreeyey wuxuu ahaa mid looga gol-leeyahay magan gelyo ku tala galkiisuna ahaa in dalka dib loogu soo noqon doono marka ay soo noqoto xasilloonida dalka oo la filayey in aaney muddo saas u dheer qaadan doonin. Firxadkii ugu horreeyey ma ahayn mid ka dhashay go'aano ay gaareen dad dalkooda ka quustay sida hadda jirta ee waxay u badnaayeen qoysas isugu jira waayeel tabar gab ah mustaqbal waxbarashona dhaafay iyo caruur aan go'aan lahayn ujeeddadoodu ugu weynina ay tahay in ay helaan magan gelyo. Hal-Ku-Dhigga heestii ay fannanadda Nakruumo kaga qayb-gashay shirki dib-u-heshiinta Soomaaliya ee lagu qabtay. Carta sannadkii 2000 oo ahaa **"Dib Baa Loo Noqonayaa"** wuxuu si dhab ah uga tarjumayey wixii ugu weynaa ee ay ku naalloonayeen qurba joogtii Soomaaliya ee xilligaas oo ahayd **"Waxaa nasiib leh qofkii mar uun Sooamaaliya ku noqda".**

Halista la soo gudboonaatay badbaada nafta dhallinyarada Soomaaliya ma aha in laga dayo sababo ay isla-dhallinyarado leeyihiin ee waa in loo arko natiijooyin ka dhashay Xaaladaha qallafsan oo la kowsaday oofsashadii dawladnimda isna biirsanayey marba marka ka dambeeya oo ay daahdo dib-u-hanashada dawladnimadu. Dadaal kasta oo ku aaddan wax ka qabashada natiijooyinka mira dhal wax ku oola lagama gaari

doono haddii la abbaarin sababaha saldhigga u ah oo ay ka soo fufayaan.

Siyaasadda qaran ee Dhallinyaradu ee ku aaddaan badbaadinta dhallinyarada Soomaaliya waxaa tiir-dhexaad u ah isla-xiriirinta sababta iyo ifafaalayaasha ka dhasha. Majaraha ka sabatabixinta dhallinyarada Soomaaliya masiibooyinkaas waa amabaqaadidda hanashada iyo taabba gelinta dawlad Qaran. Dib-u-hanashada dawladnimadu wuxuu dhallinta iyo shacabka ku abuurayaa in ay dalkooda ku kalsoonaadaan. In kasta oo dadaallada badbaadinta dhallinyaradu u baahanayaan iskaashi iyo ka wada-qaybgal ballaaran haddana mar walba Xukuumadda JFS ayaa iska leh kaalinta hoggaaminta.

Dejinta Siyaasadda Qaran ee Dhalliyarada waxay ka marag kacaysaa in tubtii dib-u-hanashada dawlad qaran oo ka talisa dalka Soomaaliya oo dhan shacabka oo dhammina u egmaday in ay keligeed adeegsato awoodda talinta. Dejinta Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada waxay ka turjuamaysaa in Xukuumadda JFS ku qanacsantahay in awoodda dhidibba u aasasiddu dalwad qaran ay ku jirto dhallinyarada. Sidaas awgeed badbaadinta dhallinyaradu waa tiir-dhexaadka Siyaasadda Qaaran ee Dhalliyarada. Siyaasadda u gaarka ah badbaadinta dhallinyaradu waxay u degsantahay saddex heer oo iskaabaya isla markaasna qayb ka ah siyaasadda guud. Heerka koowaad, waa abbaaridda ifafaalayaasha ugu cawaaqib xun ee halista ku ah nolosha dhallinyarada. Dadaaladii wada tashi ee la xariiray curinta siyaasadda dhallinyarada waxaa ka soo baxay in ifafaalayaasha cawaaqib xumada daran ku yeesha dhallinyaradu ay yihiin: (i) Tahriibta; (ii) U ciidaminta Argagixisada; (iii) Iska Horkeenida Dhallinyarada

TAHRIIBTA

- Dhallinyara badan oo ay ula muuqatay in xaaladda siyaasadeed, nabadgelyo iyo dhaqaale ee Soomaaliya aaney ka soo raynayn
- Dahallinyarada oo aan ku baraarugsanayn mas'uuliyadda taariikhiga ee ka saaran in Soomaaliya hanato Nabadgalyo, Xasilooni iyo Horumar dhaqaale.
- U hanqal taagidda heerka nololeed ee ka jira dalalka horumaray
- Dhallinyarada ku guulaysta socdaalka tahriibta oo u gacan haadiya kuwa dalka ku haray
- Horumarka is-gaarsiinta oo sahlay in dhallinyaradu hesho macluumaadka la xariira qaabilaadda qaxootiga, socdaalka tahriibta, iyo la xariiridda qoysaskooda si loo bixiyo lacagta madax-furashada ee ay sheegtaan ka ganacsatada tahriibtu ee ka adeegta dalalka kulaala Yurub
- Adeegyo iyo xiriiro fududeeya tahriibta oo ka jira dalka gudhiisa iyo dibaddisa

3.5.2 Istrateejiyada 1aad ee Xakamaynta Tahriibta

Abaabulidda iyo dhiirrigelinta fursado suurta gelinayo kala doorashada tahriibta iyo ku negaanshaha dalka

Tallaabooyinka ma huraanka ah ee la qaadayo:

1. Dajinta siyaasada qaran ee shaqaalaysiinta dhalinyarada

2. Hirgalinta dugsiyo farsmo gacmeed oo la jaan qaadaya baahida shaqaale ee suuqa ka jirta
3. Ku dhiirrigelinta dhalinyarada in ay la yimaadaan qaabab kala duwan oo looga midha dhalinkaro mustaqbalka
4. Abuuritaanka xarumo lataliya kana qayb-qaata dhiirigalinta dhalinyarada
5. In la hirgaliyo xarun dhexdhexaad ah oo dhalinyaradu ay ka daalacan karaan fursadaha shaqo si looga hortago in fursadaha shaqo ay cid gaari ka faa'iidaysato.
6. In warbaahinta kala duwan lagu baahiyo khatara uu leeyahay tahriibka sharci darada ah isla markaana fursadaha jira loogu soo bandhigo warbaahinta.

3.5.3 Istrateejiyada 2aad ee Xakamaynta Tahriibta

ABUURITAANKA JAWI QURBAJOOGTA SOOMAALIYA KU DHIIRRI GELIYA IN AY DALKA U SOO DABBAALAAN HAL-ABUUR AQOONEED IYO MAAL-GASHI

Tallaabooyinka ma huraanka ah ee la qaadayo:

1. In la qaban qaabiyo shir sanadeedka qurbajoogta iyadoo diirada lagu saarayo horumarinta dhalinyarada, iyadoo qurba joogtuna ay soo bandhigayaan nolosha dhabta ah ee ka jirta qurbaha
2. Dhiirigalinta dhalinta qurba joogta ah in ay dalkooda ku soo noqdaan oo ay ka faaiidaystaan xirfadaha ay soo barteen.

3. Hirgalinta aqoon is waydaarsiyo kor loogu qaadayo aqoonta dhalinyarada si ay dalkooda kula noqdaan xirfadaha ay leeyihiin.
4. In la dhiirigaliyo sanduuqa horumarinta dhalinyarada iyagoo lagu dhiirigalinayo in ay ka qayb qaataan.
5. Abuurista mareegta isku xidhka dhalinyarada dalka iyo qurbaha
6. In la sameeyo barnaamijyo lagu dhiirigalinayo maalgashiga caalamiga ah ee Soomaaliya iyo sidoo kale in qurbe-joogtu ay maalgashadaan dalkooda si ay shaqo abuurka ay uga qayb qaataan.
7. In la sameeyo filimo muujinaya masiibooyinka laga dhaxlay tahriibka iyo dhibaatooyinka ay dhalinyaradu kala kulmeen

HALISTA 2AAD: U CIIDAMINTA ARGAGIXISADA

1. Wacyi gelin xoog leh oo dhallinyarada ku hanuunisa manhajka argagixisada
2. Ku qancinta dhallinyarada in xagjirnimadu tahay dariiqda Saxa ee Islaannimada
3. Ku tallaalidda dhallinyarada xagjirnimada inta ay carruurta yihiin (ka yar 15 jir)
4. Askaraynta khasabka ah ee carruurta
5. Tabashooyin la xariira caddaalad darro
6. Awoodda dawladda oo aan deegaannada dalka wada gaarin
7. Shaqa la'aanta baahsan iyo yaraanta fursado dhaqaale

3.5.4 Istrateejiyada 3aad

Ka hortagidda U Ciidaminta Argagixisada ee Dhallinyarada

Tallaabooyinka Lama Huraanka ah in la Qaado

1. Culimmada Soomaalidu waa in ay soo saaraan fatwa qeexaysa waxa Diinta Islaamku ka qabto argagixisannimada
2. Ambaqaadidda ololayaal lagu baahinayo fatwada oo isugu jira warbaahin, muxaadarooyin, daraasado cilmi iyo wacyigelin fool-ka-fool ah oo dal iyo dibadba gaarsiisan
3. Horumarinta iyo xoojinta garsoorka dalka
4. Shaqa abuur iyo fursado dhaqaale oo baahsan
5. Baahinta Awoodda Dawladnimada

3.5.5 Istraateejiyada 2aad ee Ka Hortegidda Xagjirnimada

Dib-u-Kasbidda Dhallinta U Ciidamisa Aragagixisadda

Tallaabooyinka Lama Huraanka ah in La Qaado

1. In dawladdu abuurto jawi soo jiidan kara dhallinta u ciidamisa argagixisada
2. In cafis iyo ballanqaadyo la xariira horumarinta noloshooda loogu baaqo
3. In dawladdu ka dhabayso ballanqaadyadeeda sida xarumo dhaqan celin iyo u carbin shaqo
4. In laga shaqeeyo sidii dhalinta ka soo noqota xagjirnimadu ugu gacanhaadin lahaayeen dhiggooda weli ku harsan gacanta aragagixisada

Halista Saddexaad: Iska Hor Keenidda Dhallinyarada

1. Dhallinyarada oo u nugul in loo ababulo difaacidda dano gaar ah

2. Dhallinta si fudud dhexdooda isugu dhaca
3. Falalka aanada
4. Muranno deegaanno meelaha qaarkood
5. Khilaafyo soo noq-noqdo

3.5.6 Istrateejiyada 1aad ee baajinta iska horkeenidda Dhallinyarada

Dhaqangelinta Sharciga

Tallaabooyinka Lama Huraanka ah in La Qaado

1. Waci gelin ballaaran
2. Dib-u-heshiin
3. Dhaqan celin
4. Dhallinayarada oo laga qaybgeliyo ha'adaha amniga
5. Abuuritaan fursado aqooneed iyo shaqo

3.6. Adkeynta Muwaadinnimada iyo Kaqeybgalka Dhallinyarada Arrimaha Bulshada iyo Siyaasadda

3.6.1 DULMAR

Shakhsi waxaa mar walba horyaal culays kaga imaanaya sida uu ula falgelilahaaa marka ay is herdiyaan danaha shakhsi, kuwa deegaan iyo qaran. **Muwaaddinnimada Dawlad Qaran - Nation-State Citizenship** – waxay shakhsi kasta faraysaa inuu ku hirto **hayb (identity)** uu la wadaago shacab ku nool dal leh xuduudo u gaar ah iyo dawlad uu u egmaday ka talinta dalkaas. Sidaas awgeed shucuubta dunida oo dhan waxay isu aqoonsanyihiin in ay yihiin muwaddiniin dawlado qaran (Nation-States) macaamil kasta oo dhex marayana waxaa xiriiriya dawladhooda si waafaqsan shuruuc

caalami ah oo la wada degsaday. Halka muwaaddin kasta uu ka yahay xubin waajibaad iyo xuquuq leh ee qaran jira ayey dhammaan dalalka leh jiritaan qarannimo oo la aqoonsayahay ay xubno ka jihiin **Qaramada Midoobey (United Nations) iyo furuucdeeda kala geddisan.**

Dulmarkan kooban ee la xariirta muwaaddinnimada wuxuu gogol xaar u yahay muhimadda mowduucu u leeyahay guud ahaan Soomaaliya, maadaama dhallinyaradu tahay aqlabiyadda Shacabka Soomaaliya wuxuu muhimad gaar ah usii leeyahay dhallinyarada. Ayada oo aan la inkirayn muhiimadda doorka shakhsiga, bulshada iyo caalamka, Siyaadda Qaran ee Dhallinyarada waxaa tiirdhexaad u ah **Mudnaansiinta Haybta Qarannimada (National Identity).** Taas macneheedu ma aha in la inkiro amaba la duudsiiyo danaha xalaasha iyo tabashooyinka jiri kara heerar ka hooseeya haybta qarannimada. Dulucda mudnaansiinta muwaaddinnimada Qaran waa is-waafajinta saddex xaaladood.

Tan Koowaad:- ku dhaadashada haybta qarannimada ee barax la'a waxay ka dhigantahay midaynta quluubta iyo tabarta shacabka taasoo ah sida keliya oo lagu hiigsan karo horumar iyo baraare loo simanyahay.

Tan Labaad:- muwaaddinnimadu waxaa laf-dhabar u ah in caam ahaan la wada dareensanyahay in **"dhibta muwaaddin soo gaarta ay la mid tahay mid bulshada oo dhan soo gaartay"** sidaas awgeedna muwaaddiniinta oo dhammi isu damqadaan xaqana isugu hiiliyaan.

Tan Saddexaad:- muwaaddininnta dhexdooda waa u simanyihiin sharciga, sharciga ayaana qof kasta ka sareeya.

Siyasadda Qaran ee dhallinyaradu waxay hor iyo horraan soo bandhigeysaa:-

(i) caqabadaha jira ee la xariira muwaaddinnimada;
(ii) Istrateejiyada caqabaadahaas lagu abbarayo iyo;
(iii)Tallabooyanka wax qabad ee ku aadan Istiraatiijiyad kasta gaar ahaanteed.

Caqabadaha Jira

- Dhallinyarada oo uu saameeyey wacyiga guud ee qolannimadu
- Waciga iyo aqoonta muwaaddinnimada ee dhallinyarada oo hooseeya
- Dhaq-dhaqaayada dhallinyarada oo kala qaybsan, dhexdoodana ka taratama, u kala xagliya is-herdiga itijaahyada ku loollama kala hororsiga hoggaanka dalka sidaas awgeedna ay yartahay saamayntooda siyaasadda ee heer qaran, heer dawlad goboleed, heer Gobol iyo deegaannada sedexdaba.
- Wakiillo danaha dhallinyarada matala oo ku yar hay'adaha hoggaaminta heer qaran, heer dawlad-goboleed iyo heer degaanba
- Miisaaniyadaha maamullada iyo baarnaamijyada ay maalgeliyaan ha'ayadaha caalamigu oo tixgelinta ay mudanyihiin aan siinin barnaamijyo iyo mashaaariic u gaar ah horumarinta danaha taagan iyo kuwa mustaqbal ee dhallinyarada
- Fir-fircoonida dhallinyarada ee la xariira horumarinta bulshada iyo ka qayb-qaadasha siyaasadda oo aad uga hooseesaysa heerkii la gudboonaa

- Dhallinyarada oo aan xog ku filan ka hayn baaqyada iyo baarnaamjiyada Qarammada Midoobey, Ururuka Midowga Africa iyo hay'adaha kale ee caalamaiga ah ee la xariira xuquuqda carrurta iyo kor u qaadida kaalinta bulshada iyo siyaasadda ee dhallinyarada.

- Dhallinyarada oo aan lahayn qaab siyaasadeed iyo mid hay'adaysan oo ay ugu qareemaan horumarinta danahooda iyo tan dalka

3.6.1 Istraatiijiyada 1aad

ABUURITAANKA XAALAD DHALLINYARADA U SUURTA GELINAYSA IN AY YEESHAAN HAYKAL ABAABULAN OO DAL IYO DIBADBA XARIIRSAN

Tallaabooyinka Ma Huraanka ah

In kasta oo tallaabooyinka la xiriira istratiijiyada 1aad ay badanyihiin kuwa loo arko ma huraan waa kuwa horseedaya in dhallinyarada Soomaaliya u korto curiye is-beddel (Change Agent) oo kasbada qaddarinta dawladda, buslahada iyo deeq-bixiyayaasha

I. Xarun Macluumaad Dhallinyarro (Youth Resource Center)

Dawladda iyo Deeqbixiyayaashu waa in ay iska kaashadaan Xarun Macaluumaad dhallinyaro oo gacan ka geysata:

(a) Daraasado la xariira xaaladda dalka gaar ahaan xaaladaha sida tooska u saameeya dhallinyarada ayada oo mar walba loo kuur gelayo duruufaha kala geddisan ee la xariira:

(i) Da'da,

(ii) Lab Iyo Dheddig,

(iii) Deegaan Nololeedka Joogtada Ah Iyo Kaan Joogtada Ahayn,

(iv) Kuwa Waxbarta Iyo Kuwa Aan Wax Baran,

(v) Kuwa Shaqeeya Iyo Kuwa Aan Shaqeyn,

(vi) Noocyada Hab-Dhaqannada Ee Dhallinyarada;

(vii) Xaddiga fursadaha jira iyo sida ugu habboon oo looga faa'iidayn karo,

(viii) Horumarinta fursadaha jira baaxad ahaan iyo tayo ahaanba iyo abuuritaan fursado cusub oo isugu jira kuwa la xariira baahida taagan iyo midda mustaqbalba.

(ix) Ilaha laga helayo iyo kallifka baaxadda dhaqaalaha ee ay ku kacayaan barnaamijyada horumarinta danaha, muddada 2017 ilaa 2021.

(b) Dejinta manhajyo ku salaysan daraasadahaas iyo hirgelinta tababarro la xariira:

(i) Muwaaddinnimada,

(ii) Dhaqanka madaninnimada (civic culture),

(iii) Qiimaynta baahida (needs assessment),

(iv) Dhisidda iyo maaraynta hay'adaha dhallinyarada,

(v) Mutadawcnimada,

(vi) Abaabulidda bulshada yo khayraadka (community and resource mobilization),

(vii) Qorsshaynta ka wada qayb-gelidda ku dhisan (Community participatory Planning),

(viii) Horumarinta joogteysan (sustaianable development),

(ix) U qareemidda danaha iyo xuquuqda dhalinyarada,

(x) Horumarinta dhaqaalaha shakhsiga (entrepreneurship)

(xi) Is-xiririnta dhallinta iyo hay'adaha dhallinyarada(networking).

(xii) Shaqa raadinta iyo horumarinta khibradda shaqo ee dhallinyarada

(c) Natiijooyinka iyo talooyinka ka dhasha daraasadaha ku xusn (a) la waafajiyo adeegyada hay'adaha dowaladda, qorshayaasha horumarinta dalka iyo barnaamijyada ay maalgeliyaan deeq-bixiyayaashu lagana qayb-geliyo dhallinyarada dejinta iyo hirgelinta qorshayaasha.

II. Abaabulidda, Dhisidda iyo Horuminta Hay'ado Dhallinyaro

Ayada oo laga amba qaadayo baahsanaanta abaabulnaanta ee hay'adaha dhallinyarada ee xilligan Siyaasadda Qaran ee Dhallinyarada waxaa hagaya:

1. In noocyada abaabul dhallinyaro ee ka jira dawlad-goboleedyada, Gobolka Banaadir iyo deegaannada la sii xoojiyo tabar ahaan iyo tayo ahaanba;
2. In abaabullada dhallinyarada ee dawlad-goboleedyadu yeeshaan wada xaajoodyo iyo wadatashiyo la xariira isku-dubbaridida dadaalladooda si ay u yeehaan saamayn wax ku ool ah heer Qaran, heer Dowlad Gobleedyada, Gobolka Banaadir iyo heer deegaan.
3. Ku dhaadashada dhaqanka dimuqaraaddiyada, matalaad xaq ah, xil-gudasho marka lagu jiro abaabulidda ha'aydaha dhallinyarada iyo xil-gudashadooda heer kasta.
4. Iswaafajinta kaalinta Dawladda ee la xariirta hogaaminta fulinta Siyassada Qaran ee dhallinyarada iyo dowrka hay'adaha dhallinyarada oo ah qayb ka mid ah bulshada rayidka (Civil Society).

3.6.3 Istrateejiyada 2aad

KA QAYBGELINTA DA'YARTA DADAALLADA LA XARIIRA HORUMARINTA NOLOSHOODA, QOYSASKOODA, DEGAANNADOODA IYO DALKOODA

Tallaabooyinka Ma Huraanka ah

1. Heerka barbaarinta (6 – 14) sano

Heerka baarbaarinta waxaa khusaysa qaybta bulshada ka mid ah ee da'adoodu u dhexeyso 6 ilaa 14 sano. Hadba inta ay le'egyihiin dadaallada da'ddaas loo huro ayey ku xirantahay qiyamka iyo wax-tarnimada jiilka da'a horaadka dhallinyarada (15-25 sano) iyo guud

ahaanba u koridda waayeelnimadu. Taloobooyinka ku aaddan barbaarinta waa badanyihiin waxaase ma huraan ah:

(a) Ardayda Dugsiga Hoose

(i) Kor u qaadidda tirada carrurta loo diiwaangeliyo heerka fasalka koowaad ee dugsiga hoose

(ii) Yaraynta heerarka saaqididda, dhicidda iyo hoosaynta darajooyinka imtixaannada.

(iii) In barashada maaddada muwaaddinnimadu laga bilaabo fasalka koowaad ilaa iyo dhammadka dugsiga sare

(iv) In dugsiyada iyo waalidku iska kaashadaan in carrurta loo barbaaariyo Xirfadaha Nolosha (Life Skills)[1] sida inay is-baraan jarmaadada, fiid seexashada, dhowridda nadaafadda jirkooda, la dhaqanka carrurta facooda ah ee guriga kula nool, ardada kale iyo deriska.

(v) Waalidka waa in la baro in koolkoolinta carruurtu ay dhaxalsiiso in ay fishaan in wax kasta loo qabanayo oo aanu xil saarin jirin. Taas beddelkeeda waa in waalidku carruurta u barbaariyo in ay qabsadaan wax

[1] Life skills" are defined as psychosocial abilities for adaptive and positive behaviour that enable individuals to deal effectively with the demands and challenges of everyday life (UNICEF). " **Xirfada Nolsha** waa fursadda maanka(maskaxda) ee la qabsashada xaaladaha iyo hab-dhaqan fiican ee qof kasta u suurta gelainaya u tabcashada daboolidda baahidiisa iyo la falgelaidda caqbadaha la soo gudboonaada maalin walba oo noloshiisa ka mid ah".

kasta oo ay ku fialanyihiin kaalinta kaga aaddanna ka qaataan waajibka ka saran qoyska iyo bulshada.

(vi) Xoojinta is-saamaynta ardayda dhinaca wanaagga.

(vii) Macallimiinta dugsiyada hoose waa inay si gaar ah u tilmaansadaan ardayda u jarjeera fahmad sare, akhlaaq fiican iyo astaamo hoggamineed si uu dugsi walba u yeesho qayb ardayda ka mid ah oo u noqda muunad inta kale ay ku daydaan (Role models).

(b) Dejinta iyo hirgelinta barnaamijyo barbaarineed oo u gaar ah carrurta da'ada dugsiga hoose ee aan helin fursado waxbarasho, sida da'yarta:-

(i) Xoola dhaqatada

(ii) Beeraleyda

(iii) Kalluumaysatada

(iv) Xijiyeysatada

(v) Barakacayaasha iyo kuwa waalidkoodu yihiin saboolka magoolooyinka iyo,

(vi) Kuwa ka saaqida dugsiyada hoose

3.6.4 Istrateejiyada 3aad

ABUURISTA TAAGEERO WAXTAR LEH OO KU WAJAHAN KA QAYB QAADASHADA FIR-FIRCOON EE DHALINTA ARRIMAHA BULSHADA IYO QARANKABA.

Tallaabooyinka ma huraanka ah ee la qaadayo:

1. In la dhiiri galiyo lana taageero barnaamujyada iskaa wax u qabso iyo istaageerka dhalinta dhexdooda.
2. In la dhiiri galiyo matalaada dhalinta ee heerarka kala duwan ee dawladada iyo kuwa madaxa bannaan iyo golayaasha go'aanka lagu gaadho ee bulshada.
3. Isticmaal golayaal la talineed oo dhalintu leedahay.
4. In la curiyo Abaalmarino Qaran oo Dhalinta lagu abaalmariyo waxtarkooda bulsho iyo qaranba.
5. U isticmaalida Deeqaha Yar- yar ee Qaramada Midoobay (QM) iyo Haayadaha Caalamiga ahba arrimo dhiirigalinaya dhalinta.
6. Iyo in lagu hogaamiyo dhalinta ka shaqaynta barnaamijyo bulsheed. Kuwaas oo abuuraya wadaniyad dhinta ka qulqulka dhalinta ee wadanka.

3.6.5 Istaraateeijiyadda 4aad

KA QAYB GELIDDA DHALLINYARADA SIYAASADDA DALKA

Taxanaha siyaasadda Soomaliya wuxuu inna barayaaa in dhallinyarada oo si gurracan looga qayb-geliyo siyaasadda ay horseedday burbur. Sidoo kale haddii dhallinyarada laga go'odoomiyo siyassaddana laga dhaxlayo xaalad fadhiidnimo ee maamul, bulsho iyo dhaqaale. Sidaas awgeed ma aha in dhallinyarada laga qaybgeliyo siyaasadda oo keliya ee waa in si toosan oo koryeeleysa aayahooda iyo kan dalka loogu soo dabbaalo. Taallabooyinka suurta gelinaya in dhallinyaradu qayb fir-fircoon ka qaadato siyaasadda waa badanyihiin, kuwa mahuraanka ah waxaa ka mid ah:

I. In Geeddi socodka Siyaasadda Qaran loo Qaabeeyo Tub-Raac Kasbaya Dhallinyarada kuna soo Dabbaalaya in ay Garowsadaan Xilkooda Qarannimo si Fir-Fircoonna u Gutaan. Arrimaha ugu mudan ee la xariira qaabaynta geeddisocodka siyaasadda Qaran waxaa ka mid:

(a) Geedi-socodka dastuur samaynta oo laga qayb-geliyo dhallinyarada gaar ahaan dhinacyada:

(i) goloyaal dhallinyardu kaga tashato waxa kala gudboon dastuurka ugu dambayntana isku dubba ridaan cod midaysan oo xambaraansan aragtidooda la xariirta mowduucyada dastuurka oo aan ku koobnayn dhinaca xuquuqda oo keliya;

(ii) Dejinta manahaj wacyigelin oo la xariira barashada dastuurka si ay hindisayaal habboon uga dhiibtaan fagaarayaasha u gaarka ah dhallinta iyo kuwa kale ee ka qayb-qaadashada dastuurka,

(iii) In tiro wax ku ool ah oo dhallinyaro ah loo tababbaro tababarayaal wacyigelineed (civic educators) , fududaynta doodaha dastuurka, ku dhiirrigelinta shacabka inay si fir-fircoon uga qayb-qaataan fagaarayaasha, ka doodidda dastuurka iyo isku-dubbaridida fikradaha laga soo jeediyo fagaarayaasha.

(b) In dhallinhyaradu si firfircoon ugu ololayso u gudbidda hannaan doorasho oo toos ah:

(i) Hirgelinta jadwalka doorashooyin toos ah inta lagu jiro xilli xukuumadeedka hadda socda (2017 -2021),

(ii) In dhallinyarada u bandhigto hay'adaha go'aan gaarista leh ee heer kasta hindisayaal isku-dubbaridan ee la xariira hirgelinta doorashooyin toos ah oo si xalaal ah oo daahfuran u dhaca;

(iii) Ababulidda is-diwaangelinta dhammaan muwaaddiniinta gaartay da'ada cod bixinta magaalo iyo miyi, lab iyo dheddig, dal iyo dibad,

(iv) In dhallinyaradu ka qayb-qaadato ololoyaasha doorashooyinka dhinaca doodaha la xariira mowduucyada olololayaasha doorashada xisbiyada, kala doorashada murashixiita sida ay ugu qalmaan matalaadda guud ahaan shacabka iyo gaar ahaan hurmarinta dhallinyarada.

II. Suulinta Caqabadaha ku Gudbanaan kara Ka qayb-galka Siyaasadda ee Dhallinyarada:

(a) Dib-u-eegidda da'ada mutaysiga xubinnimada hay'adaha soo socda:

(i) Golayaasha sharci-dejinta Federaalka, Dawlad Goboleedyada, iyo Golayaasha Dawladaha Hoose,

(ii) Mutaysiga xil-qabashada golayaasha fulinta heer qaran, Dawlad Goboleed iyo Dawladaha Hoose,

(iii) Mutaysiga xubinnimada Guddiyada Qaran

(b) Meelaynta qoondo ka mid ah golayaasha sharci-dejinta heer federaal, Dawlad Goboleed iyo Dawladaha Hoose ee ku xeeran dastuurka qaran iyo kuwa dawlad Goboleedyada, iyo sharciyada iyo habraacyada doorashada ee heer kasta.

(c) Xakamaynta musuqmaasuqa doorashooyinka nooca uu yahayba

4. KOOXAHA MUDNAANTA LEH

Siyaasadda Dhalinyarada Qaranka waa hiigsiga iyo haykalka horumarinta dhamaan dhalinyarada Soomaaliya. Sidoo kale, waxay diirada saarysaa toddoba kooxood oo u baahan fiiro gaar ah iyo dedaal dheeraad ah si loo gaadho horumarinta dhalinyarada dalka loona xaqiijiyo talaabooyinkii ma huraanka ahaa iyo waxqabadyada qorshaysan. Toddobada kooxood ayaa kala ah:-

- Dhalinyarada naafada ah (Kuwa Baahiyaha Gaarka Qaba)
- Dhalinyarada la nool xanuunka AIDSka
- Agoonta iyo dhalinyarada nugul
- Dhalinyarada la takooray
- Dhalinyarada Gudaha Ku Barakacay
- Dhalinyarada reer guuraaga ah;
- Dhalinyarada shaqo la'aantu aafeysay

5. HEYKALKA HIRGELINTA SQDH

Siyaasaddaan Dhallinyarada Qaranku waxay ku salaysan tahay mabda'a iskaashiga iyo wada shaqaynta - " waa waajib in dhammaan daneeyayaasha horumarinta dhallinyarada - wasaaradaha dawladda, ururada bulshada rayidka ah, ganacsiga gaarka ah iyo dadka dhallinyarada ah - in ay iska kaashadaan kana wada shaqeeyaan si loo hubiyo natiijada ugu fiican ee horumarinta dhallinyarada Soomaaliya Wiil iyo Gabarba ".

Siyaasaddan Horumarinta Dhallinyarada Qaranka waxay soo jeedinaysaa: -

1. Marka ay Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ansixiso Siyaasadda Dhalinyarada Qaranka, in la dejin doono qorshe hawleedka Dhalinyarada Qaranka **(National Youth Action Plan)** kaas oo si faahfaahsan u sharixi doona Maxaa la qabanayaa? Yaa masuuliyad ka saaran tahay? Sidee loo qabanayaa? Iyo Goorma ayaa la qabaayaa?

2. In la sameeyo Golaha Dhalinyarada Qaranka **(National Youth Council)** oo ka qayb qaadan doona fulinta Siyaasadan noqona doona buundada (birriishka) isku xidha dhalinyarada iyo daneeyayaasha Horumarka dhalinyarada..

3. In la magacaabo u qeybsanayaal arrimaha dhalinyarada oo wasaarad kastaa yeelato

(Youth Focal Points) Kuwaas oo awoodda saaridoona isku-dubaridka waxqabadka wasaarad kasta adeega ay u fidinayso dhalinyarada.

Siyaasadani waxay ku mudaysan tahay mudo shan sano ah, taas oo lagu dedaali doono in la gaadho ujeedooyinka iyo ka midho dhalinta talaabooyinka ma huraanka ah in lagu talaabsado. Mudada siyaasadani marka ay dhamaato dib ayaa loo sameyn doonaa wax ka bedelkeeda oo wada-tashiyo xog lagu ururinayo loo sameyn doonaa si loo helo siyaasad cusub oo la jaanqaada baahiyaha waqtigaa taagan.

6. XUQUUQDA & WAAJIBAADKA DHALLINYARADA

Siyaasadda Dhallinyarada Qaranku waxay taageeri doontaa in dhamaan dhalinyarada iyadoon loo eegin da'da, jinsiga, kartida, xaaladda bulsho-dhaqaale ama deegaanka uu ku noolyahay xaq u leeyihiin inay ku raaxaystaan –

- Dhalinyarnimadooda iyaga oo xor ka ah nooc kasta oo rabshado, dagaal, xadgudub, dhiig-miirasho iyo bahdilaad,
- Waxbarasho tayo leh iyo fursado shaqo,
- Daryeel caafimaad oo wanaagsan, iyo
- Ka qaybgalka dejnta go'aamada ku saabsan arrimaha saameynta noloshooda

Sidoo kale, waxa ay Siyaasaddan Dhallinyarada Qaranka ku baaqaysaa dhalinyarada wiil iyo gabar in ay gutaan masuuliyada iyo in ay go'an tahay ka shaqaynta nabadda, barwaaqo iyo maamul loo dhanyahay oo Soomaaliya ka hana qaado. Dhalinyaradu waxay ku gaadhi kartaa marka la sameeyo -

- Ixtiraamka iyo barashada diinka islaamka;
- Xoojinta midnimada, hiddaha iyo dhaqanka dadka iyo dalka Soomaaliya;
- Ka fogaanshaha duufsashada iyo falalka argagixisada;
- Ixtiraamida sharciga iyo kala dambaynta iyo hantida muwaadiniinta kale;

- Taageeridda xubnaha dhalinyarada nugul ama kuwa kasoo jeeda reeraha la takooro si looga hortago dhamaan noocyada kala duwan ee takoorka;
- Ilaalinta iyo dhawrista deegaanka;

Ugu dambeyn, Siyaasada Dhalinyaradda Qaranku waxay ugu baaqaysaa dhamaan ummadda Soomaaliya in –

- La dhiirigeliyo ka qayb qaadashada dadka dhallinyarada ah ee horumarinta bulshada iyo dalka;
- La siiyo fursado isku mid ah si ay dhallinyarada iyada oon loo eegin jinsigooda,
- La caawiyo dadka dhalinyarada ah in ay gaadhaan awoodooda buuxda; iyo
- La dhiirigeliyo dhalinyarada in ay si firfircoon uga qayb qaataan dhammaan dhinacyada bulshada iyo horumarka qaranka.

Dadka da'da yarta Soomaaliya waxay noolyihiin waqtigan oo isbedel cajiib ah uu socdo. Waa qayb weyn oo ugu qiimo badan bulshada, laakiin waxay yihiin kuwa ugu nugul ee dhanka shaqada, caafimaadka, rabshadaha iyo argagixisada.

7. GUNAANAD

Mudaddii ay socotay samaynta iyo xog-ururinta Siyaasadda Qaran ee Dhalinyarada ee Dowladda Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya, waxay da'yartu wiilal iyo gabdhaba sheegeen caqabadaha ay la darsaan iyo baahiyaha ay qabaan ee ka hortaagan in ay si buuxda uga qayb qaataan dib-u-dhiska dalkooda. Waxaana ka mid ahaa:

- Helitaanka adeegyada dhalinyarta muhiimka u ah sida waxbarashada, shaqada, iyo caafimaadka oo yar;
- Dadka waaweyn oo aan siinin fursad kuna ixtiraamin aragtidooda iyo ka qaybgalintooda
- Takoorka iyo qaybsanaanta bulsho ee ay sababtay qabiilka iyo jinsiga (Lab/Dhadig)
- Sharci iyo Siyaasad dhalinyaro oo hagta adeegyada iyo horumarinta dhalinyarada oo aan jirin;
- Wasaaradaha dawlada JFS, Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo Gobolka Banaadir oo aan dejin talaabooyinka lama huraanka ah ee ay qaadayaan si ay mudnaan u siiyaan adeegyada dhalinyarada muhiimka u ah.
- Arrimaha Siyaasada oo aan laga qayb galinin
- Dhalinyarada oo aan door muuqda ku lahayn fulinta adeegyada lagu horumarinayo Dalka
- Ka qaybgal La'aanta dhallinyarada ee dejinta siyaasadaha hay'adaha dawlada (Wada-tashiyada laguma daro) iyo fulintooda (Hayadaha dawladu kama faaidaystaan xooga dihin ee Dhallinyarada);

Waxaan rajeynaynaa, Siyaasadan Dhallinyarada Qaranku in ay kor u qaadi doonto fahamka baahida iyo rabitaanka gabdhaha iyo wiilasha dhallinyarada ah ee Soomaaliya iyo sidii ay si haboon uga qayb qaadan lahaayeen bulshada iyo horumarinta qaranka.

Iskusoo wada duuboo, waxaa la rajeynayaa in Siyaasaddan Dhallinyarada Qaranka u adeegi doonto horumarinta dhalinyarada oo ay u midayn doonto qeybaha kala duwan ee bulshada sidii loo horumarin lahaa dhalinyarada Gabdho iyo Wiilalba.

1.5. Caqabadaha Jira

Soomaaliya waxaa waqtigan ka jiro arrimo dhowr ah oo caqabad ku ah horumarka bulshada, siyaasadda iyo dhaqaale ee dalka, waxaana ka mid ah –

- **Awood darada hay'adaha dawlada** – Inta badan hayadaha dawlada ayaa la daalaa dhacaya miisaaniyada dhaqaale, tayada shaqaalaha iyo qaab-dhismeedka maamul iyo shaqo oo hooseeya.

- **Kaabayaasha dawliga ah oo xaddidan** – burburkii xukuumadii dhexe ayaa sababtay in ay dumaan goobo badan oo dawladeed isla markaana aanay ku filnayn miisaaniyada dawladu dib-udhiskooda iyo dayactirkooda.

- **Deegaanka oo ah mid Cakiran** – Maamul xumada arrimaha deegaanka, abaaraha iyo xaalufinta joogtada ah, dhirtii oo si xad-dhaaf ah looga shidayo dhuxul, ayaa ka dhaxalsiiyey deegaanka Soomaaliya in ay noqoto mid u nugul masiibooyin dabiici ah iyo xaalada nololeed oo adkaada

- **Baaxada saboolnimada** – heerka haynta dhaqaale (Per capital income) ee muwaadiniinta Soomaaliya ayaa ah mid hooseeya reer miyi iyo magaalaba.

- **Dadka Gudaha ku Barakacay (DGB)** – Shantii qof ee Soomaaliya u dhashayba qof ayaa waqtigan ah barakace ama kasoo laabtay deegaankii uu ka barakacay. Dadkan

ayaa ah kuwo ku nool xaalado nololeed aad u hooseeya oo fursadaha shaqo iyo khayraadkuna ay ku yar yihiin.

- **Duufsiga dhalinyarada iyo Argagixisada** – dhalinyarada Soomaaliya ayaa ka mid ah kuwa ay aafeysay duufsiga (radicalization) iyo falalka argagixisada taas oo ay fududeysay heerka aqoonta dhalinyarada oo hooseeya, shaqo la'aan baahsan, iyo mudadii dagaalada sokeeye oo qorigu uu noqday shaqada ugu badan ee ay dhalinyaradu haystaan.

Arrimaha kor ku xusan ayaa ah kuwo u baahan in la fahmo oo talaabooyin horumarineed oo muhiim u ah Siyaasada Dhalinyarada Qaranka. Da'yartu wiilal iyo gabdhaba waxay yihiin kuwo aad ugu nugul dhibaatooyinka ka dhasha arrimaha kor ku xusan.

= DHAMMAAD =

XEER RAISUL-WASAARE LR. 026 Taariikh: 09/11/2017

GO'AAN GOLE " ANSIXINTA SIYAASADDA QARAN EE MUSIIBOOYINKA"

Raisul-Wasaaraha Xukuumadda JFS

MARKUU ARKAY: Qodobka 99aad(a), (b) & (e) ee Dastuurka Federaalka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 100aad (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka.

MARKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.27.11.17** ee **09/11/2017**, kuna saabsan ansixinta **Siyaasadda Qaran ee Musiibooyinka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo Siyaasadda Qaran ee Musiibooyinka

Wuxuu Meel-mariyay:

Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.27.11.17** ee **09/11/2017**, kuna saabsan ansixinta **"Siyaasadda Qaran ee Musiibooyinka"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay

Qodobka 2aad

Waxa Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Siyaasadda Qaran ee Musiibooyinka.

Qodobka 3aad

Siyaasadda Qaran ee Musiibooyinka, waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 09/11/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/029/2017
TAARIIKH 13/11/2017
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



WASAARADDA GARGAARKA IYO MAAREYNTA MUSIIBOOYINKA DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

SIYAASADDA QARAN EE MAAREYNTA MUSIIBOOYINKA

Nofeembar 2017

GOGOLDHIG

Dalka Soomaaliya waxaa ku habsaday abaaro iyo fatahaado soo noqnoqday oo ay wehliyaan colaado iyo dagganaansho la'aan siyaasadeed muddo ka badan rubuc qarni. Arrimahani waxay carqalad ku abuureen nolasha dadka iyo hab-nololeedkoodaba, kuwaasoo khatar geliyay nolosha aadanaha iyo sugnaanta cuntada islamarkaana wiiqay nidaamyada badbaadada bulshada, baabi'yayna kaabayaasha dhaqaale ee dalka.

Soo noqnoqoshada iyo kororka musiibooyinka oo ay wehliso isbeddellada cimilada, magaaleynta iyo xaalufinta deeganka, waxey dib u dhigeen geeddi socodka soo kabashada iyo degganaashaha dalka. Heerka saameynta musiibooyinka waxaa sare u qaaday qorshe la'aanta habka yareynta iyo ka jawaabidda musiibooyinka waqtiga ku haboon. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in si wadajir ah diiradda loo saaro musiibooyinka sii badanaya taasoo u baahan ficillo isdaba joog ah oo ka yimaada dhinacyo kala duwan si ay ummaddeenna u noqoto mid adkeysi u leh musiibooyinka.

Maareynta khataraha musiibooyinka oo ay wehliso arrimaha badbaadada bulshada waxey ka mid yihiin halku dhigyada furaha u ah Qorshaha Horumarinta Qaranka Soomaaliyeed, taasoo ah istiraatiijiyad qaran oo looga gol leeyahay in lagu xaqiijiyo sidii ilaha dhaqaalaha loogu beegi lahaa meelaha ahmiyadda u leh si loo gaaro horumar waara oo loo dhanyahay oo ayna barakacaayasha iyo dadka dalka dib ugu soo laabanaya si fudud ugaga qayb galaan dhaqalaha rasmiga ah ee dalka.

Diyaarinta Siyaasadda Qaran ee Maareynta Musiibooyinka waa tallaabo horey loo qaaday si loo xaqiijiyo in maareynta qataraha musiibooyinka ay yihiin mas'uuliyad guud ayna qeyb ka noqoto qorshayaasha horumarineed ee dhamaan qaybaha kala duwan ee dalka. Siyaasaddani waxay soo bandhigeysaa qaab dhismeedyada hay'adaha, dowrarkooda,

waajibaadyadooda, iyo geedisocodka furaha u ah in la gaaro isku xirnaansho iyo wadashaqeyn joogto ah si loo maareeyo arrimaha la xiriira musiibooyinka.

Dowladda Soomaaliya waxaa ka go'an dhaqan gelinta siyaasaddan iyo diyaarinta nidaamyo xooggan oo awood u leh in ay si firfircoon ugu diyaargaroobaan ka hortagga, ka jawaabida xaaladaha degdega ah iyo ka soo kabashada musiibooyinka. Wasaaradda Gargaaarka iyo Maareynta Musiiboyinka waxaa loo abuuray in ay isku xirto howlaha maareynta musiibooyinka ee dhamaan heerarka kala duwana ee qaybaha dowladda, ayadoo la adeegsanayo hab siyaasadeed mideeysan.

Waxaan ku boorineynaa dhamaan hay'adaha ku howlan arrimaha maareynta musiibooyinka iney si wadajir ah ula shaqeeyaan heerarka kala duwan ee hay'adaha dowladda si loo xaqiijiyo in u adkeysiga musiibooyinka laga soo dhiso heer qaran, heer degaan iyo heer bulsho.

Mudane Xasan Cali Kheyre

Ra'iisul Wasaraaha Dowladda Federaalka Soomaliya

HORDHAC

Siyaasadda Qaran ee Maareynta Musiibooyinka waxaa loo dejiyey si loo helo istaraatiijiyad siyaasadeed oo lagu gaari karo ujeeddo fog oo lagu yareynayo qasaaraha nolaleed iyo midka bulsho, dhaqaale iyo deegaanba. Siyasaddan waxey ifineysaa hab sharciyeed gundhig u noqon kara nidaamyada dowliga ah ee la xariira maareynta musiibooyinka si loo xoojiyo awoodaha qaran ee u diyaargarowga, ka jawaabista, yareynta, ka hortagga iyo ka soo kabashada musiibooyinka, loona badbaadiyo nolasha, hab-nololeedka, hantida, deegaanka iyo dhaqaalaha guud ee dalka.

Baahida loo qaabo in la helo Siyaasad Qaran ee Maareynta Musiiboyinka oo dhameeytiran waxaa dheliyay dhowr ahmiyadood oo muhiim ah iyo istaraatiijiyada ah in Soomaliya ay noqoto qaran adkeysi u leh musiibooyinka gaar ahaan bulshooyinka loo arko iney u nugul yihiin qataraha musiibooyinka. Sidaa daraaddeed, siyaasaddan waxay xoojineysaa in la helo qaab bulsho ku salaysan, kuna dhisan feejignaan iyo horumar ay qeyb ka yihiin dhamaan qaybaha kala duwan ee hay'adaha dowladda ee u diyaargarowga, ka hortaga, yareynta musiiboyinka, iskuna xiraayo arrimaha maareynta musiibooyinka iyo howlaha horumarineed ee dowladda.

Dowladda Soomaliya waxey yareyn kartaa heerka waxyeellada iyo qasaaraha dhaqaalaha iyo tirada dadka ay saameeyso musiibooyinka marka la horumariyo awoodaha dowladda federaalka, dowlad goboleedyada iyo maamullada degmooyinka ee la xariira u diyaargarowga iyo ka jawaabidda musiibooyinka waqtiga ku haboon. Haddaba, arrintani waxay salka ku heysaa sidii looga gudbi lahaa qorshayaasha kala fur-furan ee waqtiga gaaban looguna gudbi lahaa qorshayaal isku xiran oo hal dhinac ah oo ay isla wadaan dhamaan hay'adaha dowladda, hay'adaha aan dowliga aheyn, ganacsatada iyo hay'adaha horumarinta heer qaran iyo heer gobol si ay u hergeliyaan mashaariic la xiriirta maareynta qataraha musiibooyinka oo wax ku ool ah.

Diyaarinta siyaasaddan waxay soo martay marxalado kala duwan iyo wadatashiyo ay ka qeyb qaateen dhinacyo kala duwan. Wadatashiyadan waxaa qeyb ka ahaa wasaaradaha dowladda federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada, hay'ado caalaami ah iyo kuwo maxalli ah, hay'adaha qaramada midoobay, ganacsatada, ururrada bulshada rayidka ah iyo xubanaha kale ee bulshada. Hay'adaha USAID iyo ADESO ayaa iyana qeyb ka geystay bixinta qarashaadka lagu fududeeyey soo saarista nuqulka siyaasaddan.

Waxaan u mahadcelineynaa dhammaan intii ka qeyb qaadatay soo saarista nuqulka siyaasaddan. Waxaan aad u rajeynayaa in u heellanaantii ay muujiyeen dhammaan dadkii qeybta ka ahaa soo saarista siyasaddan in ay sii wadaan hirgelinta iyo in dhamaan howlaha socda lagu dabaqo siyaasadan.

Marwo Dr. Maryan Qaasim
Wasiirka Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiiboyinka

QAAMUUSKA ORAAHDA

La Qabsasho: Nidaamyada bani'aadamka, hannaanka la qabsashada cimilada meesha ka jidha ama cimilada la filaayo iyo saameynteeda, si loo xaddido dhib ama looga faa'iideysto fursado manaafacaad leh. Nidaamyada dabiiciga ah, hannaanka la qabsashada cimilada meesha ka jidha iyo saameynteeda; hawlaha bani'aadamka ayaa laga yaabaa inay fududeeyaan la qabsiga cimilo la filaayo.

Isbaddalka Cimilada: Isbaddal cimilo oo ku yimid hawl bani'aadam oo toos ah ama dadban taasoo wax ka baddasha hawada caalamku waxyaabaha ay ka kooban tahay taasoo dheeraad ku ah kala duwanaanshaha cimilada dabiiciga ah ee la ogaaday waqtiyo la isu barbar dhigi karo.

Xaalad Degdeg ah oo Bani'aadminimo oo Murugsan: Tani waa dhibaato ka jirta dal, gobo lama bulsho dhexdeed taasoo uu ka dhex jiro burbur guud ama mid ilaa heer ah, burburkaas oo ku yimid dawladda kana dhashay colaad ama colaado gudaha ama dibada ka yimid.

Qorshe Wax Dhici Kara Loogu Talo Galay: Waa tillaabo gaar ah/qorshaha maareynta musiibada ee musiibo (dhici karta) oo weliba aad loogu badinaayo inay dhacdo, inkastoo aanan la ogeyn inay dhici karto boqolkiiba boqol.

Xiriirin (Markii Musiibooyin ay Jiraan): Wax ka qabashada musiibada caadiyan waxay ku lug leedahay shaqooyin badan oo kala duwan oo murugsan oo ay tahay in la isu keeno, kuwaasoo tiiba ay leedahay dawr gaar ah. Xiriirin waxay isu keentaa hay'addaha iyo agabyada si loo xaqiijiyo wax ka qabashada musiibada oo wax ku ool ah. Waxay aasaas ahaan khuseysaa si nidaamsan usoo helidda iyo adeegsiga agabyada iyo dad (urur ahaan, shaqaale iyo qalab) ayadoo loo eegayo waxyaabaha loo baahan yahay ee dhibaatadu keentay ama ka dhashay natiijada xaalad degdeg ah. Waxay si dherar ah uga dhex shaqeysaa hay'addaha maadaama ay tahay hay'ad wax u talisa, ayadoo sidoo kalena si dadab ah uga dhex shaqeysa hay'addaha sidii shaqada hay'ad wax koontaroosha.

Musiibo: Waa tixane carqaladeyn ah oo ku yimaada bulsho kaasoo sababtiisu tahay natiijada xaalad degdeg ah oo murugsan, mid bani'aadam uu sababay ama dabiici ah taasoo ku keenta carqaladeyn khatar ah sida beel ama bulsho u shaqeyso, ayadoo sababta khasaare baahsan oo bani'aadmi, mid qalab iyo mid deegaan kaasoo ka tan weyn beesha ama bulshadu intay u adkeysan kadho;

ayadoo adeegsanaysa agabyadeeda una baahan wax ka qabasho weyn oo xiriirsan oo Dawladda iyo ururo ay samaynayaan si bulshada loogu caawiyo inay kasoo kabato carqalada. Musiibooyinka waxaa caadiyan lala xiriirshaa dhaawac weyn oo soo gaara kaabeyaasha iyo dhismeyaasha, geeri, dhaawac dadka soo gaara iyo guryo la'aan, waxayna noqon karaan kuwo baahsan ama kuwo ku kooban waax ama waax hoosaad gaar ah.

Maareynta Musiibada: Soo uruurinta iyo maareynta agabyada iyo xilalka loogu talo galay la tacaamulka waxyaabaha kala duwan ee xaaladdaha degdega ah, gaar ahaan u diyaar garowga, wax ka qabashada iyo soo kabashada. Maareynta wax ka qabashada xaalad degdeg ah waxay ku lug leedahay qorsheyaal, qaab dhismeedyo iyo qabanqaabo la hirgaliyay si loogu hawlgaliyo dadaalada dawladda, hay'addaha iskaa wax u qabsada ku shaqeeya iyo kuwa gaarka ah si hab dhamaystiran oo xiriirsan wax looga qabto baahida xaaladda degdega ah.

Maareynta Halista Musiibada: Waa hannaanka nidaamsan ee adeegsiga go'aano maamul, xirfado urur iyo kuwo shaqo oo siyaasado lagu hirgaliyo, istaraatiijiyado iyo awooddaha bulshada iyo beelaha ee lagu dhimo saameynta dhibaatooyinka dabiiciga ah iyo musiibooyinka deegaanka iyo tiknoolojiyada ee la xiriira. Maareynta halista musiibada waxaa ujeedkeedu yahay in laga baaqsado, la yareeyo ama la gudbiyo saameynta ba'an ee dhibaatooyinka ayadoo la adeegsanaayo hawlo iyo tillaabooyin loogu talo galay ka hortagga, yareynta iyo u diyaar garowga musiibooyinka.

Dhimidda Halista Musiibada: Dhimitaanka halista musiibada ayadoo la adeegsanaayo dadaalo nidaamsan oo lagu qaadaa dhigo laguna xaqiijiyo adeegsiga siyaasado, istaraatiijiyado iyo dhaqamo lagu dhimayo u nuglaanta ayadoo la adeegsanayo diyaargarow, ka hor tag iyo dhimitaanka saamaynta ba'an ee dhibaatooyinka markii uu jiro horumar lasii wadi karo. Arintaani waxay ku lug leedahay dhimitaanka beylahda loogu jiro dhibaatooyin (loo jilicsan yahay dhibaatooyinka), dhimidda nuglaanta dadka iyo hantida, maareynta agabyada iyo deegaanka iyo sare u qaadidda diyaargarowga wax looga qabanayo musiibooyinka markii ay dhacaan laguna caawinaayo dadka ay saameeyeen si ay usoo kabtaan. Tani waxay ka kooban tahay dhammaan qaababka kala duwan ee hawlaha, oo ay ku jiraan tillaabooyinka qaab

dhismeedka iyo kuwa aan qaab dhismeedka ahayn si looga fogaado (ka hortag) ama loo xadido (yareyn iyo u diyaargarow) saamaynta ba'an ee dhibaatooyinka.

Halista Musiibada: Waa tillaabada cawaaqibka dhibka badan ee ka imaan kara is dhexgalka afar asbaab oo waaweyn oo kala ah: dhibaatooyinka marka laga hadlaayo xooggooda iyo inta ay baaxaddoodu dhan tahay iyo inta dhibaatadu waqti qaadatay; beylah u ahaansho (u nuglaan) marka laga hadlaayo waa inta dhibaato loo jiro iyo waqti inta ay dhibaato qaadanayso; u nuglaansho (dhan bulsho, dhan dhaqaale, qaab dhismeed iyo deegaan ahaan); iyo tillaabada degdega ah iyo awoodda kasoo kabashada ee bulshada.

Saameynta El Nino: Waa dhacdo isbaddalo ah oo ku timaada heer kulka sare iyo mowjadaha badda *Pacific, Atlantic* iyo badweynata *Indian*, taasoo sababeysa badi isbaddalada dhanka roobka da'a ee sanadlaha ah.
Isbaddaladaas ayaa muujiyay inay yihiin kuwo in la saadaaliyo ay adag tahay ama in la fahmo waxyaabihii dhaliyay ay adag tahay.

Xarunta Hawlgalada Degdega ah: Waa dhisme loo hirgaliyay in lagu koontaroolo laguna xiriirsho tillaabada iyo taageerada markii wax ama xaalad degdeg ahi dhacdo.

Nidaam Digniin Hore Loogu Talo Galay: Kani waa qaab dhismeed isku duwan oo loogu talo galay saadaalinta iyo qeybinta xog waqti leh oo wax ku ool ah si loogu saamaxo shakhsiyaad laga yaabo inay halis ku jiraan inay qaadaan tillaabo si ay uga fogaadaan ama u dhimaan halista ay ku jiraan ayna u diyaar garoobaan tillaabo wax ku ool ah. Ujeedka nidaamyada digniinta hore waa in xogta lagu xiriirsho adeegga gurmadka.

Beylah u Ahaansho: Waa ag joogitaanka, ku sugnaanta amaba u dhawaanshaha dad, waxyaabo agab ah oo maciishad laga raadsado, adeegyo deegaan ama kheyraad, kaabeyaal, ama dhaqaale, hanti bulsho ama mid dhaqan ka ag dhowyahiin meelo si xun ay musiibo u saamayn kadho.

Dhibaato: Waa dhacdo, shay, hawl bani'aadam ama xaalad *awood u leh inay sababto* musiibo. Dhibaatooyinku waxay noqon karaan dabiici (sida daad,

duufaan, *sunaami*), mid bani'aadam keenay (sida kiimiko meel lagu qubo, dab, qarax, dagaal iyo colaad), mid bayoloji ah (sida SARS, Hargabka Shimbiraha), ama tiknoolojiyad ahaan ah dabiiciyan (sida meel tamarta nukleyrka dhalisa oo shaqeyn weyda). Dhibaatooyinka micnaheedo ma ahan in ay musiibo iyagu yahiin.

Dhibaato Dhanka Biyaha iyo Hawada ah: Dhacdo dhanka hawada ah, dhanka biyaha ama dhanka bad weynta oo laga yaabo inay sababto geeri ama dhaawac, burbur hanti, burbur dhaqaale mid mujtamac ama mid deegaan sida daadad, burbur dhismeyaal, dhiiqo soo rogmatay iyo duufaanada ka dhaca dhulka kuleylaha ah.

Hay'adda Garwadeenka ah: Waa urur khibradiisa iyo agabyadiisa dartood aasaas ahaan masuul ka ah la tacaamulidda dhibaato gaar ah.

Musiibo Kadib: Waa waqtiga ku xiga waqtiga xaaladda degdega ahi jidhay taasoo tillaabooyinka ay tahay in la qaado si awood loogu siiyo dhibbaneyaasha inay sii wataan noloshoodii caadiga ahayd iyo qaababkii ay maciishadooda u raadsan jireen, iyo in dib loo soo hagaajiyo kaabeyaashii, adeegyadii iyo dhaqaalaha si munaasab ah oo lagu haqab tiri karo baahiyaha mudada dheer iyo ujeedooyinka horumarka ee la qeexay.

Udiyaar Garow: Waa tillaabooyin loogu talo galay in lagu xaqiijiyo in bulshooyinku ay lahaan doonaan aqoonta iyo fahamka deegaankooda dhibka badan si ay awood ugu yeeshaan inay u babac dhigaan dhibaatooyinka dhici kara.

Ka Hortag: Waa hawlo ama tillaabooyin loo qaado in lagu dhimo ama meesha looga saaro halis.

Dib u Dhis: Waa tillaabooyin badan oo la qaado musiibo kadib si dib loogu hirgaliyo bulsho waxaana ku jira dhisida guryo joogto ah iyo kaabeyaal, in si buuxda adeegyada loogu soo celiyo, iyo in la dhammaystiro wixii la samaynaayay waqtigii ka horeeyay musiibada ayadoo laga faa'iideysanaayo fursadda lagu qaadayo tillaabooyinka lagu dhimo halista musiibada iyo in lagu adeegsado mabda'a 'dib u dhis oo sidii hore ka wanaagsan u dhis'.

Dib u Habeyn: Waa tillaabooyin la qaado musiibo kadib kuwaasoo loogu talo galay in durba dib loogu soo cesho xaaladihii nololeed ee dadka musiibadu ku

dhacday ayadoo la adeegsanayo dayactirka iyo dib u hirgalinta adeegyada muhiimka ah ee musiibo carqaladeysay.

Samatabixin: Waa tillaabooyin loogu talo galay in lagu horumariyo nidaamyada loo baahan yahay in lagu taageero bulshooyinka saamayntu gaadhay ayadoo dib loo dhisaayo kaabeyaashoodii lana soo celinaayo caafimaadkoodii dhanka dareenka iyo dhanka jismiga ahaa. Samatabixin waxaa ku jira dib u habayn iyo dib u dhis labadaba oo waxaana laga yaabaa inuu ku jiro sii waditaanka qaaditaanka tillaabooyin gaar ah oo gargaar (daryeel) kuwaas oo loogu naxariisanaayo kooxo gaar ah oo taag daran ama u nugul dhibaatooyinka.

Gargaar: Waa guud ahaan cawimaadda mustaqbalka dhow ee dhibaatada lagu yareynayo. Waxaa ku jira lacag, raashin, dawo, gabbaad, dhar ama wixii kale ee ah cawimaad dadweyne ama mid gaar ah ee la siiyo dad iyo bulshooyin si ay uga soo kabtaan saamaynta musiibo ku dhacday.

Adkeysi: Awoodda nidaam, beel ama bulsho dhibaatooyin qabsadeen ay isaga difaacdo, kula qabsato, ku wajahdo oo uga soo kabato saameynta dhibaatooyinkaa si waqti cayiman leh ayadoo qaab dhismeedkeedii aasaasiga ahaa wali leh shaqeyneysana, ama ay dib ugu soo noqoto kana soo kabsato durba saameynta dhibaato leedahay. Yeelashada adkaysi waxay ku xiran tahay awoodda bulsho u leedahay wax ka barashada musiibooyin hore ayadoo adeegsanaysa badbaado iyo hirgalinta tillaabooyin dhibta lagu dhimo.

Halis: Waa cawaaqib dhib badan oo loo badinaayo inay dhacaan ama khasaare la filaayo (dhimasho, dhaawac, burbur hanti, maciishad burburta, dhaqaale ama hawl carqaladi ku timaado ama dhaawac soo gaara deegaanka) oo ka dhalanaaya dhibaatooyin dabiici ah iyo kuwo bani'aadami kallifay oo isku darmay kuwaasoo abuura xaalado nuglaansho.

Unuglaansho: Waa saamayn ba'an oo loo badinaayo inay ku qabsato – waa qaababka iyo daruufaha bulsho, nidaam ama hanti ka dhiga kuwo baylah u ah saamayn dhaawac geysata ee dhibaato. Waxaa jira noocyo badan oo nuglaansho ah, oo ka dhasha sababo toos ah, kuwo bulsho, kuwo dhaqaale, iyo kuwo deegaan.

MAGACYO LA SOO GAABSHAY

CBDRM	Maareynta Halista Musiibada ee Bulshada Kusalaysan (Community Based Disaster Risk Management oo la soo gaabshay)
DM	Maareynta Musiibada (Disaster Management oo la soo gaabshay)
DMA	Hay'adda Maareynta Musiibada (Disaster Management Agency oo la soo gaabshay)
DMC	Guddiga Maareynta Musiibada (Disaster Management Committee oo la soo gaabshay)
DDMT	Kooxda Maareynta oo la soo gaabshay (Disaster Management Team oo la soo gaabshay)
DRM	Maareynta Halista Musiibada (Disaster Risk Management oo la soo gaabshay)
EOC	Xarunta Hawlgalada Xaaladdaha Degdega ah (Emergency Operation Centre oo la soo gaabshay)
FAO	Ururka Cunnada iyo Beeraha (Food and Agriculture Organisation oo la soo gaabshay)
FEWS Net	Shabakada Nidaamyada Digniinta Hore ee Macaluusha (Famine Early Warning Systems Network oo la soo gaabshay)
FGS	Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya (Federal Government of Somalia oo la soo gaabshay)
FSNAU	Cutubka Helitaanka Raashinka iyo Nafaqeynta (Food Security and Nutrition Unit oo la soo gaabshay)

HC	Xiriiriyaha Bani'aadamnimada (Humanitarian Coordinator oo la soo gaabshay)
ICS	Nidaamka Taliska Dhacdada (Incident Command System oo la soo gaabshay)
IDP	Qof Dalka Gudihiisa ku Barokacay (Internally Displaced Person oo la soo gaabshay)
IGAD	Hay'adda Dawladdaha Kadhexeysa ee Horumarka (Inter-Governmental Authority of Development oo la soo gaabshay)
MoHADM	Wasaaradda Arimaha Baniaadanimada iyo Maareynta Musiibada (Ministry of Humanitarian Affairs and Disaster Management oo la soo gaabshay)
MTR	Dib u Eegida Dhexbartamaha Waqtiga (Mid Term Review oo la soo gaabshay)
NDMC	Guddiga Qaran ee Maareynta Musiibooyinka (National Disaster Management Council oo la soo gaabshay)
SDMCG	Kooxda Xiriirinta Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya (Somalia Disaster Management Coordination Group oo la soo gaabshay)
NAPA	Qorshaha Ficilka Qaran ee Laqabsiga (National Adaptation Plan of Action oo la soo gaabshay)
NDMF	Qasnadda Qaran ee Maareynta Musiibooyinka (National Disaster Management Fund oo la soo gaabshay)
NEOC	Xarunta Qaran ee Hawlgalada Xaaladdaha Degdega ah (National Emergency Operations Centre oo la soo gaabshay)

NGO	Urur aan Dawli Ahayn (Non GovernmentalOrganisation oo la soo gaabshay)
OCHA	Xafiiska Xiriirinta Arimaha Bani'aadminimada (Office for the Coordination of Humanitarian Affairs oo la soo gaabshay)
OI	Sargaalka Masuulka ka ah (Officer In-charge oo la soo gaabshay)
SNDMP	Siyaasadda Qaran ee Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya (Somalia National Disaster Management Policy)
SNDP	Qorshaha Qaran ee Horumarinta Soomaaliya (Somalia National Development Plan oo la soo gaabshay)
SODMA	Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya (Somalia Disaster Management Agency oo la soo gaabshay)
SOP	Habraaca Heerka Sare ah ee Hawlgalida (Standard Operating Procedure oo la soo gaabshay)
SRCS	HAY'ADDA BISHA CAS EE SOOMAALIYA (Somalia Red Crescent Society oo la soo gaabshay)
SWALIM	Maareynta Xogta Biyaha iyo Dhulka Soomaaliya (Somalia Water and Land Information Management oo la soo gaabshay)
UN	Qaramada Midoobay (United Nations oo la soo gaabshay)
WHO	Ururka Caafimaadka Aduunka (World Health Organisation oo la soo gaabshay)

CUTUBKA 1: HORDHAC

1. Arar

1. Laga soo bilaabo 2012, markii la hirgaliyay Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya (FGS), dalku wuxuu horay ugu socday dhisidda awoodiisa dhan kasta ah ee lagu bixinaayo xukun wax ku ool ah dalka oo dhan. Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya (SODMA) waxaa abuuray 2011 Ra'iisul Wasaaraha Dawladii Federaalka ee Kumeelgaarka ahayd (TFG) intii ay jirtay macaluushii 2010-2011 si ay u maareyso dhammaan dhibaatooyinka musiibooyinka dalka ka jiray, iyo si ay ula timaaddo istaraatijiyo loogu talo galay mustaqbalka dhow iyo kan fog si looga hortago, wax looga qabto, oo loo maareeyo musiibooyinka dalka soo wajahaya.

2. Soomaaliya waxay qaadatay qaab dhismeed federal ka Jamhuuriyad ahaan, ayadoo Dawladda Federaalka ah ay daggan tahay Muqdisho Dawlad Goboleedyana ay ka jiraan gobolada. Maareyn musiibo oo wax ku ool ah waxay u baahan tahay hoggaan adag oo heer Gobol iyo heer maxali ah, kuwaasoo si la mid ah hoggaan xooggan oo ka imaanaya Dawladda Federaalka ah uu u caawinaayo. Hadii ay macquul tahay, dhammaan Dawlad Goboleedyadu waa inay lahaadaan xukun wanaag iyo awood dhaqan gal ah oo loogu diyaar garoobo laguna maareeyo musiibooyinka nooc kasta leh ee saameeya goboladooda, ayadoo Dawladda Federaalka ah ay bixinayso qaab shaqo oo wanaagsan, xiriirin iyo taageero lagu dardargaliyo agabyada munaasab ah ee ku jira hannaanka. Qaar ka tirsan Dawlad Goboleedyada waxay horayba u hirgaliyeen hay'addahooda maareynta musiibooyinka (tusaale, Puntland, Somaliland) kuwaasoo ayaga u gaar ah si loogu awood siiyo maareyn musiibooyin oo wax ku ool ah oo ka dhacda Goboladooda gudahooda.

3. SODMA waxaa hirgalisay Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya (FGS) ayadoo cuskanaysa Xeerka (1) Nambarkiisu yahay 17 ee 27/6/2016 (oo halkaan loogu xusay sidii "Sharciga") ayadoo la leeyahay qorshaha cad ee samatabixinta iyo ka badbaadinta dadka Soomaaliyeed iyo hantidooda musiibooyinka dalka ka dhaca iyo nugeylka. Sharcigu wuxuu sidoo kale masawiranayaa in SODMA ay u diyaar garoobeyso ka hortagida ama yereynta dhammaan musiibooyinka dalka ka dhaca ayna wax ka qabato durba, taasoo ayadu laga yaabo inay gacan ka geysato hirgalinta xarumo iyo meelo ku yaala degmooyinka iyo gobolada dalka ee u nugul musiibooyinka, iyo xaqiijinta inay jirto siyaasad qaran oo wanaagsan oo ku saabsan maareynta musiibooyinka dalka ka jira taasoo hagta gebi ahaanba shaqada la xiriidha maareynta musiibooyinka.

4. Xeerku wuxuu amar ku bixinayaa in SODMA dejiso siyaasad dhamaystiran oo loogu talo galay maareynta musiibada si loo abuuro qaab shaqo oo wax awood siiya kaasoo loogu talo galay hirgalinta nidaam musiibada lagu maareeyo oo loogu talo galay dalka oo idil. Dukumiintigaan arintaa ayuu jawaab ka bixinayaa. Siyaasadda waxaa lagu diyaarshay hannaan wada tashi oo ay ku lug lahaayeen dhowr waaxyood iyo Wasaarado ah heer Federaal iyo weliba heer Dawlad Goboleedyo.(2)

1Dowladda Federalka ah ee Soomaaliya (2016). Sharciga Aas-aasitaanka Hay'adda Maaraynta Musiibooyinka, Xeerka Nambarkiisu Yahay 17 ee 27/6/2016.

2 Nidaamka siyaasadda horumarinta oo tafaftiran ayaa lagoogu soo lifaaqay Annex 1 ahaan.

1. Ujeedada Qorshaha siyaasadda dhamaystiran ee maareynta musiibooyinka

5. Ujeedada Qorshaha Siyaasadda Qaran ee Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya (ama 'siyaasadda maareynta musiibooyinka', hadii la soo koobo) waa in la bixiyo qaab shaqo oo sharci oo loogu talo galay ka dhex abuuridda maareynta musiibooyinka (DM) qaab dhismeedyada habboon ee dawladda (ama dawladaha)(3) sidaana ku xoojisa awooddaha qaran ee loogu talo galay u diyaargarow musiibo oo wax ku ool ah, wax ka qabasho, yareyn, ka hortag iyo samatabixin, si loo badbaadsho nafta iyo maalka iyo maciishadda, deegaanada iyo dhaqaalaha guud. Markii la kobcinaayo awoodda heer Federaal, Dawlad Goboleed iyo heerar *Waax/Tabeele* (qeyb/tuulo) kuwaasoo loogu talo galay wax ka qabasho iyo u diyaar garow wax ku ool ah oo loo diyaar garoobo waxna laga qabto, Soomaaliya waxay aad u dhimi kartaa tirada dhimashada, xaddiga dhaawaca iyo lumidda dhaqaalaha iyo tirada dadka musiibooyinku ay saameeyaan.

- Ujeedooyinka gaarka ah ee siyaasadda Maareynta Musiibooyinku waa:
- In la hago si cadna loo muujiyo waajibaad loogu talo galay waxyaabo kala duwan oo ah maareynta musiibooyinka kuwaasoo ka jira heerarka kala duwan ee dawladda dhammaantood;
- In la fududeeyo ku jiheynta maareynta halista musiibada qorsheyn iyo hannaan samatabixin gudaha Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya heer kasta;
- In sare loo qaado tillaabooyinka lana hirgaliyo qaab looga hortagaayo ama lagu dhimaayo musiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa dadku sababaan ee dalka ka dhaca;

3 Dokumiintigan dhexdiisa, 'dowladaha' waxaa laga wadaa Dowladda Federalka iyo Dowlad Goboleedyada. Hase ahaatee marka toos ah Dowladda Federalka looga hadlayo waxaa la isticmaalay 'Dowladda' oo xarafka hore la wayneeyay.

- In la sameeyo nidaam wax ku ool ah oo lagu ogaado halista dhibaatooyinka, sida loogu nugul yahay musiibooyinka iyo samaynta qiimeyn dhamaystiran oo lagu samaynaayo halista dhibaatada dushana lagala soconaayo heer kasta;
- In la sameeyo nidaam digniin hore oo isku dhafan ahna wax ku ool kaasoo ah mid guud;
- In sare loo qaado dhaqan badbaado iyo mid adkeysi oo ka dhex jira masuuliyiinta maareynta halista musiibada, iyo bulshooyinka;
- In qiimeyn lagu sameeyo lana xalliyo sababaha dhibaatada keena ee ugu horeeya;
- In la xoojiyo nidaamka u diyaar garowga musiibada si si wax ku ool ah wax looga qabto loogana soo kabto heer kasta;
- In la bixiyo qaab shaqo oo loogu talo galay xiriirin iyo maareynta dhammaan musiibooyinka dalka ka jira ee dabiiciga ah iyo kuwa dadku sababeen.

1.3 Halista musiibooyinka Soomaaliya

1.3.1 Xaaladda dalka oo murugsan

6. Dhibaatada bani'aadamnimo ee Soomaaliya waa mid ka mid ah xaaladdaha degdega ah ee ugu dhib badan caalamka ee daba dheeraaday. (4) Soomaaliya waxay aad ugu nugushahay musiibooyinka – dalku wuxuu ku jiraa booska 15aad ee liiska DFID dalalka soo koraya ee aadka halista ugu jira musiibooyinka.(5)

4 UNDP (2015): DUKUMIINDIGA MASHRUUCA Soomaaliya – Cinwaanka Mashruuca: Sare u qaadidda u Adkeysiga Cimilada Bulshooyinka Nugul iyo Deegaanka Soomaaliya. p13

5 OCHA (2015). Qorshaha Waxka Qabashada Arimaha Bani'aadminimo – Soomaaliya, 2016. Nofeembar 2015.

Abaartii 2011 waxay galaafatay dad gaaraya 260,000 oo ku dhintay gudaha Soomaaliya.(6) Tobankii sano ee lasoo dhaafay, abaaraha ayaa raashin yari dhigay 870,000 oo qof ilaa 2.3 malyan oo qof oo dheeraad ahna waxay ka dhigeen kuwo u nugul raashin yari – waa qeyb markii dadka dalka loo qeybsho shan qeybood.(7) Baanka Aduunka Daraasadiisa Meelaha Musiibooyinka u Nugul Dabiici Ahaan, 43% dhulka Soomaaliya waxaa kusoo fatahi kara daadad waxaana ka dhici karta abaar taasoo beylah uga dhigta ilaa 54% shacabka dalka dhibaatooyin dhanka jawiga ah iyo kuwo kale oo dabiici ah.

7. Faqri ba'an, unuglaansho iyo beylah u noqoshada dhibaatooyin badan, oo ay weheliso dawlad tacbaan ah oo dalka kajidha macnahoodu waa in Soomaaliya ay halis ugu jirto musiibooyin joogto ah. In ka badan boqolkiiba 73 dadku waxay kunool yihiin heer ka hooseeya faqriga ($1.25 maalintiiba); mid ka mid ah 18 kastoo haween ah way dhimataa markii ay dhalayso; ilaa 1.7 milyan oo carruur ah ayaan iskoolo dhigan; 82 boqolkiiba dadku ma haystaan biyo nadiif ah iyo nadaafad aasaasi ah; oo, Soomaaliya waxay ugu horeysaa dalalka nafaqo darradu kajirto caalamka.(8) OCHA ayaa ku qiyaasay in sanadkii 2016, ilaa 308,000 carruur ah oo ka yar 5 sano jir ay qabeen nafaqo-darro cusub halka 56,000 oo carruur ah ay aad ula il darraayeen nafaqo darro ba'an, halka culeyska guud ee nafaqo darrada cusub ay ka badneyd 800,000 oo xaaladood.(9)

---

6 Daniel Maxwell, Nisar Majid, Heather Stobaugh, Jeeyon Janet Kim, Jacqueline Lauer, Eliza Paul (2014). Casharadii laga bartay Macaluushii Soomaaliya iyo guud ahaan Dhibaatada Geeska Afrika 2011–2012. Dib u Eegidda Qoraalada ee Miiska Dushiisa ah, Jaamacada Tufts University

7 UNDP (2015). UNDP: Op cit

8 OCHA (2015). Op cit

9 OCHA (2015). Op cit

8. Siyaasaddaha iyo borotakoolada lagula macaamilo musiibooyinka iyo u nuglaanta dhibaatooyinka ee u dhow kuwo aan ka jirin hay'addaha dawliga ah dhexdooda haatan ayumbey bilaabayaan inay kobcaan. Kani waa halka dawrka Dawladu uu yahay inuu kasoo galo – oo ah in la sameeyo qaab shaqo oo xaqiijiya in musiibooyinka loo garowsado kuwo qoto dheer oo muddo dheer jiray oo ay tahay qorshe in loo dejiyo, ayagoo leh cawaaqib la dhimi karo lana yareyn karo saamayntiisa markii tillaabooyin munaasab ah la qaado.

9. Ayadoo in ka badan 1.1 milyan oo qof ay wali gudaha dalka ku barakacsan yihiin muddo dheer ayadoo fursaddaha ay ku heli karaan adeegyo aasaasi ah iyo maciishad ay yar yihiin, ayaa dalka waxaa wali laga diiwaan galinayaa barakac cusub oo ka dhashay colaad hub laisu adeegsado musiibooyin dabiici ah oo soo noqnoqda. Luuliyo 2015, hawlgalo cusub oo military ayaa barakiciyay in ka badan 42,000 oo qof gudaha Bakool, Baay, iyo Gedo, Hiiraan, Galgaduud iyo Shabeelaha Hoose. 2015, 76,000 oo qof ayaa waxaa barakiciyay roobabkii Gu'ga iyo Deyrta (Oktoobar-Janaayo). Dagaal qabiilada u dhexeeya ayagoo ku dagaalamaya dhulka, daaqa ama biyaha ayaa wali socda oo khasaare keena iyo barakaca rayidka. Abaarta haatan jirta ee soo bilaabatay Nofeembar 2016 waxay barakicisay in ka badan 257,000(10) waxayna raashin yari dhigtay qiyaastii dadka Soomaaliya kala bar (6.2 milyan oo ka tirsan 12.3 milyan) una baahday cawimaad bani'aadamnimo. Dumarka ku nool miyiga ayaa loo garowsaday inay ku jiraan kooxaha ugu nugul isbaddalka cimilada gudaha Soomaaliya maadaama aysan si saami ah u helin agabyada dabiiciga ah iyo kuwa aan dabiiciga ahayn.

10OCHA (2017). Soomaaliya: Qorsheha hawsha loogu talo galay ka hor tagga macaluusha (Jan-Juun 2017), Febraayo 2017

10. Kasokow barakacayaasha badan, in ka badan 1.2 milyan oo qaxooti Soomaali ah ayaa ku nool dalalka jaarka ah ee gobolka iyo Yemen, haatana qaar ayaa soo laabanaya dagaalka Yemen ka jira awgii.Dabayaaqadii Nofeembar 2015, ku dhawaad 30,000 oo qof oo ka baxsanayay dagaalkaa ayaa soo gaaray Puntland, Somaliland, iyo koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, kuwaasoo badi Soomaali ahaa. Waxaa la filaayay in 18,000 oo dheeraad ah oo isugu jira qaxooti Soomaali ah oo soo laabtay (qaxooti iyo muhaajiriinba) ay ka yimaadaan Yemen sanadkii 2016. Tiro guud oo ah 50,000 oo qaxooti soo laabtay ah waxaa laga filaayay inay ka yimaadaan Kenya sanadkii 2016, iyo weliba 1,000 ka imaanayay Itoobiya.(11)

11. Saadalinada isbaddalka cimilada ee SWALIM, 2002-2012, NAPA (ayadoo la adeegsanayo taageerada ICPAC) iyo weliba dalalka jaarka ah ee guud ahaan gobol weynaha Geeska Afrika (GHA), waxay muujinayaan in Soomaaliya heer kulkeedu uu mustaqbalka aad u kordho, asagoo kordhaya ilaa 3.2°C wixii loo gaaro 2080.(12) Koror tartiibtartiib ah oo roob ah ayaa laga filayaa gudaha Soomaaliya ayadoo xilliyada uu ku kala duwanaan doono iyo weliba koror ah darnaanta iyo inta jeer ee ay dhacaan abaaruha iyo daadadku.(13)

12. Dhibaatooyinka dabiiciga ah waxaa ku darsamay colaada soo martay dalka rubuc qarnigii la soodhaafay, inkastoo Soomaaliya ay soo mareen waqtiyo dagganaan iyo ammaan ah tobanaankii sano ee la soodhaafay ayadoo intii lagu jiray oo qeybo ka mid ahna aysan lahayn wax dagaal ah. Beelo maxali ah oo ku dirira kheyraad, dagaalo siyaasadeed ayadoo lagu dirirayo gobol iyo kheyraadkiisa,

11 OCHA (2015). Qorshaha Waxka Qabashada Arimaha Bani'aadminimo –Soomaaliya, 2016. Nofeembar 2015

12 Wasaaradda Kheyraadka Qaranka ee Soomaaliya (2013). Qorshaha Ficilka Qaran ee Laqabsiga Isbaddalka Cimilada ee loogu talo galay Soomaaliya (NAPA 2013)

13 Wasaaradda Kheyraadka Qaran ee Soomaaliya (2013). Ibid

dawladdaha dalalka gobolka oo ku lug yeeshay (mar mar ayagoo dad kale adeegsada), iyo dagaal ay hurinayaan afkaar xagjir ah oo caalami ah ayaa sii xumeeya dhibaatada bani'aadamnimo ee socota ee ay ugu wacan yihiin daadadka iyo abaaruhu, sida laga marag kacay intii ay jidhay macaluushii 2011.(14) Gobolka koofurta iyo bartamaha ayaa aad waxaa u saameeyay dhibaatooyin badan, ayadoo saddex meelood dadka gobolkaa markii afar qeybood loo qeybsho ay baahi bani'aadminimo ay la soodaristay, halka Somaliland ay sii ahayd meel xasilloon ayna gaadhay horumar tartiibtartiib ah oo ku wajahan dhisida hay'addaha dawliga ah, Puntland ayaduna ay ka xasillooni badan yahay Koofurta iyo Bartamaha, balse ay saameeyeen amni darro, dembiilenimo iyo burcad badeednimo.

13. Siyaasaddaha iyo borotakoolada lagula tacaamulo musiibooyinka waxay u dhow yihiin kuwo aan jirin maadaama hay'addaha dawliga ahi ay tartiib u kobcayaan. Qorshaha sanadlaha ah ee Wax ka Qabashada Arimaha Bani'aadminimada ee loogu talo galay Soomaaliya,(15) oo OCHA uu xiriirshay, waa dukumiintiga qura ee bixiya guudmarka musiibooyinka iyo sida ururo qaran iyo kuwo caalami ah ay wax uga qaban lahaayeen musiibooyinka socda. Awooddaha farsamo iyo kuwa shaqo ee dhimidda halista musiibooyinka waa kuwo aad u nugul dhammaan gobolada Soomaaliya. Ayadoo uusan jirin nidaam digniin hore oo rasmi laga dhigay iyo qorshe heer degmo ah oo loogu talo galay maareynta musiibooyinka oo asna aanan jirin, bulshooyinka waxaa marmar dhif ah looga digaa xaalado daran umana diyaarsana. Xog digniin hore ah ayaa la siiyaa bulshooyinka waxaana caadiyan loo siiyaa si hal haleel ah ama dhif ah oo aan xiriirsanayn waxaana siiya hoggaamiyeyaasha

14 Waaxda Horumarinta Dibada (2012). Qorshaha Hawlgalka 2011-2015, DFID Soomaaliya, Waxaa la cusbooneysiiyay Juun 2012

15 OCHA (2015). Qorshaha Wax Ka Qabashada Arimaha Bani'aadamnimada – Soomaaliya, 2016. Nofeembar 2015.

ama saraakiisha ayagoo ugu soo dira farriimaha gaagaaban ee taleefanada ama waxay uga sheegaan afka.

14. Dagaalka daba dheeraaday ee Soomaaliya waxaa uu sababay burburka shabakad lagula socdo cimilada; marka, macluumaad yar ayaa laga hayaa waqtigii ka dambeeyay 1990, taasoo adkeysay in la sameeyo falanqeyn sax ah oo ku saabsan isbaddalka cimilada Soomaaliya. 5tii sano ee la soodhaafay, hay'adda FAO Soomaaliya gaar ahaan laanteeda SWALIM, IGAD, ICPAC iyo laanta FEWS NET ee USAID ayaa dadaaladoodu ay diirada saareen horumarinta saadaalin hawo oo heer goboleed ah oo Soomaaliya loogu talo galay, ayadoo la adeegsanaayo shabakada dib u habaynta lagu sameeyay ee ah xarumaha dusha kala socodka marka lagu daro xarumo dibada ah (Kenya, iyo Jabuuti).(16) Laanta FSNAU ee FAO waxay samaysaa labo qiimeyn xilliyeed sanad walba oo kusaabsan helitaanka raashinka iyo nafaqada kuwaasoo laga sameeyo miyi iyo magaalo iyo weliba xeryaha barakaceyaasha ee Soomaaliya ku firirsan. Ayadoo kaashaneysa SWALIM, FSNAU waxaa ay dusha kala socotaa inta roob da'a ayadoo adeegsanaysa shabakado gaaraya 40 xarumood oo roobka la socda inta uu dhan yahay kuwaasoo ku yaala qeybaha dalka oo dhan. Si kastaba ha ahaatee, hay'addaha dawladda ee ku lugta leh Maareynta Halista Musiibada (DRM) si wax ku ool ah uma aysan adeegsan aqoonta saadaalinta ee laga helay dadaaladaas si ay awood ugu helaan inay sharraxaad ka bixiyaan macluumaadka saadaasha.Arintaa ayaa cawaaqibka ka dhashay uu noqday in dalku waayo awoodda saadaalinta dhibaatooyin dhici kara oo baaxad weyn uuna yeesho diyaar garow yar oo loogu talo galay jawiga daran.

16UNDP Dalka: DUKUMIINTIGA MASHRUUCA Soomaaliya- Cinwaanka Mashruuca: Sare u Qaadidda u Adkeysiga Bulshooyinka iyo Deegaanka Nugul Isbaddalka Cimilada Soomaaliya. p13

1.3.2 Xaalad khatar ah

Dhibaatooyinka la xiriira Biyaha, hawada iyo cimilada

Abaar

15. Roobabka oo baaqda (*Gu ama Deyr*) waa caam taasoo sababta in dalagyo aysan soo go'in cawskuna qalalo ayadoo roob la'aantu noqoto joogto. Dhulka Soomaaliya ee qalalan ama qalayl xigeenka ah (ASALs), oo dhulka dalka ka ah in ka badan 80% hoyna u ah inta qeyb xoolo dhaqatada Afrika kagasoo aadeysa dalka intooda badan, (17) waa gaar ahaan ku u nugul xaaladdaha daran ee hawada. In ku dhow 70 boqolkiiba Soomaalidu waxay ku taxaluqaan beer qodasho cimilada ku xiran iyo xoolo la dhaqdo. Xoolo dhaqatadu waxay ku xiran yihiin dhul cawsle ah oo dooggu biyaha roobka uu kusoo baxo kaasoo xooluhu u daaqaan waxayna leeyihiin hanti aad u yar oo maguurto ah. (18) Ayadoo asbaabaha cimiladu ay keenaan abaar, hadana sababaha bani'aadamku kallifo sida colaada socota waxay xaddidaan la'aanta meel loo maro dhul daaqsinka waxayna sababaan inuu guul darreysto nidaamka daryeelka mujtamaca, si kastaba ha u fududaadee, ayadoo taasi sababto musiibooyin iyo macaluul la mid ah tii 2010-2011.

16. Sanado colaad ah, dawlad la'aan iyo maal gashi yari ayaa sababay inay sii xumaadaan meelaha laga helo biyaha iyo warihii jiri jiray todobaatameeyadii. Heer maxali, waxaa xadidnaa maareyn ilo dabiici ah oo bulsho ku salaysan isla markaana wanaagsan iyo u diyaar garowga musiibooyinka. Bulshooyinku waxay la' yihiin habab lagu keydsado biyaha roobka oo wax ku ool ah waxaysana awoodin inay dhulka biyaha daadaya ka dhurtaan oo keydsadaan waqtiga roobabka

17 Wasaaradda Kheyraadka Qaranka Soomaaliya 2013. Qorshaha Ficilka Qaran ee Laqabsiga Isbaddalka Cimilada ee loogu talo galay Soomaaliya (NAPA 2013)

18 Ibid

mahiigaanka ah si ay biyahaa u isticmaalaan xilliga jiilaalka. (19) Tuulooyin tiro yar ayaa ku keydsada biyaha roobka baraago (*barkado*), laakiin si munaasab ah looma keydsho. Bulshooyinka reer miyiga ah waxaysan awoodin in ay isticmaalaan maareynta dhulka cawsku ka baxo/cawska si ay u xaqiijiyaan inay helaan raashin iyo quud xoolo oo ku filan markii abaaro dhacaan.

17. Taariikh ahaan, abaaro ba'an ayaa Soomaaliya ka dhacay 1964, 1969, 1974, 1987, 1988, 2000, 2001, 2004, 2008,(20) iyo 2011, kuwaasoo saameeyay 4 milyan oo qof dilayna ku dhawaad 258,000 oo qof kuwaasoo kala bar ay ahaayeen carruur.(21) Abaartii dhawaan dhacday ee 2017 waxay saamaysay ku dhawaad 6 milyan oo qof ayadoo ka dhacday dhammaan

Sawirka 1: Meelaha abaaruhu saameeyeen (2017) ee Soomaaliya



19 Ibid

20SWALIM

21Dhimashada dadka koofurta iyo bartamaha Soomaaliya ee ay saameeyeen raashin yari ba'an iyo macaluul 2010-2012 Daraasad ay samaysay FAO/FSNAU iyo FEWS NET

qeybaha kala duwan ee dalka.(22) Abaar joogto ah waxay sidoo kale ku qasabtaa inay haajiraan ayagoo doonaya baad, taasina badanaa waxay horseedaa colaado maadaama dadku isku dagaalo dhul daaqsinka. Dad badan ayaa waxaa qasab ku noqota inay guryahooda isaga tagaan oo ay noqdaan barakaceyaal. Dhab ahaantii, badi dadka wax qaadaa dhiga ee waayo-aragnimada u leh dabeecada hijrada reer baadiyaha waxay muujinayaan in sababaha dhaliya colaadaha maxaliga ah ee Soomaaliya badankood ay yihiin abaar, inkastoo hadhow ay dib ka yeeshaan qaabab kale.

Daadad

18. Daadadku waa dhacdooyin sanadle ah oo badanaa sida ugu daran u yimaada Maarso-Maajo iyo Sebtembar-Nofeembar dhulka ku teedsan labada webi ee Jubba iyo Shabeelle. Daadad xooggan ayaa ku fataha dooxooyinka Jubba iyo Shabeelle sanad kasta Abriil ilaa Juun iyo min Oktoobar ilaa Diseembar. Kaabeyaasha oo xadidan sida gidaarada celiya daadadka ee jiinka iyo nidaamyada biyaha celiya ama dhan kale u jiheeya, waxay arintaasi beylah bulshooyinka uga dhigtaa daadadka sanad walba, ayadoo badanaa arintaasi u leedahay natiijooyin musiibo badan beeraleyda iyo dhaqaalaha miyiga.(23) Gobolada Shabeelaha Hoose & Shabeelaha Dhexe ayaa saamaynta ugu badani soo gaadhaa ayadoo xilliyada qaar markii la gaaro burbur uu soo gaaro dhul beereedka, guryaha iyo kaabeyaasha sida jidadka gala beeraha kasokow in arintaasi saamayso maciishada xoolo dhaqatada. Webi Shabeele wuxuu qarka jabsadaa meel u dhow xadka dalku la wadaago Itoobiya, qiyaastiina u jidha 40 Km Baladweyne, xarunta Hiiraan. Daadadla kasoo bilowda Burdhinle oo u dhow Beledweyne mararka qaar waxay soo gaaraan magaalada Jalalaqsi, ayagoo ku qasba barakaceyaasha nawaaxigaa kunool inay magangalyo bidaan dhulal

22OCHA Soomaaliya

23 Ibid

sare oo ka fog guryahooda iyo beeraha. Intaa waxaa dheer, gobolka Shabeelaha Dhexe, kanaal sanado ka hor lagu jeexay cawimaad laga helay Shiinaha ayaa soo fataha badanaa asagoo keena daadad xooggan oo ku qasaba dadka deegaanka ah inay u guuraan magaalooyinka sida Jowhar. Waxaa lagu qiyaasay in in ka badan 50 tuulo oo ku teedsan dhul 100-km ah oo kuyaala gobolka Shabeelaha Dhexe xilliyada qaar daadad ay saameeyaan.

Sawirka 2: Meelaha daadku ku badan yahay Soomaaliya



19. Shabeelaha Hoose, wabigu wuxuu ku fatahaa meelo ay ku jiraan Afgooye, Mubaarak iyo Awdheegle meelo ku hareereysan; waxaa la qiyaasay in gobolkaan, nolosha xoola dhaqatada 70 tuulo in ka badan daadadku ay saameeyaan. Webi Jubba oo soo gala Soomaaliya qiyaastii in dhan 70 Km kana soo gala xadka dalku la leeyahay Itoobiya (meel u dhow Luuq Gobolka Gedo) wuxuu soo dhex maraa dhul buuraley ah markii uu usoo socdo Soomaaliya; laakiin markii uu soo gaaro meel u dhow

magaalada Baardheere, ayaa uu fatahaa taasoo saamayn ku yeelata beeraha, xoolaha iyo guryaha. Laga bilaabo Bardheere, Gedo ilaa halka uu uga daro Badweynta Hindiya, webi Jubba wuxuu ku fatahaa dhul ballaaran oo dad badani daggan yahay.

Duufaano iyo dabayl badan

20. Duufaantii Soomaaliya ee 2013 waxay ahayd tii labaad ee ugu ba'neyd duufaanada ka dhaca dhulalka kuleylaha ah caalamka oo idil 2013 iyo weliba tii ugu xumeyd ee ku dhufata Soomaaliya taariikhda inta la xasuusto, ayadoo dishay ku dhawaad 300 oo qof. Roobab maahiigaan ah ayaa daba socday duufaanta kuwaasoo ku dhuftay magaalooyinka xeebaha kuyaala iyo miyiga fog xaddi aad u sareeya oo aan horay loo filayn. Buundooyin, tuulooyin, dhismeyaal, guryo iyo doomo ayaa duufaantu burburisay.

<u>Dhibaatooyinka dhanka Juquraafiga ah (dhulgariirka, sunaamiga)</u>

21. Maadaama ay ka mid tahay dooxada (rift) ee Bariga Afrika, Soomaaliya waxaa ka dhici kara dhul gariiro dhexdhexaad ah oo u dhexeeya hal beegga 4 iyo 5.5. Sunaamigii Badweynta Hindiya ee 2004 Soomaaliya saamayn ayuu ku yeeshay sidoo kale ayadoo dhaawacu uu soo gaaray gaar ahaan xeebta Puntland oo kutaal waqooyibar Soomaaliya.Puntland, biyo sare u kacay ayaa burburiyay hanti Xaafuun iyo Kulub, halka qeybo ka tirsan magaalooyinka iyo miyiga gobolkaa biyo kusoo fataheen. Qeybo kale oo xeebta ah sida Jubada Hoose waxoogaa waxaa soo gaadhay saamayn.

Dhibaatooyin aan gaar ahayn

Colaad iyo argagaxisonimo

22. Soomaaliya waxaa qarribtay colaad hubeysan in ka badan rubac qarni laga soo bilaabo markii dagaal sokeeye uu ka bilowday halkaa horraantii sagaashameeyadii. Kooxaha siyaasadda, qabiilo, qabqableyaal dagaa, burcad dambiileyaal ah iyo asxaabtooda ah shabakado argagaxisonimo oo caalami ah ayaa ka dillaacay dhammaantood dalka burburay, taasoo abuudhay xaalad murugsan oo daba dheeraatay oo dalku wali uusan kasoo kaban. Hadii aan ku bilowno dagaalo qabiil iyo dad isaga soo horjeeday dhanka awoodda oo u dhisan sidii qabiil qabiil iyo aqoonsiyo xukun ka buuxo ayaa kacay oo xukunkii booskiisa buuxshay; si kastaba ha ahaatee, 10kii ilaa 12kii sano ee la soodhaafay, kooxo argagaxiso ah ayaa la wareegay xoogagaa colaada. Isku xirmida dhibka badan ee qabiilka iyo kala qoqobmida siyaasadeed ee ah dhinac iyo afkaarta argagaxisonimo ee colaada oo dhanka kale ah ayaa wali dhibaato aan la sookoobi karin u geysanaya dadka. Ayadoo wax macluumaad ah aan laga heyn khasaaraha bani'aadamka kasoo gaaray isku darkaa asbaabahaa wax burburiya, ayaa hadana waxaa la qiyaasayaa in in kabadan labo milyan oo qof lagu qasbay inay ka cararaan guryahoodii shan iyo labaatankii sano ee la soodhaafay, ayadoo kala bar dadkaa ay dalka gudihiisa ku barakaceen barka kalena ay ku firdheen mandaqada.

Cuduro safmar ah

23. Maadaama abaarta dalku ay noqotay mid soo noqnoqota, cuduro abaarta la xiriira iyo biyoha ayaa noqday caam. Abaarta hada intii ay socotay taasoo dalka kasoo jidhay laga soo bilaabo dabayaaqadii 2016, faafitaanka cudurada safmarka ah sida shuban biyoodka iyo daacuun caloolaha iyo waliba jadeecada ayaa kordhay. 7dii asbuuc ee ugu horeeyay 2017, in ka badan 6000 oo xaaladood iyo 65 qof oo

dhintay una dhintay shuban biyood/daacuun ayaa la sootabiyay.(24) Jubada Dhexe iyo Bakool ayaa soo tebinaya tirooyin dhimasho oo aad u sareeya, kuwaasoo aad uga sareeya kaabiga xaaladda degdega ah ee 1% ee ururka caafimaadka aduunka ee WHO. Cudurada biyaha sida daacuunka/cudurka shuban biyoodka ayaa saameeya dad tiro badan deegaanada webiga u dhow sidoo kale maadaama biyuhu wasaqoobaan. Maadaama aysan jirin tillaabooyin wax looga hortagi karo daryeelka caafimaadna uu liito, waa carruurta iyo haweenka, duqeyda iyo masaakiinta dadka dhibaatada ugu badan ay kasoo gaarto cudurada safmarka ah. Xarumaha wax lagu dabiibo ee isbitaalada sida gaarka ah loo leeyahay kuwaasoo adeegyadoodu qaal yihiin ama kuwa ku yaala isbitaalada ururada aan dawliga ahayn ay maamulaan ee magaalooyinka waaweyn iyo caasimadaha ma ahan kuwo ay si fudud isaga daawayn karaan intooda badan bulshooyinku.

Dhibaatooyin kale

24. Ka sokow dhibaatooyinka waaweyn, dhibaatooyin kale oo saamaynaya bulshooyinka ku nool Soomaaliya waxaa ku jira:

- Dabab kaca
- Dhibaato xasharaat iyo cayayaan ah oo soo bata (ayax, gandi, iyo shimbiraha *Queleaquelea*)
- Dhibaatooyin ka dhasha waxyaabo (sida saliid ama gaas lagu daadiyo badda, qashinka oo lagusoo qubo, bacaha)
- Dhibaatooyin dhanka deegaanda ah

24 WHO (2017). WHO waxay sare u qaadaa wax u qabashada dadka abaartu saamaysay ee Soomaaliya maadaama ay xaalad adagi soo food saartay, 27 Febraayo 2017

2.1 Nidaamka haatan ee maareynta musiibooyinka Soomaaliya

25. Laga soo bilaabo markii Soomaaliya colaaddu ka dillaacday horraantii sagaashameeyadii, markii ay burbureen hay'adihii dawliga ahaa, kumanaan ururo oo aan dawli ahayn (NGOs), oo isugu jiro kuwo gudaha ah iyo kuwo caalami ah, hay'addaha QM iyo kooxo diimeed iyo waliba deeqbixiyeyaal cawimaad ay bixinayeen ayaa bulshooyinku nafta ku celcelinayeen si ay u noolaadaan inta musiibooyinku socdaan iyo kadiba. Qaar ka tirsan gobolada dalka sida Somaliland iyo Puntland waxaa laga bilaabay hay'ado dawli ah oo ismaamul hoosaad ah maadaama ay talada u qabteen dawlad goboleedyo. Dalka intiisa kale, maqnaanshaha qaab dawladeed oo mideysan macnihiisu waa in qaabab aan xiriirsanayn oo halhaleel ah oo lagula macaamilo musiibooyinka ay noqdaan wax iska caadi ah. Ayadoo qaababkaasi laga yaabee inay ka koobmaan cawimaadda bani'aadminimo oo qura ee dadka saamayntu ay soo gaadhay ayaa hadana qaab dhamaystiran oo lagula tacaamulo maareynta halista musiinooyinka, dhimidda musiibada, yareynta saamaynteeda, wax ka qabashadeeda iyo samatabixintu aysan helin dareenkii lasiin lahaa ee ku filnaa.

26. Awooddaha farsamo iyo kuwa shaqo ee lagu dhimo halista ayaa aad u taag daran dhammaan qeybaha kala duwan ee Soomaaliya. Ayadoo aysan jirin nidaam digniin hore lagu bixiyo iyo qorshe heer degmo ah oo lagu maareeyo musiibooyinka ayaa bulshooyinka waxaa marmar dhif ah looga digaa loona diyaarshaa inay wajahaan dhacdooyinka aadka u daran. Xogta digniinta hore waxaa loo siiyaa bulshooyinka caadiyan si halhaleel ah, oo aan xiriir ahayn waxaana usiiya sidaa hoggaamiyeyaasha ama saraakiisha ayagoo isticmaalaya farriimo gaagaaban ama afka ayay uga sheegaan.

27. Haatan Dawladu waxay leedahay awood yar oo ay ku samayso qiimeynta dhibaatada ama ay ku bixiso digniin hore oo waqtigii la rabay ah. Qiimeyn waaxyo badan ay sameeyaan ayaa waxaa sameeya kooxo hay'ado ah oo kala duwan oo QM iyo masuuliyiin kale ay hoggaamiyaan, oo ilaha kaliya ee laga helo macluumaadka waa QM, FEWSNet iyo ururada aan dawliga ahayn. Hay'addaha dawliga ah iyo laamaha dawladu kuma lug lahan hannaankaa. QM iyo ururada aan dawliga ahayn ayaa isu abaabula si gaar ah markii ay jiraan xaalado degdeg ah waxqabadkoodana waxaa xiriirsha kooxaha QM hoos imaada ee ah ururada aan dawliga ahayn markii ay isku dayayaan inay wax ka qabtaan xaaladdaha degdega ah ayagoo isticmaalaya qarash laga helo beesha caalamka. Ma jiro nidaam xubinimo dawladu xubin ka tahay ururadaa hoos yimaada QM oo si rasmi ah laisugu raacay ama matalaad lagu matalo xiriirinta hawlaha ururadaa hoos yimaada QM. Intaa waxaa dheer, hannaanka qarash siinta ama fan gareynta ee hay'addaha hoos yimaada QM ee qeybaha kala duwan ku jira ayaa ah mid badanaa waqti dheer qaata oo cawimaadu waxay soo gaartaa bulshooyinka dalka gudihiisa ku nool waqti dheer kadib. Galitaanka degmooyin badan wali waa xadidan tahay maadaama ay dagaalo ka jiraan waxqabadkuna ma gaaro dhammaan bulshooyinka dhibaatooyinku saameeyeen.

28. Heer gobol, Somaliland waxay 2006 dhistay Hay'adda Qaran ee Cilmibaarista Deegaanka iyo Udiyaar Garowga Musiibooyinka (NERAD). Ayadoo hoos tagta Madaxweynaha Somaliland, NERAD waxay si buuxda u samaysay qaab shaqo oo sharci ah oo qeexaya ogolaanshaha ay hawshaa u heysato, shaqooyinkeeda iyo islaxisaabtan. Dawladda Puntland waxay dhistay hay'ad rasmi ah, waa Hay'adda Dawliga ah ee Arimaha Bani'aadamnimada iyo Maareynta Musiibooyinka (HADMA), taasoo la hirgaliyay 2005, ayadoo

ogolaansho buuxda u heysta maareynta musiibooyinka gudaha Puntland. Ayadoo labadaa hay'adood ay xiriir la leeyihiin ururada gargaarka ee ka hawl gala goboladaa ayna dejiyeen qorsheyaal loogu talo galay xaaladdaha degdega ah iyo qaabab shaqo/siyaasado oo lagu maareeyo musiibooyinka gudaha goboladooda ka dhaca, hadana waa kuwo agab ku filan aan heysan awoodooda wax qabadna ay yar tahay. Maamul goboleedyada kale ma lahan qaabab shaqo oo sharci ah ama siyaasad ku saabsan maareynta musiibooyinka. Xataa dawlad goboleedyada leh awood wanaagsan oo lagu maareeyo musiibooyinka, qaab dhismeedyada maareynta musiibooyinka hawl galkoodu badanaa waa mid dhib badan heer degmo iyo heer gobol intaba. HADMA, tusaale ahaan ma lahan haatan wax wakiilo ah oo u jooga heer degmo iyo heer gobol. Degmo kasta ama gobol kasta wuxuu sameystaa qorshehiisa loogu talo galay maareynta musiibooyinka, ayadoo uu soo wacaayo dawladda qaran hadii loo baahdo ama markii loo baahdo. Si kastaba ha ahaatee, wali waxaa diiradu aad u saaran tahay waxqabad halhaleel ah oo aasaas ahaan aad diirada u saara inuu bixiyo gargaar ayadoo la siinayo dareen aad u yar u diyaar garowga musiibooyinka, dhimitaanka musiibada, dhimidda halista ama soo kabashada.

29. Haatan oo Soomaaliya ay hirgalinayso qaab dhismeed runtii federal ah waxaa loo badinaayaa in qaab dhismeedyo la mid ah Puntland iyo Somaliland ay kasoo baxaan dhammaan gobolada kuwaasoo xiriir la leh Dawladda Federaalka ah ee Muqdisho ayadoo dawlad goboleedyada ay qaabeeyeen rajooyin goboleed oo meel ah iyo faaiidooyinka laga helo in lagu dhex shaqeeyo qaab dhismeed federal ah dhanka kale. Marka dawladda federaalka ah waxay u baahan tahay inay yeelato awood ay ku bixiso qaab shaqo oo siyaasad guud ah oo loogu talo galay qaababka maareynta musiibooyinka oo baahsan inay hana qaadaan.

30. Maareyn musiibo oo wax ku ool ah waa mid maadooyin badan una baahan in waaxyo kala duwan iyo wasaarado ay u wada shaqeeyaan si wanaagsan. Wasaarado kala duwan oo isla shaqeeya sida wasaaradda biyaha (daadka iyo abaarta), wasaaradda caafimaadka oo ka shaqeysa ka hortagga waxyaabaha halista ah ee caafimaadka ka dhanka ah, wasaaradda hawlaha guud iyo dib u dhiska, iwm., ayaa soo baxa si ay wax u qabtaan markii ay jiraan musiibooyin si munaasab ah. Si kastaba ha ahaatee, dhammaan hay'aduhu waxay la' yihiin qaabab shaqo oo sharci ah iyo kuwo hay'adeed iyo weliba siyaasado wax loogu qabto si xiriirsan oo guud.

2.2Qaab-dhismeedka Ururada- Hay'addaha Maareynta Musiibooyinka ee Jira

31. Maareyn musiibo waa istaraatiijiyado u dhexeeya waaxyo kala duwan oo wax ku ool ah una baahan in Wasaarado dhowr ah iyo hay'ado farsamo ay wada shaqeeyaa, sida ku cad Qodobka Maareynta Musiibooyinka (2016) ee Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya, xafiiska raiisul wasaaraha ayaana leh waajibaadka guud ee bixinta hoggaan iyo fursan siyaasadeed oo loogu talo galay qaab Dawladeed wada dhan oo loogu talo galay maareyn musiibo oo guud oo ku lug leh qiimeyn lagu sameeyo halista, diyaar garow, yareynta saamaynta musiibada, wax ka qabasho, samatabixin, dhimidda halista iyo adkeysi ama dhabar adayg. Sidaa darteed, xafiiska raisul wasaaruhu wuxuu:

- Soo saari karaa awaamiir ku socda wasaaraddaha ay arintu khuseyso ee loogu talo galay inay diyaarshaan dhammaan agabyada lagama maarmaanka ah ee lagu kaabayo waxqabadka, gargaarka iyo hawlaha samatabixinta ah ee xiriirinta ka wada

Soomaaliya sida Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka.

- Adkeyn karaa go'aan adag oo siyaasadeed oo loo baahan yahay in sare loogu qaado loona isticmaalo isku dhafida dhimidda halista musiibada iyo dhabar adayga iyo barnaamijka horumarinta.

- Taageeri karaa abuurida iyo xoojinta qaababka qaran ee dhimidda halista musiibooyinka ee isku dhafan wuxuuna sare u qaadi karaa ugu dhafida sida munaasabka ah dhimidda halista siyaasaddaha horumarinta, fulinta barnaamijka iyo qorsheynta heer kasta oo dawladda ah, arintaasoo ay ku jiraan istaraatiijiyado faqri dhimid ah iyo siyaasado iyo qorsheyaal waaxyo iyo waaxyo badan.

- Awooddaa inuu u qoondeeyo agabyo ama qarash horumarin iyo hirgalinta siyaasaddaha maareynta halista musiibooyinka, barnaamijyada, sharuuc iyo xeerar ah dhammaan waaxyaha munaasabka ah iyo hay'addaha dawliga ah ee heer kasta.

- Xaqiijin karaa dib ugu qoondeynta qarashka ama agabyada kufilan Wasaarado ay hawshu khuseyso oo ay ku jiraan shaqaalaha meelo musiibadu aysan saamayn oo la geeyo meelo saamayn musiibadu ku yeelatay si ay u bixiyaan taageero ku aaddan baahida jidha oo loogu talo galay gargaarka, samatabixinta iyo hawlaha dib u habaynta/dadaalada sida loo baahan yahay iyo marka loo baahan yahay.

32. Xaqiijin karaa jiheyn wanaagsan oo ah dhanka shaqada maareynta musiibada heer siyaasadeed , ayadoo dhawaana Dawladda Soomaaliya ay dhistay wasaarad cusub, waa Wasaaradda Arimaha Bani'aadminimada iyo Maareynta Musiibooyinka (MoHADM), wasiirna uu hoggaansho hayda SODMA na ay hoos imaan doonto.

2.3Qaabka Shaqo ee Jira ee Sharciga iyo Siyaasadda

33. Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya qorshaheeda qaran ee horumarinta(25) wuxuu cadeynayaa aragtidiisa fog ee maareynta musiibooyinka sida inay tahay: "U diyaar garow wax ku ool ah oo musiibo laga feejignaado iyo wax ka qabasho waxaa lagu jiheyn donaan shaqada dawladda iyo tan gaarka ah waxaana ku jiheyn doona shakhsiyaad ayadoo aad loo dhimaayo geerida, dhaawaca, burbur dhaqaale iyo dad musiibooyinku ay saameeyeen."

34. Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka waxaa masuul looga dhigay fulinta aragtidaa fog ayadoo kaashaneysa dhammaan hay'addaha ku habboon ee dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn iyo hay'addaha caalamiga ah ee lagu caddeeyay Xeerka Dawladda Federaalka ah ee Hirgalinta Hay'adda Maareynta Musiibooyinka (Xeer Nambar. 17 ee 27/6/2016).(26) Qodobka 3 ee Xeerkani wuxuu markii uu dejinaayo ujeedooyinka Hay'adda cadeynayaa in ay:

- Samatabixin doonto ayna ka badbaadin doonto dadka Soomaaliyeed iyo hantidooda musiibooyinka ka dhaca dalka ayna sidoo kale ka badbaadin doonto nuglaanshiyaha iyo dhabar adayg la'aanta markii ay yimaadaan musiibooyinka qaarkood;
- Maareyn doonto dhammaan musiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa dadku kallifeen ee dalka ka dhaca;
- Diyaarin doonto qorsheyaal ficil oo loogu talo galay mustaqbalka

25Qorshaha Qaran ee Horumarinta Soomaaliya (SNDP) –ee ku wajahan Soo Kabasho, Dimuqraadiyad iyo Barwaaqo 2017 – 2019

26 Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya (2016). Sharciga Hirgalinta Hay'adda Maareynta Musiibooyinka, Xeer Nambar. 17 ee 27/6/2016

dhow iyo kan fog ee badbaadinta ama dhimitaanka waxyeelada dhammaan musiibooyinka ka dhaca dalka iyo sidii waqti hore wax looga qaban lahaa;

- Hirgalin doonto xarumo iyo meelo kuyaala degmooyinka iyo gobolada dalka kuwaasoo lagu maareeyo musiibooyinka dhaca;
- Abaabuli doonto ayna hawl galin doonto kooxo iyo waaxyo awood u leh ka hortagida iyo in si degdeg ah wax looga qabto musiibooyinka;
- Soo uruurin doonto macluumaad ku saabsan khatarta musiibooyinka waxayna bixin kadhaa digniino hore markii ay lagama maarmaan yihiin;
- U jiheyn doonto ururada gargaarka ee wax ka qabta musiibooyinka dhanka wax ka qabashada baahiyaha markaa jira, ayadoo ka fakareysa baahida mudnaanta leh;
- Dejin doonto siyaasad qaran oo ku saabsan maareynta musiibooyinka ka dhaca dalka;
- Ka dhigi doonto Hay'adda Maareynta Musiibooyinka surinka hay'addaha dawladda iyo ururada aan dawliga ahayn ee ka shaqeeya arimaha maareynta musiibooyinka ay usoo maraan iskaashiga.

35. Istaraatiijiyada maareynta musiibooyinka ee loogu talo galay Soomaaliya lana sameeyay 2016(27) waxay hoosta ka xarriiqday baahida loo qabo qaab wanaagsan oo ku salaysan bulsho, wax horumariya waaxyo badana leh oo jamciya u diyaar garowga musiibada, ka hortageeda iyo dhimideeda, isla markaana ku dhafta maareynta musiibooyinka hawlaha horumarinta qaranka. Markii halkaa la maraayo, istaraatiijiyada istaraatiijiyadu waxay la timid qaabkaan shaqo ee guud ee loogu talo galay maareynta musiibooyinka (Masawir 1).

27 Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya, Wasaaradda Amuuraha Gudaha & Amuuraha Federaalka (2016). SAMAYNTA QAAB SHAQO OO LOOGU TALO GALAY MAAREYNTA MUSIIBOOYINKA KA DHACA SOOMAALIYA, 2016-2018

36. Qorshaha Qaran ee Horumarinta Soomaaliya(28) (SNDP) ee loogu talo galay 2017-2019, si waafaqsan istaraatiijiyada maareynta musiibooyinka ee sare lagu soo xusay wuxuu hoosta ka xarriiqayaa istaraatiijiyadaha wax qabad ee muhiimka ah ee soo socda heer qaran iyo heer gobolba:

- Maamulo maxali ah oo wax ka qabashada musiibooyinka loogu talo galay ayaa la hirgalin doonaa si dawladda ay ula shaqeeyaan, danaha gaarka ah iyo kuwa gudaha si loo xaqiijiyo badbaadinta dadka gudaha laga badbaadinaayo musiibo;
- Hirgalinta siyaasad qaran oo ku saabsan maareynta musiibooyinka;
- Xarun loogu talo galay xogta iyo xiriirinta oo laga hirgalinaayo heer qaran iyo heer gobol;
- Halista dhibaatada iyo u nuglaanta musiibooyinka iyo raashin yarida waxaa loo darsayaa si nidaamsan, waa la cusbooneysiinayaa waxaana loo qeybinayaa dhammaan heerarka kala duwan ee dawladda;
- Hawlaha diyaar garowga heer gobol iyo heer federaalba iyo nidaamyo digniin hore/helitaanka raashinka;
- La shaqeynta wasaaraddaha hawsha ku shaqo leh ee heer federal iyo heer gobol si loo dayac tiro ama loo dhiso kaabeyaal muhiim ah oo dhimi kara saamaynta daad, abaar ama colaad;
- Xarumo saad qaran oo laga hirgaliyo 10 degmo oo musiibooyinku ku badan yihiin;
- Nidaamyo loogu talo galay Dhimidda Halista Musiibada oo bulshadu maamusho oo la hirgasho lana xoojiyo.

28Qorshaha Qaran ee Horumarinta Soomaaliya (SNDP) – oo ku wajahan Soo Kabasho, Dimuqraadiyad iyo Barwaaqo 2017 – 2019

37. Qorshaha Qaran ee Horumarinta Soomaaliya (SNDP) xaqiiqdii wuxuu ka shisheeyaa maareyn musiibo oo caadi ah oo wuxuu sii adkeynayaa qaab kusaabsan dhabar adayg ayadoo la adeegsanayo horumarin wax walba leh. Wuxuu ku doodayaa in barakaceyaasha iyo qaxootiga soo laabtay in dhaqaalahooda lagu dhafo dhaqaalaha rasmiga ah. Haatan waxaa jira ilaa qiyaastii 2 milyan oo qof oo barakaceyaal ah oo ku kala nool meelo kala duwan oo dalka ah oo ay ka dhisan yihiin guryo aan rasmi ahayn oo aan la qorsheyn iyo xeryaha qaxootiga ee dalalka jaarka ah taasoo ka kooban 71% kiisaska arimaha bani'aadminimo (FSNAU 2016). "Dhexgalintooda dadka waxaa daahiyay xukunka sharciga oo laga horjoogsaday, amni darro toos ah, guryo la'aan iyo ayagoon heli karin adeegyada aasaasiga ah ee horumarinta (sida caafimaadka, waxbarashada, biyaha iyo shaqooyin wanaagsan)."

38. Hadii si kale loo dhigo, Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxay garowsan tahay xiriirada u dhexeeya arimaha faqriga iyo takoorka oo dhan ah iyo u nuglaanta musiibooyinka oo dhan kale ah. Darnaanta musiibada waxaa aad loola xiriirshaa heerka dayacnaanta dadka saamayntu gaadhay waxayna sidoo kale ku taxaluqdaa dhabar adayga dadkaa (alyacni awoodda ay u leeyihiin inay u adkeystaan dhibaatada musiibada iyo/ama kasoo kabsashadeeda). Nugeyl aad ah oo loo nuglaado musiibooyin waa shaqo faqri, siyaasad iyo xaalado dhaqan dhaqaale. Marka maareyn musiibo lagu ma samayn karo taageero gargaar oo qura, oo dadkeeda ma horumari karo ilaa Soomaaliya ay wax ka qabato u nuglaanta musiibooyinka iyo colaada. Maareyn musiibo marka waxay u baahan tahay wada shaqeynta qeybaha kala duwan ee dawladda.

Sawir 1: Sawir ku saabsan Qaabka Shaqo ee Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya (2016-2018)		
	KU WAJAHAN U ADKEYSIGA MUSIIBADA	
	JIHEYNTA U ADKEYSIGA MUSIIBADA	
Qaabka guud ee dawladu u wajahdo	**Isku dhafka siyaasadda & isku-xirnaanta** ❖ Qorshaha qaran ee horumarintu wuxuu sare u qaadaa dhimidda halista musiibada ❖ Qaab xiriirin oo wasaaraddaha ka dhexeeya ❖ Qodobada & Shuruucda hawsha ayaa ururada ay khuseyso arinta la xisaabtama ❖ Dhammaan maaligashiyada mustaqbalka waxaa saamayn kara musiibooyinka **Barnaamijyada iyo Mashaariicda** ❖ Waxyaabo halis ah oo cusub oo musiibooyin la xiriira waa inaan la abuurin ❖ Dusha kala socoshada iyo soo tebinta qaranka ee waxyaabaha ka soo cusboonaada u adkeysiga saamaynta musiibooyinka ❖ Dhinaca qaymaynta jinsiga dadka oo ka muuqata maareynta musiibáda guud ahaan	**Dowrka SODMA: taageero**
Istaraatiiji	**ISTARAATIIJIYADAHA DHIMIDDA HALISTA MUSIIBADA** **Ka hortagid** ❖ Dhibaato saynis & falanqeyn ku saabsan halis isbaddalka cimiladu keentay ❖ Falanqeynta u nuglaanta dhibaatooyinka ❖ Qiimeynta halista iyo darsid ❖ Ka miisaal qaadasho & moodal samayn	**Dowrka SODMA: La shaqeynta Wasaaraddaha hawsha wada**

	❖ Kala habeyn wax ku ool ah & maareyn **Dhibaato yareyn** ❖ Tababar wacyi galin ah oo aan mid qaab dhismeed ahayn & awood dhisid ku saabsan dhaqamada beeraha ❖ Dhisme-waro, jamalo waaweyn oo dadi sameeyay, biyo xireeno ❖ Awood siinta bulshada iyo isla xisaabtan ❖ Adeegyo bulsho oo wax ku ool ah –caafimaad, nadaafad, biyo ❖ Daryeel bulsho oo wax ku ool ah	
Hawlgal	**U DIYAAR GAROWGA MUSIIBOOYINKA, DIGNIINTA IYO WAX KA QABASHADA** **Digniinta & Udiyaargarowga** ❖ Dusha kala socosho, digniin hore & saadaalin ❖ Habraaca Heerka Sare ah ee Hawlgalida ee loogu talo galay maareynta wax ka qabashada musiibooyinka ❖ Keydsasho saad & qorsheynta tasiilaadka ❖ Xiriirinta lala leeyahay maamulada gobolada & hay'ado kale ❖ Qorsheyn daad gureyn ❖ Qorsheyn isgaarsiin **Wax ka qabashada** ❖ Qiimeynta baahiyaha ❖ Xiriirin, nidaamka taliska wax laga hago ❖ Baahinta xogta ❖ Cawimaad & gargaar ❖ Tasiilaad	**Dowrka SODMA: waxay tahay hormuud**

Dib u dhis wanaagsan	SAMATABIXINTA MUSIIBADA KADIB AH, DIB U DHIS IYO DIB U HABEYN	Dowrka SODMA: La shaqeynta Wasaaradda hawsha wada
	Kaabeyaasha ❖Qorsheyaal ku saabsan isticmaalka dhulka ❖Kaabeyaasha dadweynaha ❖Guriyeynta ❖Biyaha	
	Maciishada ❖Cayrta & daryeelka bulshada ❖Beero falasho/kalluumeysi, iwm ❖Maciishad taa baddalkeeda ah ❖Shaqo abuurid	

CUTUBKA 3: YOOLKA SIYAASADDA MAAREYNTA MUSIIBOOYINKA & UJEEDOOYINKA

3.1 Hadafka siyaasadda iyo xadkeeda

39. Hadafka Siyaasadda Qaran ee Maareynta Musiibooyinka Soomaaliya (SNDMP) waa in la bixiyo awaamiir ballaaran oo loogu talo galay qaab shaqo oo loogu talo galay maareynta musiibooyinka dalka taasoo sare u qaada dhaqan lagu maareeyo halista si loo dhimo nugeylka dadka halista ku jira, waxaana qeyb ka ah tillaabooyin ku wajahan ka hortagida musiibada, dhimitaanka, u diyaar garowga, wax ka qabashada, soo kabashada iyo dib ugu dhisida si xoojisa xiriirada u dhexeeya maareynta halista musiibada, dhabar adayga iyo horumarka sii jiri kara. Rajada xoojineysa yoolka waxay ka timaadaa waajibaad caalami ah oo Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya ay saxiixe ka noqotay qaabka shaqo ee Sendai (29) kaasoo caddeeyay: *"Ka hortagida halis musiibo oo cusub iyo yareynta saamaynta mid jirta ayadoo la adeegsanaayo hirgalinta tillaabooyin isku dhafan oo ay ku jiraan kuwo dhanka dhaqaalaha ah, dhanka dhismaha, sharciga, bulshada, caafimaadka, dhaqanka, waxbarashada, deegaanka, teknoolojiyada, siyaasadda iyo dhanka hay'addaha dawliga ah ee ka hor taga isla markaana dhima halista dhibaato loogu jiro iyo u jilicsanaanta musiibada, kordhiya u diyaar garowga wax ka qabashada musiibada iyo soo kabashada, hadana xoojiya u adkeysiga saamaynta musiibada" (Qaabka Shaqo ee Sendai, Maarso 2015).*

40. Siyaasadda waxaa lagu wajahayaa dhammaan hay'addaha Dawladda Soomaaliya iyo Dawlad Goboleedyada, dawladdaha hoose iyo ururada ka baxsan nidaamka dawladda ee ku lugta leh maareynta musiibooyinka.

---

29 Qaramada Midoobay, A/RES/69/283 (2015). Baaq uu aqbalay adeegsigiisa Golaha loo Dhan Yahay 3 Juun 2015 – Qaabka Shaqo ee Sendai ee Dhimidda Halista Musiibada 2015-2030. 3 Juun 2015

3.2 Mabaadiida Hagaya

41. Siyaasaddaan waxay ku salaysan tahay sideed (8) mabda' oo dawladda Soomaaliya ay ku xiriiriso dhammaan hay'addaha ay khuseyso inay u hoggaansamaan ayna kula xisaabtanto:

- **Waajibka Dawladda**: Dawladu waxay dusha u ridanaysaa waajibka aasaasiga ah ee ka badbaadinta dadka, kaabeyaasha iyo hantida kale ee qaranka musiibooyinka; si kastaba ha ahaatee, markii xaddiga musiibooyinku ay ka tan bataan awoodda Dawladda, waxay dhiiri gelin doontaa oo soo dhaweyn doontaa taageerada ka imaaneysa dhammaan dadka inay bixiyaan cawimaadda doonaya ee diyaarka u ah inay wax caawiyaan. Qaabka shaqo ee Sendai oo Dawladda Federaalka Soomaaliya ay saxiixday wuxuu sharraxaad ka bixinayaa in maareynta musiibadu diirada saadho "badbaadinta dadka iyo hantidooda, caafimaadka, maciishada, iyo hantida wax soo saarka leh, iyo weliba hantida dhaqanka iyo deegaanka, ayadoo sare u qaadeysa oo badbaadineysa dhammaan xaquuqul insaanka." Tani waxay u baahan tahay in dalku raaco kuna dhaqmo qaab xaquuqo ku salaysan oo lagu maamulo halista musiibada (DRM).

- **Kala qeybsi waadax ah oo la kala qeybsado dawrarka iyo waajibaadka u dhexeeya heerarka kala duwan ee dawladda**: DRM ugu horeyn waa maado ku saabsan heer gobol iyo heer degmo. Siyaasaddaha qaran waxay bixiyaan qaabka shaqo ee guud ee loogu talo galay dhimitaanka halista laakiin Dawladda, degmada iyo dawladdaha hoose iyo weliba kooxaha bulshada rayidka ah oo wada jira ayaa ku wanaagsan inay sare u qaadaan oo taageeraan maareynta musiibooyinka, oo ay kujirto dhimitaanka halista heerar maxali. DRM si si wax ku ool ah ay ugu dhimaan nugeylka iyo dhibaatooyinka, ay u maareeyaan natiijada musiibooyinka, ayna uga dhigaan bulshooyinka kuwo intii hore ka adkeysi badan, iskaashi heerar kala duwan ah ayaa lagama maarmaan ah.

• **Si ku salaysan qiimeyn halis oo gudaha ah iyo awoodda:** Maareynta musiibada waxaa sida ugu wanaagsan laga samayn karaa heerarka maxaliga ah. Maareynta musiibo waxay u baahan tahay in lagu saleeyo dhibaatada, nugeylka loo nugul yahay dhibaatada iyo halista falanqeyn ku saabsan, oo ay ku jirto in la ogaado nooca iyo xaddiga nugeylka ama halista (taasoo ay kujirto in la ogaado kooxo gaar ah oo dhibaato u nugul), arintaasoo saamaxda kala ahmiyad siinta dhibaatooyinka ama meelaha ka juquraafi ahaan taasoo ku salaysan caqli gal ahaanta si loo sheego qaabka waxqabadyo habboon oo farsamo ahaana wanaagsan. Cawimaadda wax ka qabashada musiibada waa in lagu saleeyo qiimeyn aad ah oo la qiimeynayo baahiyaha dadka dhibaatadu asiibtay iyo awooddaha gudaha ee la heli karo si loo daboolo baahiyahaa.

• **Dhisida awoodu waa muhiim:** Maareynta musiibadu waa xil saaran dhammaan inta ay khuseyso – Dawladda Federaalka ah, dawlad Goboleedyada iyo maamulada Degmooyinka, ganacsiyada, ururo aan dawli ahayn iyo kuwo caalami ah, iyo ugu dambeyn, dhammaan muwaadiniinta. Dawladda dawrkeeda arintaan ku aaddan waa inay tahay fududeeye iyo wax keene xaqiijiya in awoodda wax lagu qiimeeyo, wax lagu abaabulo laguna hawl galiyo aalado ku filan iyo agabyo looga hortago, lagu dhimo, laisugu diyaarsho waxna looga qabto musiibooyinka ayadoo la adeegsanaayo tillaabooyin gargaar iyo kuwo soo kabasho ay jirto.

• **Ka qeybgalka bulshada iyo u adkeysiga dhibta:** Maareynta halista musiibadu waxay u baahan tahay in lagu dhiso ururo bulsho oo jira iyo awoodooda maadaama ay u baahan yihiin inay heystaan xogta iyo xirfadaha lagu dhimo saamaynta dhibaatooyinka ay ku leeyihiin nafafyaalkooda iyo maciishadooda; sidaa daraadeed in la kaashado bulshooyinka markii la samaynaayo qiimeyn ku saabsan nugeylka iyo awoodda waxay bixisaa meelo laga soo galo dhisidda wacyiga, ka qeyb qaadashada iyo adkeysiga markii musiibooyin ay dhacaan.

• **Xiriirin iyo iskaashi**: DM waxaa soo galaya dhibaatooyin culus oo wada jira oo u baahan wax qabad urur qura uusan bixin karin. DM wanaagsan wuxuu sidiisaba ku saabsan yahay xiriirin wanaagsan si loo soo waarido khibradaha, agabyada iyo awoodda hay'ado badan-dawladda, ururo badan, ururo aan dawli ahayn, bulshada rayidka ah iyo ganacsiga–waana waajib saaran Dawladda Federaalka ah iyo Dawlad Goboleedyada dalka si loo xaqiijiyo in qaabab xiriir oo wax ku ool ah ay jiraan si dawladu u bixiso hoggaan ah heer Federaal iyo heerarka Dawlad Goboleedyada.

• **Dhexdhexaad iyo Eex La'aan**: Musiibooyinku waxay saamayn ku yeeshaan dadka kooxaha dhaqan dhaqaale kasta oo dhan marka sidaa darteed gebi ahaan wax ka qabashada musiibo waa inay ahaato dhexdhexaad iyo eex la'aan ayadoon la eegeyn qabiil, jifo, jinsi labood alyacni rag iyo dumar kan qofi yahay, naafonimo ama wax kale. Hadaba waxaa waajib ku ah dhammaan dawladuhu inay xaqiijiyaan in maareynta musiibada ee heyadaha ay lahaato madax bannaani lagu gaaro go'aano ku salaysan baahiyaha dadka iyo awoodooda, iyo in ururada bani'aadminimo ay durba helaan fursad ay ku gaaraan dadka tabaaleysan.

• **Waajibka Dawladda ka saaran badbaadinta dadka tabaaleysan**: Waa waajibka Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya inay badbaadiso dadkeeda, waa dhammaan muwaadiniinta. Marka la eego barakaca soo noqnoqday ee dadka dalka shan iyo labaatankii sano ee la soodhaafay, kaasoo ka dhashay dagaalka dabada dheeraaday, barakac dheeraad ah in laga hortago iyo in lala tacaamulo dhibta heysa dadka haatanba barakacsan ayaa ah caqabada ugu weyn ee hor taagan dib u dhisida Soomaaliya. Mabaadiidii 2004 ee Hagayay Arimaha Barakaca Gudaha,(30) oo ah dukumiinti caalami ah wuxuu ka doonayaa Dawladdaha inay ka hortagaan barakac marka loo eego waajibkooda

30 UNHCR (2004). Mabaadiidii 2004 ee Hagayay Arimaha Barakaca Gudaha

xaquuqul insaanka ee ah in dadka laga badbaadiyo dhibaatooyin la og yahay iyo kuwo la saadaalin karo oo asiibi kara noloshooda, xubnahooda, iyo caafimaadkooda. Waa xil saaran Dawladda Federaalka ah inay xaqiijiso in awoodo ku filan ay leeyihiin Dawlad Goboleedyada dalka, degmooyinka iyo dawladdaha hoose si loo bixiyo hoggaan wax ku ool ah loona guto waajibaadyo shaqo.

3.3 Ujeedooyinka siyaasadda

42. Ujeedooyinka ugu waaweyn ee siyaasadu waa in:

- La xaqiijiyo in wax ka qabashada musiibada loo sameeyo si nidaamsan oo degdeg ah si loo badbaadiyo nafta, maciishada, iyo hantida intaba, isla markaana sare loogu qaado dhimida halista musiibada.

- La bixiyo qaab shaqo oo waadax ah oo loogu talo galay ka hortagga musiibada, dhimitaankeeda, u diyaar garowga, wax ka qabashada, soo kabashada iyo dib u dhiska, lagu sameeyo qaabka shaqo ee maareynta halista ee dhammaan qeybaha kala duwan ee dawladda.

- La xaqiijiyo in hay'addaha iyo hawlaha loogu talo galay maareynta halista musiibada la xiriirsho-lana-samatabixiyo ayadoo la adeegsanayo iskaasho ka dhexeeya dawladdaha heerarka kala duwan (heer Federaal, Gobol iyo dawladdaha hoose), bulshooyinka maxaliga ah, Laanqeyrta Cas ee Soomaaliya, QM, ganacsiyada sida gaarka ah loo leeyahay iyo ururada aan dawliga ahayn, iyo weliba hay'addaha mandaqada ee Afrika.

- Loo caddeeyo dhammaan dadka ku lugta leh dawrka waaxyaha dawladda ee muhiimka ah iyo hay'addaha heer federal, dawlad goboleedyada iyo heerarka degmo ee samaynaya maareynta waxyaabo kala duwan oo musiibada ah, iyo sida ay isula shaqeeyaan oo isu dhammays tiraan.

• Siyaasadu hoosta ka xarriiqdo baahida jiheynta dhimidda halista musiibada ee qorsheyaasha horumarka iyo istaraatiijiyadaha heer kasta si sare loogu qaado awoodda bulshooyinka nugul si ay ugu adkeystaan saamaynta ba'an ee musiibooyinka.

• La siiyo talo dhammaan Wasaaraddaha dawladda Federaalka ah iyo hay'addaha dawliga ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya si ay u diyaarsadaan Habraaca Heerka Sare ah ee Hawlgalida (SOP) oo waafaqsan siyaasaddaan iyo in lagu dhiirigaliyo dhammaan dawlad goboleedyada dalka hay'addahooda, Hay'addaha Dawliga ah ee Degmooyinka iyo masuuliyiinta kale inay diyaarsadaan SOPs loogu talo galay hay'addahooda kuwaasoo ku saabsan mawduucyo tóos ula xiriira ka hortagga musiibooyinka, dhimidda, u diyaar garowga, qiimeyn ku samaynta halista, digniin hore, wax qabad degdeg ah, soo kabasho iyo dib u dhis.

3.4 Ahmiyadaha siyaasadda

3.4.1 Ka hortagidda Musiibada

43. Ka hortagid waxay u baahan tahay tillaabooyin joojiya ama ka baaqsada in musiibo dhacdo. Dhibaatooyinka dabiiciga ah sida dhul gariirka, daadadka, abaaraha ama duufaanda lagama hortagi karo /lama baajin karo. Musiibooyinka dadku kallifo sida colaada iyo musiibooyinka teknoolojida (kiimiko daadata, shilal nukleyr), tusaale ahaan waa laga hortagi karaa. Bulshooyinku tusaale ahaan waxay leeyihiin itatraatiijiyadahooda looga hor tago dagaalada iyo/ama kuwa lagu xallilo kuwaasoo qeyb ka ah u babac dhigida ay u babac dhigaan. Waa hawsha dhammaan ururada samofalka iyo dawladda inay ogaadaan xoojiyaana istaraatiijiyadahaa soo jireenka ah ee ka hortagga musiibooyinka iyo sida loo maareeyo, iyo inay abuuraan deegaan wax suurta galisa oo qaababka ceynkaa ah ay ku xidideystaan.

3.4.2 Yereynta saameynta musiibada

44. Dhimitaanku wuxuu ku saabsan yahay dhimitaanka/yareynta saamaynta musiibada. Qaab xooggan oo daryeel bulsho ah ama in la helo maciishad ilo kala duwan ka timaada waxay qoysaska ku caawin kadhaa inay u babac dhigaan saamaynta musiibooyinka iyo murugada, waxayna hadaba gacan ka geysataa horumarinta awoodda bulshadu ugu babac dhigto saamaynta xun ee musiibooyinka. Waxaa jira xiriir adag oo u dhexeeya horumarka iyo maareynta musiibooyinka maadaama dhimitaanka saamaynta musiibadu ay wax ka qabato asbaabaha keena in dhib loo nuglaado. Dawladu waxay taageeri doontaa tillaabooyinka dhimidda saamaynta musiibada kuwaasoo diirada saara kordhinta awoodda dadku ugu babac dhigo musiibooyinka loo badinaayo inay saameeyaan. Tillaabooyin wanaagsan oo lagu dhimo saamaynta dhibaatooyinka waxay ka hor tagi karaan dhibaatooyini inay isu baddalaan musiibooyin. Dawladu waxay aad sare ugu qaadi doontaa tillaabooyin sida:

- Bilaabida mashaariic si wanaagsan loo qorsheeyay oo dhibta lagu dhimo (sida qaabab lagu xaddido daadka, biyo dhurashada iyo qaababka waraabka iyo horumarinta kaabeyaal la mid ah) kuwaasoo laga dhisaayo meelaha musiibooyinku ku badan yihiin, ayadoo la kaashanaayo wasaaraddaha Dawladda Federaalka ah iyo dawlad goboleedyada dalka;
- Dhiirigalinta iyo caawinta mashaariic dhib dhimid ah oo heer gobol ah si waafaqsan tilmaameyaasha;
- Sare u qaadidda caymis tiro ku salaysan oo loogu talo galay xoolaha nool iyo dalagga.

3.4.3 Udiyaargarowga Musiibada

45. U diyaar garowga musiibo waa tillaabooyin wada jira oo ku salaysan aqoon iyo fahamka deegaanda halista, kuwaasoo la qaado ka hor dhibaato dhici kadha si loogu caawiyo bulshooyinka iyo hay'addaha inay wax ka qabtaan lana tacaamulaan saamaynta musiibada. Tusaaleyaal kusaabsan hawl musiibo u diyaar garow waxaa ku jira: nidaam digniin hore; gabbaadyo laga galo duufaan iyo qorshe daad gureyn hadii dufaano dhacaan ama dadaad yimaadaan; meel habboon oo saadka raashinka lagu keydsado, iyo weliba saadka dawada iyo waxyaabaha kale ee muhiimka ah, iwm. Qiimeyn guud oo socota oo lagu sameeyo nugeylka iyo dhibaatooyinka si loo fahmo dhibaatada loona horumariyo bartilmaansiga wax ka qabashada musiibada ayaa sidoo kale ah hawl diyaar garow ah. Sidaas oo kale, in la helo maareyn musiibo oo si waadax ah loo hirgaliyay nidaamkeed (xarun talis iyo koontaroolid loogu talo galay; qaab dhismeed xiriirin) oo ah gudaha degmooyinka iyo bulshooyinka baadiyaha fog ayadoo arinta dambe ay caam tahay (bulsho baadiye fog kunool) taasoo qeyb ka ah diyaargarowga. Hawlaha ugu muhiimsan u diyaar garowga musiibada waxaa ku jira:

- Horumarinta awoodda qiimeyn ku samaynta nugeylka iyo halista;
- Hirgalinta kaabeyaal isgaarsiin oo shaqeynaya iyo awood guud oo la xiriirta saadaalinta, digniin hore iyo feejignaan, xog uruurin;
- Dejinta qorsheyaal loogu talo galay waxyaabo aan la saadaalin kareyn oo ah heer degmo, heer gobol iyo heerarka dhexe ee dawladda;
- Sare u qaadidda waxbarashada dadweynaha iyo wacyi galinta iyo nidaamyada xogta oo heer kasta ah;

- Dejinta qorsheyaal daad gureyn, samatabixin, buugaag yaryar iyo layliyo tusaale ah;
- Meeleynta saadka gargaarka;
- Diyaarinta dhismeyaal dawladu leedahay iyo kuwo si gaar ah loo leeyahay sida iskoolo, isbitaalo, xafiisyo iyo guryo;
- Meel dhigidda nidaamyo xiriirin oo shaqeynaya aadna laisugu duway oo ah heer Federaal, heer dawlad goboleedyo iyo heerarka degmo;
- Kula talinta wasaaraddaha wada shaqeynaya inay ahmiyad siiyaan soo waaridida awoodo loogu talo galay xaaladdaha degdega ah.

3.4.4 Wax ka qabashada Musiibada (Gurmadka)

46. Wax ka qabasho waxay ku lug leedahay hawlo la qabto inta musiibo socoto ama durba markii ay dhammaato. Tillaabooyinka ceynkaa ah waxaa lagu jiheeyaa badbaadinta nafta iyo maciishada iyo la tacaamulidda dhaawaca durba musiibadu sababto. Dhammaan caawimaada mustaqbalka dhow sida daad gureyn ku meel gaar ah, lacag, raashin, dawo, hoy, dhar, in la dhimo tirada xoolaha la dhaqanaayo markii ay jidho abaar/macaluul, ama wixii kale oo ah cawimaad dawlad ama mid gaar ah oo lasiinayo dad ama bulshooyin si ay uga gudbaan saamaynta musiibo waxay ka dhigan yihiin gargaar.

3.4.5 Kasoo kabasho iyo u bixida dhanka adkeysiga

47. Waqtiga soo kabashada wuxuu u baahan yahay barnaamijyo loogu talo galay in lagu caawiyo bulshooyinka si ay ugu soo noqdaan xaaladoodii caadiga ahayd waxaa uuna jamciyaa dib u habeyn iyo dib

u dhis labadaba, waxaana laga yaabaa inuu ku jiro sii waditaanka tillaabooyin gaar ah oo gargaar (daryeel) loogu isxaan falayo kooxo gaar ah oo sabool ah ama dhibaatada u nugul. Dib u habeyn waa *soo celinta* hay'addaha dhaqan dhaqaale iyo qaab dhismeedyada bulshada/beesha saamayntu soo gaadhay ayadoo loo diyaar garoobayo dib u dhis sida dib u dhisida nidaamyadoodii noloshooda ay ku taageeri jireen iyo horumar dheeraad ah. Tillaabooyinka soo kabashada waxaa loogu talo galay bulshooyinka saamayntu gaadhay in lagaga taageero dib u dhisashada iyo horumarinta dheeraadka ah (si wanaagsan dib ugu dhisid) ee kaabeyaashoodii iyo dib u soo celinta danahoodii tooska ahaa kuwoodii bulsho iyo kuwoodii dhaqaale.

48. Waxaa dhammaan tillaabooyinka soo kabashada hoos imaanaya mabaadiida sii waditaanka iyo xoojinta adkeysiga bulshooyinka. Adkeysi wuxuu ka walax yahay awoodda shakhsiyaadka, bulshooyinka, hay'addaha, ganacsiyada iyo nidaamyadu ay kusii jiraan, ay kula qabsadaan, ayna ku kobcaan xataa hadii ay jiraan noocyo kastoo ah *xaalado murugo badan* (sida shaqo la'aan ba'an oo joogto ah, gaadiid dad weyne oo culeys badan saaran yahay, dhibaato maaliyadeed oo caalami ah iyo raashin yari iyo biyo yari ba'an), iyo *dhibaatooyin ba'an* (oo lama filaan ah ahna kuwo durbo si dhaqso ah ku yimaada–sida daadad, colaad si lama filaan ah u qaraxda, dhul gariir iyo cuduro la kala qaado). Siyaasaddaan waxay la xiriirtaa u adkeysiga dhibaatooyin daran, waxayna ku taxaluqdaa oo ay kuwada saabsan tahay halis iyo nugeyl si toos ah loola xiriirshay dhibaatooyin dabiici ah iyo kuwo kale oo aan cimilada ku taxaluqin, waxaana lala xiriirshaa isbaddalo dhanka cimilada ah.

CUTUBKA 4: NATIIJOOYINKA SIYAASADDA IYO QAABKA SAMATABIXINTA

4.1 Ka hortagidda musiibada, yareynta saameynteeda iyo u diyaargarowgeeda

49. Maareyn musiibo oo wanaagsan waxay ku saabsan tahay sare u qaadidda dhaqan ah ogaansho halis ka jirta heer kasta iyo xaqiijinta in waxyaabaha halista ah ee la ogaaday ay u dagsan yihiin qorsheyaal guriga ah, kuwo heer bulsho ah iyo kuwo heer Gobol ah. Kuwaaso dhammaan waa hawlaha la sameeyo ka hor inta musiibo aysan dhicin. Baragaraafyada soo socda waxay sharraxaad guud ka bixinayaan tillaabooyinka/waxyaabaha la samayn doono ee ay tahay in heerar kasta laga fuliyo.

Dawladda Federaalka ah

50. Dawladda Federaalka ah ayaa qaadi doonta dhammaan tillaabooyinka noocaa ah ee ay u aragto lagama maarmaan ama muhiim, iyo/ama kuwa laga codsado oo ay dawlad goboleedyadu ka codsadaan, looguna talo galay qorshaha DM, waxayna xiriirin doontaa tillaabooyinka QM hay'addaheeda, ururada caalamiga ah iyo dawladdaha dalalka shisheeye ee wada maareynta musiibooyinka. Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka waxay ahaan doontaa wasaaradda qaabilsan fududeynta dhammaan qeybaha kala duwan ee DM, ayadoo leh dawrar fulineed oo ay ka ciyaaran wasaarado hawsha wada qabanaya iyo waaxyo talada ku dari doona talo bixinada dawlad goboleedyada dhammaan qorsheyaashooda iyo tillaabooyinka. Tillaabooyinka soo socda ayaa gaar ahaan ahmiyada la siin doonaa:

- Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka waxay kala seereyn doontaa ama kala qeyb qeybin doontaa dhibaatooyinka si guud, nugeylka iyo qariirada halista ee dalka oo dhan ah, ayadoo kaashanaysa dawlad goboleedyada, FEWSNet iyo SWALIM, waxayna

xaqiijin doonaan in macluumaadkaa loo gudbiyo dhammaan hay'addaha Federaalka, hay'addaha dawlad goboleedyada iyo hay'addaha dawliga ah ee degmooyinka ayadoo la adeegsanayo qoraalo xog, waxbarasho iyo isgaarsiin (IEC) iyo siminaaro aqoon laisku weydaarsado;

- Ayadoo la tashanaysa dawlad goboleedyada dhammaantood, Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka waxay soo saari doontaa qariirad ku saabsan nugeylka kooxo dhaqan dhaqaale kuwaasoo aad ugu nugul dhibaatada oo ayadoo kaashaneysa Wasaaradda Qorsheynta iyo hay'addaha QM ayaa ay samayn doontaa qorshe mustaqbalka dhexe loogu talo galay oo wax looga qabanaayo nugeylka aadka ah ee kooxahaasi u nugul yihiin dhibaatada;
- Waxay ku dhiiri galin doontaa dhammaan hay'addaha dawladda Federaalka iyo kuwa dawlad goboleedyada inay tixgaliyaan asbaabta halista iyo waxyaabaha macquulka ah ee lagu dhimi karo halista iyo xoojinta adkeysiga ayadoo diyaarinaysa oo hirgalinaysa dhammaan mashaariicda horumarinta;
- Waxay sare u qaadi doontaa ololeyaasha iyo barnaamijyada waxbarasho ee ku saabsan wacyigalinta ka dhanka ah halista iyo DRR ayadoo la adeegsanaayo macaahiid waxbarasho, warbaahinta iyo macaahiida cilmi baarista;
- Waxay soo ogaan doontaa hay'ado gaar ah oo ah heer Federaal iyo heer dawlad goboleedyo oo masuul looga dhigay dusha kala socoshada iyo kormeerka musiibooyin gaar ah sida duufaano, abaaro iyo daadad, iyo inay soo ogaato marnaan dhanka teknoolojiyada ah oo u baahan in la buuxsho. Ayadoo la shaqeyneysa SWALIM iyo FEWSNet, waxay samayn doontaa awood farsamo iyo kaabeyaal laga dhisaayo degmooyinka ay musiibooyinku ku badan yihiin (oo ay aad uga dhacaan) kuwaasoo loogu talo galay saadaalin, digniin hore iyo maareynta xogta;

- Ayadoo la shaqeyneysa Wasaaradda Biyaha, Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka iyo Wasaaradda Qorsheynta, waxay soo ogaan doontaa mashaariic dhanka kaabeyaasha ah oo muhiim ah sida dhismeyaal waraab loogu talo galay, waro, biyo xireeno, haamo biyo lagu keydsho iwm., oo ah degmooyinka ay aadka uga dhacaan abaaruhu/ama daadadku ku fatahaan waxayna fududeyn doontaa qorsheyn iyo abaabulka dhismeyaashaa/ama dib u habeyntooda waxyaabahaas;

- Ayadoo la shaqeyneysa wasaaraddaha ku habboon (sida wasaaradda beeraha, kheyraadka biyaha), hay'addaha gobolka iyo kuwa caalamiga ah, ayaa waxay samayn doontaa daraasad ku saabsan saamaynta macquulka ah ee isbaddalka cimilada ee musiibooyinka dabiiciga ah inta jeer ee ay dhacaan iyo xaddigooda sida duufaanada, daadadka iyo abaaraha 20ka sano ee soo socda;

- Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka waxay hirgalin doontaa Xarunta Qaran ee Hawlgalada Xaaladdaha Degdega ah (NEOC) oo ku qalabeysan agabyo teknoolojiyad iyo isgaarsiineed, lehna awood ay macluumaad kusoo uruuriso, xog uruurin, ayna ku samayso falanqeyn, iyo inay u qeybiso xogta dhammaan Wasaaraddaha Dawladda Federaalka, dawlad goboleedyada, hay'addaha dawliga ah ee degmooyinka iyo hay'addaha caalamiga ah;

- Diyaarinta qorshe ku saabsan waxyaabo aan la saadaalin karin oo loogu talo galay daadka, abaarta, colaada iyo duufaanaha iyadoo si joogto ah u cusbooneysiin doonta xogta arimahaa la xiriirta, ayadoo kaashanaysa hay'addaha dawladda, Bisha Cas ee Soomaaliya (SRCS, oo ah laan ka tirsan Dawladda Soomaaliya), QM hay'addaheeda iyo ururada aan dawliga ahayn;

- Diyaar garowga ka sokow, waxay kala shaqeyn doontaa waaxda/wasaaradda ay khuseyso keydinta raashinka iyo agabka gargaarka ah ee saadka muhiimka ah gobolada musiibooyinku ku badan yihiin iyo in ay meel dhigto heshiisyo diyaar ah oo lagu keenayo

alaabo gargaar ah;

- Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka waxay fududeyn doontaa dhisida xiriiro hay'ado heer Federaal, heer dawlad goboleedyo iyo heer degmooyin ah kuwaasoo lala leeyahay SRCS oo laamo ku leh mutadawaciina ujoogaan degmooyin musiibooyinku ku badan yihiin oo dalka ah;
- Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka waxay hirgalin doontaa qaabab xiriir oo ah heer Federaal ah (Sanduuq 1) waxayna fududeyn doontaa samaynta qaabab kuwaa oo kale ah oo heer dawladeed ah, ayadoo wakiilo ay ka imaanayaan dhiggeeda munaasabka ah ee ku jira dawladda, QM, SRCS iyo ururo aan dawli ahayn;
- Waxay samayn doontaa ayna hirgalin doontaa ayadoo kaashaneysa wasaaradda/waaxda ay khuseyso tababar nidaamsan oo qasab ah iyo barnaamij hanuunin ah oo loogu talo galay dhammaan degmooyinka xaduudka/saraakiisha qeybo kala duwan oo DM ah.

51. Inkastoo Soomaaliya ay ka dhaceen musiibooyin ayna ka dhacayeen muddo dheer, aqoonta iyo waayo-aragnimada laga helay la tacaamulidda arimahaa ma ahan kuwo la nidaamiyay lana heli karo si ay u hagaan sida dalku wax uga qabto musiibooyinka mustaqbalka. Si loo xoojiyo cilmi baarista, Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka, ayadoo la tashanaysa hay'ado saynis iyo kuwo farsamo oo kuyaala mandaqada ballaaran, waxay dhisi doontaa koox ka kooban khubaro kasocota ururada aan dawliga ahayn, QM iyo bulshada rayidka ah si loo garto baahiyaha cilmi barista iyo u diyaar garowgeeda musiibada iyo dhimitaanka halista, iyo in la sameeyo daraasado cilmi baaris. Cilmi baarista siyaabihii hore ee soo jireenka ahaa ee la qabsiga colaada, daadka iyo dhibaatooyinka abaarta ayaa ahmiyad la siin doonaa.

Sanduuq 1:Qaababka Iskuxirka ee Heer Federaal

1. Guddiga Qaran ee Maareynta Musiibooyinka (NDMC)

Sida ku cad Qodobka Maareynta Musiibooyinka ee 2016, NDMC waxaa loo hirgalin doonaa sidii guddi ka dhexeeya wasaaraddaha si uu u bixiyo jiheyn guud iyo hagid loogu talo galay maareynta musiibooyinka (DM) taasoo ay ku jiraan dhimid, u diyaar garow, wax ka qabasho iyo soo kabasho, dhimidda halista musiibada (DRR) iyo adkeysi. Qorshihiisa ugu weyn ayaa ahaan doona inuu xaqiijiyo abuuridda iyo hirgalinta siyaasad qaran, qorsheyn iyo qaabab shaqo oo sharci oo loogu talo galay maareyn musiibo oo guud oo Soomaaliya gudaheeda ah. Intaas waxaa dheer markii ay jiraan musiibooyin qaran oo waaweyn, NDMC wuxuu bixin doonaa kormeer istaraatiiji ah oo lagu samaynaayo hawlaha wax ka qabashada musiibooyinka. Ayadoo uu guddoomiye u noqonayo Raisul Wasaare ha ayaa NDMC wuxuu hoos imaan doonaa Raisul Wasaaraha. NDMC waxaa ku jira Wasiirada soo socda oo ka noqonaya xubno jagooyin ka haya jagooyinkaasoo waafaqsan maareynta musiibooyinka:

Wasiirka Maareynta Arimaha Bani'aadminimada iyo Maareynta Musiibooyinka; Wasiirka Beeraha; Wasiirka Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha; Wasiirka Caafimaadka; Wasiirka Hawlaha Guud iyo Dib-u-Dhiska; Wasiirka Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa; Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha; Wasiirka Shaqada iyo Adeegyada Bulshada; Xafiiska Deegaanka oo hoos imaanaya Raisul Wasaaraha; Wasiirka Arimaha Gudaha iyo Arimaha Federaalka; Wasiirka Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda; Wasiirka Gaadiidka iyo Duulimaadka Rayidka; Wasiirka Amniga Gudaha; Wasiirka Maaliyada; Wasiirka Arimaha Haweenka iyo Xaquuqul Insaanka, Wasiirka Dhalinyaradda iyo Isboortiga, Wasiirka Gaashaandhiga iyo Xafiiska Arrimaha Deeganka.

Wasiirka Arimaha Bani'aadminimada iyo Maareynta Musiibooyinka ayaa ah Xoghayaha NDMC kaasoo kulmaya ugu yaraan labo jeer sanakii – kasokow kulamo aan caadi ahayn markii ay jiraan musiibooyin waaweyn markii loo baahdana la qabto si:

1) *Dib u eegid loogu sameeyo nidaamka qaran ee maareynta musiibooyinka loona bixiyo talo istaraatiiji ah oo loogu talo galay dhimitaanka musiibada iyo maareynta wax ka qabashada xaaladdaha degdega ah*

2) *Sare loogu qaado wada hadal ah dhammaan waaxyaha ayadoo looga gol leeyahay in lagu dhafo dhimidda musiibada qorsheyaasha horumarinta ee waaxyaha iyo barnaamijyada wasaaraddaha kala duwan*

3) *Loo fududeeyo tillaabooyinka xiriirinta dhibaatooyin badan iyo waaxyo badan oo la xiriira dhimidda halista musiibada iyo maareynta wax ka qabashada xaaladdaha degdega ah*

4) *Dib loogu eego tillaabooyinka u diyaar garowga musiibada iyo si loo bixiyo talo istaraatiiji ah*

5) *Dib loogu eego qorsheyaasha maareynta musiibooyinka ee dawlad goboleedyo kala duwan iyo Dawladda Federaalka ah iyo DMA, hadii ay ku lug leedahay fan gareyn laga helay Qasnadda Maareynta Musiibooyinka Qaran, iyo ansixinta wixii loo qoondeeyo.*

6) *Loogu talo bixiyo soo deynta qarashka loogu talo galay shaqooyinka mashruuc gaar ah.*

NDMC wuxuu bixin doonaa tilmaameyaal lagu caawinaayo Wasaaraddaha Federaalka, Waaxyaha iyo Dawlad Goboleedyada si loo qaabeeyo qorsheyaashooda mudnaanta leh ee maareynta musiibooyinka. Wuxuu ansixin doonaa Istaraatiijiyada Maareynta Musiibooyinka Qaran iyo Habraaca Hawlgalka ee Heerka Sare ah ee loogu talo galay Maareynta Musiibooyinka kaasoo ay dejin doonto SODMA. Wuxuu kula talin doonaa Raisul Wasaaraha inuu qaado wixii kaloo tillaabooyin ah ee loo arko lagama maarmaan si looga hortago musiibooyin ama loo dhimo ama loogu diyaar garoobo loona dhiso awoodda loogu tala galay la tacaamulidda musiibo ama xaalad musiibo oo ba'an.

2. Kooxda Isku-duga Maaraynta Musiibooyina Soomaaliya (SDMCG)

Iyada oo NDMC ay tahay hay'adda guud ee isku xirka maamulka iyo ka warqabka maaraynta musiibooyinka ee dalka istaraatijiyad ahaan, Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinkaayaa qabanaysa shirka kooxda isku xirka oo ka kooban mas'uuliin inta badan saraysa (Xoghayayaasha Joogtada, Agaasimiyaasha Guud iyo Maamulayaal Guud) ee dhamaan waaxyaha iyo hay'adaha dalka ee ay qusayso, Madaxyada Hay'adaha Dalka ee Midaysan, SRCS iyo NGOs. SDMCG waa in ay ugu yaraan sanadka caadiga ah ay saddex jeer kulmaan, iyo ugu yaraan hal mar bishiiba waqtiyada ay musiibooyinku jiraan, si ay u hagaan howlgalka dhinacyada Maamul Musiibo (DM) oo dhamaystiran. Xoghayaha Joogtada ee Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka waxuu noqonayaa Xoghayaha u xilsaaran SDMCG.

Qaasatan, SDMCG waxay qabanaysaa:

- *Isku-duga waxqabadyada kala duwan ee qaybaha waxqabanaya dhacdada musiibo ka hor (ka hortag, qafiifin iyo diyaargarow), musiibooyinka, iyo musiibooyinka ka dib (gurmad, kabasho, dib u noolayn iyo dib u dhis)*
- *Waqtiga musiibooyinka, inay xaqiijiyaan qiimaynta iyo garashada baahida dadyowga taagta daran, iyo inay talo ka siiyaan hay'adaha iyo waaxyada inay u sheegaan siday baahida u kala hormarin lahaayeen.*
- *Inay talo ka siiyaan NDMC iyo Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka dhanka farsamo iyo dhaqaale-bulsheedka maamulka gurmadka deg-degga ah iyo Yaraynta Qatarta Musiibada (Disaster Risk Reduction)*

- *Inay hubiyaan in qaab dhamaystiran oo lagu qiimeeyo qatarta u jilicsanaanta qatartu ay dalka ka jirto, oo xogta loo aruuriyo si nidaamsan, la qiimeeyo oo lala qaybsado kuwa ay qusayso ee heer Qaran, Gobol iyo Degmaba.*
- *Bixinta isku xirka awoodaha maaraynta musiibooyinka ee Qaran, heer ku haboon, ayna ka caawiyaan in hay'adaasu ay sidoo kale u maarayso kuwa la shaqeeya ee heer Xubno Gobol.*
- *Soo jeedin iyo/ama qiimaynta qorshayaasha ka soo kabasho ee mudada fog.*
- *Caawinta garashada baahida kala hormarinta deegaanka ee DRR iyo talo bixinta sida loo bixinayo qayraadka, iyaga oo jadwal u samaynaya falalka, eegaya oo qiimaynaya sida loo dhaqangalinayo waxqabadyada DRR, iyadoo ku toosan hab-waxqabadka Sendai.*

Dawlad goboleedyada xubnaha ka ah

52. Dawlad goboleedyadu garashadooda ayagoo adeegsanaya waxay samaysan karaan Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Dawlad Goboleedka (DMA) oo gaar ah taasoo loogu talo galay fududeynta maareyn musiibo oo guud dawlad goboleed walba. Hadii dawlad goboleedi go'aansato inaysan lahaan hay'ad noocaan ah oo u gaar ah, waxay ugu yaraan dhiseysaa guddi maareyn musiibo (DMC) oo uu hoggaamiyo Xoghaye darajo sare leh (kaaso noqonaya Guddoomiyaha DMC) ee Dawlad Goboleedka, kaasoo xubnihiisu ka kala imaanayaa waaxyaha muhiimka ah (sida Agaasimeyaasha Guud, Madaxda Waaxyaha) oo saameyn toos ah ku leh u diyaar garoobida musiibooyinka iyo wax ka qabashadooda. DMA dawlad goboleed leedahay meeshii uu ka jiro ama DMC, waxaa uu qaban doonaa hawlaha soo socda:

- Xaqiijinta xiriirinta u dhexeysa dawlad goboleedka iyo Agaasimaha Guud (DG) ee Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka marka laga hadlaayo dhammaan qeybaha kala duwan ee maareynta musiibada oo qorsheyaasha maareynta musiibooyinka ee dawlad goboleedka waxaa wargaliya tilmaameyaal qaran iyo ahmiyado;

- Sameynta seereyn dhamaystiran oo ah dhibaatooyinka, qariidad ku saabsan sida loogu nugul yahay musiibooyinka iyo qiimeyn ku saabsan halista oo loogu talo galay dawlad goboleedka oo idil si loo xaqiijiyo in arintaa lagu baahiyo dhammaan hay'addaha dawlad goboleedka iyo hay'addaha dawliga ah ee degmooyinka ayadoo la adeegsanaayo qoraalada IEC iyo siminaaro aqoon isweydaarsi ah;

- Soo saaridda qariidad ku saabsan sida ay u nugul yihiin kooxo dhaqan dhaqaale kuwaasoo aad ugu nugul dhibaato iyo dejinta qorshe mustaqbal dhexe ah si wax looga qabto nugeylka aadka ah ee kooxahaa;

- Dhiirigalinta dhammaan hay'addaha dawlad goboleedka si xisaabta loogu daro sababaha dhimidda musiibada iyo waxyaabaha macquulka ah ee dhimidda halista ayadoo la diyaarinaayo lana hirgalinaayo dhammaan mashaariicda horumarka;

- Dejinta SOP loogu talo galay u diyaar garowga musiibada iyo waxqabadka loogu tala galay ficilka oo ah heerarka dawlad goboleedka, degmada iyo degmo hoosaadka, iyo xaqiijinta tababarida iyo hanuuninta dhammaan shaqaalaha iyo hoggaamiyeyaasha bulshada ee ku jira SOP;

- La shaqeynta DG-ga Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka, SWALIM iyo FEWSNet, si loo sameeyo awood farsamo iyo kaabeyaal laga dhisayo degmooyinka ay musiibooyinku ku badan yihiin (oo had iyo jeer ay ka dhacaan) taasoo loogu tala galay saadaalinta, digniinta hore iyo maareynta xogta;

- Tilmaamida mashaariic muhiim ah oo kaabeyaal ah sida waxyaabaha loogu talo galay waraabka, waraha, biyo xireenada, baraagaha, iwm., ee degmooyinka ay ku badan yihiin abaaraha/daadadka iyo fududeynta qorsheynta iyo abaabulida agabka loogu talo galay dhismaha/dib u habeynta dhismeyaasha;

- Hirgalinta Xarunta Hawlaha Xaaladdaha Degdegga ah ee dawlad goboleedka (SEOC) oo ku qalabeysan teknoolojiyad ku filan iyo qalab isgaarsiin, iyo awood lagu soo uruursho xog, uruurinta macluumaadka iyo falanqeyn, iyo ku faafinta xogta dhammaan hay'addaha dawlad goboleedka, hay'addaha dawliga ah ee degmooyinka, SRCS, ururada aan dawliga ahayn iyo hay'addaha caalamiga ah;

- Diyaarinta qorshe loogu talo galay in wax looga qabto daadka, abaarta, colaada iyo duufaanada iyo u cusbooneysiinta qorshahaa si joogto ah, ayadoo la kaashanaayo hay'addaha dawlad goboleedka, laamaha SRCS, hay'addaha QM iyo ururada aan dawliga ahayn.

- Hirgalinta qaab dhismeed xiriirin oo ah heer dawlad goboleed oo xubnihiisu ka socdaan hay'ado ku habboon (hay'addaha dawladda, QM, SRCS iyo ururada aan dawliga ahayn);

- Ayadoo diyaar garowga ay qeyb ka tahay, in la dhiso nidaamyo loogu talo galay keydinta saad muhiim ah oo ka imaanaya baqaarada dawladda Federaalka ah iyo in la heysto heshiisyo diyaar ah oo ku saabsan saad iyo qalab gargaar;

- Xaqiijinta in dawlad goboleedku haysato qorshe ku saabsan maareynta musiibooyinka kaasoo isku dhafaya tillaabooyinka ka hortagga, dhimidda, hirgalinta nidaamyo digniin hore, awood dhisida hay'addaha dawliga ah ee degmooyinka ee maareynta musiibooyinka, iyo xiriirinta lala leeyahay Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka - ka dawladda Federaalka, SRCS iyo ururada caalamiga ah/ururada bani'aadamnimo ee gudaha dalka ka jira.

53. Maareynta Halista Musiibada oo Bulsho ku salaysan (CBDRM) waxay dawr muhiim ah ka ciyaartaa xoojinta nidaamka guud ee maareynta musiibooyinka. Gudaha Soomaaliya SRCS, ururo aan dawli ahayn iyo ururada bulshada rayidka ah ayaa samaynayay qaabkooda u gaarka ah eek u aaddan CBDRM, ayadoo ay ku xiran tahay meelba xaaladda u gaarka ah. Hadii la waayo qaab shaqo oo ah CBDRM oo wanaagsan, waxaa adkaata in la abuuro wax wada qabasho iyo helitaanka faaiidooyinka ugu waaweyn ee loogu talo galay bulshooyinka dhexdoodu dhibaatadu ku badan tahay faaiidooyinkaa oo laga helo dadaalada CBDRM. Dawlad goboleed kasta waxaa lagu dhiiri galin doonaa oo Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ay ku dhiiri galin doontaa inay samaysato qaab shaqo oo CBDRM ah kaasoo lasii isticmaali karo oo lagu sii habeyn karo heerarka degmo.

Maamulka degmada

54. Dawrka maamulka degmada waxaa uu muhiim u yahay maareyn musiibo oo wax ku ool ah maadaama taasi u baahan tahay in lagu saleeyo qorsheyaal iyo tillaabooyin maxali ah. Guddoomiyaha Degmada ayaa qaadi doona dhammaan tillaabooyinka loogu talo galay maareynta gudaha degmada si waafaqsan tilmaameyaasha ay dajisay Dawlad goboleedka DMA/DMC-kkeda iyo SDMCG. Saraakiishaa ayaa isku soo duba ridi doona qorshe degmo oo munaasab ah, guddi xiriirin iyo hirgalin ka shaqeeya oo loogu talo galay maareynta musiibada. Gaar ahaan, Guddoomiyaha Degmadu wuxuu xil ka saarnaan doonaa tillaabooyinka soo socda:

- Diyaarinta liis dhamaystiran oo ku saabsan bulsho dhibta u nugul iyo qariidada seereynta meelaha dhibtu ka jidho ee degmada.

- Diyaarinta qorsheyaal dhamaystiran oo ah mustaqbalka dhow, kan dhexe iyo kan fog ah oo loogu talo galay dhimidda halista heer degmo ayadoo la kaashanaayo hay'addaha dawliga ah ee gudaha/*Tabeèle* iyo xaqiijinta in qorsheyaasha degmadu xogta ka qaataan qiimeyn halis oo nidaamsan.

- Si ku salaysan qariidadaha sida dhibta loogu nugul yahay, hirgalinta guddi farsamo oo maareeya musiibada kaasoo ka kooban waaxyo wada shaqeynaya (Beeraha, Xoolaha, kheyraadka biyaha/waraabka, iwm) oo degmada gudaheeda ah;

- Kormeerida dhaqaalaha gudaha iyo maciishada la xiriirta calaamadaha digniinta hore (oo loogu talo galay abaaraha, colaadaha iyo macaluusha) iyo dejinta macluumaad/kalendaariyeha dhibaato xilliyada qaar dhici kadha, hadii ay jidho.

- Hirgalinta xiriir toos ah oo lala yeelanayo hay'addaha dawliga ah ee degmo hoosaadka/tuulada iyo hoggaamiyeyaasha maxaliga ah iyo xaqiijinta in macluumaadka dhammaan cinwaanada la adeegsado

markii xaalado degdeg ahi jiraan ay diyaar u yihiin in lagu soo gudbiyo digniino iyo geyfnaan galin waqti hore ah– dhammaan madaxda degmooyinka ay ka dhacaan duufaanada iyo daadadku waxay u baahan yihiin inay mudnaan siiyaan 'khad ilaa maylka ugu dambeeya gaarsiisan' kaasoo loogu talo galay gudbinta digniinaha iyo geyfnaan galinta hore ee ka imaanaysa xarumaha degmada loona dirayo bulshooyinka ku dhaqan heer tuulo.

- SRCS wuxuu laamo ku leeyahay dhammaan degmooyinka waana qeyb ka tirsan Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya. Dhammaan madaxda degmooyinka musiibooyinku ku badan yihiin waxaa laga doonayaa inay si joogto ah ula soo xiriiraan SRCS oo sidoo kalena lahaan kara mutadawaciin degdeg loo hawl galin karo markii musiibooyin ay yimaadaan.

- Haysashada liis ku saabsan hay'addaha aan dawliga ahayn ee ka shaqeyn kara maareynta musiibooyinka iyo xiriirinta hawlahooda.

- Diyaarinta liis ku saabsan dhismeyaasha, iskoolada, koleejooyinka, xarumaha iwm., ayadoo sanad walba la samaynaayo kormeer joogto ah si dadku ay u isticmaalaan markii xaalado degdeg ahi dhacaan (barakicin qasab ah dagaal dartii,duufaano, daadad iwm) ayadoo loo isticmaalaayo sidii xeryo gargaar/ xeryo ku meel gaar ah. Isticmaalka dhismeyaasha macaahiida waxbarashada kuwaaso laga dhigto xeryo gargaar waxaa loo baahan yahay in laga hor yimaado.

- Degmooyinka daadadka, abaarta iyo dufaantu ku badan yihiin gudahooda ku qabo siminaar iyo kedisyo sanadkiiba mar kuwaasoo ay kasoo qeyb galayaan shaqaalaha dhammaan waaxyaha wada shaqeeya, hoggaamiyeyaasha tuulooyinka, SRCS iyo ururada aan dawliga ahayn.

- Markii la arko calaamadaha musiibo dhici kadha, guddiga farsamo ee degmadu waa inuu diyaarsho qorshe ay ku lug leeyihiin ururada aan dawliga ahayn, SRCS, iyo hay'addaha dawliga ah ee heerka *Waax/Tabeele*.

4.2 Gurmad degdeg ah

55. Sidii horeyba loo soo xusay, haatan Soomaaliya ma lahan siyaasad qaab shaqo oo xiriirsan ama asaas sharci oo loogu talo galay xaaladdaha degdega ah in wax looga qabto taasoo badi ay bixiyaan ururada caalamiga ah, kuwa gudaha iyo ururada aan dawliga ahayn ee caalamiga ah, ururo diineedka iyo hay'addaha dawladdaha shisheeye/deeq bixiyeyaasha, yadoo hay'addaha dawladu ay ciyaaraan dawr aan aad u qoto dheereyn. Hay'addaha dawladda ayaa leh awood xaddidan hada ayagoo wax yar ku biirsha wax qabadka tanina waxay u baahan tahay in wax laga baddalo maadaama ay tahay dawladda waxa waajibka ugu weyn uu ka saaran yahay maareynta musiibooyinka. Intaa waxaa dheer, hoggaan wanaagsan oo laga helo dawladda wuxuu aad sare ugu qaadi karaa wax ku oolnimada wax ka qabashada musiibada ee ay wax ka qabanayaan hay'addaha badan ayadoo la bixinaayo qaab shaqo oo wanaagsan xiriirsana kaasoo fududeeya in wax loo qabto si degdeg ah oo wanaagsan taasoo ku salaysan baahida meesha ka jidha. Sidaa daraadeed, tillaabooyinka soo socdaa heerar kala gadisan laga qaadi doonaa:

Dawladda Federaalka ah

56. Markii musiibo ku habsato hal dawlad goboleed ama wax ka badan oo taasina ay ka tan badiso dawlad goboleedkaa ama dawlad goboleedyadaas ayna bixin waayaan hoggaan iyo xiriirin loogu talo galay bixinta cawimaadda iyo badbaadinta dadka, Raisul Wasaaruhu asagoo adeegsanaya talo bixinada NDMC iyo la tashi uu lasamaynayo madaxda dawlad goboleedyada, wuxuu xisaabta ku darayaa in musiibo ba'ani dhici kadho(31) taasoo sababaysa dhimasho

31Tani waxay khusaysaa musiibo si aayar ah u dhacaysa, sida roob la'aan xun, taas oo isubadali karta abaaro. 'inay dhici karto' ayaa waxaa muujin kara dhowr cadaymood/dhacdooyin (sida abuurka oo xumaada, xoolahoo dhamaada, dadka oo ay qasab

ama dhaawac iyo burbur hanti oo ka dhaca hal dawlad goboleed ama wax ka bdan iyo in soo celinta xaaladii caadiga ahayd aysan gacan ugu jirin dawlad goboleedkaa ama dawlad goboleedyadaas markii xaalado noocaa ah ay dhacaana, asaga/ayadu waxay shaaca ka qaadi doontaa *xaalad degdeg ah oo qaran*oo ka jirta meelahaa. Shaacinta caynkaa ah ee xaaladda degdega ah waxaa lagu salaynayaa afar wax: xaddiga, qallafsanaanta, sida ay degdeg u tahay iyo awoodda (dawlad goboleedyada). Sharuudo gaar ah ayaa loo baahan doonaa markii la samaynaayo shaacinta noocaa ah:

- In dad badan ay dhintaan ama dhaawacmaan xoolo/nimcooley;
- In waxyeelo ba'ani soo gaadho kaabeyaasha, hantida iyo maciishada;
- Dhaawac ba'an oo soo gaara caafimaadka dadka, iyo xaaladdaha ammaanka ee deegaankaas;
- Waxyeelo halis ah oo aan wax laga qaban karin oo soo gaadha deegaanda, iyo weliba halis soo wajahda nolosha dadka, hantida iyo maciishada.

57. Shaaca ka qaadidda '*xaalad degdeg ah oo qaran*' waxaa marka hore laga dhigayaa saddex bilood, ayadoo Raisul Wasaaruhu uu hadhow ku kordhin karo saddex bilood oo kale asagoo adeegsanaya talada NDMC. Markii shaaca laga qaado in musiibo jirto, NDMC iyo SDMCG ayaa hormuud noqon doona waxayna qabanayaan hawlaha munaasabka ah (Sanduuqa Sare ee 1). Markii musiibo aysan ahayn mid 'qaran' baaxad ahaan oo ay tahay maxali kana jirto hal dawlad goboleed ama wax ka badan, SDMCG iyo Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka wali waxaa xili ka saaran yahay inay bixiyaan markii dawlad

ku noqoto inay guur-guuraan, sicir barar, iwm), kuwaas oo mudo dheer loo kuurgalay, inta badan dhowr bilood.

goboleedkaa ama dawlad goboleedyadaasi ka codsadaan dhammaan taageerada munaasabka ah iyo hagitaanka la siinayo hay'addaha dawliga ah iyo inay ku caawiyaan sidii ay wax qabad wax ku ool ah u qaban lahaayeen.

58. Inta ay socdaan hawlaha wax looga qabanaayo musiibada oo dhan, guddoomiyaha SODMA wuxuu sii wadi doonaa inuu shir guddoomiyo shirarka kooxda xiriirinta qaran oo laga yaabo wax intii caadiga ahaa ka badan inay kulmaan, waa ka badan intii ay kulmi jireen markii lagu jiro waqtiyada yareynta saameynta musiibada iyo diyaar garowga. Guddoomiyaha ayaa xaqiijin doona in hay'addaha dawladu ay heerar munaasab ah kala xiriiraan nidaamka gargaarka caalamiga ah (kooxaha hay'addaha samofalka ah ee hoos yimaada QM, OCHA, iyo xiriiriyaha arimaha gargaarka).

59. Markii ay jiraan musiibooyin waaweyn, hoggaaminta hannaanka qiimeyn ku samaynta waxyeelada iyo khasaaraha, ayadoo la kaashanaayo ururada caalamiga ah, iyo in la ogaado baahiyaha mudnaanta leh ee u baahan xalka waqtiga gaaban, kan dhexe iyo kan fog.

60. Diritaanka codsi si degdeg ah kaasoo lagu codsanaayo in wax looga qabto musiibada kadib markii ay dhacdo musiibo weyn iyadoo si xilli ka xilli ah loo cusbooneysiinayo/loona baddalaayo codsiga si qoto dheer oo ku salaysan macluumaadka qiimeynta baahiyaha markii ay soo baxaan. Hirgalinta qasnad lagu maareeyo musiibada oo cawimaad ka hesha miisaaniyada dawladda Federaalka ah iyo deeqo dalal shisheeye, ururo caalami ah iyo ururo goboleed.

61. NDMC waxay samayn doontaa qaab qoondeyn iyo shuruuc loogu talo galay ka faaiideysiga qasnadda maareynta musiibada iyo kormeerida maamulideeda oo wasaaradda Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ay dusha kala socoto.

Dawlad goboleedyada

62. Dawlad goboleedyada aan heysan qaab dhismeed gaar ah oo loogu talo galay maareynta musiibadu waxay dhisi doonaan guddi maareyn musiibo ka shaqeeya (DMC) oo uu madax u yahay xoghaye darajo sare (kaasoo Guddoomiye u ah DMC) oo ka tirsan dawlad goboleedka, guddigaasoo xubnihiisu ka imaanayaan waaxyaha muhiimka ah (Agaasimeyaasha Sare, iyo Madaxda Waaxyaha) kuna leh saamayn munaasab ah u diyaar garowga musiibada iyo wax ka qabashadeeda. Durba markii la soosaaro digniinta musiibada, dawlad goboleedku waxay ku wargalin doontaa guddoomiya DMC inuu matalo masuulka Nidaamka Taliska Dhaqdada (ICS) wuxuuna noqon doonaa qofka ugu horeeya ee ay la sooxiriireyso SDMCG iyo maamulka degmadu. Asaga ama ayada ayaa waxaa lasiin doonaa awood munaasab ah oo uu ku amro waaxyaha ay khuseyso abaabulka waqtiga ay jidho xaaladda degdega ahi. ICS (ama DMA, hadii ay jidho) waxay qaban doontaa dhammaan hawlaha lagama maarmaanka ah ee lagu xiriirinaayo laguna caawinaayo hay'addaha wada shaqeynaya/waaxyaha sidii ay wax uga qaban lahaayeen musiibada. ICS wuxuu kaashan doonaa Agaasimaha Arimaha Bani'aadminimada ee Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka oo ah xoghaye sare oo ka tirsan SDMCG kaasoo loogu talo galay hagitaanka iyo taageerada ka imaanaysa Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya. Madaxa ICS ama DMA ayaa qaban doona hawlaha soo socda ee waqtiyada ay jiraan xaaladdaha degdega ah:

- Masuul ka noqoshada xiriirinta wax ka qabashada musiibada iyo Kooxda Maareynta Musiibada (DMT) taasoo ka kooban shaqaale ka socda waaxyo kala duwan/hay'ado ay tahay inay caawiyaan maareynta musiibada.

- Xiriirinta qiimeynta xaaladda iyo talo siinta hay'addaha dawliga ah iyo kuwa samofalka.

- Liis gareynta dadka wax qabanaya ee maxaliga ah iyo helitaanka agabyada.

- Sameynta qorshe musiibada lagu maareeyo iyo ahmiyado la xiriira xubnaha kooxda maareynta musiibada

- Hirgalinta xiriiro toos ah oo lala yeelanayo maamulka degmada iyo siinta hagitaanka iyo taageerada lagama maarmaanka ah maamulka degmada
- Hawl u yeelida ama u diridda kooxda maareynta musiibada, hay'addaha waxqabadka iyo adeegyada taageerada
- Hawsha oo lala xiriirsho Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ama lala agaasimo ayada iyo deeqbixiyeyaasha si loo helo agabyo iyo taageero.

63. Dawlad goboleedyadu waxay dardar galin doonaan SOP si wax looga qabto musiibada durba markii laga war helo inay musiibo dhacday, waxayna soo wargalinayaan DG ee Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka. Qaab agaasimid oo habboon oo ku lug leh hay'ado dawli ah oo kala duwan, ganacsiyo, ururo aan dawli ahayn iyo hay'addaha QM ee dawlad goboleedka ku sugan ayaa sidoo kale la dhisi doonaa. Hadii hay'addaha wada shaqeeya ee QM hoos yimaada la dardar galiyo, dawlad goboleedka hay'adiisa maareynta musiibooyinka ama sargaalka masuulka ka ah (OI) ee ICS ayaa wax ka shir guddoomin doona hay'addahaa wada shaqeeya ee hoos yimaada QM/shirarka waaxyaha ee lala leeyahay OCHA/QM.

64. Dawlad goboleedyadu waxay hirgalin doonaan qasnadda maareynta musiibooyinka oo qoondo ka heleysa dawladda federaalka iyo dawlad goboleedka, qarash ka imaanaya dalal dibada ah, ururo caalami ah iyo ururo goboleed oo mandaqada kuyaala iyo weliba cawimaad iyo deeqo ka imaanaya ganacsiyo maxali ah iyo dad samo doon ah. Qasnadda waxaa maamuli doonta hay'adda dawliga ah ee maareynta musiibooyinka, waa hadii ay jirto, ama sargaalka masuulka ka ah nidaamka ICS oo hoos imaanaya qaabka shaqo ee xisaab xirka maaliyada dawladda.

65. Xeryaha kumeel gaarka ah ee gargaarku waxay heli doonaan biyo la cabo oo dadka kunool ku filan, biyo lagu qubeysto, nadaafad iyo xarumo laga helo daryeel caafimaad. Hadii ay macquul tahay, guddiyo farsamo oo gaar ah oo laga soo xulaayo qoysas musiibadu asiibtay ayaa la dhisi doonaa si loo xaqiijiyo in bulshooyinku ku lug yeeshaan kana qeyb qaataan gargaarka loo fidinaayo iyo dib u habeynta. Nidaamyo maamul oo wax ku ool ah sida kaararka lahaanshaha hantida, kaarar aqoonsi oo la baceeyay iwm, ayaa la samayn doonaa taasoo qeyb ka ah dhaqamada maamulida gargaarka ee isku midka ah ayadoo la adeegsanayo hay'addaha dawliga ah ee munaasabka ah ee maareynta musiibooyinka.

Maamulka degmada

66. Durba markii la ogaado in musiibo ka dhacday degmada, waxay ogeysiinayaan Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ama sargaalka masuulka ka ah nidaamka ICS.

67. Ka hirgalinta qol wax laga koontaroolo Xarunta Degmada (32) iyo la xiriiritaanka NEOC ee Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka iyo weliba Qolka Wax Laga Koontaroolo ee Dawlad Goboleedka. Soo saaritaanka ogeysiis digniin ah oo ku socda dhammaan dadka danaynaya diyaargarowga si wax looga qabto xaalad degdeg ah oo dhici karta, iyo xaqiijinta in dadka halista ku jira loogu digo isgaarsiin iyo nidaam warka lagu baahsho oo la hirgaliyay intii lagu jiray marxalada diyaar garowga. Taa waxaa ka mid noqonaya: in hay'addaha arintu khuseyso ay diraan digniino munaasab ah oo ah meel gaar ah; inay qabanqaabiyaan siiyaale halis ah oo cad dadka deegaanka dhexdiisa iyo in la xaqiijiyo in

32 Waxaa la fahansan yahay in Soomaaliya ay degmooyinku leeyahiin xaruumo bixiya digniinta hore. Waxaa tan ku filan qolal koontarool hadii ay awoodaan inay digniinta ka sakow ay sidoo kale aruuriyaan warbixinta, ayna sidoo kale ICS siiyaan xogta ugu danbaysay ee baahida taagan iyo gurmadka la bixiyay.

calaamadaha ku saabsan musiibada dadku ay arkaan, waa dadka ku sugan meelaha halista badan ee musiibooyinka badan; ayadoo geyfnaan la galinaayo dhammaan dad ku sugan degmo hoosaadka iyo tuulooyinka.

68. Ka shaqeysiinta shaqo samatabixin ah ayadoo xaalad degdeg ahi jidho lana adeegsanayo agabyo deegaankaa laga heli karo lana kaashanayo hay'ado kale oo ka kooban kooxo samatabixin oo ku sugan meelo musiibadu aad ugu habsatay.

69. Qabanqaabinta iyo jiheynta dad halis ku jira oo daad iyo duufaano ku dhufteen kuwaaso laga yaabo in hadii la isku dayo in durba markii la soosaaro digniinaha la badbaadsho(33) oo la keeno meelo badbaado leh/xeryo gargaar/guryo la adeegsado markii xaalado degdeg ahi jiraan naftu biimo galeyso, ayadoo la xaqiijinyo in xarumaha badbaadada/xeryaha gargaarka/guryaha la adeegsado markii xaalado degdeg ahi jiraan laga dhiso degmada oo loo maareeyo si waafaqsan tilmaameyaasha gudaha ee jira markaa iyo heerarka waxqabadka gargaarka marka laga hadlaayo bixinta badbaadada iyo waafaqida baahiyaha aasaasiga ah ee ugu yar ee barakaceyaasha. Markii dad tiro badan loo rarayo kaamam ama dhismeyaal caam ah, xaqiijinta ka hortagga, badbaadinta iyo daryeelka caafimaad ee dadka si loo joojiyo faafitaanka/dillaacida cudurada.

70. Qabashada shirar joogto ah oo ay leeyihiin dhammaan hay'addaha kala duwan (waaxyaha munaasabka ah ee degmada ee wada shaqeeya, SRCS, ururada aan dawliga ahayn, ururada diinta) si loo xaqiijiyo isku xirid, xallinta caqabadaha hortaagan hawl galka, iyo muujinta wixii

33 Badbaadintu waxay sidoo kale noqon kartaa in dadka laga caawiyo inay la soo wareegaan waxyaalaha muhiimka u ah sida (xoolahooda, digaagooda, cunooyinka muhiim ah, gaas, shumac, raadiye etc.).

kala dhimman. Wakiilada bulshooyinka saamayntu soo gaadhay ayaa sidoo kale lagu casuumi karaa shirarkaas. Maamulka degmadu wuxuu sidoo kale amri karaa degmo hoosaadyadu inay qabtaan shirar kuwaa la mid ah oo heer maxali ah.

71. Xaqiijinta qiimeynta baahiyaha ee laga sameeyo degmada in la xiriirsho xogtana loo soo uruursho si nidaamsan, iyo in baahiyaha qiimeynta lagu sameeyo macluumaadkeeda loogu jawaab celiyo qorsheyaal habboon oo loogu talo galay wax ka qabashada musiibada. Xaqiijinta xisaabaadka la xiriira khasaareha si loo ogaado ahmiyada iyo waxyaabaha loo baahan yahay ayadoo la adeegsanaayo kormeer ay sameeyeen saraakiil ama dad kale oo hawshaa qaban kara.

72. Qaaditaanka tillaabooyin habboon oo loogu talo galay xaqiijinta ammaanka shaqaalaha gargaarka ka shaqeeya ee dalka iyo dibada inta ay socoto musiibo iyo xaqiijinta gaaritaanka bulshooyinka musiibooyinku ku habsadeen iyo amniga guud ee haweenka, carruurta iyo dadka naafada ah inta ay socoto musiibo (ayadoo la dajinaayo xarumo badbaado leh/guryo iyo meelo kale).

73. U qoondeynta iyo qeybinta degmooyin hoosaadka iyo tuulooyinka, qalab gargaar ah oo laga keenay dawlad goboleedka ama hay'adda maareynta musiibada marka loo eego sida ay lagama maarmaan u tahay iyo awaamiirta ka soo baxay DMB iyo maamulka degmada.

74. Ayadoo diirada la saarayo gargaarka, dareen ayaa la siin karaa sidoo kale dib u habeyn degdeg ah oo lagu sameeyo kaabeyaasha muhiimka ah sida xafiisyada dawladda (hadii waxyeelo ay iyana soo gaadhay), waddooyinka, xarumaha daryeelka caafimaadka, iwm, maadaama ay lagama maarmaan u yihiin bixinta gargaarka.

75. Diyaarinta qorsheyaal degdeg ah oo loogu talo galay shaqada dib u habeynta ah aydoo si taxaddar leh loogu salaynayo tillaabooyinka ahmiyada leh ee loogu talo galay dhimitaanka halista heer degmo.

4.3 Samatabixin iyo dib u dhis

Dawladda Federaalka iyo dawlad goboleedyada

76. Waqtiga ay qaadanayso wax ka qabashada xaalad degdeg ah inta uu dhan yahay kol hore lama sii ogaan karo marka wuu kala badan yahay oo xaaladba waa si. Waa in la xasuusnaado in waqtigaa inta uu dhan yahay laga yaabo inuusan la mid ahayn inta uu dhan yahay waqtiga Raisul Wasaaruhu uu shaaca ka qaado 'xaalad degdeg ah oo qaran'. Waqtiga u dhexeeya wax ka qabashada xaalad degdeg ah iyo inta laga soo kabto waligeed maahan arin cad oo leh waqti go'an oo la leeyahay markii midi dhammaado mid kale ayaa bilaabanaya. Hawlaha soo kabashada (oo sida saxda ah loogu yeero soo kabasho hore) waxay bilaaban karaan ayadoo wali wax ka qabashadii xaaladu ay wali socoto–tusaale, dib u habayn iskool ama isbitaal durba kadib markii daad uu soo fatahay, ama ku caawinta beeraley abuur, qalab iyo lacag caddaan ah. Caadiyan, wax ka qabashada xaalad degdeg ah waa inay dhammaato maadaama ay tahay wixii dhaliyay wax qabadka – halis degdeg ah oo nafta ku timaada, hantida iyo maciishada –macnaha waa sii dhammaadaa, inkastoo halistu aysan gebi ahaan dhammaanteed aysan baabi'in, taasina waa marka soo kabasho iyo dib u dhis buuxa ay bilowdaan. Markii lagu jiro dib dhiska, qaar ka tirsan hay'addaha maareynta musiibada ayaa bilaaba in ahmiyadoodii lunto maadaama hay'addaha farsamo /kuwa gaarka ah ay bilaabaan inay qorsheeyaan oo hirgaliyaan wax qabadkooda, inkastoo baahida loo qabo xiriirinta iyo wadaagida xogta ee hay'addaha dhexdooda ah wali ay jiraan. DMA ama DMC waxaa ay la tashan karaan dhammaan masuuliyiinta, waxay go'aansan karaan inaysan had iyo goor kulmin marmar dhif ah maahee, ayna uga tagaan hay'ado kala gaargaar ah inay sameeyaan shaqadooda sidaana Gudoomiyaha ku wargaliyaan.

77. Markii shaqada samofalku sii socoto lana sameeyo qiimeyn buuxda oo ku saabsan waxyeelada iyo khasaaraha, NDMC iyo dawlad goboleedka ama dawlad goboleedyada waxaa ay u baahan yihiin inay

keenaan siyaasad cad oo loogu talo galay soo kabashada taasoo sharraxaysa dhammaan qeybaha waqtiga kala guurka ah min gargaar ilaa soo kabasho (ama soo kabasho hore), dib u habayn, dib u dhis, soo noqosho, dib u dejin iyo dib u mideyn (hadii barakac jiro). Siyaasadu waxay sharraxaad ka bixin doontaa qaabka loo shaqeynaayo, qorshe mar kale kheyraad lagu helo iyo waqti cayiman kaasoo dib u habayn iyo soo kabasho ay dhici doonto. Waxyaabo banneynaya dareen ayaa ah dib u soo celinta adeegyada dadweynaha, kaabeyaasha iyo adeegyada dawladda ee muhiimka ah (hadii la burburiyay), jidad, guryo, ilo biyo la cabbo laga helo, adeegyo loogu talo galay xarumo nadaafadeed, helitaanka deyn, abuur beer la galiyo, soo celinta maciishada, xoolo dib usoo gaditaan (hadii xoolihii dhinteen).

78. Hadii ay dhacaan musiibooyin daran oo dadi ku baro kaco, hadii xaaladdaha hawada oo xun ay noqdaan kuwo nafta halis ku ah ama markii waqtiga joogitaanka guyo ku meel gaar ah uu daba dheeraado aana la ogeyn mar laga bixi doono, dhisida guryo heer dhexe ah/ama guryo ku meel gaar ah waa in la dhiso kuwaasoo leh musqulo si loo xaqiijiyo nolol macquul ah oo tayaysan oo ay ku noolaadaan dadka saamayntu soo gaadhay. Qaabka guryaha noocaa ah deegaan waa u roon yihiin waxayna waafaqsan yihiin dhaqanka. Waxaa la jecleysan kari lahaa hadii DMAs/DMCs ay qorsheyn lahayd waqtiga caadiga ah ee waxba uusan jirin, naqshada guryaha kumeel gaarka ah ee qiimaha jaban ee dadka deegaankuna u baahan yahay waxyaabo badana loo isticmaali karo. Tani waa marxalada kumeel gaar ah oo qura maadaama dadku ay sugaan inay si buuxda guryahooda dib ugu dhistaan.

79. Musiibo kastoo ba'an ka dib, guud ahaan waxaa soo if baxa baahi loo qabo in maciishada dib loo dhiso oo bulshada musiibadu ku dhacday ay bilowdo xulashooyin arintaa kusaabsan kala doorashadooda dawlad goboleedyadana waa inay arintaa ogaadaan ayna ku daraan

hannaankooda qorsheynta maareynta musiibada. Xulasho kastoo noocaa ah waa inay xaqiijisaa in hantida, kaabeyaasha iyo dhismeyaasha la abuurayo ay noqdaan kuwo dhibka u adkeysi badan, muddo dheer jiri kara, la daryeeli karo, isla markaana qiime jaban. Dawlad goboleedyadu waa inay si gaar ah u ta'kiidiyaan dib usoo celinta maciishadii joogtada ahayd ee dadka musiibadu ku habsatay dareen gaar ahna la siiyo baahiyaha qoysaska dumarku madax u yihiin, beeraleyda, bulshooyinka reer guuraaga ah iyo dadka kasoo jeeda qeybaha bulshada ee la xagliyo iyo kuwa dhibaatooyinka u nugul.

80. Dawladuhu waa inay xaqiijiyaan in qoraalo rasmi ah oo munaasan ah oo ku saabsan dhulalka, sida loo kala leeyahay iyo xaquuqda kireystenimo ee hantida, iyo lahaanshaha koontooyin bangi iwm., la daba galo ama dib loo soo abuuro, waa hadii la burburiyay, maadaama ay waxyaabahaasi muhiim u noqon doonaan soo kabashada qoyska.

4.4 Qaxootiga iyo barakaceyaasha

81. Sidii horayba loo soo xusay, Soomaaliya waxaa ku nool in ka badan 2 oo qof oo barakaceyaal ah kuna nool xeryo barakaceyaal oo gudaha Soomaaliya ah, ama qaxooti ku ah goblka. Sanadkii la soodhaafay, qaxooti badan ayaa bilaabay inay soo laabtaan, ama iskood ayay usoo laabteen ama daruufo dartood. In badan oo dadkii soo noqday ah ayaa barakacsan kuna nool xaalado xun qaar ka tirsan magaalooyinka, oo ay kujirto Muqdisho oo ay ku nool yihiin in ka badan 400,000 oo ah barakaceyaal/qaxooti soo laabtay.

82. Helitaanka xalal waara oo loo helo barakaceyaasha waxaa ay diirada saareysaa soo celinta xaquuqdooda, marka waxay arintaasi xaqiijinaysaa in aysan inaba heysan wax cawimaad ah oo gaar ah iyo baahiyaha dhanka badbaadada ee sida tooska ah ula xiriirsan

barakacooda. Mabaadiida(34) ka Dhexeeya Hay'addaha kala duwan ee wax hagaya waxay caddeynayaa in barakacayaashu ay tahay inay ku naaloodaan xal waara. Xal waara oo loo helo barakac gudaha dalka ah waxaa lagu heli karaa:

- *Dib isugu dhafid* sii jiri kadha oo meeshii ay kasoo jeedeen ah (laabasho);
- *Isku dhafid deegaanka ah* waadha kana jidha isla deegaankaa ay kusoo barakaceen ee ay usoo dageen sidii barakaceyaal ama ay soo magan galeen;
- *In meel kale* si rasmi ah loo dajiyo, waa meel kale oo dalka ka mid ah.

83. Guddiga Qaran ee Qaxootiga iyo Barakaceyaasha (NCRI) (35) wuxuu ahmiyad siin doonaa arimaha barakaceyaasha iyo qaxootiga soo laabtay wuxuuna samayn doonaa qorshe ficil oo loogu talo galay xal waara, asagoo kaashanaya UNHCR, IOM, hay'addaha dawliga ah ee magaalooyinka iyo ururo kale. Xalkii la doonaba ha loo doortee dhammaan barakaceyaasha, waxaa lagama maarmaan ah in dawladu siiso fursad ay ku helaan warqado baddal ah oo ah kuwooda shakhsi iyo dukumiintiyo kale, taasoo u noqoneysa daaweyn wax ku ool ah xadgudubyada la xiriira barakaca, sida helitaanka caddaalada, dib u dhoofinta iyo xogta ku saabsan sababaha xadgudubyada keena. (36)

34 Gudiga Xiriirka Hay'adaha Ka Dhexeeya (2010). Buugga daryeelka dadka barakacayaasha ah, Juun 2010, http://www.unhcr.org/refworld/ docid/4790cbc02.html

35 Marka loo eego Xeerka Sharciga Lagu Aas-aasay SoDMAA, tani waa mas'uuliyadda sharciyeed ee SoDMA marka laga bilaabo 26-da Juun 2016.

36 Golaha Sare ee Qaxootiga Qaramada Midoobay (2011). UNHCR Buugga Dib u Dajinta, Soo Saarka Juulay 2011

4.5 Qasnadda Qaran ee Maareynta Musiibooyinka

84. Dawladda Federaalka ah ayaa hirgalin doonta Qasnad Qaran oo Musiibada Maareynteeda loogu talo galay (NDMF), ayadoo la adeegsanaayo tabarucaad laga helay Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya, ururo maxali ah, ganacsiyo iyo deeqbixiyeyaal caalami ah. Qasnadda ayaa waxaa maareyn doonta Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ayadoo uu dusha kala soconaayo NDMC, sida uu dhigaayo xeerka xafiiska Xisaabxirka Qaran. Qasnaddaa ayaa waxaa loo qoondeyn doonaa loogana faaiideysan doonaa qorsheyaasha soo socda:

- Hirgalinta hawlaha u diyaar garowga musiibooyinka markii aad loogu badinaayo in musiibo dhacdo;
- Markii la bilaabayo waxqabad lidi ku ah xaalad degdeg ah/naf badbaadin;
- Tillaabooyin muddo gaaban oo dib u habeyn ah iyo qorsheynta hawlada samatabixinta /dib u dhiska.

85. Codsiyada fan gareynta ama qarashka lagu doonayo waxaa loo soo gudbin karaa waaxyaha wada shaqeeya ee Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya, DMAs/DMCs kasoo jeeda dawlad goboleedyada, ama Hay'ad kale oo u Qalanta oo dawladeed, oo ay xaqiijin doonto kartideeda Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka ka hor inta aan loo gudbin NDMC si ay u ansixiso.

86. Ayadoo la tashanaysa Xafiiska Xisaab Xirka Qaran, Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka waxay dejin doontaa

warbixin maaliyadeed iyo habraac xisaab oo ku taxaluqi doona Qasnaddaan, iyo xaqiijinta in warbixinada ka faaiideysiga maaliyada ee xisaab xirka lagu sameeyay iyo ansixin xilli ka xilli loo gudbiyo NDMC oo iyana warbixinadaa muujinaya qoondeynta iyo qarashka baxay usoo bandhigi doonta dadweynaha iyo deeqbixiyeyaasha.

CUTUBKA 5: KORMEER IYO QIIMEYN

87. Wasaaradda Gargaarka iyo Maareynta Musiibooyinka wuxuu dib u eegid ku samayn doonaa hirgalinta siyaasadda asagoo isticmaalaya hannaan wada tashi oo sanadle ah kaasoo ku lug leh hay'addaha munaasabka ah ee dawlad goboleedyada (sida DMA ama DMC), Wasaaraddaha ay khuseyo ee Federaalka, hay'addaha QM ee ay khuseyso gaar ahaan OCHA iyo HC, ururada aan dawliga ahayn iyo ururada bulshada rayidka ah. Dib u eegida ayaa ku lug lahaan doonta qiimeynta horumarka la gaaray marka loo barbar dhigo mabaadiida hagaya ee taageeraya siyaasadda (qeybta 3.2). Wadatashiga ayaa ku lug lahaan doonta siminaar maalin dhan ah oo la wada hadli doono si dibada loo soo dhigo aaraada masuuliyiin kala duwan oo ku saabsan shaqada oo caddeyn ay la socoto, oo xiriiriye kale uu xiriirin doono, taasoo uu daba socon doono qiimeyn lagu samaynayo shaqada ayadoo loo eegayo mabaadiida hagaya cabbir ah 0-3 (0-ma jiro horumar; 1: horumar liita; 2: horumar lagu qanco; 3: Horumar wanaagsan) iyo in la helo qodobo ficil loo baddali karo oo loogu talo galay sanadka soo socda. Sharuudo gaar ah, dib u eegidaan waxay ku lug lahaan doontaa baaritaanka su'aalaha ku liis gareysan Shaxda 1 ee hoose:

Shaxda 1: Dib u eegid sanadle ah oo loo barbar dhigaayo mabaadiida hagaya

Mabaadiida hagaya	Su'aalo dib u eegid	Qiimeyn Qodobo ficil loo rogayo/Casharo
Waajibaadka gobolka	1. Waxaa jiray horumar marka loo eego Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada taasoo muujinaysa rabitaan iyo awoodda waajibaad intii hore ka weyn oo loogu talo galay maareynta musiibada? 2. Miyay jiraan nidaamyo iyo qaabab durba si wax ku ool ah looga qabto musiibooyinka? 3. Miyaa dawladu (Federaal/dawlad goboleed) ay muujisay isku day dhab ah oo lagu xaqiijinaayo badbaadinta rayidka musiibadu saameysay?	
Wadaagid cad oo la wadaago dawrarka iyo waajibaadka u dhexeeya heerarka kala duwan ee dawladda oo ku salaysan qiimeynta maxaliga ah ee halista iyo awoodda	1. Miyaa shuruucda ganacsigu ay daggan yihiin heer Federaal iyo heerar Dawlad goboleed si si waadax ah loogu qeexo dawrarka iyo waajibaadka maareynta musiibada? 2. Heer gobol miyaa guddiyada maareynta musiibooyinku si cad u ogaadeen uguna sheegeen dhammaan maamulada degmooyinka, *Waax* iyo *Tabeele*?	
	1. Miyaa dawladu ogaatay dhibaatooyin iyo waxyaabo loo nugul yahay meelaheeda u gaarka ah oo miyay soo ogaadeen dadka ugu jilicsan? 2. Ilaa intee dawladuhu ay yeesheen awood ay ku sameeyaan qiimeyn baahi oo nidaamsan?	

3. Miyaa dawladda Federaalku caddeysay Gobolo/degmo aad ugu nugul dhibka oo laga yaabo inay aad u dooneyso inay taageerto hay'addaha dawliga ah ee Gobol/degmo si wax looga qabto dhibaatada?

4. Miyaa kaabeyaal muhiim ah (sida xarumo caafimaad, biyo xireeno ama waro) kuyaala meelo dayacan la ogaaday tillaabooyina dawladu u qaaday sidii ay u badbaadin lahayd kaabeyaashaa?

Ka qeyb galka bulshada iyo adkeysiga

1. Miyaa dawladda Federaalku taageertay Dawlad goboleedyo inay dhistaan awoodooda lagu samaynayo/sare loogu qaadayo iskaashi nidaamsan oo lala yeelanayo bulshada kaasoo ah dhanka maareynta musiibada?

2. Miyaa aalado iyo qaabab loo sameeyay lagana adeegsadaa heer degmo iyo heer *Waax* si loo sameeyo qiimeyn bulsho oo nidaamsan oo ku saabsan halista musiibada?

3. Miyaa dawladdaha hoose ay ku daraan qiimeynta halista qorsheynta mashaariicda horumarinta?

4. Miyaa dhibaatooyinka dumarka gaar ahaan la ogaaday oo wax laga qabtay intii la waday hawlaha dhimidda halista iyo wax ka qabashada musiibada?

Xiriirin iyo shirkoobid

1. Miyaa dawladda Federalku awooddaa inay bixiso xiriirin wax ku ool ah heer qaran?

2. Miyay jiraan habab xiriirin oo si wanaagsan loo hirgaliyay oo heer Gobol iyo heer degmo ah?

Dhexdhexaadnimo iyo eex la'aan

1. Miyaa dawladu muujisay mabda'a dhexdhexaadnimada iyo eex la'aanta marka laga hadlaayo wax ka qabashadeeda musiibada iyo kala mudnaan siinta dadka la caawinayo?

Waajibka dawladda ee ah badbaadinta

1. Miyaa dawladda Federaalku dejisay qorshe cad oo ficil ah oo lagula tacaamulaayo qaxootiga soo noqday iyo barakaceyaasha?

2. Miyaa dawladda Federaalku ka taageertay Dawlad goboleedyada horumarinta awoodooda ay ku siinayaan xalal waara barakaceyaasha iyo qaxootiga soo noqday?

3. Miyaa dawladuhu qaadayaan tillaabooyin munaasab ah si looga hortago barakicin dad oo dheeraad ah?

88. Siminaarku intuu socdo waa la qori doonaa qodobada la niqaashayo si faahfaahsan ayaana loo qori doonaa si bannaanka loo soo dhigo tusaaleyaal gaar ah oo ku saabsan shaqo la qabtay iyo shaqo aan la qaban iyo casharo noqon doona aasaaska loogu talo galay dejinta qorsheyaal ficil loo baddalo kuwaasoo loogu talo galay waqtiga xiga. Si qiimeyn loogu sameeyo shaqada marka loo eego natiijooyinka (qeybaha 4.1-4.5), dib u eegis kala barka waqtiga ah (MTR) oo uu samaynayo qiimeeye madax bannaan ayaa la samayn doonaa marka qorshehaani kala bar marayo taasoo tijaabin doonta sida Dawladu uga soo baxday waajibaadkeeda gaarka ah ee heerarka kala gadisan ee dawladda. Taasi waxay noqon doontaa daraasad ujeed leh oo ku salaysan caddeynta tijaabo si tillaabo tillaabo ah loo sameeyay. Sharuudo tixraac oo la faahfaahiyay oo loogu talo galay dib u eegistaa kala barka waqtiga ah (MTR) ayaa la samayn doonaa dhammaadka sanadka labaad ee fulinta qorshahaan.

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 027 07/12/2017

Ujeeddo:- Go'aan Gole "Ansixinta Qaab-siyaasadeedka Qorsha Istiraatiijiyadda Amniga Gudaha ee 2017 - 2022"

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad (a), (b), (e) & (f) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Soo-jeedinta Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha.

Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.31.12.17 ee 07/12/2017, kuna saabsan ansixinta Qaab-siyaasadeedka Qorshaha Istiraatiijiyadda Amniga Gudaha ee 2017 - 2022, oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo in la meel mariyo Qaab-siyaasadeedka Qorshaha Istiraatiijiyadda Amniga Gudaha ee 2017 -2022.

Wuxuu meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.31.12.17 ee 07/12/2017, kuna saabsan ansixinta "Qaab-siyaasadeedka Qorshaha Istiraatiijiyadda Amniga Gudaha ee 2017 - 2022" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Qodobka 2aad

Waxa Wasaaradda Amniga Gudaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Qaab-siyaasadeedka Qorshaha Istiraatiijiyadda Amniga Gudaha ee 2017 - 2022.

Qodobka 3aad

Qaab-siyaasadeedka Qorshaha Istiraatiijiyadda Amniga Gudaha, waxa uu dhaqangelayaa marka uu Saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda

+252-615-912780 E-mail: bashiiraxmed3@gmail.com or bashiiraxmed3@hotmail.com Mogadishu, Somalia

DOWLADA FEDERAALKA AH EE SOOMAALIYA

WASAARADA AMNIGA GUDAHA

(WAG)

جمهورية الصومال الفيدرالية

ISTARAATIJIYADA AMNIGA GUDAHA

SOOMAALIYA OO HESHA AMNI IYO NABAD BUUXDA

2017 - 2022

HORDHACA:

Annigoo ku hadlaayo magaca wasaaradda amniga gudaha XFS , waxaa sharaf ii ah in aan halkaan idinkugu soo gudbiyo istiraatiijiyada wasaaradda amniga gudaha ee shanta sano ee soo socoto.

Qorshahan waxaa asal u ah waajibaadka uu nafarayo dastuur KMG, sidoo kale waxa ay salka ku haysaa qorshaha amni ee qaranka (QAQ) ee 2016.

Qorshahani waxaa looga gol leeyahay in la isugu keeno laguna hago dhamaan qeybaha shaqo ee kala duwan ee hay'addaha amniga gudaha sida sirdoonka, la dagaalanka dembiyada iyo sugidda amniga guud, hay'addaha wasaaradda hoos yimaada waxay sameysan doonaan qorsho fulineed oo u gaar ah hawlaha ay mas'uulka ka yihiin.

Waxa uu si kooban u qeexayaa mas'uuliyadda iyo waajibaadka hay'addaha hoos yimaada wasaaradda amniga gudaha, waxa uu sameeynayaa nidaamka isku xirka shaqo ee ka dhaxeeya hay'addahaas.

Sidoo kale qorshahani waxa uu muujinayaa in ay muhiim tahay isku xirka iyo wada shaqeynta hay'addaha difaaca iyo amniga guud ee dalka, waxa uu tixgelin siinayaa in baahiyaha amni ee dowlad goboleedyada iyo deegaanada dalka ay kala duwanaan karaan, haddaba, waxaa haboon in mudnaanta mid walbo leedahay la siiyo si taxadar lehna looga fiirsado isku xinaanshaha iyo wada shaqeynta amniga ee heerarka kala duwan si wada tashi iyo iskaashi lehna loo wada fuliyo.

Ugu danbeeyntii, qorshahani waxa uu tusmeeynayaa in dib u dhis iyo kubcin loo sameeyo dhamaan hay'addaha amniga gudaha loona dhameeystiro sharciyada iyo nidaamka shaqo ee loo baahan yahay loolana jaan qaado nidaamka fedraalka ah ee dalku qaatay iyadoo sidoo kale la eegayo baahida amni ee jirta iyo xaalada mar kasta lagu sugan yahay ee dhinacyada amniga, dhaqaalaha, siyaasada iyo mida bulshadeedba.

Mahadsinidiin,

HON. MOHAMED ABUKAR ISLOW (DUALE)
WASIIRKA WASAARADDA
AMNIGA GUDAHA XFS.

QEYBTA 1-AAD
QEEXITAANKA YOOLKA
HIMILADA IYO AHDAAFTA QORSHAHAAN.

UJEEDDO.

1-1. siyaasadani waxey si qoto dheer ufariisinaysaa qorshaha amaanka gudaha (QAG) ee Wasaarada Amniga Gudaha (WAG). Waxey daba socotaa hagitaanadii xeeladeed ee siyaasada amaanka qaranka 2016, waxeyna salka ku haysaa qorshaha hormarinta qaranka iyadoo la soo dhaweynayo xiriirka muuqda ee udhaxeeya amaanka lagu naaloon karo iyo hormarada bulsho iyo dhaqaale.

1-2. QAG waxaa diirada lagu saari doonaa sidii loo gaari lahaa himilada iyo ahdaafta qorshahaan ee hoos lagu qeexay iyo yagleelida nabad, amaan iyo nabadgelyo waarta ee soomaaliya, halkaasoo hormarada bulsho iyo dhaqaale ay ku xidadeysan karaan kuna bulaali karaan.

HABKA IYO QAABKA.

1-3. Qorshahani wuxuu ku saleeysan yahay hab raaca afarta waji u qeybsan ee la isticmaalo, kaasoo sidoo kale uu ku saleysnaa qaab siyaasadeedkii amniga qaranka ee 2016-ka. Saddexdaas qaab qorshe oo kala ah, qeexidda meesha aan hada joogno iyo awoodeena, meesha la rabo in la gaaro, imkaaniyaadkii lagu gaari lahaa iyo wadadii loo mari lahaa.

Waxey ku bilaabandoontaa himilada, yoolka iyo ahdaafta xeeladeed, kadibna falanqeynta hab xeeladeedka, qeyraadka iyo hababka la helikaro, ugu danbeyn wuxuu qeexayaa sidii gabagabada lagu gaari lahaa. Helida iyo ogaanshaha qaabkii lagu gaari lahaa meesha aan hiigsaneyno waa waxa hagaya istatiijiyada amniga qaranka.

1-4. qorshe kasta ee amaanka gudaha ee loo qaateen ahi waa inay hubisaa in bixinta adeeg yada aasaasiga ahi ay ku jiraan rabitaanka dad weynaha, Halka bixinta adeegyadaas aasaasiga iyagana ay qeybtooda ka qaadanayaan wasaaradaha kale ee dowlada dhexe, WAG oo kaashanaysa wasaaradda gaashaandhiga ayaa laga sugayaa inay abuuraan jawi nabdoon kaasoo suuragelinaya bixinta adeegyada asaasiga ah sida hormarinta arrimaha bulshada, dhaqaalahuna ku xidideysan karo kuna bulaali karo. WAG shaqooyinkeedu waa shaqooyin aad u baahsan kuna saleysan sugida amniga muwaadiniinta Soomaaliyeed iyadoo muhiimada la siinayo Boliiseynta Bulshada, ilaalinta muwaadiniinta xiliyada xasaradaha, xuduudaha iyo xakameynta muhaajiriinta, sidoo kale xoojinta Howlaha sirdoonka waxay muhiim u yihiin guul ka gaarista sugida amniga dalka.

HIMILADA

1-5. sida lagu qeexay dastuurka kumeelgaarka ah, himilada fog ee WAG waa aasaaska nabad, xasilooni iyo soomaaliya oo federal ah oo hesha amaan waara gudaha, dariskeeda iyo caalamka kale. 4 DRAFT 1

Soomaaliya oo ku raaxeysaneysa amaankeeda ay soo ceshatay, adeegyada caafimaadka iyo hirgelinta sharuucda; ilaalinaysa dastuurkeeda, xaquuqda aadanaha muwaadiniinteeda iyo dhamaan hayadaheeda amaanka oo ilaalinaya sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, isla xisaabtan iyo soomaaliya oo awood u leh in ay ilaashato dastuurkeeda, dadkeeda, madaxbanaanideeda midnimada dhulkeeda iyo is dhex gal ka dhan ah dhamaan caqabadaha jira. Nidaam iyo ciidan amaan oo adag ayaa aasaas u'ah in

la'abuuro jiritaanka bulsho cadaaladeed, sareynta sharciga, aadanaha iyo amniga qaranka.

MUHIIMADA QORSHAHAAN IYO MABAADI'DIISA.

1-6. Muhiimada qorshahaan iyo mabaadii'dani waxey ka turjumayaan dhamaan siyaasadaha hormarineed ee WAQ:

A. Tayeynta hey'addaha si ay u gaarsiiyaan bulshada adeeg amni oo hufan. Hayadaha amni oo ka qeyb qaata soo celinta sharciga , kala danbeynta iyo ilaalinta shacabka iyo hantidooda, Waa in la kasbadaa kalsoonida dadweynaha iydoo laga hortagayo dhibaatooyinka, loona ilaalinayo dalka si xirfadeysan, masuuliyadu ku dheehantahay iyo hab sharci ah. Ugu horeyn waa in bulshada la siiyaa adeegyada amaan ee aasaasiga ah. Umada soomaaliyeed waxey xaq uleeyihiin inay helaan adeegyo amaan oo aasaasi ah si'ay udareeman amaan looguna fududeeyo adeggyada dadweynaha sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha, gabaad, korontada, iyo kaaba yaasha dadweynaha. Amni la'aantiis, majiri doono hormar iyo bixin adeeg dadweyne. Qodobadaan oo la'iska indho tiara waxey nagu hogaaminaysaa faqri iyo xasilooni la'aan bulsho. Waxaa kale oo iyaduna muhiim ah ilaalinta qeyraadka dalka iyo yareynta saameynta musiibooyinka. Sidaas daraadeed dowladu waxey qaadidoontaa tilaabooyin wax ku ool ah si loo hubiyo helitaanka adeegyadaas aasaasiga ah, oo ka madax banan faragelin aan sharci ahayn, amni daro, argagixiso, iyo danaha siyaasadeed ee eexda ku saleysan.

B. Dib-uqaabeynta hayadaha (Reform). Doorashada nimaadka federaalismka, guud ahaan nidaamka dowliga ah wuxuu ubaahnyahay maamul ay udhanyihiin maamulada iyo

bulshada rayidka ah, dowladu waxey fulinaysaa siyaasadeeda ku aadan maamul wanaaga, transparency, iyo isla xisaabtan si looga faa'iideeyo dhamaan bulshada soomaaliyeed. Hadii ay jirto xasilooni la'aan siyaasadeed iyo sadbursi, wey adkaandoontaa in lafuliyo baahiyaha amaan ee aasaasiga ah. Dowladu waxey fariisisay qaabeynta hayadaheeda amaanka ee looga baahanyahay fulinta siyaasada dowlada, dib-uqaabeynta hayadaha amniga, hagaajinta iyo fulinta barnaamijyada iyo mashaariicda kuwaasoo qeyb ka ah hormarka guud ee adeegyada WAG sida:-

1) Kor ka ilaalinta dimuqraadiyadeed iyo isla xisaabtan (Oversight): xoojinta hogaaminta hey'addaha madaniga (civil leadership), koontaroolida, kor-ka ilaalin hey'addaha amniga iyo abuurida adeegyada amniga kaasoo waafaqsan kuna shaqeeya sharciyada dalka gaar ahaan dumarka iyo caruurta.

2) Isku dhafka ciidamada: ciidan loo dhan yahay oo isku dhafan ee hayadaha amaanka kaasoo matalaya dhamaan qeybaha iyo gobolada dalka si la'isugu dheeli tiro una noqdo ciidan la'aamini karo. Tani waxey ubaahantahay siin tababar aasaasi ah, waa in ay isla fahmaan maul goboleedyada iyo dowladda federaalka qaabka loo xulayo , loo tababarayo, dhaqaalahooduna loo bixinayo leyskuna dhafaayo.

3) Xirfadeynta ciidamada (professionalizing): in la abuuro barnaajijyo loo hindisay tababarka iyo qalabeynta boliiska iyo ciidamada amaanka ee kale si ay u gutaan shaqooyinkooda iyo waajibaadkooda eek u cad dastuurka ama uu muujinayo sharciga iyada oo la abuurayo aqoon sare oo ah dhinaca xuquuqul insaanka, sharciga xuquuqul insaanka caalamiga ah, dareenka jansiyadeed iyo xuquuqda shacabka sida uu qabo sareynta sharciga (rule of law).

4) Hubka dhigista, isu keenida iyo isku dhafka (DDR): dajinta siyaasadaha iyo habka fulinta ee hubka dhigista, isu keenida iyo isku dhafka ee ciidamada hubeysan iyo malishiyaadka gobolada.

C. Hormarinta nidaam ay saldhig u tahay nabadda iyo iscafinta iyadoo lagu soo darayo barnaamijka amniga Gudaha. Dowladdu waxey sii wadi doontaa fursadaha ay siiso Dagaalyahanada Alshabaab si ay ugu soo biiraan qeybna uga noqdaan bulshada, si loogu muujiyo xushmad iyo niyad wanaag.Dowladu waxeey ka dooneysaa dagaalyahanad isisoo dhiiba inay uhogaansamaan shuruucda dalka ayna ka tanaasulaan argagixisanimada, QAGjirnimada, iyo rabshadaha ka dhank ah dowlada, umada soomaaliyeed iyo wixii la xariira. Sidaas daraadeed dowladu waxey ku casuumi doontaa Al-Shabaab inay noqdaan kuwa udooda qeybna ka ah hormarinta nidamyada amaanka si loo hagaajiyo dalka iyo dadka. Hanaanka nabadeed wuxuu ku socondoonaa si Isfahan ah.

UJEEDDOOYINKA ISTARATIJIYADAN (Strategic Objectives)

1-7. In la fuliyo himilada WAG soomaaliya, ayna abuurto jawi nabdoon, xasiloon oo nabad ah, waxay u baahnaan doontaa tayeynta iyo horumarinta qorshayaasha kor loogu qaadayo ujeeddooyinka istratijiyada ee hoos ku qoran:

A. In la hormariyo awooda hay'addaha nabadgelyada, si ay ugutaan waajibaadkooda dastuuriga ah, ayna ka ilaaliyaan qaranka iyo muwaadiniintaba qataraha uga imaanaya Al-Shabaab iyo fakarkooda sumeysan iyo dhamaan falalka kale ee dambi habka ugu haboon.

B. Inay si dhow ula shaqeeyaan Ciidanka Xooga Dalka, iyo AMISOM si loo hormariyo duruufaha iyo qorshayaasha ku meel gaarka ah si dalka ay ula wareegaan ciidanka soomaaliyeed marka AMISOM ay dalka ka baxdo.

C. In loo adkeeyo hormarka amaan ee laga sameeyay goobaha dhawaan laga xoreeyay Al-Shabaab, loona gaarsiiyo awooda dowlada, iyo adeegyada aasaasiga ah dalka oo dhan.

D. In sare loogu qaado ka qeybqaadashada loogana qeyb qeyb geliyo dhamaan qeybaha bulshada sida:-odayaasha dhaqanka, hogaamiyeyaasha diimaha, Ganacsatada, dhalinyarada, haweenka, iyo qeybaha kale ee bulshada si ay wadajir uga qeyb qaataan hormarinta amaanka iyo cadaalada.

E. In loo hormariyo qorshayaashayaasha ladagaalanka rabshadaha QAG jirnimada iyo dhamaan qeybaheeda.

F. in loo hubiyo in hayadaheena amaanku ilaaliyaan, shuruucda dalka, qawaaniinta caalamiga ah ee xaquuqda aadamaha iyo in si siman qof kasta ugu adeegto cadaalada dalka.

G. In sare loo gu qaado hey'xiriirka iyo wada shaqeynta dowlada dhexe iyo maamul goboleedyada arrimaha la xariira amniga gudaha.

H. In la hormariyo ciidanka ilaalinta xeebaha ee shaqeynaya.

I. In la hormariyo qorshaha maareyn hubka iyo rasaasta sisare loogu qaado awoodeena si aysan noogu badan hubka fudud iyo rasaastu.

J. in loo hormariyo awooda wasaarada ee la xariirta qaraxyada iyo xaalafunta haraaga walxaha qarxa dalka oo dhan.

K. In sare loo qaado awooda hey'addaha dhaqan celinta si ay u awoodaan in xubnaha I soo dhiiba ku sameeyaan hub kadhigis iyo dhaqan celin una sahlaan dib ugu biiritaanka bulshada si aamin ah nadiifna ka ah xagjirnimada.

L. In la soo saaro qorsheyaal lagu ilaaliyo kaabayaasha qaranka ee muhiimka ah iyo difaaca madaniga ah ee dadweynaha.

M. In la horumariyo awooda hay'adda socdaalka si buuxda u maareyso xuduudaheena.

N. In wasaarada loo aas-aaso qorshe iyo xarunta isku xirka istaratiyadeed (strstegic communication unit)

O. In si dhow loola shaqeeyo beesha caalamka, si loo hubiyo in meel wax ku ool ah loo gaarsiiyo heerka (Strand 2B) si loo maareeyo hawlaha ay wadaagaan hey'addaha kala duwan ee dowladda (cross-cutting issues). si loo hubiyo in wada shaqeynta (synergies) u dhaxeysa colaadaha, amniga iyo hormarka loo daraseeyo hab wanaagsan oo Isfaham leh.

MASUULIYADA QORSHAHA AMAANKA GUDAHA.

1-8. Hormarinta iyo dhaqangelinta qorshaha amniga gudaha ee dowlada soomaaliya, waa masuuliyada wasiirka wasaarada amniga gudaha iyo wasaaradiisa, Waxaa jira todobo (7) hayadood oo sharci fulineed oo hoos taga WAG, waxeyna kala yihiin :-

A. Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.
B. Hayyada Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha.
C. Hayyada Nabad sugida & Sirdoonka Qaranka.
D. Ilaalinta Xeebaha.
E. SEMA (Haya'da Maareynta Walxaha qarxa)
F. WAM (Maareynta Hubka iyo Rasaasta)
G. Difaaca madaniga ah.

1-9. Wada shaqeynta iyo iskaashiga hey'addahaas waxay muhiim u tahay fulinta siyaasada amniga ee wasaarada. Qorshaan amniga gudahu wuxuu hagaa hey'addaha hoos yimaada wasaaradda iyadoo loo marayo qorshooyin qaas ah iyo siyaasado uu go'aamiyo wasiirku, Fulinta qorshe hooseedyada hey'addaha iyo qorshe howleedkooduba waxey noqonayaan mas'uuliyadaha madaxda hayyadaha amaanka sida:- Taliyaha Ciidanka Boliiska iyo Agaasima hayyada Nabad sugida iyo Sirdoonka Qaranka. Masuuliyadahaasna waxaa ka mid noqondoona:

A. Sameynta siyaasadaha iyo tilmaamayaasha isku xirka sirdoonka ee lawada wadaago (cross-cutting Issue) waa mas'uuliyada WAG, hasayeeshee hormarinta, fulinta iyo sameynta qorsho hawleedyada u gaarka ah ee sanadlaha ah waa masuuliyada agaasimaha nabad sugida iyo sirdoonka .

B. Sameynta siyaasadaha iyo tilmaamayaasha nidaamka socdaalka iyo ilaalinta xuduudaha waa mas'uuliyada WAG, hasayeeshee fulinta hawlaha socdaalka, jinsiyadaha iyo qorsho hawleedka u gaarka ah ee sanadlaha ah waa mas'uuliyada agaasimaha hey'adda socdaalka iyo jinsiyadaha .

C. Sameynta siyaasadaha iyo tilmaamayaasha la dagaalanka argagixisada waa mas'uuliyada WAG, hasayeeshee hormarinta, fulinta iyo sameynta qorsho hawleedyada u gaarka ah ee sanadlaha ah waa masuuliyada hey'adda amniga ee u xilsaaran.

D. Difaaca bulshada madaniga ah, waa masuuliyada agaasimaha difaaca bulshada madaniga ah marka la sameeyo.

E. Maareynta Hubka iyo Rasaastu waxay hada ku kala qeybsan tahay wasaaradda amniga, gaashaandhiga iyo la taliyaha xafiiska madaxweynaha dhinaca arrimaha amniga, hasayeeshee marka la abuuro (WAM) waxay hoos imaan doontaa WAG.

F. Sameynta siyaasadaha iyo tilmaamayaasha Burburinta iyo xaalafunta haraaga walxaha qarxa waxaa mas'uul ka ah WAG, fulintiisana waxaa mas'uul ka ah agaasimaha hey'adda SEMA.

G. Qorshaha iyo siyaasada ilaalinta xeebaha waa mas'uuliyada WAG , hasayeeshee fulintiisa waa mas'uuliyada taliyaha ciidanka ilaalada xeebaha marka la abuuro.

QEYBTA 2-AAD
QIIMEYNTA XAALADAHA AMNIGA

QIIMEYNTA CAQABDA IYO QATARTA

2-1.Tilaabada ugu horeysa waa qiimeynta xaaladda amni iyo u nuglaanta khataraha jira.
Noocyada Qataraha.

2-2. Si loogu caawiyo muhiimadna loo kala siiyo qeeyraadka loo qoondeeyay iyo xalintooda, qataraha waxaa loo kala qaaday, Qatar toos ah iyo Qatar dadban, iyada oo loo fiirinayo natiijooyinkooda. Qataraha aan tooska ahyni guud ahaan waxey la xariiraan, arrimaha Bulsho, Siyaasadeed, Deegaan iyo Dhaqaale, waxeyna ku xiranyihiin wasaarado aan ahayn tan amniga qaranka. WAG waxey masuul katahay la tacaalida iyo maamulka qataraha tooska ah. Kuwaas oo la xariira qiimeyntii qataraha amniga qaranka ee 2015 iyo siyaasadii amniga qaranka ee 2016.

Qataraha waxaa loo kala qeybiyey dhowr tiir, caqabadaha tiirka 1-aad waa kuwa joogto ah, oo saameyn balaaran leh, una baahan fal deg deg ah, Qataraha tiirka 2-aad waa kuwo badanaa aan dhicin, laakiin ay macquul tahay in saameyntoodu balaarantahay, qataraha tiirka 3-aad waa kuwo aan badneyn qorsheyntooduna waa mid joogta ah. Dhamaan qataraha iyo cabsiyuhuba waxay isla badbadalaan hadba xaaladu sida ay isu badesho. Qiimeynta khatararuhu waa inay noqtaa nidaam socda.

QATARTA TIIRKA 1-AAD

2-3. Al-Shabaab.
A. Al-Shabaab (AS) waa qatarta ugu weyn ee Soomaaliya. AS waa koox argagixisa ah oo aad u'abaabulan taasoo ku xiran

Al Qaeda, donysana inay meesha ka saarto Dowlada Federaal-ka ah ee Soomaaliya, si ay uhirgeliso fikirkeeda guracan. AS waxey kale oo so bandhigtay awoodeeda si ay uweerarto dowladaha deriska ah ee ciidamadooda ku yaboohay howlgalka AMISOM.

B. Alshabaab waxaa ka mid ah xubno argagixisada caalamiga iyo dagaalyahanada shisheeye, kuwaas oo la yimid farsameynta qaraxyada (IED) iyo qibrado kale ee farsamo ee ay kala yimaadaan goobo kale oo ay argagixisadu ka howlgasho. 2016 waxaa la diiwaan geliyay 1,800 dhacdooyin dhimasho ah iyo ugu yaraan 395 dhacdooyin qarax ah. Intaas waxaa sii dheer, argagixisadaan caalamiga ahi waxey aad ugu xeeldheer yihiin isticmaalka saxaafada iyo isticmaalka baraha bulshada si ay ugu baahiyaan probogaandadooda iyo ujeedooyin ay ku soo jiidaan dad cusub oo ay qortaan.

C. Awoodii AS ee aahayd inay u howlgalaan sidii jabhad ilaa horin ciidan ah (120) iyo sameyntii weerarada gaadmada ah iyo qasaare gaarsiinta, si joogto ah xarumaha ciidanka dowlada iyo xarumaha AMISOM hoos ayeey udhacday, waxyna u wareegeen inay diirada saaraan howlo xajmi yare e argagixiso ee ku eg qaraxyada IED, VBIED iyo weerar nuuc shirqool ah. Awoodii Al-shabaab ay kusameyn jireen cutubyo ciidan ah, si fududna ay isugu qeybin jireen una gali jireen dhulka howdka si ay u adkaato in la helo waxuu ku jiraa gabaabsi.

D. Ka guuleysiga propagandada Al-Shabaab waa howl dowlada oo dhan utaala, taasoo la rabo in WAG ay ka cayaarto door ugu weyn. Al-Shabaab waxay ku can baxday mid ka mid ah isticmaalayaasha ugu badan ee baraha bulshada. Dhanka kale, Al-Shabaab waxey

propagandoda ka soo guuriyeen Al-Qaedada Jaziiratu Arab (AQAP).Al-Shabaab waxaa lagu asteeyay inay kooxaha argagixisada kooxda ugu isticmaalka badan baraha bulshada.
E. Hayyada Cilmi barista Soomaaliyeed ayaa soo saartay qodob cadeynaya QAGjireynta dhalinyarada soomaaliyeed, iyo dhalinyarada qurba joogta soomaaliyeed ee dalka ku soo laabanaya kuwaas oo looga faa'iideysanayo daltabyada ay uqabaan dalka iyo dadka.Cilmi baarayaasha oo daba socda bulshada soomaaliyeed ee ay QAGjiriinta argagixisada ah ee Al-Shabaab bartil maameedsatay ayaa si cad uqeexay in "xiligaan uu yahay xiliga xuriyada baraha bulshada taas oo soomaaliya Qatar u'ah."

F. Ka dib markii laga saaray magaalooyinka waaweyn ee Somaliya, waxay u duruktay xaga dowladaha dariska ah, iyagoo xoojiyey dhaqdhaqaaqii howlgal ee ay ka wadeen wadamadaas. AS waxay xoojisay xiriirada ay la leeyihiin argagixisada caalamiga sida kuwa ku sugan Yaman, bariga dhexe iyo Afrika.

2-4.Dacish. dacish, waxa loogu yeero dowlada Islaamiga ah ee Ciraaq iyo Siriya (ISIS) waxay isku dayday in ay ku abuuranto kuna faafto dhulka miyiga ah ee buura leeyda waqooyiga Puntland Somaliya, ujeedkooduna yahay in inay weeraraan ciidamada dowlada ayna burburiyaan hayyadaha dowlada. Hadii aan si deg deg ah aan looga hortagin, Dacish waxey noqonkartaa Qatar weyn mustaqbalka.

2-5. Milishiyaadka iyo kooxaha kale oo hubaysan. Badnaanta kooxaha hubeysan waxay khatar ku keeneysaa Amniga qaranka iyo kala danbeynta. Kooxaha hubeysa waxaa ka mid noqon kara kooxo ka falaagoobay ciidamada qalabka sida, kuwaas oo si khaldan ay u isticmaalayaan kooxo dana gaar ah leh. Taas oo keeni karta khatar iyo caqabado soo wajaha

amniga guud ee wadanka una baahan in laga hortago si loo sugo sharciga , kala danbeynta iyo cadaaladda.

2-6. Qataraha Badda. Maadaama Soomaaliya ay tahay wadanka ugu xeebta dheer ee Africa, qataraha baddu waxaa la rumeysanyahay inay yihiin qataraha ugu weyn ee xasilooni darada iyo burbur dhaqaalaha ee dalka keeni kara. Qatarahaasna waxaa ka mid ah.

A. Kaluumeysiga aan diiwaangashneyn ee sharci darada ah. (IUU). Waxey ka qeyb qaataan luminta ama hoos udhac ah dhaqaalaha qaranka, waxeyna saameyn toos ah ku leedahay wax soo saarka kaluumeysiga Soomaaliyeed.

B. Burcad Baddeed, Qataraha Qaranka iyo Ganacsiga Badaha Caalamiga ah. Dowlada Soomaaliya iyo beesha caalamkuna waxa dhibaato ka soo gaadhaa saameynta burcad badeed.Kharashka ku baxa falalka burcad badeednimo waxay dhaawacaa dhaqaalaha soomaaliya waxuuna dhib u geystaa dhaqdhaqaaqa ganacsiga soo galaya iyo wax ka baxayaba. Bulshada Soomaaliyeed (Qaasan dhalinyaradeeda) qatar ayeey galinaysaa marka ay aadaan badda si'ay isugu dayaan falal burcad badeednimo.

C. Guud ahaan Dembiyada la xariira Baddaha. Ka guuleysiga kala gooshida, iyo guud ahaan dembiyada kale ee la xariira badduhu, waxey ubaahanyihiin hab isfahan iyo waxka

qabasho wadajir ah ee dowlada dhexe iyo dowladaha xubnaha ka ah, sababo la xariira hirgelinta sharciga iyo cadaalad marintooda.

D. Muranada Baddaha ee caalamiga ah.Muranada xuduudaha bada ee caalamiga ahi, waxey ubaahanyihiin faragelin siyaasadeed iyo dhex dhexaadin caalami ah.

TIER TWO THREATS

2-7. BIXITAANKA AMISOM. Inta badan 10kii sano ee ugu danbeysay, qeyba badan oo dalkeena ka mid ah, saaxiibadeen iyo walaalaheen AMISOM ayaa dagaal ku soo xoreeyay.Sidii la'isku raacay heshiiskii amaan, waqtiga iyo marxaladaha bixitaanka AMISOMhada ayaa lasii daraaseeyay. Wajiyada bixitaanku waxey abuurayaan qataro dheeri ah, masuuliyadaha iyo fursadaha ay Soomaaliya yeelandoono si taxadarleh ayaa loo maamulidoonaa. Iyadoon aan loo helin hayada amaan oo la'isku haleyn karo, dadejinta bixitaanka waxaa laga dhaxlikaraa qatar weyn oo lidi ku ah dhis maha iyo hormarinta soomaaliya.

2-8. Faragelinta Shisheeye. Khataraha laga dhaxlayo faragelinda wada jirka ah ee lagu hayo madaxbanaanida soomaaliya ee uga imaanaysa dowladaha deriska ah waxaa loo arkaa inay hooseyso. Hase yeeshee waxay leedhay khatarteeda.

2-9. Dembiyada. In kastoo ay soo hagaagyaan sharcigii iyo kala danbeyntii, dembiyada ka dhaca gudaha iyo kuwa caalamiga ahiba Soomaaliya weli waa laga walaacsanyahay. Burcada badanaa waxey qeeyraadka la wadaagaan isku dariiqana usticmaalaan Al Shabaab iyo ururada kale ee argagixiso. Baahitaanka hubka fudud, joogitaanka kooxaah hubeysan, iyo dambiyada abaablani waxey sare usii qaadayaan falalka dembi ee ka dhaca dalka.Dhibaatooyinka dembi, burcad baddeed, argagixiso iyo jabhadeed waxey qeyb ka noqdeen hor mar la'aanta iyo maalgashi la'aanta soomaaliya.Dagaalka cad ee lagula jiro dembiyadu wuxuu meesha ka saarayaan fowdooyinkii, iyo hormar la'aantii ka

jirtay meelaha ay colaaduhu ka jireen, kuwaas oo hadii kale caqabad weyn ku noqon lahaa hormarka bulsho iyo dhaqaale.

2-10. Hubka yar yar iyo midka Fudud (SALW). Somaliya waxaa ku soo qulqula hubka yar yar iyo fudud; waxey dhaxalsiisay noqoshada gobol aan deganeyn xuduudihiisuna furanyihiin. Halka hada aan wadno wajigii hsore ee soo saarista nidaamyo lagama maarmaan u'ah maareynta Hubka iyo Rasaasta (WAM) dowlada federal-ka ah ee Somaaliya waxey wadaa qorshaal lagu hormarinayo maareynta hubka iyo rasaasta, kuwaas oo aas aasaya nidaam heer qaran, xeerar iyo habab kuwaas oo fududeynaya maamulka iyo cirib tirka hubka yar yar ee fudud ee yaala soomaaliya. In kastoo weli amni daro iyo xasiloonidaro jirto, dowladu wey garowsantahay in muwaadiniin badan ay wali ubaahnyihiin isticmaalka hubka fudud si'ay ugu ilaaliyaan naftooda iyo tan hantidooda.

2-11. Ku'aasida suntan iyo waxyaabaha Qatarta ah. Dowlada soomaaliya wey aqoonsantahay qataraha jira eek u aasida sunta iyo walxaha qatarta ah, maadaama ay uyuhiin Qatar cad fayadhowrka guud, fayaqabka bulshada soomaaliyeed iyo deegaan kaba.

2-15. Kor ka ilaalin la'aanta Baarlamaan iyo Saxaafaddaoo aan Waxba Dabagelin.

Kor ka ilaalinta baarlamaanka iyo dabagalka saxaafad biseyl iyo waayo aragnimo lehi waxay muhiim u tahay kor u qaadida dimuqraadiyadda iyo la-xisaabtanka Nabadsugidda iyo Ciidamada amniga. Gudiyada kor-ka-ilaalinta (oversight committee) ee baarlamaanku waa in ay si buuxda ula socdaan dhamman qaybaha kala duwan ee shaqooyo ee Wasaaradda Amniga Gudaha. Wadashaqeynta iyo xogwadaaga

baarlamaanka iyo WAG waxay kor u qaadeysaa wada shaqeynta iyo kalsoonida.

2-16. La'aanta shuruuc Wax ku ool ah. Dhiska sharciyo iyo qawaaniin wax ku ool ah oo muhiim u ah xukunka iyo hagidda afcaasha iyo hawlgaladda ciidamada sirdoonka iyo amniga ee dimuqraadiyadda ku dhisan waa in la dejiyo oo si buuxda loo horumariyo.Sameynta sharciyo cusub ama casriyeynta kuwii hore waa masuuliyad ka dhexeysa Wasaarada safka hore iyo Baarlamaanka Fadaraalka, iyada oo toosintooda iyo ilaalintooda ay yeelanayso Wasaaradda Cadaaladda.

2-17. Tayada Haya'daha oo Liidata. Ma aha oo keliya in aanu ka dhex jirin sirdoonka iyo guud ahaanba garabka amniga oo idil wax ah nidaamo, siyaasado, iyo habraacyo waxku ool ah, ee waxaa kaloo badanaaba aan jirin dhismayaal ku habboon in ay degaan Talisyada, Baraha Hagidda,ama Saldhigyada boliiska.1. In kastoo Bulshada Caalamku inta badan soo hadal qaadaan Wasaarada Amniga, dhabtu waxay tahay majirto wax lagu tilmaamo wasaarad, ee waxaa jira wax aad u yar oo shaqaale xuddun ah oo aad u dhabar adeygay, kuna dadaalay in ay xaalad aan caadi ahayn ku shaqeeyaan. Mudnaanta waxaa weeye in Wasaaradda Amniga loo helo meel ku hanoon oo amni ah oo shaqooyikeeda ay ku gudato, halkii shaqaalaheeda xuddunta ahi uu xafiisyo ku kala filiqsanaan lahaa. Wasaaradda Amniga Gudahu waxay u baahantahay barnaamij dhameystiran oo horumarin haya'deed ah iyo taageero si ay ugu suuro gasho in shaqooyinkeeda lagama maarmaanka ah si wax ku ool ah u gudato.

1 Ilaa hadda WAQ ma leh meelku habboon oo amniah oo ay ku shaqeyso

2-18. La'aanta Shaqaale Aqoon leh oo Tababaran. Waxaa shaqaalaha laamaha sirdoonka iyo amniga dhammaan ee Somaaaliya kor iyo hoos ka jirta aqoon iyo waayo aragnimo la'aan. In kastoo aan la waayi Karin dadshaqo doon ah, waxaa dhibtu ka jirtaa in aan dadkii loo baahnaa la qorin isla markaasnaaan la siin tababaro wax ku ool ah la siin qaybaha ciidamada sirdoonka iyo amniga. Qorshe waaxyeedyada ciidankii Boliiska iyo Haya'dda Sirdoonka waa la diyaariyey wuxayna u xanibanyihiin dhaqaale la'aan. Waxaa loo baahanyahay in ciidamada heerer, xeelado, farsamooyin, iyo habraacyo isku mid ah loo dejiyo oo la dardargeliyo.

2-19. Nugeylka Kheyraadka Lagama Maarmaanka ah. Soomaliya kheyraadka dabiiciga ee lagu maneystay ee fara badan lagama faa'iideysan. In kastoo uu jiri karo qulqul dakhli badan oo ka imaankara dhinaca "dhaqaalaha kheyraadka Badda" oo lagu kharash gareyn karo amniga. Sidaas darteed, kheyraadka lagama maarmaanka ah waa in si taxadar len loo maamulaa.Dawladda Federaalka ah waxay wadaa habkii kayd loo abuuri lahaa loona dejin lahaa qorshayaal lagu maareeynayo masiibooyinka iyo lama filaanada iyo hoos u dhacyada xun ee daruuriyaadka.

2-20. Istaraatajiyo la'aan Amniga Badaha. Kheyraadka Badaha iyo Istaraatajiyada Amniga ee Soomaaliya waxay noo iftiiminaysa qaab dhiska/habraaca looga hawlgelayo amniga badaha iyada oo la isu keenayo Guddiga Qaranka ee Isuduwidda Badaha iyo Gudigga Isuduwidda Amniga Badaha. Mar haddii la isla oggolyahay in la sameeyo Ilaalada Xeebaga ee Heer Fadaraal, WAG waxaa laga rabaa in ay dejiso oo meel mariso Istratajiyada Horumruinta Ilaalada Xeebaha, siyaasado, iyo qorshe hawleed si wanaagsan ula falgeli kara qorshaha istraatajiyada ay dejiso Guddiga Qaran ee Isuduwiddda Badaha.

QAYBTA SEDDEXAAD
ISTARTIIJIYADA WAXQABADKA WASAARADDA
HORUMARINTA WASAARADDA

3-1. Caqabadda. Haya'daha Dawladda Fadaraalka oo dhan, shaqooyinka WAG ayaa ugu baaxad weyn oo in la maareyo aad loogu baahanyahy. Marka laga reebo shaqaale yar oo xudun ah, WAG ma laha goob shaqo oo amni ah oo ay hawlahaas badan ku maamusho. WAG waxaa haysta caqabad weyn oo hortaagan isudubaridka hawlaha looga fadhiyo iyo hadafyada laga rabo in ay gaarto iyo himilooyinka ku xusan Heshiiska Amni (Security Pact), Habka Dhammeystiranee Amniga (Comprehensive Approach to Security), iyo Qaab Dhiska Amniga Qaranka Soomaaliyeed (NSArch).

3-2. Jawaabaha Wasaaradda. Shax hawleedka ee Annex A ku tilmaaman waxay muujinaysaa hawlaha u baahan in WAG hadda waxka qabato. Kelmadda siyaasadda, Istaraatajiyada Amniga Gudaha ee WAG waa tilmaame siyaasadeedka ugu horreeya ee wasaaradda laga rabo in ay wax ku hagto, macneyso, oo ay isugu dubariddo waaxyaha, haya'daha iyo waxqabadyada ay u xilsaarantay. Istraatajiyada Amniga Gudahu wuxuu gacan siin kara Qorhe Hawleedka sannad laha ah ee wasaarddu dejiso kaas oo qeexayay hadafyada dhakhso loo higsanayo, kala horeynta mudnaanaha iyo u qaybinta kheyraadka waaxyaha, haya'daha, iyo hawlaha kale. Qorshe hawleedyadaasu waa in ay saameeyaan oo hagaan qorshayaasha hawleed ee waaxyaha kala duwan, haya'daha, iyo hawlaha kale.

3-3. Qaab Dhismeedka Wasaaradda. Qaab dhismeedka soo socda waxa uu muujinayaa shaqooyinka kala duwan ee wasaaradda iyo sida loo kala hagayo iyo sida la isugu duwayoba. Sababo la xiriira deegaanka iyo wax ku oolnimada

hawgaladoodu, iyo shaqooyinkooda oo baahsan ayaa haya'daha Boliiska, Waaxda Socaalka iyo Jinsyadaha, iyo Nabadsugidda waxay yeelanayaa talisyo u gaar ah laakiin waa in ay toos ugu xiranyihiin Xarunta WAG. Haya'daha yaryar waxaa xafiixyo ku filan laga siinayaa dhismaha ama xarunta wasaaradda. WAG waxay hadda Muqdishu ka raadinaysaa xarun ku habboon oo amni ah oo ay degto. Wax kastaaba ha jireene, WAG waxaa looga fadhiyaa in ay sameyso kor u qaadid tayada shaqaale oo aad u mug weyn si loo daboolo ciladaha kor lagu soo cayimay.




WASIIRKA WASAARADDA
WASIIRU DOWLAHA
WASIIR KUXIGEENKA
W.Maamulka, Shaqada & Shaqalaha
W. Maareynta Hubka Iyo Rasaasta
W.Qorsheynta
W. Maaliyada.
W. Sharciyada & Deiinta Sivaasadaha
W. Arrimaha Bulshada & Wacyi gelinta
W. Isku Duwida la dagaalanka Arg.
W. DDR-ka & Difaaca Madaniga
W. Xiriirka Gobolada & Hay'addaha WAG
XOGHAYAHA JOOGTADA
AGAASIMAHA GUUD
BOLIISKA
NISA
H. SOCDAALKA & JINSIYADAHA.
SEMA
ILAALADA XEYBAHA (CG)
MASHAARIICDA

weyn oo jirta oo nusqaan weyn ku haysa in la dhiso wasaarad hanan karta hawlaha loo igmaday.

3-4. Sharciyo La Dejiyo: Iyada oo lala shaqeynayo Wasaaradda Cadaaladda isla markaasna lala tashanayo Dawaladda Federaalka, Maamul Goboleedyada, Baarlamaanka, ururada bulshada, WAG waxay u xilsaarantahay in ay sameyso dhawrka hindise sharciyeed cusub ee hoos ku qoran:

- Dib u eegidda iyo dib u diridda Sharciga la Dagaalanka Argagixisada
- Sharciga Hubka Fudud ee Dadweynuhu leeyihiin,

A. Xeerka Boliiska Somaaliyeed, (iyada oo la beddelayo kii 1962 lana waafajinayo xaaladda cusub)
B. Sharciga Socdaalka Soomaaliyeed
C. Sharciga Nabadsuggidda Soomaaliyeed
D. Sharciga Ilaalada Xeebaha

3-5. WAG waxa kale oo ay masuul ka tahay in ay hubiso in miisaaniyadda qaranka ee sannadlaha ah qoondo ku filan laga siiyo Wasaaradda. Ugu yaraan in la helo mushaharka shaqaalaha dawladda ee u shaqeeyo iyo in ku dhow odoroska kharashaadka intii kale ee loo bahan yahay.

3-6. Xoogaga/Ciidamada Amniga Gudaha: Masuuliyadda dejinta iyo ku dhaqanka xeerarka iyo istraatajiyada Boliiska/Nabadsugidda/ Socdaalka waxay dusha ka saarantahay taliyaasha ama Agaasimayaasha hay'adaha Fadaalka iyo shaqaalahooda ka shaqeeya haya'dahahoos yimaadda Wasaaradda Amniga Gudaha. Sidoo kale, waxay noqonaysaa masuuliyadda Wasaaradaha Amniga Gudaha ee

Maamul Goboleedyada in ay dejiyaan istaraatajiyadahooda Boliseynta iyo arrimihii kale ee la xiriira amnigooda.

3-7. Maareynta iyo Kor ka Ilaalin. Kor-ka-ilaalinta DFS ee Amniga gudaha waxaa laga rabaa Gudiga Amniga ee Baarlamaanka, WAG, iyo Hay'adda Latalinta Madax Banaan ee Boliiska oo ka kooban qaybaha bulshada ee kala duwan. Shaqadoodu waa in mar mar kormeeraan meesha ay rabaan si ay hubiyaan. Boliiska iyo ciidanka kale ee amnigu waa in ay ixtiraamaan xuquul insaanka dadka ay u shaqeeyaan sida waafaqsan sharciyada dalka iyo kuwa caalamaka. WAG waa in ay iyana kormeer iyo u kuurgal shaqo sameysaa iyada oo hubinaysa habsami u socodka hawlaha iyo maaereynta, maamulka miisaaniyadda, wax soo iibsiga iyo qandaraas bixint haya'daha hoos yimaaddaa sida Boliiska, Nabadsugidda, Socdaalka, iwm..
WAG waa in ay dhistaa tayadeedaa -dhinac dadka iyo qalbkaba- si ay u maamusho masuuliyadeeda kor-ka-illaalin oo ay u diyaariso warbixino iyo tilmaamaha loo baahan yahay. Kor ka ilaalinta haya'ha anmiga waxaa masuul ka ah Baarlamaanka Maamulkaas.

3-8. Taliyaha Boliiska, Ilaalaha Xeebaha, Agaasimaha Nabadsuggidda, iyo Agaasimaha Socdaalka waa inay abuuraan hab wax ku ool kor-ka-ilaalin gudahooda ah si ay ugu suura gasho in ay qiimeyn karaan FGS qaab dhiska maareynta amniga oo ay hawlgalo u sameyn karaan iyaga oo shacabka u jawaab celinaya, isla markaasna hubinaya in si hufan oo shaqo wanaag ah iyo sharaf leh loo gutay hawshii la rabey. Taas ay ka midtahay hab dhaqanka anshaxa iyo in si aan mugdi ku jirin u fahmaan darajo kasta ha lahaadee hab dhaqanka, hadafka iyo qiyamka, habraaca hawlgalka, iyo sisiladda ka la sareynta iyo isla-xisaabtanka. Dawlad

Gobaleeyadu waxay sameysanayaan Hab Kor ilaalin u gaar ah.

3-9. Maamul Goboleedyada: WAG waxay xiriir wadashaqeyn oo dhow la yeelaneysaa Wasaaradaha Amniga maamul goboleedyadau waxaa la sameynayaa gole ay ku mideysan yihiin wasaaradaha qaabilsan Amniga gudaha, yeeshana shirar joogto ah oo lagu falanqeyyo kor u qaadida Amniga dalka. Waxaa laga rabaa wasaasardaha Amniga M. Goboleedyada in ay sameyaan qorshayaal hoosaadyo amni ee ay waxa kaga qabanayaan Amniga maamul goboleedka ay joogaan.

ISTRAATAJIYADA QORSHAYAASHA BOLIISKA TIXGELINO MUHIIM AH

3-10. Masuuliyadda. WAG iyada oo la tashanaysa Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed iyo Wasiiradda Amniga Gudaha ee Maamul Gobleedyada waxay abuuraysaa guddi Farsamo oo isku dhaf ah oo qorsheysa islamarkaasna hirgelisa waxyaabaha lagu heshiiyo iyo habraacyada Qaabka Cusub ee Boliiska Somaaliyeed (New policing Model) Model. Guddigu waxay soo baarayaan kana soo talo bixinayaan siyaabaha kale duwan ee ku haboon higelinta go'aamada Nidamka Amniga Qaranka Somaaliyeed iyo baahida loo qabo in 32,000 askari oo Boliiska ah loo qaybsado si siman oo caddaaladah iyada oo lagu saleynayo baahidu sida ay u kala weyntahay. Baahidu waxay inta badan ku saleysnaanaysaa hadba sida ay khatartu u kala badabtahay. Taas oo ay ku jirayso qoondeynta tirada inta noqonaysa Fedaraal, Boliis Maamul Goboleed, Amni Badeed, Daraawiish, Ilaalo Xeebeed iwm. Waxaa muddan in la abbaaro oo lala muujiyo ama qeexo doorarka, hadafyada, musuuliyadaha iyo kheyraad qaybsiga Fedaraalka iyo Maamul Goboleelyada iyo isu soo dumidda xoogaga Daraawiishta.

Go'aamadaas oo dhan waxay u baahan yihiin in si taxadar leh loo maamulo, waxaana muhiim ah in la hubiyo ciddii loo arko in ay dheeraad ku tahay baahiddan la fadhiisiyo ama la ruqseeyo, isla markaasna loo sameeyo barnaamij wax loogu qabanayo oo aan cidla lagu sii deyn si daacadnimadooda iyo khibradooda aanay gacanta ugu gelin cadawga qaranka ka soo horjeeda.

3-11. Dhismayaasha iyo Tayada. Saldhigyada Boliiska intooda badan iyo dhismayaashii kale ee Boliiska waxay burbureen xiliyadii dagaalka sokeeye waxayna u baahanyihiin in dib loo dhiso loona qalabeeyo.Waa caqabad dalka oo dhan ku baahasan.Helitaanka hab la iskula xiriiro oo wax ku ool ah oo ay saacidayso tiknoolajida casriga ah waxay lagama maarmaan u tahay tayada hawlgalada ciidamada amniga ee dalka oo dhan. Dad, Dhisme, iyo taageero dhaqaale ayay u bahanyihiin ilaa ninka u sareeya iyo askariga u hooseya meel kasto ha joogee ciidanka amni ama boliiska.Nidaamka Amniga 16 DRAFT 1

Qaranka Soomaaliyeed (NSArch) wuxuu qeexayaa tirada ciidanka Fadaraalka Boliiska iyo Nabadsuggidda. Haseyeeshee, wixii wada hadal ah ee ku saabsan tirada Boliiska iyo Nabdsugdda ee dhexmara Fadraalka iyo Maamul Goboleedyada, waxaa loo bahanyahay in lagu heshiiyo qaabkii loo qaybsan lahaa, kharshkoodana meel loo saari lahaa.

Imminka waxaa jira faraq weyn oo u dhexeeya tirada iyo tayada waxqabad ciidamada jooga Maamul Goboleedyada. WAG waxay ka shaqeynaysaa sidii ay u dabooli lahayd meeshana uga saari lahayd faraqyaas ka jira dhinacyada

Fadaraaka iyo dhinaca maamul Goboleedyada hadday tahay tirada iyo tayadaba si loo helo ciidan Boliis dalka oo siman oo meel loogu soo haggago leh. Tirada cayiman ee ciidanka iyo kharashkooduba waa masuuliyad dusha ka saaran madaxda amniga ee Haya'daha ee Mamul Goboleedyada.

3-12. Shaqo ka Badelid. Shaqo ka saariddu waxay ku waajantahay shanmqaybood oo ciidanka ah: madaxda sare; kuwa googoyska ah, kuwa dhaawaca ah; iyo shaqo ka eris/ka saaridda Boliiska, milatariga, nabadsugidda, iyo Daraawiishta. WAG iyada oo la tashanaysa madaxda amniga ee maamul goboleedyada taageerana ka dalbanaysa haya'daha caalamka ayay massuul ka noqonaysaa dejinta siyaasad lagu maamulo iskudhafka ciidanka iyo shaqo kafariisinta oo ka qaybo ah maamulka shaqaalaha iyo horumarintiisa.

3-13. Dhaqan beddel: Dhaqan beddelidda ciidanka waa xaaladda ugu adag ee la waajaho. Waxaa si gaar ah u sii adkeeya marka colaado ay baabi'yaan wixii hore u jirey oo wax walba hos laga soo dhisayo. Matalan dhaqan beddiladda ciidanka Nabadsugidda iyo Boliska si ay u noqdaan ku ixtiraama xuquuqul insaanka isla markaasna la dagaalama denbiyada waxay u baahantahay tababaro aad u qoto dheer oo ilaalinta Xuquuqul Insaanka.Sidoo kale, higelinta masuuliyadda ka saaran Nidaamka Cusub ee Boliiska waa in WAG isku dubbariddaa iyada oo la tashanaysa Dawlad Goboleedyada.

3-14. Tayo Dhis. Waxaa loo baahanyahay in Qorshaha Heegan dib loogu noqdo si cagli gal ahna loo casriyeeyey iyada oo looga jeedo in uu fududeeyo hirgelinta Habka Cusub ee Boliiska federalka ah.Sidoo kale haya'daha hoos yimaadda WAG waxaa laga rabaa in ay qorshe horumarin u

gaar ah la yimaadaan kaas oo laga soo dheegay istaraatajiyadahooda iyo siyaasadahooda u gaarka ah.

Habdhiska Cusub ee Boliiska

3-15. Heshiis ayaa dhex maray WAG iyo Dawlad Goboleedka dalka oo lagu caddeyey hab loogu talagalay in lagu hago qaabka iyo hawl qabadka ciidanka Boliiska soomaaliyeed. Farsamooyinka waxaa lagu xardhay shan iyo toban qodob oo halkan ku qoran Annex B. Habdhiska Cusub ee Boliiska oo aad loo faahfaahiyey waxa la dhameystirayaa sannadkan dhammaadkiisa 2017, haseyeeshee la shaqeynta haya'daha amniga ee dawlad goboleedyada WAG waa in ay hubisaa oo fududeysaa dhismayaasha Boliis Goboleedyada dhammadka 2018. Ugu yaraan waa in DFS iyo Dawlad Goboleedyadu isu yimaadaan iyaga oo Guddiyadii Frasamo iyo qorshe horumarinta boliiskooda ay u dhan yihiin. Si barbar socoda ah waa in helo siyaasadaha ciidanka iyo habraacyada oo la mideeyey si loo hubiyo in la helo dhisme/habraac lagu joogteynkaro adeegyada boliiska.

Qorshaha Istaraatjiyada ee Haya'dda Nabdsugidda

3-16. Masuuliyadda. Iyada oo hoos timaadda WAG, NISA waxay masuul ka tahay dejinta istaratajiyadda qorshe hawleed ku aadan dhamman ilaha helidda iyo uruurinta xogaha iyo siraha gudaha iyo dibeddaba. Waxa kale oo ka mid ah masuuliyadeeda uruurinta xogaha iyo qiimeyntooda iyo u qaybinta hay'adaha qaranka khataraha jira ee cadawga si madaxdu ay go'aan uga qaadhaan. NISA waxa kale oo ay masuul ka tahay lidxuuraanka iyo ka hortagga argagixisada iyo aqoonsisiga waxi debniyo ah ee lid ku ah danta qaranka,

sida amniga, dhaqaalaha iyogancsiga, maalka iyo dhismayaasha qaranka. Hadda Xogaha la istimaali karo iyo qaabka deriseynta a oo is ilaaliya ayaa laga yaabaa in soo hooyo xogo badan oo cadawga.

Qaabka deriseynta waxaa uu aad kor ugu qaadayaa shabakadaha isku xiran ee aqoonsiga iyo dhexgalka oo dhisaya xiriir wanaagsan oo dhex mara ciidanka iyo shacabka. Si loo saaridda xogta loona hagaajiyo, la isuguna dubarido, oo loo maamulo, waxaa muhiim ah in aan ilaha xogta keliya lagu koobnaan ee waa in haya'daha heer qaran gudahooda la iskuduwaa, isla markaasna kor looqaadaa tayada xogta la soo ururiyey. Sidaas darteed, abuuridda Xarun Isku dhaf ah oo Xogta la isu keeno Xarunta Iskudhafka Hawlgaladda Isuduwidda. Mustaqbalka Dawlad Goboleedyadu waa in ay sameystaan xaruumaha xog isweydaarsiga iyo isku dhafka howlgalada.

3-17. Awoodda Weerar. Si loo hubiyo in howlgal la sameyn karo iyada oo lagu duulayo xog dhab ah oo la weerarayo Alshabaab iyo denbiilayaasha kale oo shacabka gumaadaya waa in NISA leedahay awood ay degdeg ugu qaadi karto weerar. Hase ahaate Mudada dhow Wasaarada Amniga waxa u qorshaysan in NISA ku ekaan doonto shaqadeeda gaarka ah ee xog ururinta.

Istaraatajiyadda WAG ee Socdaalka iyo Xuduudaha

3-18.Hordhac. Sanadahan danbe isu socodka Soomaaliya iyo dalalka Bariga Afrika aad ayuu kor ugu kacay. Sida meelaha kale ee DFS ay uga jiraan tayo xumo ayaa maareynta socdaalka sharciga ah iyo kan aan ahayniba u xadidanyahay.

Isu socodka muwaadiniinta iyo danaha qarankuba waxay u baahanyihiin dejinta siyaasaso iyo habraacyo ku cad Sharciga Socdaalka.Ilaa inta sharciyadaas ay baalamaanka iyo golaha wasiiradu ay soo saarayaan, hayadaha amnigu waa in ay iskaashi buuxa la sameeyaan hay'adda Socdaalka si ay hormuud ugu noqoto maareynta howlaha socdaalka ee dalka. Hay'adda socdaalka waxaa laga rabaa in ay ilaaliso xuduudaha dalka gelid iyo bixid isla karkaasna xoojiso sharciyada jira, sharcigana horgeyso wixii ku xad gudba. Sidoo kalena soo dhoweysaa dadka maalgashiga u imaanaya ee shaqooyinka abuuraya.

3-19. Masuuliyadaha Gaarka ah. Haya'dda Socdaalka iyo Sinjiyadaha waxay masuul ka tahay kantaroolka socdaalka ee bixid, soo gelid, iyo bixinta deganaashaha. WAG iyada oo la tashaneysa Haya'dda Socdaalka waxay dejinaysaa siyaasadda iyo habraaca isdhiibidda, immigrationka, deganaashaha, Qoomiyad hubinta, oggolansho dal soo gal, oggolaasho degidda dalka, Diidmo soo gelid, xaquuqda iyo masuuliyadda qofka, siyaasadda dal kugalka dalxiisayaasha iyo baayac mushtarka, fiiga foomamka la buuxiyo iyo cosiga habraacyada socdaalka.

3-20. WAG waxay dusha kala soconaysaa Haya'dda Socdaalka hirgelinteeda siyaasdaha iyo habraacyada. WAG waxay hubinaysaa in si wax ku ool ah dawladda oo dhan isuduwidda hawlaha iyo qiimeynta sharciyada kala duwan ee socdaalka, shuruudaha, iyo siyaasadaha iyada oo looga danleeyahayin in la daboolo meelaha banana lana oggaado goldaloolinka la istimaali karo. WAG waxay sameynaysaa hab dibu eegis si loo hubiyo sharciyada loo baahanyahay in ay shaqeynayaan.

Wasaaradda Maaliyadda iyo Qorsheynta Dhaqaalaha waxay masuul ka tahay arrimaha xawaaladda la xirrira.Wasaaradda Arrimaha dibedda waxay masuul ka tahay arrimaha qurba joogta iyo ilaalinta iskuxidhnaanta qurbo joogta.Xafiiska tirakoobka qaranku wuxuu masuul ka yahay ilaalinta macluumaadka Isu socdka iyo lasocdsiinta WAG.
Istaraatajiyadda Ka Hortagga Argagixisada ee Dawladda Faderaalka Soomaaliyeed

3-21. Habraac Dhammeystiran: WAG waxay hogaan ka tahay ka hortagga Argagixisada, waxay masuul ka tahay in ay ka jawaabto argagixisada iyada oo adeegsanaysa qaab dhis xoogan oo culeys saaraya qaabab fara badan oo isku dhaf ah, isla markaasna ka dalbanaya caawimo gudaha iyo dibedda dalka iyo saaxiibada caalamka. Qaab dhiskan wuxuu u hawlgalaa seddex heer oo kala sareeya oo kal ah Xoojinta tayada xogaheenna, suggidda bartilmaameedyada degan, iyo kor uqaadidda diyaar garowgakaga horeynta iyo dabagelidda shabakadaha argagaxisada iyo weeraradooda. Mawqifka DFS ee ku aadan argagixisada waxaa ka mid ah:

A. Tallaabooyin lagu sugayo amniga meelaha ay bar tilmaansanayaa kuwaas oo lid ku ah waxay damac sanyihiin. Dawladdu waa in ay kor u qaadaa tayadeeda xog helid si ay loo ilaaliyo meelaha muhiimka ah oo dhaqdhaqaaqyada dadka laga shakisanyahay loola soconayo.

B. In sharciyo iyo qawaaniin la sameeyo ku waajahan denbiilayaasha iyo araggixisada. Waa in la isticmaalo sareynta sharciga ee argagixisada gudaha iyo debedda.

C. Dabagelidda, saariddda, iyo dhexgelidda unugyada agagixisada ay Al-qaacida duufsatay oo ay hogaamiso Alshabaab oo aan doonayn in nabad dalan ka dhalato.

D. In awood la saaro in aan kooxo kale soo ifbixin iyo aan la duufsan dadka. Taas oo ah in nabad meel kast oo Soomaliya ah laga helo, kor loo qaado heerka nolosha, dhaqaalaha iyo shaqooyinka kuwaas oo ah xaaladaha suurogeliya in argagixiso meel ka hana qaadao.

E. Dejinta istaraatajiyad isku dhaf ah oo mideysan oo lagaga hortatgayo QAG Xag-jireenka iyada oo culeys la saarayo waxa keena iyo cawaaqibka ay geestaan.

F. Culeys la saaro warbaahinta si looga hortago beenaha ay faafiyaan QAG Xag-jireenku.

3-22. Istaraatajiyada Shanta udub/Tiir;

Istaraatjiyadda Ka hortagga Argagixidada ee DFS waxay ku salaysan tahay:

A. Ishortaag: Is hortaaga shabakadaha argagixo iyada oo la rabshayo loona diidayo in ay xor ah uga shaqo galaan oo dadka nugul ay u qortaan.

B. Iskuduubi: in al abuuro jawi nabada si haya'daha dawladdu u heliaan dhul ay shaqooyinkooda iyo adeeyada ka fuliyaan oo ah dhulka laga qabsado ama laga xoreeyo Alshabaab

C. Meel ku hayn: Si aanay u hanaqaadin waa in la hayo iyadoo la sameynayo hab lagula socnayo khataraaha iyo dhacdooyinka si aan dadweynaha uga maskaxda badin oo aan loo gelin argagaxisada inay ka gacan sareyso

D. Islaxiriirid: waa in si wax ku ool ah la isula xiriiraa iyada oo la dejinayo istraatajiyad la iskula xiriiro taas oo hoos u dhigaysa fekerkooda guracan iyo beenahooda ay ka been abuurayaan shareecada Islaamka

E. So gurigalin: In al beddelo fikirka kuwa hadda jooga iyo kuwa imaankara ee Alshabaab iyada oo dawladdu si fiican ula dhaqmayso si ay u soo jiitaan kuwa kale. Iyada oo la siinayo fursad weyn oo lagula heshiiyo kuwa raba in ka noqdaan QAGjirnimada oo dhaqancelin loo sameynayo loona abauurayo qaab ay ku noolaadaan oo ay beddeshaan falalka foosha xun. Dhaqan celinta dhalinta ka soo baxday Alshabaab waa arrin muhiimah oo looga hortagayo Aragaggisada.

3-23. Qaab Dhammeystiran. Iyada oo la socota istaraatajiyada ka hortagga argagixida ee DFS, Wasaaraddu waxay soo saaraysaa qodobo si fiican u qeexaya hadafyada laguna hirgelinayo doorka ay ku leedahay mashruuca guud ee ka hortagga argagixisada iyada oo lahubinayo in WAG si dhab ah u fulisay waajibaadkeeda shacabka soomaaliyeed. Hirgelinta hadafka DFS ee ka hortagga argagixisada wuxuu ubaahanyahay wadashaqeyn, isku xirnaan wasaaradaha iyo haya'daha kale iyo shacabkaba.

3-24. Marka la eego wasaaradda shaqadeeda waxaa muuqarta in loo baahanyahay in shanta tiir ee siyaasadda la dagaalanka argagixisada loo wada dhanyahay oo laga wada shaqeeyo wasaaradaha kale ama door hogaamin ha ka qaato ama mid kaleba. Sidaas darteed, si loo waajaho caqabadaha jira waa in la abuuro qaab dhis lagula shaqeynayo wasaaradaha kale. Wasaaraddu ama hoggan ha noqoto ama yay noqon si isku

dhaf ah loo dejiyo qorshe loo dhanyahay loona wada sameeyo sidii loo hirgelin lahaa shaqooyinka.

A. In la hubiyo dhamman haya'daha xooojinta sharciga ay leeyihiin hab ay kuwada xiriiraan hawlahana ku hirgashadaan

B. In la abuuro tababaro xirfadeed oo tayo leh oo ayka qayb qaatan haya'daha amniga oo dhan si ay u fahmaan Istaraatajiyada DFS ee ku aadan ka hor tagga argagixisada iyo qorshe hawleedyada loo bahanyahay.

Seddexdan qodob waxy waxay noqonayaa saldhigga hirgelinta Istaraatajiyada amniga ee WAG.

3-25. Istaraatajiyada ka hortagga Xagjirnimada. Qodob muhiim ah oo ka mid ah habka iskudhafka ee ka hortagga xagjirnimada, DFS waxay qorsheynaysaa in ay dejiso Istarataajiyadda Ka hortagga xagjirnimada taas oo culeyska saaraysa waxyaabaha kelifa argagixisada iyo dejinta sidii loo daaweyn lahaa. Si loo taageero ka hortagga xagjirnimada waa in xarun la abuuraa lagu qabto cilmi baaris tababaro, isuduwid, horumarin, iyo soo bandhigid waxqabadka ka hortagga xagjirnimada.

3-26. Qorshaha Wasaaradda Amniga Gudaha ee dhaqan celinta maleeshiyaadka.

A- Si looga adkaado xag-jirka loona soo dhaweeyo dhalinyarada la marin habaabiyay waxaa loo baahan yahay Sameynta xarumo dhaqan celineed guud ahaan dalka oo dhan.

B- Dar-dargelinta mashaariicda hada socota ee dhaqan celinta iyo gaarsiinta dalka oo dhan.

Istaraatajiyadda Badda

3-27. Xaaladda Hadda Jirta. Khataraha dhinaca badda ee soo waajaha DFS iyo DGyada aad bay u badanyihiin waxaynuna si qoto dheer ugaga hadli doona qormada taxliilinta khataraha ee kelmadda istaraatajiyada. Soomaaliya iminka ma leh awood ay ku sameyso xuduud biyoodkeeda gaafmeer ku filan iskagana daafacdo khataraha jira.

3-28. Iyada oo la tixraacayo Qaad Dhiska Amniga Qaranka, xoogga badaha Soomaliyed waxaa loo qaybinayaa seddex nooc: Ciidanka Badda, Ilaalada Xeebaha, iyo Boliiska Badaha.Sidaas darteed dhammadka 2017 WAG waxay diyaarinaysaa Sharci qaybyo qoraal ah ee Ilaalinta Xeebaha iyo habraaca awoodda hawlgal si markaas sharcigan ay u ansixiyaan Golaha Wasiirada iyo Barlamaanka Fadaraalka ah (BF).Arrintani waxay u baahantahay in DFS iyo Madaxda DGyadu ay ku heshiiyaan sida ay u shaqeynayso Ilaalada Xeebaha (Guud ahaanba hoos imaanaysa WAG) oo uu xukumayo Taliyaha Ilaalada.Waxaa kale oo heshiiskan ka mid noqon doona in laga sameeyo DGyada oo dhan iyo magaalooyinka waaweyn ee xeebaha ku yaal iyo fariisimada ciidanka rugo ama saldhigo caawiyeyaal ah. Ciidanka Ilaalada Xeebahu wuxuu masuul ka noqonayaa meelmarinta sharciga iyo nabadgelyada badda.

3-29. Boliiska Badaha. Waxaa loo baahanyahay in go'an siyaasadeed laga qaataa in uu Taliyaha Boliiska ee DG uu masuul ka noqonaya rugta Boliiska Badaha ee ku taal DG uu ka tirsanyahay iyo in ay ka mid noqonayso Ciidanka Boliiska Mideysan ee hoos tegaya Taliska Ciidanka Boliiska

Soomaaliyeed. Go'aamada ku aaddan shaqada, saldhigga, hawsha iwm waxay noqonayaan kuwa ay iska leeyihiin oo u gaar ah Madaxda Boliiska ee DGyada. Boliiska Badaha ee DGyada waxaa masuuliyad ka saarantahay dekadaha iyo biyo badeedka fogaantiisu tahay ilaa 3 mayl badeed.Decisions on duties, basing, manning etc will be a responsibility for each FMS individually.

3-30. Guddiga Qaranka ee Isuduwidda Badaha (GQIB). Sannadkii 2016, DFS waxay magacawday Guddiga Qaranka ee Isuduwidda Badaha.DGyadu si buuxda ayay bilowgiiba uga qaybqaateen sameynta guddigan.Guddigani waxay masuul ka yihiin in ay dejiyaan istaraatajiyadBuuxda Badaha Qaranka taas oo shaqada amnigu ay qayb muhiim ah ka noqonaysa laynka hawlgalada. WAG waa inay hubisaa in Istaraatajiyadeeda ku aadan horumarinta badaha ay si buuxda ula falgelikarto shaqada GQIB

BADBAADINTA SHACABKA IYO ISTARAATAJIYADDA GURMADKA XAALADAHA ADAG

3-31. Masuuliyadda horumarinta, maareynta, iyo gaarsiinta Qorshaha Badbaadinta Dadweynaha waxay dusha ka saarantahay WAG. In la abuuro Waaxda Badbaadinta Dadweynaha lana qoro shaqaale aqoon sare leh waa mudnaanta kowaad ee WAG. Yareynta ama hoos udhigidda khatarta marnaba kuma siinayso amni 100% la isku haleyn karo, sida aanay suuragal u ahayn in khataraha oo dhan la saadaaliyo oo xitaa khataraha la aqoonsaday baan eber hoos loogu dhigi Karin. Sidaas darteed, waxaa la rabaa in heerka macquulka ah ee la qaadankaro la caddeeyaa, lana isu dheeli tiraa khayraadka la heli karo. Tamarta iyo kharashka la gelayo waa in loo eegaa maxsuulka ka soo bixi kara. Caqabadda ka

hor timaadda dawlad kasta waa maareynta khatarta iyo sidii hoos loogu dhigi lahaa caqabadaha badan ee filiqsan, isla markaasna loo kala horeysiin lahaa fangarayntooda iyo weliba sidii loo macnayn lahaa waxa la aqbali karo marka laga eego inta ugu yar ee caqliga geli kara.

3-32. Aqoonsiga Dhimayaasha Muhiimka ah ee Qaranka.Dhismayaasha qaran ee muhiimka ah ee FGS u dejisey Istaraatajiyada khafiifinta khataraha waxaa ka mid ah kuwa soo socda. Liiskani wuxuu u baahanyahay in isha lagu hayo oo la beddelo hadba sida xaaladda istaraajiyad u soo baxdo..

A. Xarumaha iyo Dhismayaasha Dawladda
a. Xarunta Madaxtooyadda Qaranka. Villa Somalia Complex,
b. WAD, WAG, NISA, Taliska Boliiska, iyo Dhismaha wasaaradda ee aan ahayn MOD, MIS, NISA, Police HQ and ministry buildings not in VS,
c. Saldhigyada Xoogga Dalka iyo Kuwa Boliiska. military bases and police stations,
d. Maxkamadda Sare iyo Baarlamaanka. Supreme Court & the Parliament.

B. Xarumaha Warshadaha/Ganacsiga. Industrial Complex.
a. Garoonka Aden Adde, Garoomada kale ee DGyada. MIA, other regional airports,
b. Dekada Xamar iyo Dekada kale ee muhiimka ah ee DGyada>Mogadishu port and harbour facilities and significant regional port and harbour facilities,
c. Meelaha Keydka shidaalka iyo Kimikada & Goobaha Moobalada iyo af daboolada. Oil and chemical storage depots & Mobile phone facilities and masks.
C. Public Utilities.

a. Biyaha, bulaacadaha, iyo korontada. Water, sewage & electricity etc.

3-33. Noocyada Cabsida. Ka sokow weerarada argagixisada iyo kuwa kale ee denbilaasha ee lala beegsado dhismayaasha qaran ee muhiimka ah iyo meelaha dayacan ama nugul, aafooyinka dhaca in badan oo ka mid ah waxay noqonkaraan kuwo ay dadku sababeen ama kuwo dabiici ah ama isku darka seddexdooda oo dhan. Waxaa la dejin doonaa Istaraatajiyada Yareynta weerarada si looga hortago 22 DRAFT 1

kuwa wejiga keliya leh iyo weliba kuwa badan ee isku xidhan ee loo qorsheeyey in ay wareeriyaan wax ku oolnimada gurmadka DFS.

3-34. Aqoonsiga Gurmadka iyo Meelaynta
Si loo hormariyo istaraatiijiyad ka hortag oo sal balaaran , waa laga maarmaan in la aqoonsado lana diiwaan geliyo jawaab bixiyayaasha suurta galka ah. Jawaab bixiyayaasha waxaa ku jiri doona dhammaan hay`adaha Dowladda ay qususeyso, hay`adaha shibilka iyo hantida sida lagu heshiiyey, hay`adaha shibiliga ah oo isku jira , goobaha caafimaad iyo shaqaalaha, qorsheynta keyd waxey dejin doontaa jawaab bixiyaasha qaar sida heerka 1aad ama 2aad oo ku xiran heerka ka go`naashaha iyo ka qeyb qaadashada qorshaha keyd, faa faahinta ka qeybgal kasta ee hay`ayadaha shibiliga ah wadahadal hordhaca ayaa laga sameyn doonaa..

3-35. Qorsheynta Lama Filaanka ah.
Qorshaha keyd ee shaqaalaha difaaca madaniga ee Wasaaradda Amniga Gudaha wuxuu ku saleysnaan doonaa tilmaamaha Amni ee hoos ku xusan:

A. Qaab dhismeedka maareynta Amniga ayaa la dhisayaa kasoo dajinaya hay`adda hogaamineysa heerka 1aad iyo heerka 2aad ee jawaab bixiyayaasha

B. Maamul , nidaam xariir oo wax ku ool ah ayaa loo dajin doonaa dhammaan hay`adaha ku lugta leh, shaqaalaha oo ay ku jiraan jawaab bixiyayaasha deg dega ah, qorshayaashana waa la bari doonaa.Xarunta isku xirka howlgalada ayaa loo adeegsan doonaa dhammaan dhacdooyinka iyo maareynta musiibooyinka gudaha iyo daafaha Muqdisho

C. Hormarinta xogaha Hay`adaha dhaxdooda ah iyo wadaagista sirdoonka

D. Dhammaan dhinacyada ku lugta leh oo ay ku jiraan jawaab bixiyayaasha deg dega ah si buuxda ayaa loo tababari doonaa loona qalabeyn doonaa iyadoo loo fiirinayo doorkooda

E. Xoogagga fal celinta deg dega ah iyo jawaab bixiyayaasha deg deg dega ah ayaa lasoo bandhigi doonaa lana diyaari doonaa iyadoo loo sharaxayo loona iftiiminayo dhammaan wax yaabaha keydka u ah

F. Qorshayaasha maareynta musiibooyinka waxaa lagu tala galayaa baahida ah in la bixiyo taageero maamul iyo mid farsamo dhammaan xaaladaha keydka.

3-36. Wajiyada Qorsheynta Lama Filaanka.

Guusha qorshaha keydka waa saadaalinta iyo yareynta qataraha kahor inta aysan baahin,marka la hormarinayo qorshaha keydka si loo maareeyo qataraha iyo halisaha wajiyo howlgal ayaa la tixgelin doonaa

A. Saadaalin:Nuxurka wax ku oolnimada qorshaha keydka waa saadaal ku saleysan tababar mira dhal ah iyo sirdoon wanaagsan

B. Ka hortag:Ka fogaashaha halisaha, qataraha iyo ka hortaga inta badan waa midka ugu fudud ee lagu yareyn karo,
C. Cabsi gelin:Dhisidda difaacyo xoogan oo la isku haleyn karo waxey cabsi gelin karaan weerar kasta oo suura gal ah.
D. Baaris:Baarista hore waxey gacan ka geysan karta digniino hore oo la saadaaliyo kuna saleysan sirdoon wanaagsan oo suura geliyo in laga hortago qataraha.
E. Baajin: Baajintu waxey suura gelisaa nidaaminta si loo yareeyo, xakameeyo loona maareeyo qataraha.
F. Fashilin:Fashilinta waxey ku saleysantahay baaris hore si loo yareeyo qataraha loona maareeyo
G. Jabin:Qeexitaanka ugu dambeeya ee guusha istaraatiijiyadda ka hortagista waa jabinta halista iyo maareynta qatarta.

Qorshaha Wasaaradda Amniga Gudaha ee maareynta Hubka iyo Rasaasta

3-37. Caqabadda:Inkastoo la marayo marxalad hore oo lagu hormarinayo hababka muhiimka u ah maareynta Hubka iyo Rasaasta, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxaa ka go`an in ay sameyso dadaal kasta oo suura gal ah si loo hormariyo qorshaha istaraatiijiyada iyo qaab dhismeedka shaqo ee maareynta Hubka iyo Risaasta, kaasoo dhisaya heerarka qaran, Xeerarka iyo nidaamyada.

Inkastoo ay jiro xaalad amni daro, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxey aqbaleysaa baahida muwaadiniin badan oo Somaaliyeed u qabaan iney helaan Hubka fudud si ay ugu difaacaan Naftooda iyo Qoysaskooda, xaqiiqdii inkasto oo ay muhiim tahay in la dhiso awooda Ha`yadaha Amniga iyo ku dhaqanka sharciga, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxey meel marin doontaa oggolaashaha gaarka ah ee diwaan

gelinta iyo maareynta dhammaan hubka fudud ee muwaadiniintu lee yihiin.

3-38. Msuuliyadda Qaran ee Maareynta Hubka iyo Rasaasta.
Waqti kasta,Shaqada siyaasadda Maareynta Hubka iyo Rasaasta waxaa dajiya Xafiiska Amniga Qaranka oo gacan ka heliya Hayado dhawra oo UN-ka ka tirsan sida UNIDIR, UNSOM, UNMASS, iyo UNDP, xafiiska Amniga Qaranka gudihiisa, DFS waxey dhistay gudi maamul iyo koox Farsamo si ay usii wadaan dhismaha maareynta Hubka iyo Rasaasta, si kastaba ha ahaatee,masuuliyadda hormarinta hirgelinta istaraatiijiyada Qaran ee maareynta Hubka iyo Rasaasta waxaa loo gudbiyey WAG, Wasaaradduna waxey dhisi doontaa qaab dhismeedka iyo awoodda shaqaale si ay u qabsoonto shaqadaan.

3-39. Horumarinta howl qabadka hay'ada.
Dhinacyada shaqo ee maareynta Hubka iyo Rasaasta oo ay hormarisay Wasaaraddu waa sidaan:
A. Isku duba Ridka Farsamo ee Maareynta Hubka iyo Rasaasta.

Iyadoo lagu shaqeynayo tilmaamaha Golaha Amniga Qaranka, Ciidamada xooga waxey dhiseen Gudi maamul oo heer wasaaradeed ah iyo koox shaqo si loo tixgeliyo loona hormariyo Nidaamyada iyo Siyaasadaha maareynta Hubka iyo Rasaasta,
B. Hubinta Isku gudbidda Si loo dhowro waajibaadka Soomaaliya kasaaran hubinta cuna qabateynta Hubka, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxey dejisay hab lagula soconayo soo dejinta Hubka iyo Rasaasta. Awoodda soo dajinta Hubka iyo Rasaasta waxaa iska leh Wasaaradda Difaaca iyada ayaana u qeybineysa Wasaaradaha iyo Hay`adaha Ciidamada Qalabka Sida. Xarunta Dhexe ee

kaydka Hubka Xalane ayaa la dhigayaa dhammaan Hubka lasoo dajiyo, CQS ayaa iska leh awoodda fasaxidda Hubka.

C. Calaamadeynta iyo Diiwaan gelinta.

Wasaaradda Amniga Gudaha waxey diiwaan gelisay isla markaana caalameysay tixraacyada Hubka Ciidanka Boliska Soomaaliyeed, Nabad Sugidda Qaranka,iyo Hay`adaha Amniga Gaarka, Hoteelada iyo ganacsiyada kale ee u baahan ilaalada gaarka ah.Ciidanka Xooga sidoo kale ayaa loo sameeyey, nidaamkan wuu sii socon doonaa waxaana la kordhin doonaa qalabka wax lagu calaamadeeyo iyadoo loo tababari doonaa shaqsiyaad ku shaqeeya. Ujeedada waa in la calaamadeeyaa lana diiwaan geliyo dhammaan Hubka Dowladdu leedahay si loogu tixraaco goobta laga leeyahay iyo`qofka ku qoran.

D. Tilmaanta iyo raad raaca Hubka la qabtay.

Hubka la qabtay ee shaqeynaya waxaa lagu darayaa keydka Hubka Dowladda si loo isticmaalo. Dhammaan Hubka oo dhan mustaqbalka waa la calaamadeynayaa, diiwaan gelinayaa lana keydinayaa si loo xakameeyo looguna adeegsado marka ay suurgalka tahay marag muujinta Dembiyada. .

E. Haysasha iyo Lahaashaha Shicibka

Waqtigaan lama garanayo tirada Hubka gacanta ugu jira dadka shacabka ah kuna wareegeysanaya bulshada dhaxdeeda. Marka tirakoobka qiyaaseed ee hubka fudud lasoo saaro xaaladda Amnigana ay hagaagto, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxey bilaabi doontaa olole Hub ka dhigis dadweyne iyadoo la raacayo sharcigga si loo sharciyeeyo heysashada Hubka dadka shacabka inta suurta galka ah.

F. Burburin: Waxaa jira tira Hub ah oo aan la isticmaali Karin oo ku jira gacanta Hay`adaha kala duwan ee Amaanka

ama ay shacabku soo gudbiyeen, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxey dajineysaa qaab lagu maareeyo laguna burburiyo Hubka kala duwan si aysan dhib ugu geysan bulshada.

3-40. Qorshaha horay loogu socon doono.

Talaaboobinka muhiimka ah waa xakameynta soo dajinta, calaamadeynta, diiwaan gelinta iyo amniga Hubka gacantooda soo gala Ciidamada Qalabka Sida. Marka Tirakoobka Hubka Fudud la dhameystiro ayna soo baxdo caqabadda saxda ah ee jirta, waxaa lasoo saari doonaa qorshaha maareynta Hubka iyo Rasaasta oo faah faahsan. Qorshahaan waxuu hubin doontaa maareynta saxda ah ee Hubka ay haystaan Shacabka, dhammaan Hubka Dowladdu lee dahay waa la diiwaan gelinayaa waana la tirinayaa si loola socdo Hubka soo dagaya inuu waafaqsan yahay nidaamyada caalamiga ah. Hadafka ugu weyn waa in la xaqiijiyaa in nidaamka maareynta Hubka iyo Rasaasta Dowladda Federaalka Soomaaliya uu ka reeban yahay in la adeegsado wax isdaba marin.

Qorshaha Wasaaradda Amniga Gudaha ee maareynta Halista Qaraxyada

3-41. Haya`dda Maareynta waxaha qarxa ee Soomaaliya.

Iyadoo wasaaradda Amniga Gudaha hoos tageysa waxey masuul ka tahay hormarinta istaraatiijiyada qorshe howleed lagu sameynayo tirakoob calaamadeyn ah halista Qaraxyada baqaarada Hubka, goobaha laga guuray iyo goobaha dagaal ee wadanka iyo marinada muhiimka ah. Shaqada ugu weyn waa dhinaca bani aadanimada ee maareynta halista qaraxyada, aqoonsiga halisaha iyo nadiifintooda si loo hormariyo bad qabka Bulshooyinka ku nool deegaanadaas iyo hormarinta howlaha dhaqaale.

QAYBTA AFRAAD
QAABKA FULINTA QORSHAHAAN

3-42. WAG waxay adeegsan doontaa qaabab kala duwan oo lagu fulinayo qorshan sanooyinka soo socda iyadoo adeegsaneysa waaxaheeda, shaqaaleheeda iyo adeega khuburo ku xeel dheer arrimaha Amniga dibad iyo gudaba howlaha la qabanayo si loo fuliyo qorshan waxaa ka mid ah:-

A) In hay'ad walba diyaariso daraasad-baahiyeed ku saleysan qorshe-howledkeeda iyo gudashada waajibaadka laga sugayo. Qorshaha hay'ad walba waa in mudnaanta la siinayo howluhu sida ay kula mudan yihiin maadama hal mar aan la wada dabooli Karin baahiyaha jira.

B) WAG waxay dadaal u galeysaa sidii Dowladda federalka ay mudnaanta kowaad u siin lahaeyd baahida dhismaha haya'daha Amniga ee dalka, iyadoo hordhigi doonata baahidooda Golayaasha wasiiradda iyo Baarlamaanka, sida wakhtiga la jaangoynayo miisaaniyada dalka iyo wixii kale ee imkaaniyaad ah oo la heli karo.

C) WAG waxay sidoo kale kala hadleysaa daboolidda Baahida hay'adaha Amniga saaxiibada caalamka iyo deeqbixiyaalka si kaalmo la taaban karo uga geystaan, iyadoo la adeegsanayo strand 2B iyo golayaasha kale ee jira. Sidoo kale waxay heshiisyo toos ah la galeysaa dalalka si gooni gooni ah.

D) WAG waxay isku dubarideysaa iskuna xireysaa dhamaan howlaha adeeg bixinta amni ee ka jira dalka mid qaran, dowlad goboleed iyo mid deegaanba si ay u noqdaan cudud mideysan oo ka hortaga khataraha amni ee jira.

E) WAG waxay sidoo kale dowlahah deriska la yeelaneysa iskaashi buuxa sidii wax looga qaban lahaa argagixisada iyo danbiyada abaabulan iyadoo la raacayo habraaca sharci ee dalka iyo kan caalamiga ah.
26 DRAFT 1

SIDA HORAY LOOGU SOCON KARO

3-43. Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada iyagoo gacan ka helaya dadka Soomaaliyeed waxey wajahayaan caqabado fara badan sanadaha soo socda, si kastaba ha ahaatee dadka Soomaaliyeed adkeysigooda iyo hal abuurkooda waa mid aad u sareeya, iyagoo gacan ka helaya saaxibada caalamka iyo dhinacyada kale way ka gudbi doonaan caqabadaha. Iskaashiga Soomaaliya iyo Saaxibada Caalamka wuxuu ku qotamaa iskaashi cusub oo la xariira Nabadda, Xasiloonida iyo hormarka, waa hab ku saleysan isla xisaabtan, hormar gaarsiin la xariirta heshiisyada Amni oo bixinaya taageerada Amni ay u baahan yihiin dadka Soomaaliyeed, wuxuuna si cad u tilmaamayaa sidii dhammaan dadka Soomaaliyeed u gaari la haayeen mustaqbal wanaagsan.

Siyaasadda Amniga Qaranka ee 2016kii la dajiyey waxey ku saleysneyd in Dowladda Federaalka Soomaaliya ay dajiso istaraatiijooyin caawimaad oo dhowr ah ayna ugu muhiimsaneyd istaraatiijiyada Amniga Gudaha iyo Istaraatiijiyada Difaaca Qaranka, labadaan qorshe istaratiijiyo waxey timaameen sida loo hormari karo Xoogaga Amniga Soomaaliya iyadoo la helayo taageero caalami ah, hadda waa waqtigii laga dhabey lahaa balamahaas kala duwan ee uu caalamku bixiyey isla markaana qorshayaasha Istaraatiiji ee Soomaalidu lee dahay loogu rogi lahaa ficil, hadda waa

waqtigii la fulin lahaa go`aamada iyo balamada si loo gaaro mustaqbalka ifaya ee dadka Soomaaliyeed u qalmaan.

LIFAAQ A

QAG

2017

SHAXDA HOWLEEDKA WASAARADDA AMNIGA GUDAHA (The Matrix)

1.HORDHAC. Go`aanada siyaasadeed ee ku cad shaxdaan shaqo waxaa horay uga dooday Golaha Amniga Qaranka arimo badana waa laga heshiiyey Agoosto, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxey diri doontaa Ra`isulwasaare kuxigeenka iyo wafdi Wasiiro ah si ay uga doodaan una gaaraan heshiis faah faahsan, faah faahin la`aan qorshooyinka istaraatijiyad lama dhameystiri karo.

2.Inta badan qorshayaasha ku jirta shaxdaan shaqo waa la bilaabi karaa hadda waxaana qabanaya WAG iyo qeybaha kala duwan iyo Hay`adaha, horay waxaa u jiray qubaro caalami ah oo wadanka jooga loona keenay in ay taageeraan DFS/DG iyo Qorsheynta WAG.

3.Si kastaba ha ahaatee, iyadoo aan la ogeyn qeyraadka saxda ah ee la heli karo, midkoodna qorshayaasha ku cad shaxda shaqo dhameystirkooda iyo waqtiga saxda ah ee luga gaari karo lama cadeyn karo.

4.Ujeeddada: Ujeedada koowaad ee shaxda shaqo waa in WAG sameysaa hadafyada qorshayaasha istaraatiijiyad iyo muhiimadahooda marka loo eego xaaladda siyaasadeed ee

		Qeex hay`adda si hoggaanka ay ugu suurta gasho in ay gutaan shaqooyin iyo masuuliyado cad oo leh amar bixin iyo isku xirkooda
		Sameyn qiimeyn lagu ogaanayo dul duleeda jira iyo la fa guridda baahiyaha tababar
		Hormarinta qorshaha dhisidda awoodda hay`adda iyo siinta barnaamijyo tababar oo daboolaya shaqooyinka iyo masuuliyadaha
		Bixinta tababaro, dhisidda hoggaanka iyo soo saarista nidaamyada sharci ee loo baahanyahay
	Natiijooyinka Howleed	Si cad u muuji kaabayaasha qaran iyo sameynta qiimeyn la xariirta halista iyo qataraha
		Cadee ogeysiina jawaab bixiyaasha dowladda iyo kuwa aan dowladda aheyn
		Sameynta qorshaha keyd oo lagu hormarinayo ka jwaabidda xasradaha qaran
		Siinta tababaro dhisaya awoodda Hoggaanka iyo sameynta sharciyada loo baahn yahay
		Soo bandhigidda qorshaha keydka
MAAREYNTA HUBKA IYO RASAASTA	HORMARINTA HAY`ADDA	Qeex doorarka iyo masuuliyadaha Hoggaanka maareynta Hubka iyo Rasaasta. Dhisidda nidaamyada isku xirka dowladda dhaxdeeda.

		Qeex hayadda si wax ku ool ahna u dhis si ay ugu suurta gasho gudashada masuuliyadaha iyo doorarka ay ku jiraan amarada iyo isku xirkooda,
		Sameynta qiimeyn lagu ogaanayo dal daloolada jira iyo falanqeynta tababarada loo baahan yahay ee Hoggaanka maareynta Hubka iyo rasaasta.
	Natiijooyinka Howlaha	Hormarinta qorsha awood dhisidda hayadda iyadoo loo diyaarinayo barnaamijyo tababar oo daboolaya qeybaha masuuliyadeed ee Hoggaanka maareynta hubka iyo rasaasta
		Siinta Tababar, dhisidda Hoggaanka iyo soo saarista nidaamyada sharci ee loo baahan yahay.
		Hormarinta nidaam lagula soconayo hubka wadanka soo galaya, kan dowladdu soo iibsato, iyo midka deeqaha caalamiga ah ku yimaada
		Abuurista keyd xogeed oo la dhigo dhamaan hubka dowladda gacanteeda ku jira ayna ku jiraan hubka la soo qabtay, dowlad Goboleedyadana waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay sidaas oo kale sameeyaan
		Helista sharciyada iyo nidaamyada loo baahan yahay
		Kormeerka iyo dabagalka sharciyada iyo nidaamyada lagu hormarinayo maareynta hubka iyo rasaasta

		Dib u soo celinta hubinta (hubka iyo ciidanka) iyo howlaha isku dhafidda iyo qorshaha hub ka dhista iyo dib ugu soo celinta.		
	Dhisidda Awoodda Baarlamaanka	Dhisidda awoodda gudiga Amniga iyo Difaaca Baarlamaanka si loo xaqiijiyo in si buuxda loo wargeliyo oo xoxogaal ah		
WAG IYO TAAGEERADA CAALAMKA	DHISIDDA WAG, HORMARINTA HAY'ADDA	Qeexidda isku-dubaridka hawlaha WAG iyo u dejinta sida ugu yar uguna wax ku oolsan si ay u qabato shaqada wasaaradda ee tilmaamidda isku-duwidda		
		Helidda xafiisyo shaqo oo ammaan ah oo qalabeysan		
		Nidaam Isla-xiriir, leh taageero farsamada IT		
		adeeg dhameystiran rag iyo dumar		
		Dhameystirka tilmaamaha shaqo ee sida SOPs, siyaasadaha HR, Hab dhaqanka iyo anshaxmarinta		
		Dhammeystirka shaqooyinka Waaxyaha		
		Dhammeystirka qeexidda shaqooyinka shaqaalaha		
		Qorrldda iyo soo hubinta shaqaalaha cusub		
		Tababaridda Shaqaalaha		
		La shaqeyn dow ee Wasaaradda Caddaaladda si loo dajiyo qaabdhis sharci loona dhaqan geliyo sharciyada		

		laga maarmaanka ah		
		Dhisidda Wasaarad Shaqeynaysa oo wax ku ool ah		
	SIYAASADDA MAXSUULKA LA RABO IN LA GAARO	In la sameeyaa istaraatijiyada Amniga Gudaha		
		Soo saaridda Qorshe Hawleedyada ee waaxaha		
		Iyadoo la raacayo NSC waa in DFS iyo DG si wada jir ah u abuuraan qorshe qaran dhammeystiran oo ka hortagaan xoogaga dagaal oogayaasha ah oo ay ku jiraan C/PVE iyo CRESTA		
		Dhameystirka qorshayaasha shaqo ee Boliska,		
		Meel marinta qorshayaasha adeeg ee Boliska		
		Dhameystirka qorshaha hormarinta Nabad Sugidda Qaranka		
		Dhameystirka qorshaha hormarinta Illaalada Xeebaha, Ciidanka Badda Boliska		
		Qorshaha kobcinta ilaalada Xeebaha iyo Ciidanka Badda Boiska		
		Dhameystirka qorshaha sidoonka Qaranka		
		Meel marinta qorshaha sirdoonka Qaranka		
		Dhammeystirka Qorshaha Horumarinta Ilaalada xeebaha iyo Boliiska		

		Dhammeystirka qorshaha Sirdoonka Qaranka		
		Dhammeystirka Qorshaha amniga Xaduudaha		
		Meel marinta qorshaha xuduudaha iyo Socdaalka		
		Sameynta qorshayaasha gurmadka xasradaha iyo difaaca madaniga ah		
		Meelmarinta Qoryayaasha Gurmadka Xasaradaha iyo Difaaca Madaniga		
		Diyaarinta qorshaha maareynta Hubka iyo Rasaasta		
		Meel marinta qorshaha maareynta hubka iyo rasaasta		
		Diyaarinta qorshaha hay'adda maareynta qaraxyada		
		Meel marinta qorshaha hay'adda maareynta qaraxyada		
WAG WAAXAHEEDA GUDAHA IYO XAFIISYADA SHAQO	Dhisidda xafiisyada waaxaha iyo xarunta taliska	Qeexidda Waaxyaha WAG iyo isku-dubaridka adeegyada ay qabtaan iyadoo loo dejinayo sida u yar e ugu wax ku oolsan si ay gutaan tilmaamayaasha shaqo waaxyeedka iyo isla-xiriirka.		
		Dhisidda tayo waaxeedka: dhismayaasha, hormarinta hayadda, qorshayaasha shaqaalaha (HR), iyo		

		maxsuulka howlgaladooda, iyo natiijooyinkooda		
	Go`aanada Holwigalada	Qeybi oo qoondee 32 kun oo Bolis iyo ilaalada xeebaha ah sidii loogu heshiiyey qaab dhismeedka Amniga Qaranka		
Ciidanka Bolisika DFS	Go`aanada siyaasadeed	Ku heshiinta kala saaridda himilooyinka iyo doorarka taqasusiga ah ee u dhexeeya Boliska Federaalka iyo Bolliska DGyada adeegyada sida ku xusan nidaamka cusub fadaraaleynta Boliska iyo qaab dhismeedka Amniga Qaranka		
		Hindisidda iyo ku heshiinta u habeynta Hay`adda Boliska Federaalka (SFP) sida ugu yar ee ugu wax ku oolsan si ay u gutato shaqooyinla loo cayimay.		
		Ka heshiinta wadaagista qeyraadka Boliska Federaalka iyo Boliska Maamul Goboleedyada (DFS dhaqaalaha Boliska Federaalka iyada ayaa masuul ka ah, Dowlad Goboleedyada waa Boliska Gobolkooda		
		Qeexista iyo ka heshinta doorarka iyo habeynta Ciidanka Ilaalada xeebahaiyad oo loo eegayo Ciidanka Badda iyo Ciidanka Ilaalada xeebaha Boliska		
	HAWLQABADKA	Qeex hay`adda adeego iyo u habeynta sida ugu yare e ugu wax ku oolsan si ay u gudato howlaha Boliska ee loo cayimay oo ay ku jiraan amarada iyo isku xirkooda		

		Dejinta nidaamka shaqaaleynta iyo xulashada Boliska, Ilaalada Xeebaha, Nabad Sugidda Qaranka oo dagsan diyaarna ah		
		Sameynta qiimeynta baahiyaha Tababar lehna qorsha buuxa oo lagu maareynayo dhammaan Koorsooyinka Tababar ee dhammaan darajoonka Xubnaha Boliska, Ilaalada Xeebaha, Nabad Sugidda iyo tababaro gudaha.		
		Sameynta qorshe tababar oo dhammeysriran oo kor u qaadidda tayada haya'dda oo daboolaya dhammaan tababar ee hawlaha sirdoonka		
		Meel marinta tababarada iyo Fulinta Qorshayaasha		
		Diyaarinta isku xukunka sharcigga iyo helista caddaalad loo siman yahay dhammaan.		
	QORSHEYNTA HOWLAHA SAAD IYO QEYRAAD	Go`aaminta baahida dhar, qalab, Gaadiid, Isgaarsiin iyo kaabayaasha Boliska, Ilaalada Xeebaha iyo Nabad sugidda		
		Dhisidda nidaamka soo iibinta, maareynta iyo dayactirka dhammaan alaabaha qalab		
HAY'ADDA SIRDOONKA QARANKA	GO`AAMADA SIYAASADEED	Ka heshiinta heerka wada macaamilka iyo xarilrka laia yeelanayo Dowlad Goboleedyada		
		Ka heshiinta waqtiga la adeegsanayo awood wax burburisa iyo awodda		

		Boliska.		
	SHAQOOYINKA HOWLEED	Qeex himilooyinka, doorarka, masuuliyadaha, tilmaamaha sahqo iyo baahiyaha qeyraad		
		Qeexidda adeegyada Hay`adda iyo caddeynta waajibaadka shaqo amarada iyo isku xirkooda		

		Qeexidda adeegyada Hay`adda iyo caddeynta waajibaadka shaqo amarada iyo isku xirkooda	
		Sameynta qiimeyn lagu ogaanayo habacsanaanta jirta iyo lafa guridda baahiyaha Tababar.	
		Hormarinta ilaha Howlgal ee Sirdoonka Qaranka iyo qorshayaashooda howlgal	
		Hormarinta qorsho dhammeystiran oo lagu dhisayo awoodaha hay`adeed iyo barnaamijyo Tababa oo si buuxda u daboolaya qeybaha ay ka kooban tahay Hay`adda Sirdoonka Qaranka	
		Bixinta Tababaro iyo fulinta qorshayaasha.	
		Iyadoo lagu hoos shaqeynayo WAG, Wasaaradda Difaaca iyo dhinacyada Milatariga iyo Boliska waxaa la hormarinayaa xarun kulmisa dhammaan xogaha sirdoon ee Hay`adaha dhaxdooda ah.	
SOCDAALKA IYO	HORMARINTA	Qeexista waajibaadka iyo masuuliyadaha Hoggaanka Socdaalka	

TERRORISM		oo la xariirta la dagaalanka argagixisada aan gaar u aheyn oo kaliya AMISOM,Xooga Dalka, Hay`adaha Amniga laakin waxaa ku jira wasaaradaha ka shaqeeya arimaha bulshada, hormarinta dhaqaalaha iyo bixinta adeegyada bulsho
		Hormarinta isku xirka dowladda dhaxdeeda ah si loo xaqiijiyo in dhammaan shaqooyinka dowladda diiradda lagu saaro istaraatiijiyada baahida fog ee la dagaalanka Argagixisada si loogu guuleysto quluubta iyo maskaxda dadka
	ISTARAATIIJOOYINKA HOWLGAL	Hormarinta istaraatiijiyad qaran oo lagula dagaalamayo Argagixisada
		Hormarinta istaraatiijiyada Qaranka CRESTA taasoo ku lamaanan istaraatiijiyada qaranka ee la dagaalanka Argagixisada
		Dhisidda golaha howlgalada si loo maareeyo fulinta qorsha istaraatiijiyada la dagaalanka argagixisada ee maalinlaha ah
		Sameynta olalaha la dagaalanka argagixisada./Conduct CT/COIN campaign
CIIDANKA BADDA, ILAALADA XEEBAHA	GO`AANADA SIYAASADEED	Iyoo lawada tashanayo waxaa muhiim ah in laga heshiiyo qaab dhismeedka Ilaalada Xeebaha
		Iyadoo lala tashanayo qeex dooraraka masuuliyadaha u dhaxeeya ciidanka badda , ilaalada xeebaha iyo Ciidanka

		ilaalada xeebaha Boliskaln **NMCC**
		Hormarinta qorsha taageerada deeq bixiyaasha ee istaraatiijiyada amniga badaha
	HORMARINTA HAY`ADDA	Qeex doorarka , masuuliyadaha Ilaaalada Xeebaha iyo nidaamka xarirrin ee dowladda
		Qeex hay`adda si wax ku ool ahna u dhis si ay u suurta gasho in Ciidanka Badda ay yeeshaan shaqooyin iyo masuuliyado qeexan leh amarada iyo isku xirkooda
		Samey qiimeyn lagu ogaanayo dal daloolada iyo lafa guridda baahiyaha tababar
		Hormarinta iyo dhisidda tayada awoodeed ee hay`adda iyo dajinta barnaamijyo tababar oo daboolaya shaqooyinka masuuliyadeed ee Ciidanka Badda
		Nka BaddaQeex sharciyada iyo nidaamyada sharci ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha
	SHAQOOYINKA HOWLEED IYO WAXQABADKA	Bixinta tababaro, dhisidda Hoggaanka Ciidanka Ilaalada Xeebaha
		In si wax ku ool ah ay ugutaan waajibaadkooda Ciidanka Ilaalda Xeebaha
DIFAACA RAYIDKA	HORMARINTA HAY`ADDA	Qeex doorarka, masuuliyadaha Hoggaanka Difaaca Rayidka iyo isku xirka dhinacyada dowladda

	SHAQOOYINKa	HAWLAHA GAARKA AH/ BAAHIDA		TAAGEERADA beesha caalamka
	(a)	(b)		(d)
DFS, DG IYO BAARLAMAANKA	GO`AANADA SIYAASADEEDEE DFS, DG IYO BAARLAMAANKA	Ku heshiinta doorka Amniga Madaxweynayaasha, Ra`isulwasaaraha, Wasiirada Amniga, Hay`adda Nabad Sugidda Qaranka, iyo Taliyeyaasha Ciidanka Xoogga iyo Boliiska.		
		Isku raacidda Golaha Amniga Qaranka, Golaha Amniga Gobolka, ku heshiinta Dastuurka iyo arrimaha isuduwidda		
		Xalinta muranada xuduudaha		
		Ku heshiinta amarada, kantaroolka iyo isku afgradka u kala-dab-qaadid DFS iyo DG iyo arrimaha Ciidanka Badda, Illaalada Xeebaha, Xooga Dalka, Nabad Sugidda, iyo adeegyada Boliiska		
		Hubinta tirada Milatariga, Boliiska, Nabad sugidda iyo Daraawiishta		
		Ku heshiinta kala qeexidda himilooyinka, doorarka, waajibaadyada maaliyadeed, milsaaniyadaha, tirooyinka iyo qeyraadka saameynaya Xoogga Dalka, Boliska, Nabad Sugidda, Ilaalada Xeebaha iyo Daraawiishta		

Qaranka. Ujeedada labaad waa in la helaa hab tilmaameed caawinaya deeq bixiyaasha go`aanadooda sida meesha iyo sida ay bixinayaan caawimo maaliyadeed, qeyraad kale ama taageero farsamo oo la xariirta dhisidda kaabayaasha iyo tababarada.

5. Xaqaaiqa iyo tirooyinka ku jira shaxd hawleedkan waxaa loo baahan yahay in laga doodo oo lagala heshiiyo DDyada si loo xaqiijiyo in dhammaan arimaha oo dhan xal laga gaaray, dhanka ugu fiican iyo dhanka xunba , waqtiga lagu gaari karo. inta badan hawlaha ku qeexan shaxdaan horey ayey u dhamaan la haayeen umana baahna in dib loo soo celiyo.

QORSHAHA MAAREYNTA WALXAHA QARXA	HORMARINTA HAY`ADDA	Qeex doorka iyo masuuliyadaha Hoggaanka maareynta walxaha qarxa
		Qeex hay`adda isla markaana u dhis si wax ku ool ah si ay u gudato shaqooyin iyo waajibaadyo qeexan oo leh nidaam iyo xariirin
		Sameynta qiimeyn lagu ogaanayo dal daloolada jira iyo falan qeynta baahiyaha tababar ee Hoggaanka maareynta qaraxyada
		Hormarinta qorshaha awood dhisidda hayadda iyadoo la siinayo barnaamijyo tababar oo daboolaya shaqooyinka masuuliyadeed ee Hoggaanka maareynta qaraxyada
		Siinta tababaro iyo dhisidda Hoggaanka iyadoo loo soo saarayo sharciyada iyo nidaamyada loo baahan yahay
	NATIIJOOYINKA HOWGAL	Soo bandhig caqabadaha jira isla markaana dejinta nidaamka ugu fiican ee looga gudbi karo
		Curinta sharciyada iyo nidaamyada loo baahan yahay
		Kormeerka iyo daba galka sharciyada iyo nidaamyada iyo sida ugu fiican ee wax looga badali karo
DOWLAD GOBOLEEDYADA	GO`AANADA SIYAASADEED EE LOO BAAHAN YAHAY IYO ISKU DUBA	Cadee caqabadha jira iyo sida ugu haboon ee looga gudbi karo

	RIDKOODA	
TAAGEERADA DOWLAD GOBOLEEDYADA	Hormarinta qorshayaasha awood dhisidda ee Dowlad Goboleedyada	Qeex himilooyinka, doorarka, waajibaadyada hay`daha amniga iyo dhisidda golayaasha amniga ee heer gobol, xafiisyada amniga gobolada iyo wasaaradaha Amniga
		Qeex hay`adda si wax ku ool ahna u qeex howlaha, doorka shaqo ee amarada iyo isku xirka.
		Qiimeynta dal daloolada jira iyo baahiyaha tababar lafa gurkooda
		Hormarinta qorshe mideysan oo lagu dhisayo awoodda hayadaha iyo barnaamijyo tababar
		Siinta Tababaro lagu dhisayo awoodda hay`adaha amniga
	SOO BANDHIGIDDA Siyaasada iyo maxsuulka qorshayaasha	Sameynta qiimeynta Amniga Dowlad Goboleedyada, qiimeynta qataraha ay wajahayaan dowlad Goboleedyada iyo hormarinta istaraatiijooyinka amni ee Dowlad Goboleedyada.
		Hormarinta qorshayaasha isku dhafka (DDR) dhamaan qeybaha Amniga ee loo baahdo
		Hormarinta isku xirka dhamaan howlgalada Hay`adaha amniga dhaxdooda AMISOM ay ku jirto
		Hormarinta iyo fulinta qorshayaasha howlgal
Boliska Dowlad	HOWLAHA	Falanqeynta baahiyaha tababar iyo hormarinta qorshayaasha tababar ee

Goboleedyada oo ay ku jiraan Boliska Ilaalada Xeebaha	SHAQO	Boliska oo ay ku jiraan Boliska Ilaalada xeebaha
		Sidi loo Dabooli laha bahlda jirta iyo falan qeynta baahiyaha Tababar
		Samaynta/ Abuurista qorshayaal tababar iyo tayayn buuxda
		Dhisidda heerka adeeg bixin iyo fulinta qorshayaasha
DARAWIISH	GO`AANADA SIYAASADEED	Waa in la qeexa lagana heshiiyaa waajibaadka Daraawiishta
	SHAQOOYINKA HOWGAL IYO NATIIJOOYINKO ODA	Hubinta tirada mushaarka la siiyo
		Sameynta qiimeyn lagu ogaanayo dal daloolada jira iyo falan qeynta baahiyaha tababar
		Hormarinta Qorshayaal mira dhal ah iyo barnaamijyo Tababar
		Qaadista howlgalo mira dhal ah oo ka dhan ah Al-shabaab

5.Meel Marinta.

Natiijooyinka Shirka deeq bixiyaasha ee la qorsheeyey October uuna daba socdo shirka London oo dhici doona May waxey xaqiiji doonaan guusha ama guul darada fulinta iyo meel marinta howlaha ku cad shaxdaan iyo mustaqbalka Soomaaliya.

QAAB-DHISMEEDKA CUSUB EE CIIDANKA BOLISKA SOOMAALIYEED

Qodobka 1aad – Heerka Boliska Soomaaliya.Boliska Soomaaliya wuxuu ka koobnaa doonaa labo heer.

- Boliska Federaalka Soomaaliya,
- Boliska Dowlad Goboleedyada

Qodobka 2aad – Awoodda Boliska. Awoodda Boliska Soomaaliya waxey isugu jiri doontaa sidaan:

- Boliska Federaalka wuxuu hoos tagayaa Wasaaradda Amniga Gudaha Federaalka ,
- Boliska Dowlad Goboleedyada waxey hoos tagayaanWasaaradaha AmnigaDowlad Goboleedyada.

Qodobka 3aad – Awoodaha iyo Maamulka, awoodaha iyo maamulka waxey noqonyaan sidaan:

- Taliyaha Boliska Soomaaliya waxaa magacaabi doona Madaxweynaha Federaalka marka Wasaaradda Amniga ay soo jeediso,
- Taliyaha Boliska Dowlad Goboleedka waxaa magacaabi doonaa Madaxweynaha Dowlad Goboleedka marka wasaaradda Amniga Gudaha dowlad gobeedka ay soo jeediso.

Qodobka 4aad – Nidaam Sharciyeedyada. Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada waxey meel marin doonaan Xeerarka Boliska oo mideysan sida soo socota:

- Baarlamaanka Federaalka wuxuu meel marin

doonaa Sharciga Boliska Federaalka,

- Baarlamaanka Dowlad Goboleedyada waxey soo saari doonaan sharciga Boliska Dowlad Goboleedyada.

Qodobka 5aad – Saadka iyo maaliyadda.inta laga gaarayo heshiis faah faahsan oo qeyraadka lagu wadaagayo, Deeqaha beesha caalamka waxaa Dowladda Federaalka iyo Dowlad Goboleedyada loogu qeybin doonaa si cadaad ah oo isku dheeli tiran. Mabddda`a guudna wuxu noqonayaa sidaan:

- Dowladda Federaalka waxey masuul ka noqon doontaa taageerada dhaqaale iyo saad ee Boliska Federaalka,
- Dowlad Goboleedyada waxey masuul ka noqon doonaan taageerada dhaqaale iyo saad eeBoliska Dowlad Goboleedyada.

Qodobka 6aad – Qorista iyo Tababarada.

- Boliska Federaalka waxaa qori doonaa Taliska Federaalka,
- Boliska Dowlad Goboleedyada waxaa qori doonaa maamulada Dowlad Goboleedyada,
- Boliska Federaalka iyo kan Dowlad Goboleedyada waxey yeelan doonaan manhaj Tababar oo mideysan, nidaam qoris iyo nidaamyo Abaal marin,
- Waxaa jiri doona Akadeemiyo Boliska Federaalka ay yeelanayaan,
- Waxaa jiri doona Dugsiyo Tababar oo ay yeelanayaan Boliska Dowlad Goboleedyada.

Qodobka 7aad – Inta la isla qaadanayo dhisida ciidan boolis ee Dowlad goboleedada aan weli dhisan ciidan boolis u gaara waxey raaci doonaan qaabka Boliska hadda jira inta la isku raacayo qaab cusub oo lagu dhiso ciidankaas.

Qodobka 8aad – Daraawiishta Boliska.Boliska Federaalka iyo Boliska Maamul Goboleedyada waxey yeelan doonaan cutubyo Bolis ah oo lagu magacaabo Daraawiishta Boliska. Sharciyo gaara ayaa caddeyn doona doorkooda, waajibaadkooda iyo xariirka u dhaxeeya Daraawiishta Federaalka iyo Daraawiishta Maamul Goboleedyada.

Qodobka 9aad – Waaxda Baarista Dembiyada, (CID). Waxaa jiri doona waaxda barista Dembiyada Federaalka, laakin waxaa kale oo jiri doona Waax baaris Dembiyada ah oo ay yeelanayaan Dowlad Goboleedyada taaso lagu magacaabo unuga Baarista Dembiyada (CIU).

Qodobka 10aad – Boliska Dinlomaasiyiinta iyo Hay`daha Federaalka. Hadda shaqadaan waxaa qabta Boliska Federaalka, Dowlad Goboleedyadana waxaa laga yaabaa in ay dhisan karaan Boliska Diblomaasiyiinta.

Qodobka 11aad – Boliska Ilaalinta Canshuuraha (Trubetario). Doodo la xariira doorka, masuuliyadaha iyo awoodaha Boliska Ilaalinta Canshuuraha wali laguma heshiin.

Qodobka 12aad – Astaamaha iyo Dharka. Boliska Federaalka iyo Boliska Dowlad Goboleedyada waxey yeelan doonaan dhar mideysan laakin calaamadaha iyo astaamaha way ku kala gadisnaan doonaan waxaana u sameynaya Dowladiisa.

Qodobka 13 aad– Kulamada Wada tashi. Waxaa jiri doona

kulamo wada tashi oo joogto ah una dhaxeeya Wasaaradaha heer federal iyo heer Dowlad Goboleed iyo heer Taliyayaal Bolis.

Qodobka14 aad– Kormeerka. Boliska Federaalka kormeerkiisa waa masuuliyad saaran Gudi hoosaaska Baarlamaanka Federaalka, Golaha Wasiirada iyo Wasaaradda Amniga Gudaha Federaalka. Boliska Dowlad Goboleedyada waxaa kormeerkiisa masuul ka ah Gudi hoosaadka Baarlamaanka Dowlad Goboleedka, Golaha Wasiirada iyo Wasaaradda Amniga Gudaha maamul Goboleedka.

Qodobka 15aad – Gudiga Farsamo. Wasaaradda Amniga Gudaha Dowladda Federaalka waxey dhiseysaa gudi farsamo oo loo dhanyahay kaasoo kor kala socon doona dib u habeynta iyo hormarinta Boliska.

SHARCI LR. 09

Taariikh: 30/12/2017

ANSIXINTA MEEL MARINTA QOONDAHA MIISAANIYADDA SANADEEDKA DOWLADDA 2018

MADAXWAYNAHA J.F.S

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Ref: 409/1/B-10/17, taariikh: 14/12/2017 kuna saabsan Ansixinta Meelmarinta Qoondaha Miisaaniyadda JFS si uu ugo rogo Sharci.

Markuu Tixgeliyay: Baahida loo qabo in la meelmariyo Qoondaha Miisaaniyad Sanadeedka Dowladda 2018

Madaxweyuhu waxa uu soo saaray Xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo sharcigan, waxaa la ansixiyey Qoondaha Miisaaniyad Sanadeedka Dowladda 2018 ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Waxa uu Sharcigaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 30/12/2017

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/01/2018
TAARIIKH 21/3/2018
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

QOONDAHA MIISAANIYADDA 2018-KA

TIRSI 00011

HALKU-DHIGGA SANNADKAN 2018-KA

"KU TIIRSANAANTA DHAQAALAHEENA"

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2018-KA

Tusmada buugga

BAYAAN TIRSI 00011/2018 2

1. QAYBTA KOOWAAD GUUD AHAAN 2

CINWAAN GAABAN 2

1.1 QEEXIID 2

1.2 WADARTA MIISAANIYADDA LA QOONDEEYEY 3

~~2 QAYBTA LABAAD ..... 3~~

2.1 AWOODAHA XAFIISYADA DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA 3

2.2 MIISAANIYAD WAREEJIIN 4

2.3 MIISAANIYAD WAREEJINTA XAFIISKA DHEXDIISA 4

2.4 MIISAANIYAD WAREEJINTA XAFIISYADA DHEXDOODA 4

2.5 WAREEJINTA MIISAANIYADDA KAYDKA 4

2.6 MIISAANIYADDA KABISTA 5

2.7 GASHIBAXA/QAAN BAX 5

2.8 QAAMAHA 5

3 QAYBTA SEDEXAAD 5

3.1 MUDNAANTA KHARASH BIXINTA 5

3.2 DHITO 5

3.3 LACAGTA LAGA BIXIYO MIISAANIYADDA DUUDUUBKA 6

3.4 XADDIGA KHARASH BIXINTA 6

3.5 GEDAB 6

3.6 LACAG BIXINTA AGABKA IYO ADEEGGA 7

3.7 LACAGTA AAN LA ISTIC-MAALIN 7

3.8 WARBIXIN XISAABEEDKA 7

4 CANSHUURAHA IYO TACRIFADA FURDOOYINKA 8

4.1 CANSHUURTA FAAI'IDUL FAA'IDADA (MUSHAARAADKA) 8

4.2 TACRIFADA FURDOOYINKA 8

4.3 CANSHUURTA SOO DEGAYAASHA IYO DHOOFAYAASHA 9

4.4 CANSHUURTA IIBKA EE HOTEELADA 9

4.5 CANSHUURTA IIBKA ISGAADHSIINTA, KORONTA IYO BIYAHA. 10

5 QAYABTA AFRAAD 11

5.1 QOONDAYNTA MIISAANIYADDA XAFIISYADA DOWLADDA 11

5.2 MUDDADA DHAQAN-GALKA 11

6 LIFAAQYADA MIISAANIYADDA 2018-KA 12

6.1 SOO KOOBIDDA DAKHLIGA IYO KHARASHKA MIISAANIYADDA SANADKA 2018 12

6.2 FAAH-FAAHINTA DAKHLIGA GUUD DOWLADDA EE MIISAANIYADDA 2018-KA 13

6.3 QOONDADA HAY'ADAHA EE MIISAANIYADDA 2018-KA 14

6.4 SOO KOOBIDDA KUTALGALKA MIISAANIYADDA 2018-KA 16

6.5 FAAH-FAAHINTA KUTALAGALKA MIISAANIYADDA 2018-KA EE HAY'ADAHA DOWLADDA 18

6.6 KUTALAGALKA MUSHAARAADKA SHAQAALAHA DOWLADDA EE MIISAANIYADDA 2018-KA 43

6.7 KUTALAGALKA GUNNOOYINKA MAS'UULIYIINTA IYO SHAQAALAHA DOWLADDA EE MIISAANIYADDA 2018-KA 45

BAYAAN TIRSI 00011/2018

XEERKA DHAQANGELINTA MIISAANIYADDA SANADKA 2018 EE JAMHUURIYADDA FEDARAALKA SOOMALIYA.

Maadaama, uu qeexayo Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya in uu Golaha sharci dajintu ansixiyo, dhaqan galiyana miisaaniyadda Sanadlaha ah.

Maadaama, ay tahay lagama maarmaan in la ansixiyo, lana qaybiyo Miisaaniyadda Dowladda Federaalka ee Soomaaliya si ay ugu fuliso hawlaheeda sanad xisaabeedka 2018.

Haddaba, iyadoo laga duulayo qodobka 124rd xarafkiisa (a) ee Dastuurka KMG ah Dowladda Federalka Soomaliya, ayaa Golaha Shacabku ansixyey Miisaaniyadda 2018-ka ee faahfaahinteedu ku lifaaqan tahay halkan iyo xeerka dhaqangelinta Miisaaniyadda ee qodobadiisu hoos ku taxan yihiin: -

1. Qaybta Koowaad

Guud Ahaan

Cinwaan Gaaban

Xeerkan oo ka kooban bayaanno qodobeysan, faahfaahinta Miisaaniyadda ayaa waxaa lagu magacaabay "Xeerka Dhaqangelinta Miisaaniyadda Sanadka 2018-ka ee tirsi 00011/2018"

1.1 Qeexiid

Haddii aan si kale loogu fasirin xeerkan dhexdiisa, ereyada soo socda waxay yeelanayaa macnaha mid walba ku hor qeexan: -

1. "Qoondayn" waxaa loo la jeedaa amar kasta oo uu Golaha sharci dajintu ku amrayo in lacag laga bixiyo Miisaniyadda duduubka ah.
2. "Ansixin" waxaa loo la jeedaa ayidaadda uu ayido wasiirku, Miisaaniyadda ku diyaarsan walax kharasheedka qaab wafaqsan qoondo Miisaaniyadeedka uu Golaha sharci dajintu sameeyey.
3. "Kharashka Mashaaricda" waxaa loo laa jeedaa kharashka lagu bixiyo iibka iyo dayactirka hantida joogtada ah, oo ay ku jiraan kharashyada ay ka mid yihin kuwa tababarada iyo adeegyada latalinta.
4. "Gedab "waxaa loo la jeedaa waajibaadka noqonaya qaan hadiiba ama marka shuruudaha heshiis jiray ama sharci la fuliyo.

5. "Wasiir ama wasaarad" waxaa loo laa jeedda wasiirka maaliyadda ama wasaaradda maaliyadda hadba sida ay tahay.

6. "Xafiis dawladeed" waxaa loo la jeedaa xafiis kasta oo ka mid ah Dowladda Federalka Soomaaliya oo guud ahaan ama qayb-ahaan looga qoondeeyo miisaniyadda Dowladda ee bayaankan lagu xeeriyay.

7. "Kala wareejin" waxaa loola jeedaa ogolaanshaha kala warejinta Miisaaniyadda la qoondeeyey, lagana wareejiyo cinwaan, farac cinwaan mashruuc ama walax kharasheed laguna wareejiyo mid kale.

8. "Qaansheegatada" waxaa loola jeedaa shirkadaha ama shaqsiyaadka hay'adaha dowladda siiya adeeg ama agab.

1.2 Wadarta Miisaaniyadda La Qoondeeyey

Miisaaniyadda Dowladda Fedaraalka Soomaaliya ayaa si ay u meel-mariso hawlaha u qorshaysan Sanad misaaniyadeedka ka billaabma 1-da Janaayo 2018-ka kuna dhamaada 31, December 2018-ka, ayaa sida hoos ku xusan looga qoondeeyay dakhliga khasnadda iyo lacagaha kale ee Dowladda, sida lagu qeexay jadwalkan. Wadarta Miisaaniyadda ee loo qoondeeyey Miisaaniyadda Joogtada iyo tan Raasumaalka ah ayaa ah sidan hoos ku xusan: -

B) Kharashka Joogtada ah	**US$ 260,171,727**
T) Kharashka Raasumaalka ah	**US$ 14,458,464**
Wadarta Guud Ee Miisaaniyadda	**US$ 274,630,191**

2 Qaybta Labaad

Maamulka Miisaaniyadda

2.1 Awoodaha Xafiisyada Dowladda Federaalka Soomaaliya

1. Wasiirka maaliyadda waxaa loo Awood siiyay in uu fasaxo una qaybiyo dakhliga Dowladda Soomaaliya iyo lacagaha kaleba, cadadka halkan loogu qoondeeyay xafiisyadooda marka ay soo codsadaan mas'uuliyiinta xafiisyada Dowladda Federalka Soomaaliya ee ay khusayso, si ay hawlahooda ugu fushadaan.

2. Xafiisyada Dowladda waxaa loo awood siiyay in ay diwaan-galiyaan ciwaanka Miisaaniyadda la qoondeeyey, farac ciwaanka, mashruuca ama barnaamijyada xafiisyada, kolba kuu yahay. Waana inuu talaabada lagama-maarmaanka ah ka qaataa adeegsiga deynta ama deeq kasta oo dheerada, haday tahay mood ama lacag oo laga helo illaha gudaha ama dibadda looguna talogalay fulinta miisaaniyadda mashariicda ama miisaaniyadda joogtada ah. Sidoo kale, waxa lagama maarmaan ah in bil ka hor dhammaadka sannad miisaaniyadeedka loo gudbiyo warbixin Wasaaradda.

2.2 Miisaaniyad Wareejiin

1. Miisaaniyadda Joogtada ah waxaa loo wareejin karaa Misaaniyadda Mashaariiicda.
2. Miisaaniyadda Mashaariicada looma wareejin karo Miisaaniyadda Joogtada ah.

2.3 Miisaaniyad Wareejinta Xafiiska Dhexdiisa

1. Wasiirku wuxuu xafiis dhexdiis: -

   B. Kala wareejin karaa kharashka Miisaaniyadda joogtada ah walax walax haddii ay isku madax yihiin

   T. Ka wareejin karaa Miisaaniyadda mashruuc kuna wareejin karaa mashruuc kale.

2. Wasiirku wuxuu u xilsaari karaa mas'uulka xafiiska Dowladda ee ku habboon oo ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda in uu meel-mariyo ama fuliyo xilka iyo Awoodda lagu siiyay qodob-hoosaadka 1aad ee kor ku xusan.

2.4 Miisaaniyad Wareejinta Xafiisyada Dhexdooda

1. Wasiirku wuxuu wareejin karaa Miisaaniyadda joogtada ah ee loo qoondeeyay xafiis dawladeed in loo wareejiyo xafiis kale, kadib marka la xaqijiyo in xafiiska loo qoondeeyay Miisaaniyadda aanu wada istic-maali karaynin Miisaaniyadaas.
2. Wasiirku wuxuu amri karaa in Miisaaniyadda Mashaariicda ee loo qoondeeyay xafiis, loo wareejiyo mashruuc xafiis kale. Kadib marka la xaqiijiyo in Miisaaniyad yaraanta xafiiska laga dabooli karo miisaaniyad mashaariic oo loo ansixiyey sanadkaas xafiis kale oo dowladeed.

2.5 Wareejinta Miisaaniyadda kaydka

1. Wasiirku wuxuu awoodiisa ku amri karaa in Miisaaniyadda kaydka loo wareejiyo loona istic-maalo kharash deg-dega ah kadib marka ay dhacaan hawlo gurmad deg-deg ah, oo uu baahan kharash deg-deg ah, oo aan baahidoodu horay u muuqanin wakhtiga la diyaarinayay Miisaaniyadda sanadka. Kolka uu wasiirka ansixiyo soo wareejinta kharashka keydka kabidda waxaa lagu wareejinayaa hay'adda ka mas'uulka ah. Wasiirka ayaa si joogta ah u siin doona Golaha Shacabka warbixin ku aadan kharashka laga wareejiyey keydka kabidda.

2. Kharashka kaydka lama filaanka waxaa keliya oo loo isticmaali karaa xaalad degdeg ah sida fatahaado, abaaro, cuduro dilaacay ama kharashaad kale aan muuqan kolkii miisaaniyadda la diyaarinayey iyo IWM, looma isticmaali karo baahida kharashka caadiga ah ee xafiisyada Dowladda.

2.6 Miisaaniyadda Kabista

Golaha sharci dajintu isagoo ka duulaya tala bixinta golaha fulinta ayuu meel mariyaa Miisaaniyadda kabista ah.

2.7 Gashibaxa/Qaan Bax

Gashibaxa iyo Amaahda sharciyeysan ee laga dhaxlay Miisaaniyadda 2017-ka ayaa noqoneysa gashibax u gudbeysa sanadka 2018-ka, waxayna noqoneysaa qeyb ka mid ah mudnaanta kharashka, Wasiirka ayaa u xilsaaran xaqiijinta dhamaan qaamaha iyo gashibaxa kuwooda sharciga ku qotoma iyo kuwa hareer marsan.

2.8 Qaamaha

Dowladda Federaalka Soomaaliya ma gali karto wax qaan ah gudaha ama dibadda, marka laga reebo lacago horumaris yar yar ah ayna tahay in lagu bixiyo isla sanad Miisaaniyadeedka gudihiisa.

3 Qaybta Sedexaad

Kharash Bixin

3.1 Mudnaanta Kharash Bixinta

Haddii ay timaado hoos u dhac dhanka dakhliga ama deeqaha wasaaraduna fulin weyso dhamaan kharashaadkii loogu talagalay Miisaaniyadda 2018-ka, waxaa mudnaanta bixinta kharashka loo raacayaa sida ay u kala horreyaan ee hoos taxan.

1. Raashinka iyo Gunnooyinka Ciidamada qalabka sida
2. Khidmadaha Maaliyaddu ku shaqeyso (Khidmadda Banka iyo Gobolka)
3. Mushaarooyinka/gunnooyinka Shaqaalaha Rayidka ah
4. Gunnada Xildhibaanada iyo G/Wasiirada
5. Mushaharka iyo gunnooyinka Gashibaxa ku jira ee kasoo wareegay miisaaniyada sanadkii hore
6. Adeegga iyo Agabka Xafiisyada Dowladda qaran iyo gobolbada
7. Gashibaxa Alaabta iyo Qaamaha la hormarsaday

3.2 Dhito

1. Dhakhliga Dowladda Federalka Soomaaliya waa in la dhigaa Khasnadda Dhexe ee Dowladda Soomaaliya 24 saacadood gudahooda oo ka bilaabanaysa marka la qabtay, haddii aysan ku soo aadin maalin aan la shaqaynaynin oo leh tixgelinteeda waqti.

2. Bangiga dhexe waa in uu aqbalaa qabashada dakhliga dawladda, islamarkaana uu meel-mariyo kharash bixinta isagoo isticmaalaya xisaabta Dowladda Federalka ah ee bankiga ka furan.

3.3 Lacagta Laga Bixiyo Miisaaniyadda Duuduubka

1. Iyada oo aanu golaha sharci dajintu ogolaan, wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda duuduubka ah.

2. Lagama gali karo kharash ama gedab Miisaaniyadda la ansixiyey, ka hor inta aanu ansixin ama qoondayn wasiirku.

3. Dhamaan bixinta qorsheysan waa in ay si toos ah oga baxdaa khasnadda dhexe una aadaa qaansheegatada ayadoo mareyn hay'adaha adeegga ama agabka la siiyey.

4. Dhamaan qabashada iyo bixinta lacageed ee miisaaniyadda waa in ay martaa hab-xisaabeedka dowladda (SFMIS) si elektroonik ah, ka dibna la waafajiyaa warbixin xisaabeedka Bangiga Dhexe.

5. Dhamaan bixinta qaansheegatada iyo qandarasleyaasha waa in ay martaa barnaamij xisaabeedka dowladda (SFMIS), lagana bixiyaa madax iyo madax-xigeenada ku haboon ee khasnadda dhexe ee dawladda si toos ah uu u qaato qofka iyo shirkadda qaansheegtada ah.

3.4 Xaddiga kharash Bixinta

1. Waxaa awood kooban loo siiyey hayadaha dawladda ee qoondaha miisaaniaydda ku jira inay gacanta ku hayn karaan kharash kooban oo loogu talo-galay hawlaha degdegga ah (petty cash for emergencies) taasoo Wasiirku wareegto ka soo saari doono ku saabsan cadadka iyo waxyaabaha loo isticmaali karo.

3.5 Gedab

1. Wax gedab ah lagama gali karo qoondaha, kaliya inuu soo codsado Mas'uulka xafiiska Dowladda ama cid uu qoraal ku wakiishay mooyee.

2. Madax kasta oo xafiis dawladeed magali karo heeshiis ama nidaam kale oo uu baahan kharash, kaliya marka ay jirto hadhaa aan qaan ahayn oo ku filan in ay daboosho deynta lagali doono sanad miisaaniyadeedka 2018.

3. Wasaaraddu waxay aasaasi doontaa habraaca la raaco iyo hab diwaaneed qoraya dabagalka gedebka maaliyadeed ee walax miisaaniyadeed kasta.

4. Madaxa xafiiska dawladdu wuxuu yeellan doonaa diiwaanno lagu hubiyo gedabyada maaliyadeed ee walax kharasheed kasta habka uu u xeeriyey wasiirku.

3.6 Lacag Bixinta Agabka iyo Adeegga

1. Ka sokow foojarada kale ama cadaymaha loo bahan yahay, Xafiis kasta oo dawladeed ma bixin karo lacag illaa uu xaqijiyo ama hubiyo madaxa xafiisku ama cidda kale ee uu madaxa xafiisku u xil saaray.

B. Marka lacag bixintu tahay mid la xidhiidha hawl u baahan in la qabto, Allaab keenid ama addeeg.

I. Waa in ay tahay shaqada laqabtay, allaabta la keenay ama adeegga la bixiyay & qiimaha la saaray mid waafaqsan heeshiiska ama haddii ayna heshiiska ku caddayn noqdaa mid macquul ah.

II. Waa in ay noqoto mid-waafaqsan shuruudaha heeshiiska kharash bixintu, ka hor inta aan la dhammaystirin shaqada, aan la soo xarayn allaabta ama la helin adeegga

III. Waa in ay ahaato kharash bixinta mashaariicdu mid waafaqsan nidaamka iyo awaamiirta u deggan Wasaaradda, islamarkaana mac-quul ah oo sugan: Ama

T. Lacagta kharash kasta oo kale waa in ay ahaato mid uu lacag-qaatuhu xaq u-leeyahay, qaadashada lacagta uu qaatay.

2. Wasaaraddu waxay soo saari kartaa nidaam lagu xaqiijinayo ama hubbinayo xaqiiqda cadaymaha uu u baahan yahay qodobkani.

3. Xafiisyada Dawladdu waxay yeelan doonaan sanduuq ay ku kayd sadaan lacagta hawl fulinta cadadka yar, cadadka lacageed ee loo istic-maali doono hawl-fulin waxaa go'aamin doona wasiirka.

3.7 Lacagta aan la Istic-maalin

1. Iyadoo lagu xeerin doono wareegtooyin ay wasaaraddu soo saarto ayaa waxaa lagu celin khasnada dhexe hadhaaga Miisaaniyadda la qoondeeyey ee sanad Miisaaniyadeedku ka dhacay, aan la istic-maalina. Waxaana lagu kordhinayaa sanduuqa qasnada dhexe ee wasaaradda.

3.8 Warbixin Xisaabeedka

1. Dhamaan Hay'adaha Dowladda waa in ay u keenaan Xisaabiyaha Guud iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda dhamaan xisaab xidhka kharajka iyo dakhliga ee bishaas ugu danbeyn 7da bisha xigta iyadoo la raacayo qaabka uu tilmaami doono Xisaabiyaha Guud. Waxaa awood loo siiyey Wasaaradda inay hakiso bixinta qoondaha ee miisaaniyadda ee hayadaha keeni waaya xisaab-xirka billaha ah.

2. Warbixinta Miisaaniyadda ayaa si bille iyo rubac sanadle ah lagu daabici doonaa website-ka Wasaaradda, xilliga kama danbeysta ah ee bilkasta lagu daabacayo warbixinta, wasiirka ayaa ku soo saari doona wareegto.

4 Canshuuraha iyo Tacrifada Furdooyinka

4.1 Canshuurta Faai'idul Faa'idada (Mushaaraadka)

1. Canshuurta faa'idul faa'idada waxay ku waajibeysaa dhamaan dakhliga mushaaraadka ee muwaadiniinta iyo ajaanibta ka hawl gala dalka Soomaaliya, waxaana laga qaadayaa jaangooyada hoos ku xusan. Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxay xeerineysaa Canshuurta faa'idul faa'idada sida uu qabo xeerka Lr. 5, November 7, 1966.

2. Canshuurta faa'idul faa'idada waxaa lagu leeyahay shaqaalaha dowladda iyo kuwa gaadhka loo leeyahay, intaa waxaa sii dheer shaqaalaha u shaqeeya hay'adaha samafalka ee ia shaqeeyaha bulshada rayidka ah, canshuurta oo sal u tahay dakhligooda ah mushaaraadka iyo gunnooyinka. 2018 waaxda canshuuraha beriga waxay si gaadh ah oga shaqeyn doonaan canshuuraha ku waajibaya shaqaalah ajaanibta ah, hotelada, isgaadhsiinta, korontada iy biyahay iyo kuwo kale.

3. Canshuurtan ayaa ku waajibeysa si bille ah marka loo eego kalanderka waana in laguy shubaa khasnadda dhexe ee Dowladda Federaalka Soomaaliya oga furan Bangiga Dhexe, muddo 10 maalin ah dhamaadka bil kasta.

4. Qiimaha ku dhacaya canshuurta mushaarka ayaa waxaa sal u ah lacagta la siinayo shaqaalaha dowladda iyo kuwa gaarka ah bil kasta ee mushaar ahaan iyo gunno ahaan loo siinayo lana xidhiidha shaqada ay qabteen, sida ku cad jaantuska hoose:

Xadiga Dakhli ee Billaha ah (in US $)	Tacrifada %	Qiimeynta
0-200	0	Canshuur dhaaf
201- 800	6	Dakhliga ka Sareeya US $ 200 ilaa $800
801-1,500	12	Dakhliga ka Sareeya US$ 800 ilaa $1,500
1,501-Over	18	Dakhliga ka Sareeya US $ 1,501

5. Shaqaale kasta oo dakhli mushaar helaa waxaa looga doonayaa in uu siiyo xogta dakhhi ee gasha bil kasta Waaxda Canshuuraha Beriga ee Wasaaradda Maaliyadda ee Soomaaliya asagoo raacaya tilmaamaha ay bixiso Wasaaradda Maaliyadda.

4.2 Tacrifada Furdooyinka

1. Canshuurta furdooyinka waxay wajib ku tahay dhamaan badeecadaha la soo galiyo wadanka ee ku tilmaaman jaantuska ha laga soo galiyo Dhulka, Badda iyo Hawada dhamaan xuduudda.

2. Tacrifadan waxay dhaqangaleysaa 1da bisha January ee 2018, tacrifada furdooyinka ayaa lagu xisaabin doonaa badeecadaha ku tixan jaantuska hoose.

Nooca	Qeexidda Badeecada	Tacriifada
Qaad	Qaat	$2.5 per Kg.
Tobacco	Taraqa & Qaraaxadda (Kartoon)	$6
Tubaako	Magaadka (Bags)	$4
Tubaako	Shiishada (Tufaaxa & Dhalada lagu cabo)	$22
Tubaako	Sigaar Sports & Royal	$22
Tubaako	Sigaar Benson iwm	$24
Tubaako	Tubaako iwm	$6
Shidaalka iyo Badeecaddiisa	**Halbeegga Qiimeynta**	**Lacagta laga qaado**
Bansiin & Gas	A ton of gasoline & gas	$56.25
Naafto MT	A ton of diesel	$50.00
Fuusto Bansiin	A barrel of gasoline & gas	$12.50
Fuusto Naafto & Gaas	A barrel of diesel	$11.25

3. Dhamaan tacrifooyinka furdooyinka marka laga reebo kuwa ku cad jaantuskan waa sidoo dii waxaba lagama badalin sanadkan 2018.

4.3 Canshuurta soo degayaasha iyo dhoofayaasha

1. Laga bilaabo 1da bisha January ee sanadka 2018, dhamaan muwaadiniinta iyo ajaanibta ka soo gasha dalka ama ka dhoofta dhulka, badda iyo hawada waxaa ku waajib ah in ay bixiyaan canshuur sida ku qeexan jaantuska hoose:

Faah-faahin	Qiimaha Canshuurta
dhoofayaasha	$30

4.4 Canshuurta Iibka ee Hoteelada

1. Laga bilaabo 1da bisha January 2018, dhamaan hoteelada ku yaala muqdisho waxaa ku waajib ah canshuurta iibka 5% oo ku dhacaya adeegga ay bixiyaan ayadoo la raacayo xeerka Lr. 2 January 1984.

2. Canshuurta ayaa lugu bixinayaa sida bilaha kalanderka, waxaana lagu shubayaa khasnadda dhexe ee dowladda federaalka soomaliya oga furan bangiga dhexe muddo 10 maalin gudohood ah marka bil kasta dhamaato.

3. Dhamaan hotelada waxaa laga doonayaa in ay soo gudbiyaan xogta canshuurta iibka ay bixiyeen bilkasta loona keeno Waaxda Canshuuraha Beriga ee Wasaaradda Maaliyadda ayadoo la raacayo tilmaamaha ay bixiso Wasaaradda.

4.5 Canshuurta Iibka Isgaadhsiinta, Koronta iyo Biyaha.

1. Laga bilaabo 1da bisha January ee 2018, dhamaan shirkadaha isgaadhsiinta, koronta iyo biyaha waxaa ku waajib ah in ay bixiyaan canshuurta iibka sida tacrifada ku cad jaantuska hoose ayadoo la raacayo xeerka Lr. 2 January 7, 1984.

Shirkadaha	Tacriifada Canshuurta
Isgaadhsiinta	15%
Korontada	5%
Biyaha	5%
Internetka iyo TV-yada	5%

2. Canshuurta waxaa lagu bixinayaa sida bilaha kalanderka, waxaana lagu shubayaa khasnadda dhexe ee Dowladda Federaalka Soomaaliya oga furan bangiga dhexe, muddo 10 cisho gudohood marka bil kasta dhamaato.

3. Dhamaan canshuur bixiyaasha waxaa laga doonayaa in ay soo gudbiyaan xogta canshuurta iibka ay bixiyeen bilkasta loona keeno Waaxda Canshuuraha Beriga ee Wasaaradda Maaliyadda ayadoo la raacayo tilmaamaha ay bixiso Wasaaradda.

5 Qayabta Afraad

Qoondaynta Miisaaniyadda

5.1 Qoondaynta Miisaaniyadda Xafiisyada Dowladda

1. Miisaaniyadda hoos ku xusan waxaa loo qoondeeyay xafiisyada Dowladda sanad Miisaaniyadeedka 2018-ka, waana sida hoos ku xusan.

a) **Miisaaniyadda Joogtada ah**	**US$ 260,171,727**
b) **Miisaaniyadda Raasumaalka**	**US$ 14,458,464**
Wadarta Guud	**US$ 274,630,191**

2. Faah-faahinta qoondaha Miisaaniyadda waxay ku caddahay oo ay ku fah-faahsantahay xagga hoose ee bayaankan

5.2 Muddada Dhaqan-galka

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa maalinat Golah Shacabku ansixiyo ee March 31, 2018

Laga soo saaray Muqdhisho_____ malinta _____2018

Madaxwaynaha
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaali

6 Lifaaqyada Miisaaniyadda 2018-ka

6.1 Soo Koobidda Dakhliga iyo Kharashka Miisaaniyadda Sanadka 2018

Soo Koobidda Dakhliga iyo 2018 (Malyan US$)

FAAH-FAAHIN	2015 Dhabta	2016 Dhabta	KU-NOQOSHADDA 2017	2018 Kutalagal	Isbadalka	% Isbadalka
1. DAKHLIGA GUDAHA & DEEQAHA	141.2	171.1	260.1	274.6	14.5	5.6%
(A) DAKHLIGA GUDAHA	114.3	112.7	137.6	156.0	18.5	13.4%
DAKHLIGA CANSHUURAADKA	82.4	88.6	113.6	127.2	13.6	12.0%
Canshuurta Faa'idul Faa'ida	1.9	2.4	4.0	6.9	2.9	73.3%
Canshuurta Adeegga & Agabka	4.8	2.9	8.1	17.6	9.5	117.7%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	71.1	76.3	95.0	97.0	2.0	2.1%
Canshuuro Kale	4.5	7.0	6.5	5.7	(0.8)	-12.3%
DAKHLIGA AAN CANSHUURTA AHAYN	31.9	24.1	24.0	28.8	4.8	20.2%
(B) DEEQAHA DIBADDA	26.9	58.4	122.6	118.6	(4.0)	-3.2%
Deeq Laba Dhinac ah	2.8	31.3	38.1	61.1	23.0	60.3%
Deeq Dhinacyo Badan	24.1	27.1	84.5	57.5	(26.9)	-31.9%
2. KHARASHKA GUUD	135.5	171.1	260.1	274.6	14.5	5.6%
(C) KHARASHKA JOOGTADA AH	128.6	159.6	221.8	248.7	26.9	12.1%
Adeegga Shaqaalaha	52.9	54.9	127.9	130.4	2.5	2.0%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	48.1	56.0	64.9	75.0	10.1	15.7%
Mashaariic	0.4	3.2	0.5	8.8	8.3	1840.8%
Deeqaha Dowladda Dhexe	13.8	9.4	18.6	23.6	5.1	27.2%
Keydka Kabidda	2.6	2.1	2.3	2.5	0.2	10.9%
Gashibax	10.8	34.1	7.8	8.4	0.6	7.6%
(D) KHARASHKA RA'SUMAALKA	6.9	11.4	38.3	26.0	(12.4)	-32.2%
Adeegga Shaqaalaha	0.0	0.2	1.2	0.9	(0.3)	-23.8%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	4.9	8.5	24.9	19.3	(5.6)	-22.5%
Mashaariic	1.9	2.7	11.9	5.7	(6.2)	-52.0%
Deeqaha Dowladda Dhexe	-	0.0	0.4	0.1	(0.3)	-75.2%
3. FARAQA	5.7	0.0	0.0	0.0	0.0	

6.2 Faah-faahinta Dakhliga Guud Dowladda Ee Miisaaniyadda 2018-ka

DOWLADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA
WASAARADDA MAALIYADDA
WADARTA QIYAASTA DAKHLIGA MIISAANIYADDA 2018-KA (US$)

Madax Xigaha	FAAH-FAAHIN	2015 Dhabta	2016 Dhabta	KU-NOQOSHADDA 2017	2018 Kutalagaka
	WADARTA GUUD EE DAKHLIGA	141,196,856	171,066,744	260,129,324	274,630,191
	Wadarta Dakhliga Gudaha	114,280,009	112,674,720	187,560,000	156,027,305
	Dakhliga Canshuurta	82,375,416	88,569,153	113,560,000	127,180,000
111	Canshuurta Faa'idu Faa'idada	1,893,203	2,366,602	4,000,000	6,930,000
111101	Caanshuurta Mushaharka (Shaqaalaha Dowladda)	707,501	1,335,439	2,900,000	3,900,000
111102	Canshuurta Mushaharka (Shaqaalaha Gaarka ah)	414,796	545,817	800,000	950,000
111201	Canshuurta Faaidoyinka Ganacsiha	770,906	340,056	100,000	1,240,000
111204	Canshuurta Daaraha	-	145,290	200,000	840,000
114	Canshuurta Adeega & Alaabta	4,799,955	2,880,000	8,060,000	17,550,000
1141	Canshuurta Dheeraadka ah	4,799,955	2,880,000	8,060,000	17,550,000
114102	Qaansheegadka Hoteeladda			800,000	600,000
114103	Isgaarsiinta			5,660,000	3,500,000
114104	Warshadaha Krontadda dhaliya				450,000
114106	Iibka Badeecadaha Dekadda ka soo dega				13,000,000
114107	Macaashka Isgaadhsiinta	4,799,955	2,800,000	1,600,000	-
114108	Macaashka Xawaaladaha		80,000		
115	Canshuurta Ganacsiga Dibada ka yimaado	71,144,542	76,313,772	95,000,000	97,000,000
115000	Furdooyinka	61,986,383	62,226,949	80,000,000	81,000,000
115201	Casnhuurta Jaadka so daga	9,158,159	14,086,823	15,000,000	16,000,000
116	Canshuurta Iibka Farankabooladda	4,537,716	7,008,779	6,500,000	5,700,000
116102	Dakhliga Diiwaangalinta Notory-ga	1,451,927	4,516,253	1,000,000	2,600,000
116104	Dakhliga Canshuurta Scodka Gaadiidka	3,085,789	2,492,526	2,500,000	1,600,000
116105	Dakhliga Diiwaangalimaha kale			3,000,000	1,500,000
		31,904,593	24,105,567	24,000,000	28,847,305
142	Dakhliga aan Canshuurta ahayn	31,904,593	24,105,567	24,000,000	28,847,305
142101	Khidmadda Maamulka	625,987	162,142	150,000	147,305
142201	Khidmadda Dal kugalka	6,207,814	4,413,400	3,850,000	4,880,000
142203	Khidmadda Dhoofka				900,000
142204	Khidmadaha Shatiga				460,000
142401	Khidmadda D/galinta Shaqaalaha				460,000
142501	Khidmadda Dekadaha	25,070,792	19,530,025	20,000,000	22,000,000
13	Deeqaha	26,916,847	8,392,124	122,569,324	118,602,886
131	Kaalmo laba geesood	2,840,539	31,260,098	38,105,332	61,072,000
131101	Turkey	717,200	10,000,000	28,105,332	20,000,000
131102	Kingdom of Saudi Arabia		19,999,985		30,412,000
	Norway (SFF-Sonoqnoqota)	2,123,339	1,260,113	-	-
131103	Qatar			10,000,000	10,000,000
131105	Deeq Ganacsatada				660,000
132	Deeq Dhinacyo Badan	24,076,308	27,131,926	84,463,992	57,530,886
132402	Hadhagii Xisaabaadka Mashaariicda		3,090,475	1,946,703	1,465,648
132101	Bangiga Aduunka - Mashruuca MPTF TIU	999,979	637,291	5,430,549	2,213,753
132102	Bangiga Aduunka - Mashruuca CIP		1,059,599	6,527,695	7,638,433
132103	Bangiga Aduunka- Mashruuca PFM		3,808,697	10,236,250	3,975,000
132104	Bangiga Aduunka- Mashuurca ICT		1,003,956	2,998,937	2,127,974
132105	Bangiga Aduunka- Mashuurca SCORE		857,280	3,297,110	1,815,053
132106	Bangiga Aduunka- Mashruuca RCRF	22,280,583	13,023,056	37,695,911	28,230,000
132112	Bangiga Horumarinta Afrika- Mashruuca EFG	795,746	1,513,811	2,980,000	2,020,000
132113	Mashruuca PBF (Peace Building Fund)		760,000	1,997,810	-
132114	Mashruuca SUPP			967,896	3,097,425
132115	Mashruuca Dib u dejinta Degmooyinka (From UN)			1,492,130	939,600
132116	Midowga Yurub (Mushaaraadka Booliska)		1,377,761	8,893,000	4,008,000

6.3 Qoondada Hay'adaha Ee Miisaaniyadda 2018-ka

Madaxa	HAY'ADAHA	2015 Dhabta	2016 Dhabta	KU-NOQOSHADDA 2017	2018 Kutalagaka
		135,452,905	171,066,723	260,129,324	274,630,191
100	Qaybta Maamulka	69,698,571	96,160,268	106,585,299	119,871,907
10101	Xafiiska Madaxtooyada	3,413,650	3,145,505	4,744,797	4,961,697
102	Golaha Baarlamaanka Federaalka ah	13,298,442	7,926,858	21,582,301	23,579,717
10201	Xafiiska Golaha Shacabka	2,598,042	2,911,858	4,730,989	5,146,885
10202	Xubnaha Golaha Shacabka	10,700,400	5,015,000	13,845,312	14,449,312
10203	Xafiiska Aqalka Sare			3,006,000	3,983,520
103	Ra'iisul Wasaaraha	3,665,810	4,130,211	5,766,186	5,966,582
10301	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha	3,424,394	3,879,400	5,323,482	5,454,846
10302	Agaasinka Bil'ada iyo Duur joogta	241,416	250,811	442,704	511,736
104	Arimaha Dibedda	4,912,474	5,016,226	5,944,447	7,417,083
10401	Wasaaradda Arrimaha Dibedda & Iskaashiga Caalamiga	1,600,216	1,219,808	2,240,847	2,610,083
10402	Safaaradaha	3,312,258	3,796,418	3,703,600	4,807,000
105	Maaliyadda iyo Mashaariicda	34,449,589	56,498,704	40,185,024	43,311,199
10501	Wasaaradda Maaliyadda	4,383,682	6,402,994	7,040,309	7,632,037
10502	Xisaabiyaha Guud	545,531	836,781	1,437,740	1,617,680
10503	Adeegga Guud Ee Dowladda	29,520,376	49,258,929	31,706,975	33,401,482
10509	Agaasinka Xaruntа Warbixinada Maaliyadda				660,000
10601	Wasaaradda Qorsheynta	701,173	838,426	1,488,392	1,529,784
10602	Hay'adda Tirabkoobka Qaranka				288,000
107	Arrimaha Gudaha iyo Xuduudaha	1,453,720	8,910,701	9,341,341	8,997,005
10701	Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka	1,141,160	8,559,095	8,628,541	8,218,621
10702	Guddiga Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha	192,735	202,268	466,800	501,944
10801	Wasaaradda Arrimaha Diinta iyo Awqaafta	410,670	480,890	751,404	852,844
109	Garsoorka iyo Cadaaladda	4,289,530	5,015,272	8,249,096	8,365,968
10901	Wasaaradda Caddaaladda	402,314	326,492	554,888	628,280
10902	Cilmanka Asluubta	2,914,344	3,512,173	5,878,380	5,862,750
10903	Maxkamadda Goboleka Banaadir	729,253	847,983	1,403,652	1,413,032
10904	Maxkamadda Racfaanka	116,496	156,511	232,284	273,104
10905	Guddiga Adeegga Garsoorka	127,123	172,113	179,892	188,792
11001	Maxkamdda Sare	324,736	509,986	799,960	891,784
11101	Xeer-ilaaliyaha Guud	632,517	710,873	1,057,392	1,067,016
11201	Garyaqaanka Guud	283,006	388,031	505,024	519,864
11301	Hanti-dhowrka Guud	695,081	1,118,382	1,450,506	1,746,864
11401	Wasaarada Gargaarka iyo Maareynta Musqbbooyinka	-	-	584,541	640,700
11501	Wasaaradda Dastuurka	134,619	203,048	445,872	3,472,232
116	Guddiyadda Gaarka ah	1,033,554	1,767,155	3,689,016	6,213,568
11601	Guddiga Xuduudaha iyo Fadaraalka	60,000	226,000	706,328	644,928
11602	Guddiga M. Banaan Ee Dibu Heshiisiinta O	254,922	264,848	491,532	501,132
11603	Guddiga M Banaan Ee Dooroshooyinka Qaranka	143,400	425,595	745,500	2,500,000
11604	Guddiga Madaxa Banaan Ee Xuquuqul Insaanka	-	-	-	468,000
11605	Guddiga M. Banan Ee Dibu Eegista iyo Hir. Dasturka	298,563	317,093	646,716	695,636
11606	Guddiga Madaxa Banaan Ee Shaqalaha Rayidka	276,669	533,619	1,098,940	1,103,872
11607	Guddiga Madaxa Banan Ee la dagaalanka Musuqmaasuqa				300,000

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2018-KA

Madaxa	HAY'ADAHA	2015 Dhabta	2016 Dhabta	KU-NOQOSHADDA 2017	2018 Kutalagaka
200	Qaybta Difaaca & Amniga	45,162,281	47,846,243	89,144,626	89,561,522
201	Difaaca	26,999,433	25,800,088	49,950,250	49,050,222
20101	Wasaaradda Gaashaandhiga	667,863	737,343	1,048,768	2,646,040
20102	Taliska Ciidanka Xooga Dalka	25,335,570	23,556,745	47,330,482	44,833,182
20103	Maxkamadda Ciidamadda	996,000	1,476,000	1,456,000	1,456,000
20104	Hay'adda Naafadda & Agoonta Ciidamadda	-	30,000	115,000	115,000
202	Amniga	18,162,848	22,046,155	39,194,376	40,511,300
20201	Wasaaradda Amniga Qaranka	1,886,783	2,003,325	2,093,060	1,988,780
20202	Taliska Ciidanka Booliska	6,357,500	10,689,510	24,652,569	21,949,920
20203	Hay'adda Nabadsugidda Qaranka	8,341,065	7,922,320	10,456,447	12,505,680
20204	Hay'adda Socdaalka & Jinsiyadaha	1,577,500	1,431,000	1,992,300	4,066,920
300	Qaybta Dhaqaalaha	9,916,143	11,007,448	17,406,304	20,768,715
30101	Wasaaradda Tamarta & Biyaha	448,149	487,889	1,063,212	1,101,452
30201	Wasaaradda Macdanta	872,074	1,252,805	766,200	1,277,583
30301	Wasaaradda Beeraha	482,505	562,114	1,102,448	1,134,868
30401	Wasaaradda Xanaanadda Xoolaha, Dhirta & Daaqa	428,057	479,268	863,120	986,236
305	Kheyraadka Badaha	725,751	939,743	1,539,864	1,778,084
30501	Wasaaradad Kalluumaysiga & Khey. Badda	515,770	570,875	986,540	1,180,960
30502	Hay'adda Cilmi Baadhista Badaha Soomaaliyeed	209,981	271,958	453,984	497,784
30503	Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumeysiga	-	96,910	99,340	99,340
30601	Wasaaradda Warfaafinta	2,439,903	2,509,883	3,634,628	4,098,266
307	Boostada & Isgaadhsiinta	794,817	797,387	1,354,276	2,650,494
30701	Wasaaradda Boostada & Isgaadhsiinta	794,817	797,387	1,254,276	1,562,494
30703	Hay'adda Isgaadhsiinta Qaranka			100,000	1,088,000
30801	Wasaaradda Howlaha Guud iyo Dib-u-dhiska	432,847	563,210	1,188,220	1,245,660
309	Gaadiidka Cirka & Duulista Hawadda	1,039,762	1,021,488	1,827,492	2,592,760
30901	Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawadda	623,468	627,514	1,147,796	1,875,664
30902	Hay'adda Saadaasha iyo Duulista Hawadda	416,294	393,974	679,696	717,096
310	Gaadiidka Badda & Dekedda	1,610,436	1,572,986	2,131,944	1,307,528
31001	Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda	696,106	712,886	1,132,124	1,203,028
31002	Dekadda Xamar	914,330	860,100	999,820	104,500
31101	Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha	641,842	820,675	1,934,900	2,095,780
400	Qaybta Arrimaha Bulshadda	3,755,989	4,120,275	8,662,913	19,000,813
40101	Wasaaradda Caafimaadka	457,808	601,898	1,360,480	4,393,320
402	Waxbarashadda & Cilmi baarista	1,903,726	1,819,509	4,272,849	11,499,885
40201	Wasaaradda Waxbarashadda	849,716	707,982	2,234,847	7,077,488
40202	Jaamacadda Umadda	803,452	903,174	1,452,413	2,284,581
40203	Hay'adda Cilmi Fanka iyo Sugaanta	126,658	122,353	395,956	813,556
40204	Akademiya Goboleedka Af-Soomaaliga	123,900	86,000	189,633	1,324,260
40301	Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada	555,357	814,194	1,426,644	1,439,744
40401	Wasaaradda Isboortiga & Dhalinyarada	376,357	387,892	650,132	692,572
40501	Wasaaradda Hawenka & Hor. Xuq. Adanaha	472,741	496,782	952,808	975,292
Madaxa	HAY'ADAHA	2015 Dhabta	2016 Dhabta	KU-NOQOSHADDA 2017	2018 Kutalagaka
500	Mashaariicda	6,909,921	11,432,489	38,330,182	25,977,238
103	Ra'iisul Wasaaraha	108,116	1,145,268	6,432,903	7,638,433
1030301	Mashruuca CIP	108,116	1,145,268	6,432,903	7,638,433
105	Maaliyadda iyo Mashaariicda	5,944,956	8,429,084	26,271,849	12,173,806
1050401	Mashruuca SFF	1,972,684	643,892	7,237,399	2,213,753
1050501	Mashruuca PFM	2,368,771	4,351,857	10,165,066	3,975,000
1050601	Mashruuca EFG	295,373	1,767,530	2,996,008	2,020,000
1050701	Mashruuca RCRF	1,308,128	1,399,466	2,622,223	2,150,000
1050801	Mashruuca SCORE	-	266,339	3,251,153	1,815,053
107	Arrimaha Gudaha iyo Xuduudaha	-	222,271	1,940,729	4,037,025
1070301	Mashruuca Dib u dejinta Degmooyinka	-	222,271	1,143,055	939,600
1070401	Mashruuca SUIPP	-	-	797,674	3,097,425
307	Boostada & Isgaadhsiinta	856,849	1,635,866	3,684,701	2,127,974
3070201	Mashruuca ICT	856,849	1,635,866	3,684,701	2,127,974

6.4 Soo Koobidda Kutalgaika Miisaaniyadda 2018-ka

Soo Koobidda Miisaaniyadda 2018 (US$)

Madaxa	HAY'ADAHA	Adeegga Shaqaalaha	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	Mashaariic	Deegaha Dowladda Dhexe	Keydka Kabidda	2018 Kutalagaka
		138,730,288	94,280,843	14,458,464	23,746,000	2,500,000	274,630,191
100	Qaybta Maamulka	62,133,636	29,995,863	1,492,448	28,640,000	2,500,000	119,821,907
10101	Xafiiska Madaxtooyada	2,749,284	2,212,413	-	-	-	4,961,697
102	Golaha Baarlamaanka Federaalka ah						
10201	Xafiiska Golaha Shacabka	2,909,136	1,787,749	300,000	150,000	-	5,146,885
10202	Xubnaha Golaha Shacabka	13,642,800	806,512	-	-	-	14,449,312
10203	Xafiiska Agaasa Sare	3,082,020	901,500	-	-	-	3,983,520
103	Ra'iisul Wasaaraha						
10301	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha	2,432,196	3,022,650	-	-	-	5,454,846
10302	Agaasimka Bil'aha iyo Duur joogta	380,736	131,000	-	-	-	511,736
104	Arrimaha Dibedda						
10401	Wasaaradda Arrimaha Dibedda & Iskaashiga Caalamiga	1,504,500	1,105,583	-	-	-	2,610,083
10402	Safaaradaha	3,564,000	1,243,000	-	-	-	4,807,000
105	Maaliyadda iyo Maahaarlicda						
10501	Wasaaradda Maaliyadda	5,809,256	1,630,333	192,448	-	-	7,632,037
10502	Xisaabiyaha Guud	1,203,180	414,500	-	-	-	1,617,680
10503	Adeegga Guud Ee Dowladda	8,380,000	3,431,482	1,000,000	18,090,000	2,500,000	33,401,482
10509	Agaasimka Xaruntа Warbixinada Maaliyadda	436,452	223,548				660,000
10601	Wasaaradda Qorsheynta	1,287,784	242,000	-	-	-	1,529,784
10602	Hay'adda Jirabkoobka Qaranka	-	288,000	-	-	-	288,000
107	Arrimaha Gudaha iyo Xuduudaha						
10701	Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka	1,587,288	1,231,333	-	5,400,000	-	8,218,621
10702	Guddiga Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha	430,944	71,000	-	-	-	501,944
10801	Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Awqaafta	734,844	118,000	-	-	-	852,844
109	Garsoorka iyo Cadaaladda						
10901	Wasaaradda Caddaaladda	468,780	159,500	-	-	-	628,280
10902	Cilidanka Asluubta	2,598,000	3,264,760	-	-	-	5,862,760
10903	Maxkamadda Gobollka Banaadir	1,306,032	107,000	-	-	-	1,413,032
10904	Maxkamadda Racfaanka	184,104	89,000	-	-	-	273,104
10905	Guddiga Adeegga Garsoorka	99,792	89,000	-	-	-	188,792
11001	Maxkamdda Sare	461,784	430,000	-	-	-	891,784
11101	Xeer-ilaaliyaha Guud	755,016	312,000	-	-	-	1,067,016
11201	Garyaqaanka Guud	315,864	204,000	-	-	-	519,864
11301	Hanti-dhowrka Guud	840,864	906,000	-	-	-	1,746,864
11401	Wasaaradda Garsoorka iyo Maareynta Musuqbooyinka	191,700	449,000	-	-	-	640,700
11402	Hay'adda Maareynta Musuqbooyinka	187,440	89,000	-	-	-	276,440
11501	Wasaaradda Dastuurka	278,232	3,194,000	-	-	-	3,472,232
116	Guddiyadda Gaarka ah						
11601	Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka	524,928	120,000	-	-	-	644,928
11602	Guddiga M. Banaan Ee Dibu Heshiisiinta Q.	435,132	66,000	-	-	-	501,132
11603	Guddiga M Banaan Ee Dooroshooyinka Qaranka	1,405,000	1,095,000	-	-	-	2,500,000
11604	Guddiga Madaxa Banaan Ee Xuquuqul Insaanka	384,000	84,000	-	-	-	468,000
11605	Guddiga M. Banan Ee Dibu Eegista Iyo Hir. Dasturka	606,636	89,000	-	-	-	695,636
11606	Guddiga Madaxa Banaan Ee Shaqalaha Rayidka	1,015,872	88,000	-	-	-	1,103,872
11607	Guddiga Madaxa Banan Ee la dagaalanka Musuqmaasuqa	-	300,000				300,000

XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA 2018-KA

Madaxa	HAY'ADAHA	Adeegga Shaqaalaha	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	Mashaariic	Deeqaha Dowladda Dhexe	Kaydka Kabidda	2018 Kutalagako
1200	Qaybta Difaaca & Amniga	51,462,040	36,599,482	1,500,000			89,561,522
201	Difaaca						
20101	Wasaaradda Gaashaandhiga	831,540	314,500	1,500,000	-	-	2,646,040
20102	Taliska Ciidanka Xooga Dalka	25,733,400	19,099,782	-	-	-	44,833,182
20103	Maxkamadda Ciidamadda	936,000	520,000	-	-	-	1,456,000
20104	Hay'adda Nabadsugidda & Agoonta Ciidamadda	60,000	55,000	-	-	-	115,000
202	Amniga						
20201	Wasaaradda Amniga Qaranka	816,780	1,172,000	-	-	-	1,988,780
20202	Taliska Ciidanka Booliska	14,968,200	6,981,720	-	-	-	21,949,920
20203	Hay'adda NaBadsugidda Qaranka	5,488,000	7,017,680	-	-	-	12,505,680
20204	Hay'adda Soodhalka & Ilaalinta Dalka	2,628,120	1,438,800	-	-	-	4,066,920
300	Qaybta Dhaqaalaha	13,978,164	5056,361	616,590	-	-	20,268,711
30101	Wasaaradda Tamarta & Biyaha	1,001,452	100,000	-	-	-	1,101,452
30201	Wasaaradda Maqdanta	751,680	525,903	-	-	-	1,277,583
30301	Wasaaradda Beeraha	1,034,868	100,000	-	-	-	1,134,868
30401	Wasaaradda Xanaanadda Xoolaha, Dhirta & Daaqa	766,236	220,000	-	-	-	986,236
305	Kheyraadka Badaha						
30501	Wasaaradad Kallumaysiga & Khey. Badda	900.960	280,000	-	-	-	1,180,960
30502	Hay'adda Ciimi Baadhista Badaha Soomaaliyeed	395,784	102,000	-	-	-	497,784
30503	Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumeysiga	44,340	55,000	-	-	-	99,340
30601	Wasaaradda Warfaafinta	2,488,536	1,563,140	46,590	-	-	4,098,266
307	Boostada & Isgaadhsiinta						
30701	Wasaaradda Boostada & Isgaadhsiinta	1,175,676	386,818	-	-	-	1,562,494
30703	Hay'adda Isgaadhsiinta Qaranka	340,000	178,000	570,000	-	-	1,088,000
30801	Wasaaradda Howlaha Guud iyo Dib u dhiska	1,145,660	100,000	-	-	-	1,245,660
309	Gaadiidka Cirka & Duulista Hawadda						
30901	Wasaaradda Gaadiidka & Duulista Hawadda	947,664	928,000	-	-	-	1,875,664
30902	Hay'adda Saadaasha iyo Duulista Hawadda		94,500	-	-	-	717,096
310	Gaadiidka Badda & Dekedda						
31001	Wasaaradda Dekadaha & Gaadiidka Badda	1,019,028	184,000	-	-	-	1,203,028
31002	Dekadda Xamar	-	104,500	-	-	-	104,500
31101	Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshaynaha	1,961,280	134,500	-	-	-	2,095,780
400	Qaybta Aniimaha Bulshadda	10,439,888	3,931,925	5,150,000	-	-	19,000,813
40101	Wasaaradda Caafimaadka	1,203,320	1,100,000	2,000,000	-	-	4,303,320
402	Waxbarashadda & Ciimi baaristo						
40201	Wasaaradda Waxbarashadda	3,899,488	1,178,000	2,000,000	-	-	7,077,488
40202	Jaamacadda Umadda	2,126,016	158,565	-	-	-	2,284,581
40203	Akadeemiyada Ciimi, Fanka iyo Sugaanta	232,056	431,500	150,000	-	-	813,556
40204	Akadeemiya Goboleedka Af-Soomaaliga	164,400	159,860	1,000,000	-	-	1,324,260
40301	Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada	1,327,744	112,000	-	-	-	1,439,744
40401	Wasaaradda Isboortiga & Dhalinyarada	592,572	100,000	-	-	-	692,572
40501	Wasaaradda Haweenka & Hor. Xuq. Adannaha	863,292	112,000	-	-	-	975,292
500	Mashaariicda	602,600	19,277,212	5,699,426	106,000	-	25,977,238
103	Ra'iisul Wasaraha						
1030301	Mashruuca CIP	597,800	6,390,633	650,000	-	-	7,638,433
105	Maaliyadda iyo Mashaariicda						
1050401	Mashruuca SFF	-	1,183,193	1,030,560	-	-	2,213,753
1050501	Mashruuca PFM	-	3,275,000	700,000	-	-	3,975,000
1050501	Mashruuca EFG	-	1,478,000	500,000	-	-	2,020,000
1050701	Mashruuca RCRF	-	1,800,000	100,000	-	-	2,150,000
1050801	Mashruuca SCORE	-	1,723,553	91,500	-	-	1,815,053
107	Arrimaha Gudaha iyo Xudduudaha						
1070301	Mashruuca Dib u dejinta Degmooyinka	4,800	828,800	-	106,000	-	939,600
1070401	Mashruuca SUIPP	-	1,746,214	1,351,211	-	-	3,097,425
307	Boostada & Isgaadhsiinta						
3070201	Mashruuca ICT	-	851,819	1,276,155	-	-	2,127,974

6.5 Faah-Faahinta Kutalagalka Miisaaniyadda 2018-ka Ee Hay'adaha Dowladda

Madax	Madax Xige	FAAH-FAAHIN	2016 Dhabta	KU-NOQOSHADDA 2017	2018 Kutalagaka
		Wadarta Guud	171,066,723	260,129,324	274,630,191
		Wadarta Guud- Kharashaadka Joogtada ah	159,634,234	221,799,142	248,652,953
10101		Xafiiska Madaxtooyada	3,145,505	4,744,797	4,961,697
	2100	Adeegga Shaqaalaha	1,468,905	2,732,384	2,749,284
	2110	Gunooyinka iyo Mushaharaadka	1,438,466	2,494,064	2,510,964
	2111	Mushaarka Shaqaalaha Joogtada ah	940,126	1,517,364	1,517,364
	2112	Gunno	498,340	976,700	993,600
	2130	Kharashaadka kale ee Shaqaalaha	30,439	238,320	238,320
	2131	Kharashaadka kale ee Shaqaalaha	30,439	238,320	238,320
	2200	Adeegga iyo Agabka	1,676,600	2,012,413	2,212,413
	2210	Kharashaadka Guud	1,263,900	1,550,863	1,550,863
	2211	Hawlaha Guud	88,960	122,320	122,320
	2212	Kiro	34,000	46,750	46,750
	2213	Shidaal & Saliid	408,000	374,000	374,000
	2214	Dayactir & Hagaajin	119,340	164,093	164,093
	2215	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale	13,600	18,700	18,700
	2216	Kharashaadka Socdaalka	600,000	825,000	825,000
	2260	Kharashaadka kale	412,700	461,550	661,550
	2261	Kharashaadka kale (Raashin)	412,700	461,550	661,550
10201		Xafiiska Golaha Shacabka	2,911,858	4,730,989	5,146,885
	2100	Adeegga Shaqaalaha	1,615,356	2,793,240	2,909,136
	2110	Gunooyinka iyo Mushaharaadka	1,615,356	2,793,240	2,909,136
	2111	Mushaarka Shaqaalaha Joogtada ah	1,115,756	1,858,440	1,874,736
	2112	Gunno	499,600	934,800	1,034,400
	2200	Adeegga iyo Agabka	1,246,502	1,787,749	1,787,749
	2210	Kharashaadka Guud	868,003	1,216,156	1,216,156
	2211	Hawlaha Guud	127,500	140,250	140,250
	2212	Kiro	55,245	60,775	60,775
	2213	Shidaal & Saliid	172,818	328,339	328,339
	2214	Dayactir & Hagaajin	65,000	71,526	71,526
	2215	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale	127,440	175,266	175,266
	2216	Kharashaadka Socdaalka	320,000	440,000	440,000
	2260	Kharashaadka kale	378,499	571,593	571,593
	2261	Kharashaadka kale (Raashin)	378,499	571,593	571,593
	2600		50,000	150,000	150,000
	2621	Qaraanka Caalamiga	50,000	150,000	150,000
	2300	Kharashaadka Raasumaalka	-	-	300,000
	2314	Raasumaalka	-	-	300,000
10202		Xubnaha Golaha Shacabka	5,015,000	13,845,312	14,449,312
	2100	Adeegga Shaqaalaha	4,594,600	13,038,800	13,642,800
	2110	Gunooyinka iyo Mushaharaadka	4,594,600	13,038,800	13,642,800
	2112	Gunno	4,594,600	13,038,800	13,642,800
	2200	Adeegga iyo Agabka	420,400	806,512	806,512
	2250	Adeegga iyo Qalabka Gaarka ah	125,000	300,000	300,000
	2251	Caafimaadka & Fayadhowrka	125,000	300,000	300,000

	2260	**Kharashaadka kale**	295,400	506,512	506,512
	2261	Kharashaadka kale (Raashin)	295,400	506,512	506,512
10203		**Xafiiska Aqalka Sare**	-	3,006,000	3,983,520
	2100	**Adeegga Shaqaalaha**	-	2,646,000	3,082,020
	2110	**Gunooyinka iyo Mushaharaadka**	-	2,646,000	3,082,020
	2112	Gunno	-	2,646,000	3,082,020
	2200	**Adeegga iyo Agabka**	-	360,000	901,500
	2210	**Kharashaadka Guud**	-	280,000	497,500
